IRRIDAHA GUUSHA (3)



Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

XOGTA SHAKHSIGA:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

BUUGGA IRRIDAHA GUUSHA {3}

QORAAGA BUUGGA

CUMAR SH.C/LAAHI CAWED (HONG-KONG)

XUQUUQDA DAABACAADDA BUUGGANI WAY SUGANTAHAY, WAXAANA DAABICI KARA CIDDA AY KHUSAYSO OO KELIYA, BUUGGANNA LAMA DAABICI KARO, LAMA BADIN KARO, LAMA TURJUMI KARO, QAYB KAMID AHNA LAMA SAWIRAN KARO IYADA OO AAN WAX OGOLAANSHO AH LAGA HAYSAN QORAAGA BUUGGA.

KALA XIDHIIDH QORAAGA BUUGGA

EMAIL:CUMARCABDILAAHI94@GMAIL.COM

MOBILE:- 063-4377671 AMA 065-4377671

FACEBOOK:- CUMAR HONG-KONG

AUGUST-2026, HARGEYSA-SOOMAALILAND

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

MAHADNAQ

Ugu horrayn waxa mahad oo dhami ay usugnaatay **ALLAH swt,** inoo suurto geliyay dhammaystirka hawshan ballaadhan ee qoritaanka buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 3.**

Waxa kale oo aan si gaar ah ugu mahad-naqayaa waalidkay, sababna u ah in aan maanta soo gaadho halkan iyada ah, sidoo kale waxa mahad gaar ah leh xaaskayga Allah swt iihadiyeeyay, **SAMIIRA AXMED XIRSI,** dedaalka lataabankaro iyo dhiirigelinta ay ila-garabtaagnayd min-bilawgii hawshan iyada ah illaa dhammaystirkeedii, iyada oo ku hawl-gelaysay niyad-sami iyo garab-istaag.

Waxa kale oo aan halkan ku xusayaa uguna mahad-celinayaa Qoraa/Abwaan:- **CABDIRISAAQ MAXAMED CABDILAAHI (ODAY),** ahna macallinkaygii, oo aan uga mahad-celinaayo doorkii talo-bixineed, dhiirigelineed iyo gacan ka gaysashadii soosaarista buuggan.

Ugu dambayn waxa aan si kal iyo laab ah mahad-naq lamid ah kuwa hore ugudbinayaa dhammaan shakhsiyaadka si dadban iyo si toos ahba uga qayb-qaatay marxaladihii kala du-duwanaa ee uu soo maray diyaarinta iyo dhammaystirka buuggan**.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

HORDHACA BUUGGA

Sida aynu wada ognahay ama aynu ka wada war qabno, tan iyo bilawgii qarnigan 21aad, illaa iyo dhammaadkii qarnigii 20aad, waxa dunidan ama caalamkan aynu ku noolahay kusoo kordhay ama kusoo biiray wax loo yaqaanno baraha bulshada (social media), kuwaas oo ay isticmaalaan dhammaan jiilasha kala ged-geddisan ee bulshadu, yar iyo waynba.

Sidoo kale waxa isticmaala dhammaan qaybaha kala duwan ee ay ka koobantahay bulshadu, sida:- Dhallinyaro, Siyaasiyiin, Aqoonyahan, Culimo-awdiin, Cuqaal, Salaadiin, Weriyayaal, Abwaano, Dhakaatiir, Macallimiin, Barayaal sare, Madaxwaynayaal iwm, kuwaas oo mid-kasta oo ka mid ahi uu kusoo gudbiyo ama kusoo bandhigo, waxyaabaha uu jecelyahay ama xiiseeyo, sida:- wararka ciyaaraha, wararka caalamka, xikaayaadka ama sheekooyinka yar-yar ee qosol-qosolka ah, qissaska diiniga, jacaylka ama qubanaha ah, hadday yihiin kuwo hore udhacay, kuwo dhowaan dhacay ama hadda dhacaayaba, waxyaabaha la xidhiidha dhaqanka, waxyaabaha khuseeya siyaasadda, halxidhaalayaasha iwm.

Haddaba aniga (ururiyaha buugga) oo ka mid ah bulshada isticmaasha kuna xidhan barahaas bulshada, siiba barta **face-book**, kana duulaya halku-dhigga ah:- in baraha bulshadu ay yihiin mindi labo af-leh (xumaan & samaan), kana mid ah dadka wax ka dhex kaydiya, kuna dhex kaydiya bartan iyada ah, ayaa waxa aan

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

inbadan kudhex arkay bartan Qisooyin iyo Maqaallo fara-badan oo runtii aad iisoo jiitay, iina xiiso geliyay, xikmad iyo macne qoto-dheerna ku fadhiya, si dareen lehna uga hadlaaya una taabanaaya waaqaca nolosha aadamaha, kuwaas oo ay qoreen aqoonyahan fara-badan oo rag iyo haweenba leh oo ku xidhan kuna taxan bartan.

kuwaas oo sababay in aan ku hammiyo in haddii aan ka dhex sameeyo bartan iyada ah baadhitaan, raadin iyo baadigoob khuseeya qisooyinka iyo maqaallada ay qoreen dadka aqoonyahanka ahi ee ku xidhan bartan, kuwaas oo ah qisooyinka iyo maqaallada muhiimka iyo waxku'oolka ah, taabanayana kana hadlaaya waaqaca nolosha aadamaha, ka dibna aan isu keeno, ururiyo, habeeyo, anna aan kuladho ama kudaro wixii aan raacin karo ama ku kabi karo, aan ka samayn karo buug wayn oo wax-ku'ool ah, kaas oo wax badan kusoo kordhin kara anficina kara bulshadan aan la noolahay iyo bulshada caalamkaba.

Fikraddaas oo kama dambaystii intaan ku qancay aan ku dhaqaaqay, hirgeliyayna, taas oo dedaal dheer, baadigoob, raadin, isukeenid, ururin, kalashaandhayn, kalasaarid iyo habayn dheer kadib natiijadii kasoo baxday ay noqotay/tahayna buugaagtan taxanaha ah ee lamagac baxay **IRRIDAHA GUUSHA,** haddana akhriste aad akhriyayso taxanihii saddexaad ee **IRRIDAHA GUUSHA 3.**

Sababta ay buugaagtani magacaas uqaateenna akhriste waxa aad ogaan doontaa fahmina doontaa marka aad dhex gasho buugaagtan iyaga ah, akhridona waxa ku qoran ee ay ka hadlayaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Haddaba buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 3** waxa uu ka koobanyahay boqol iyo labaatan (120) qisso iyo saddex (3) maqaal, marka aan leeyahay qissona, qissasku waxa ay u kala baxaan kuwo male-awaal ama dad-samee ah (fiction stories) iyo kuwo dhab ah , dhacayna (fact history), kana dhacay koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, markay sidaa tahayna dhammaan boqol iyo labaatanka (120) qisso ee ku jira buuggani waa kuwo dhab ah, dhacayna (fact history), kana dhacay meelo kala du-duwan oo ka mid ah koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, waana qissas dhammaan mid kasta oo ka mid ahi ay si dareen leh utaabanayso ugana hadlayso waaqaca nolosha aadamaha.

Sidoo kale aniga (ururiyaha buugga) oo kaduulaaya kala duwanaanta xagga xiisaynta ee aadamaha ayaa buuggan waxa aan ukala qaybiyay uuna ukala qaybsanyahay una kala xidhanyahay saddex (3) qaybood oo kala ah:-

- ✓ **Qaybta koowaad:- Qissas Diini ah (20 Qisso).**
- ✓ **Qaybta labaad:- Qissas Jacayl ah (20 Qisso).**
- ✓ **Qaybta saddexaad:- Qissas Qubane ah (80 Qisso).**

Halka saddexda (3) maqaalna ay ka yihiin kuwo kala raacsan saddexda qaybood ee ay u kala qaybsanyihiin qissasku, taas oo mid kastaaba uu ka hadlaayo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

mawduuc ku saabsan qaybta uu raacsanyahay, soona xidhaayo, soona geba-gebaynaayo, soona af-meeraayo qaybtiisa.

Qisso kasta oo ku jirta buugganina waxa ay leedahay duluc, gun & gebo-gebo iyo cashar laga baranaayo, taas oo qofka akhristaha ah usoo koobaysa nuxurka iyo gobo'da ay ku fadhido qissadani uu wakhtiga badan soo akhriyayay, taas oo dhawrka sadar ee udambeeya qisso kastaana uu ka hadlaayo arrintaa iyada ah!!!.

Sidoo kale aniga (ururiyaha buugga) oo kaduulaaya qodobka ah:- in sawirku uu soo dhaweeyo fahamka aadamaha, ayaa waxa aan ku dedaalay in bar-bilawga qisso iyo maqaal kastaba aan dhigo sawir ku habboon, taas oo Allah swt igu guuleeyay aanaan ku guulaystay.

Si kastaba ha ahaatee, waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo akhriya, ha ugu yaraato hal qisso ama maqaal'e uu noloshiisa saamayn ku yeelan doono, saamayna doono!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo leh han, hammi, himilo, hiigsi iyo hadaf, kaas oo akhriya, fahmana buuggan, Allah-na swt talo saarta, uu ku guulaysandoono himiladiisa iyo riyadiisa, (haddii Allaha awoodda lihi idmo)!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya da'da uu doono ha ahaadee in dhabanka iyo gacantu ay inbadan isku daali doonaan, iskuna sawirmi doonaan!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qofkasta oo akhriya mar, laba, saddex iyo inkabadanba aanu ka xiiso goyn-doonin akhrintiisa iyo ku noq-noqoshadiisa!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya ugu yaraan hal baaragaraaf oo kamid ah uu guntiga u adkaysan doono sidii uu buuggan uwada akhriyi lahaa una dhammayn lahaa!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in uu qof kasta da'da uu doono iyo marxaladda uu doono haku jiree ka kafayn karo baahidiisa akhris, waayo haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska diiniga ah waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska diiniga ah, sidoo kale haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska jacaylka ah waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska jacaylka ah, sidaa si lamid ah hadduu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska ka hadlaaya waaqaca guud ee noloshana waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska qubanaha ah.

Guntii iyo geba-gebadii in kasta oo aan dedaal iyo daacadnimo ugu ban-baxay arrintan iyada ah (qoraalka buuggan), haddana aadmiga qallooc iyo wax lagu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

qoonsado lama waayo, gefkana waxa aan u ahay bani-aadam, haddaba wixii uu buuggani gol-daloolo yeesho, akhristayaashuna ay dareemaan, ugu horrayn waxaan ucaddaynayaa in aanay ahayn waxaan ubadheedhay, una sugnaatay shaydaan iyo ehelkii, iyagana waxa aan si kal iyo laab ah uga codsanayaa in ay igalasoo xidhiidhaan, iigunasoo gudbiyaan wixii talo, tusaale iyo iin uu buuggani leeyahayba ah ciwaanada iyo telifoonada ku lifaaqan bogagga hore ee buugga, si aannu ugu dedaalno wixii gol-daloolo ah ee aannu isla fahamno aanay ugusoo bixin daabacaadaha dambe ee buugga, kuwa horena intii aanu kaqaban-karno aanu kaqabano.

FG:- BUUGGANI WAA BUUG TAXANE AH, QAYBTANINA WAA QAYBTII SADDEXAAD.

AKHRIS WACAN:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

TUSMADA BUUGGA

Q: KOOWAAD, QISOOYIN DIINI AH:-

1) **Ninku wax ima yeelin, balse gadhkiisan wayn ayaa wax iyeelay!!!------25**

2) **Shakhsigii ugu saamaynta badnaa adduunka!!!----------27**

3) **Sayid Xamza iyo sidii uu kusoo islaamay!!!----------29**

4) **Cumar binu-Khaddaab iyo faraskii laangadhaha ahaa!!!----------32**

5) **Maxaa iidiidaaya in aan canaanteeda u adkaysan waayo!!!----------34**

6) **Daku madaxda maraadinayaan ee xaqooda ayay raadinayaan!!!--------36**

7) **Waxaanu uqoraynaa biil ilmo kasta oo Islaamka lagu dhalo!!!----------38**

8) **Malaga yaabaa in aad kahor-dhaqaaqday qof kaa da'wayn!!!----------41**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

9) Xikmadihii Sayid Cali (rc)!!!----------43

10) Albaabada Ilaahay swt iskama wada xidhaayo!!!----------46

11) Mataqaannaa Amiirka Kuufa!!!----------48

12) Curwa binu-Muxammed iyo raadkii uu kategay!!!----------50

13) Abu-Xaniifa iyo Roomaanigii!!!----------52

14) Ilaahay swt ayaan ka xishooday!!!----------55

15) Al-Ma'muun binu-Haaruun al-Rashiid iyo macallinkii yaraantiisa!!!--57

16) Salaaxu-Diin al-Ayuubi ma ahayn carab!!!----------59

17) Maye wejiyadii qurxoonaa!!!----------62

18) Maxaa kugu kellifay qaadashada Diinta Islaamka!!!----------64

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

19) Cat Steven's iyo sidii uu kusoo islaamay!!!----------66

20) Sunet William iyo sidii ay kusoo islaamtay!!!----------71

21) Maqaal - Yaa kudayasho mudan!!!----------73

Q: LABAAD, QISOOYIN JACAYL AH:-

22) Magaranaayo sida uu jacaylku udhasho!!!----------80

23) Isaga ayaa noqon lahaa madaxwaynaha Ameerica!!!----------82

24) Dukaanka ragga lagu iibiyo!!!----------86

25) Fudayl binu-Ciyaad iyo saaxiibkiis Shurayx al-Qaadi!!!----------89

26) Lammaanihii ku ballamay jannada!!!----------92

27) Walaalkayow maxaad uguursan wayday!!!----------94

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

28) Fiirsi ulahaw xogaha aad bixinayso!!!----------97

29) Waxa aan guursaday qalbigeeda saafiga ah ee ma'ahan muuqaalkeeda!!!----------99

30) Suniil Mohran iyo Anjalina!!!----------101

31) Wax-badso wax-beelbay dhashaa!!!----------104

32) Fadlan indhahayga iixafid!!!----------106

33) Laydh waynaa!!!----------108

34) Kahortag maanta qoomamada berri!!!----------110

35) Dib-jirkii xaakimka ahaa!!!----------112

36) Jacaylkayga haan qashin ayaan kadhex helay!!!----------118

37) Waxa mahadi usugnaatay Rabbiga aan iga dhigin qolof madhan!!!---120

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

38) Rajactu!!!----------127

39) Waa maxay furaha qalbiga gabadhu!!!----------133

40) Waxa aan kunoolahay geeri iyo nolol dhexdood!!!----------135

41) Wanaagga dareenka dhabta ah ee lammaanenimo!!!----------137

42) Maqaal – Noloshu waa jacayl!!!----------139

Q: SADDEXAAD, QISOOYIN QUBANE AH:-

43) Jasiiraddii kaneecada badnayd!!!----------149

44) Tijaabadii guusha!!!----------154

45) Mao Zedong iyo halgankii himiladiisa!!!----------157

46) Franklin D. Roosevelt iyo halgankii himiladiisa!!!----------159

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

47) Noqo muwaadin dhab ah, halkii aad kanoqon lahayd dabadhilif calooshii ushaqayste ah!!!----------161

48) Qof kastaa waxa uu qaadanayaa waxa kamaqan!!!----------163

49) Uroonaanta dadka!!!----------165

50) Faqrinimo xorriyad wadata ayaan kajeclahay hanti laygu addoonsado!!!----------167

51) 10 Daqiiqo ayaa aan idin siinayaa si aad sifiican ugaga bogataan midabkayga!!!----------169

52) Sulaymaan binu-Cabdi Malik iyo ninkii reer baadiyaha ahaa!!!-------170

53) Ukala hor-mari sida ay ukala mudanyihiin!!!----------173

54) Uhalgamidda hadafkaaga!!!----------175

55) Allah swt ubandhigo muraadkaaga!!!----------177

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

56) Tuug dhergay ayaa ka kharash yar tuug cusub!!!----------179

57) In uu khayrku kujiro ayaa la'arkaa!!!----------181

58) Oofinta ballanka!!!----------183

59) Bakhayl iyo fulay midna ma-ihi!!!----------185

60) Abaal nin-gala in loogudaa gar-weeye!!!----------190

61) Diinteenu waa nasteexo!!!----------192

62) Waxa aad haysataa 5 saac!!!----------194

63) Waxa aad haysataa 6 saac!!!----------197

64) Mana cabsi gelindoonaan wax carshiga ka hooseeyaa!!!----------200

65) Luka Modric iyo halgankii himiladiisa!!!----------202

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

66) Dr. Daaha Xuseen iyo halgankii himiladiisa!!!----------204

67) Weligii kamuu qalin-jebin jaamacad!!!----------206

68) Waxa lagaadhay xilligii aan ushaqayn lahaa dadkayga iyo dalkayga!-211

69) Guulaystihii aan quusan!!!----------214

70) Adiga oo keliya ayaa og waxa aad awoodid in aad qabato!!!----------216

71) Waad guulaysan kartaa!!!----------219

72) U-adeegihii fuqarada Afrika!!!----------224

73) Kelli Ayaan ugu baahanahay xaaskayga!!!----------227

74) Muwaadin-nimadu waa dareen lahaanshiyo!!!----------230

75) Haruka Nishimatsu iyo Japan air-lines!!!----------232

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

76) Waxa aan rabaa in aan qiyaaso heerka dulqaadkayga!!!----------234

77) Ubadheedh nolosha!!!----------236

78) Jeanne Louise iyo qasrigeedii Paris!!!----------239

79) Rabbi swt ayaa qaddara geerida!!!----------241

80) Haku kedsoomin aqoonta gaaban ee aadamaha!!!----------243

81) Ingvar kamprad iyo dhammaadkii noloshiisa!!!----------245

82) Sariirta ugu qaalisan dunida!!!----------247

83) Lagayaabaa in uu khayrku kuugu jiro!!!----------249

84) Waxa ay iifiirin-jireen sida xawayaanka!!!----------251

85) Ninkii dameerku garasho dhaamay!!!----------253

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

86) Cabdillaahi binu-Mubaarak iyo haweenaydii danyarta ahayd!!!-------256

87) Waxa aan lasoo noqday kabihii Xunayn!!!----------259

88) Xukunkii riyada!!!----------262

89) Bal adba!!!----------263

90) Guushu waxa ay kuu jirtaa inta dedaalkaagu gaadhsiisanyahay!!!----265

91) Harajo-beelin ee dedaal!!!----------268

92) Keliya isku day!!!----------271

93) Gacmo wada-jirbay wax kugooyaan!!!----------272

94) Adoo dhaxal reebi-kara hanoqon dhinte aan latebin!!!----------274

95) Waad qaban kartaa!!!----------276

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

96) Kafikir saad hore ugu socon lahayd, hana ku mashquulin dhaliilahaaga!!!----------278

97) Kala duwanaantu ma'aha muuqaalka, balse waa qalbiga iyo quluubta!!!----------279

98) Waxaan doonayaa inaan noqdo gabadha adduunka ugu dheeraysa!!-280

99) Marnaba haka quusanin nolosha!!!----------283

100) Ku xamdi-naq nimcooyinka rabbi ee aan xaddiga lahayn!!!----------286

101) Xusuuso kuwa kaa hooseeya!!!----------289

102) Marnaba haka quusan raxmadda Alle swt!!!----------290

103) Eebow waxaad iga qaadday nimcadii socodka ee nimcada hooyonimada ha iidiidin!!!----------292

104) Waxa aynu wada saaranahay hal Doon!!!----------294

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

105) Caqligu haku shaqeeyo!!!----------296

106) Sirtu waa isdhul-dhigga!!!----------300

107) Dhiig ayaa daboolay wejigiisa!!!----------302

108) Malala Yuusuf iyo yeydii Daalibaan!!!----------305

109) Qalbi-jab!!!----------315

110) Udhug-yeelo kahor go'aan qaadashada!!!----------317

111) Mushkiladahaaga dhinac kale urog oo ka eeg, fursadona kadhali!!!-319

112) Noqo dheg-maal!!!----------321

113) Aabbo adigu gacantayda qabo!!!----------330

114) Ma naxariis ayay katahay Aabbaha, mise naxariis darro!!!----------331

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

115) Aabbo maxaad ka akhrin qur'aanka, haddii aanad xifdiyaynin!!!----333

116) Waan kaxumahay, waana goor-dambe!!!----------335

117) Fursad labaad ayaan siinaayay!!!----------336

118) Allah swt ayaa og ka wax-kutari-doona!!!----------338

119) Duco Aabbe!!!----------340

120) Dhugasho la'aan qofna ha xukminin!!!----------343

121) Filan waa!!!----------345

122) Tuulada qaanso-raabaadda!!!----------347

123) Maqaal – Qodobbo noloshaada guul uhorseedi kara!!!----------350

124) Tixraac----------357

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)



Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Q: KOOWAAD, QISOOYIN DIINI AH:-

NINKU WAX IMA YEELIN, BALSE GADHKIISAN WAYN AYAA WAX IYEELAY!!!



Shimbir ayaa dul yimi berked biyo ah oo dhallinyaro ay biyo ka cabayaan, naftiisa wuxuu u sheegay in uu sugo inta ay ka tegayan berkedda, isagoo u baqay naftiisa in ay wax yeelaan, sidaa awgeedna uu sugo. wuxuu dul heehaababa way tageen, waxaase markiiba bedelay oo goobtii berkadda yimi nin gadh-wayn, shimbirkii waqti badan ayuu sugayay in looga dareero berkedda si uu uga cabbo, wuxuu mardambe istusay in uu ka cabi karo maadaama wiilashii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong


dhallinyarada ahaa tageen, oo ninkan gadhka wayni aanu wax yeelayn, maadaama uu yahay nin gadh-wayn-leh, mas'uuliyadina ay kamuuqato!!!.

Shimbirkii wuu soo degay si uu uga cabo biyaha, ninkii gadhka-weynaana wuxuu ku tuuray dhagax, wuxuuna kaga dhacay isha, shimbirkii wuu duulay isagoo ishii ka lulato, wuxuuna u tegay Nebi Suleymaan (CS) oo dacwadiisii usoo bandhigay, dabadeed Nebigiina (cs) wuxuu amray in loo yeedho ninkii gadhka-waynaa!!!.

Waaloo yeedhay ninkii, Nebigiina (CS) wuxuu waydiiyay ma adiga ayaa shimbirka wax yeelay, oo dhagaxa ku dhuftay, ninkiina wuu qirtay in uu wax yeelay shimbirka, shinbirkiina wuxuu yidhi:- Nebi Allow ninku wax ima yeelin, laakiin gadhkiisan wayn ayaa wax i yeelay!!!.

Biyo dhaca qisadani waxa uu noqonayaa haddii aad aragtid nin wayn oo 60 jir ah, oo u baahan in wax loo sheego u sheeg, haddii aad aragtid wiil yar oo 15 jir ah oo haya arrin macquul ahna ka dhegayso kuna dhaqan taladiisa, xikmadduna waxay ku jirtaa qofkii Ilaahay (swt) geliyo ee la doono ee ma aha midka gadhka wayn ama da'da wayn!!!.

SHAKHSIGII UGU SAAMAYNTA BADNAA ADDUUNKA!!!



Michael H. Hart oo ah qoraa wayn iyo cilmi-baadhe u dhashay dalka Mareykanka ayaa waxa ay ku qaadatay muddo 28 sannadood ah Inuu allifo Buuggiisii Uu Ugu Magac Daray Boqolka Qof Ee Adduunka Ugu Saamaynta Badnaa (‘100 most influential people in the world‘), Kadib Markuu Dhammaystiray Allifaaddii Buuga Ayuuna Muxaadiro Ku Qabtay Magaalada London, Waxaanuu Kaga Hadlayay Shaqsiyaddii Adduunka Ugu Waynayd uguna saamaynta badnayd Ee Soo Marta, Dad badan Ayaa Goobta Soo Buuxiyay Si Xiiso Badani Ka Muuqdana Waa ay U Dhagaysanayeen Hadalkan Uu Jeedinayo Ninkan Qoraaga Iyo Cilmi Baadhaha Ahi, Waxaanuu Hadalkiisii Ku Bilaabay sidatan :-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Nin Ayaa Ka Soo Baxay Tuulo Yar Oo Makka La Yidhaahdo, Dabadeed Dadkii Ku Noolaa Tuulada Waxa Uu Ku Yidhi :- Dadyahow Waxaan Ahay Rassuul Ilaahay (swt) uu Idiin Soo Diray, Waxa La Ii Soo Diray Inaan Idiin Dhammaystiro Dhaqamada Kuwooda Wanaagsan, Dabadeed Waxa Rumeeyay 4 Qof (Xaaskiisii, Saaxiibkii Iyo Laba Carruura) Immika Oo Laga Joogo Taariikh Ku Aadan 1400 iyo Wax La Jira Oo Sannadoodna Tirada Dadka Islaamka ahi Waxay Ka Badantahay 1.5 billion (Hal iyo Badh bilyan) oo qof, Maalin Walbana Waa ay Sii Siyaadaysaa!!!.

Suurto Gal Maaha Inuu Ahaa Nin Aan Run Sheegayn, Waayo Adduunyada Ma Jirto Been Noolaan Karta 1400 oo Sannadood, Sidoo Kale Waxaan Suuro Gal Ahayn In Tirada Dadka Ee Intaa Le'egi Inaanay Ku Kalsoonaadeen Beenta Qof Keliyi U Sheegay!!!.

Arrinta Kale Ee Cajiibka Ahi Waxa Weeye :- Iyadoo Waqtigaa Aadka U Dheer Ka Soo Wareegay, Haddana waxa Jira Malaayiin Muslimiina Oo Diyaar u Ah Inay Difaacaan Kuna Furtaan Naftooda Haddii Kalmad Aan Habboonayn Laga Sheego Nebigooda, runtii waxa Uu Ahaa Shaqsiyaddii Ugu Saamaynta Badnayd Ee Dunida Guudkeeda Soo Marta Nabi Muxammed (NNKH)!!!.

Qissadani waa qisso qofka muslimka ah usiyaadinaysa iimaanka, iyadoo ka hadlaysa xaqnimada diinta islaamka iyo Nebi Muxammed (NNKH) in uu ahaa rassuulkii ALLE (SWT) ee xaqa ahaa, waana dood cad oo aad ku qancin karto kulana doodi karto cidkasta iyo shakhsi kasta oo dood geliya jiritaanka iyo xaqnimada diinta islaamka iyo Nebigeennii Muxammed (SCW)!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SAYID XAMZA IYO SIDII UU KUSOO ISLAAMAY!!!



Maalin maalmaha ka mid ah Nebiga (NNKH) oo dawaafaya kacbada ayaa waxa caayay abuu-jahal, cay aad u xun, Nebiguna (NNKH) uma uusan jawaabin, kadib haweenay arkaysay waxa dhacaya ayaa u adkeysan wayday, wayna baxday, waxa ayna la kulantay Sayid Xamza (RC) oo Nebiga (scw) adeerkiis ahaa, isaga oo kasoo laabtay kana yimi ugaadhsi, waxa uuna jaclaa ugaadhsiga libaaxyada, xilligaasna gaal ayuu ahaa, waxayna ku dhahday:- haddii aad ogaan lahayd waxa uu abuu-xakam ku sameeyay wiilka walaalkaa, waxa ayna uga sheekaysay waxa dhacay, waxa uuna ku yidhi:- uma uusan jawaabin miyaa?, waxayna tidhi:- maya cidna uma jawaabin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Xamza (rc) waa uu xanaaqay waxa uuna aaday si deg-deg ah gurigii daaru-nadwa asaga oo raadinaya Abuu-jahal, wuuna helay waxa uuna qabtay abuu-jahal, waxa uuna ku yidhi:- ma waxaad cayday Muxammed aniguna diintiisa aan haysto, waxa uuna garaacay garaac dhiig ka keenay, waxa uuna yidhi:- yaa ii jawaabi kara?!!!, waxa istaagay banii-maqsuum oo qaraabada abuu-jahal ah, waxaana celiyay abuu-jahal, waxa uuna yidhi:- ka taga aniga ayaa caayay wiilka walaalkiise!!!.

Xamza (rc) waxa uu u aaray Nebiga (scw) waana uu baxay, waxuuna ku hadlay hadal uununa ugu tala gelin (Diintiisa haysto), markaasna ma uusan islaamin, waxa uu la murugooday hadalkii Sayid Xamza, waxa uuna yidhi:- habeenkii oo dhan waxaan ka fekerayay hadalkii, waxaana is dhahay carab ma u sheegtaa xaqiiqda oo carab agteeda ceeb ku ah in qof waxa uu ku qowlo ka laabto, mise waxaad iska haysataa diintii aad sheegatay, markaan murugooday ayaana Allaah (swt) baryay, waxaana idhi:- Ilaahayow, haddii diinta Muxammed sax tahay qalbigayka ku weyney, haddii kale ii sahal hadalkan meel aan uga boxo, kadibna Allah (swt) qalbigayga waxa uu geliyay, iimaan waxaana u tegay Nebiga (csw) waxaanaan qiray Towxiidka, Nebiguna (csw) aad ayuu iigu farxay!!!.

Hanuunka Alle (swt) ayaa iska leh, qofka uu waafajinayona si dhibyar ayuu ku karsiinayaa, waxaadse iswaydiisaa xamza oo markaa gaal ahaa marka uu saas oodhan uga gubanaayay af-lagaadaynta Nebiga (scw), adi oo islaamnimo sheeganaaya iyo in aad haysato diintii Nebi Muxammed (scw) maxaa lagaaga baahanyahay in aad samayso kuna fal-celiso marka maalin oo dhan Rasuulka (scw)

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

lagugu ag-aflagaadaynaayo, waxyaabaha qissadani ay inoosoo tebinayso aynuna ka faa'iidaynona waxa kamid ah in difaacidda sharafta iyo karaamada Rasuulku (scw) ay waajib inagu tahay haddaynu nahay umadda muslimiinta ah goor-kasta, xaalad-kasta iyo goobkasta oo aynu ku suganahayba!!!.

(**ILAAHAYOW JIDKA TOOSAN NAGU HANUUNI, HANUUNKA ADIGA AYAA ISKA LEHE)**

CUMAR BINU-KHADDAAB IYO FARASKII LAANGADHAHA AHAA!!!



Cumar (rc) waxa uu ahaa imiiral mu-miniin, maalin maalmaha ka mid ah ayaa cumar binu khaddaab (rc) yimid sayladda, waxa uu arkay faras, kadib waxa uu jaclaystay in uu iibsado, ninkii lahaa ayuu uyeedhay wuxuuna ku yidhi :- iga iibi, kadib way kala iibsadeen, cabbaar markuu ninkii sii socday ayuuna cumar (rc) arkay in uu laangadhe yahay farasku, kadibna waa kadaba qayliyay, ninkii ayaana soolaabtay, waxa uuna kuyidhi :- waar faras laangadhe ah ayaad iga iibisay!!!.

Ninkii waxa uu yidhi:- markaan kaa iibinayay caadi ayuu ahaa ee aduu kaajabay, markay waxoogaa murmeen ayuuna cumar (rc) yidhi:- ayaan iskula tagnaa

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

oo inakala saaraaya, ninkii ayaana yidhi:- waxa inakala saari nin layidhaahdo shureex, kadibna way isku raaceen, dadkii ayaana arkay cumar (rc) oo ay nin is haystaan, iyagoona leh:- ninkani ma amiirul mu'miniin ayuu haystaa miyuusan xishoonayn, kadib shureex ayaa layskula tagay, shureex ayaana arrintii loosheegay, shureexna waxa uu yidhi:- cumarow adaa khaldan sababtoo ah waxay ahayd inaad iska eegtid intaadan iibsan shayga, haddii lakala iibsadana soo celin malaha!!!.

Cumar binu khadaab (rc) ayaa aad u farxay kadibna yidhi :- shureexow kac oo waxaad tagtaa magaalada layidhaahdo heblaayo xukunkeedana qabo, waxaana aan aad ujeclahay in qofwalba gafka aan kagalay uu igu hor caddeeyo!!!.

Xaqa oo aad ku taagnaato, ka qudha ee aad ka cabsanayso oo aad ka dhigto Allah (swt), cabsida dadka kale oo aad iska ilawdo, arrin kasta oo laguula yimaaddo oo haddii aad aqoon uleedahay ka dhiibato sida Allah (swt) kugu ogyahay, haddii aanad aqoon ulahayna aad ka gaabsato, lagamayaabo guul iyo hurumar joogto ah maalinwalba maalinta ka danbaysa in aad soo hoyso mooyaane in aad innaba ku qasaarto, ama aad raadkaaga dib uraacdo, waana mid ka mida siraha iyo albaabada ama irridaha guusha!!!.

(CIDDA FAHAMTAABASE ISKA YAR)!!!.

MAXAA IIDIIDAAYA IN AAN CANAANTEEDA U ADKAYSAN WAAYO!!!



Saxaabi ayaa xaaskiisu ku yara kululaatay, wuxuu soo aaday madaxwaynihii mu'miniinta cumar binu-khaddaab (Ilaahay haka raali noqdee) si uu uga soo ashtakoodo, albaabkii cumar (rc) markuu saxaabigii soo istaagay ayuu wuxuu maqlay cumar binu- khaddaab (rc) oo xaaskiisu canaananayso oo si daran ugu qaylinayso oo bannaanka hore laga maqlaayo waxay ku dhigayso cumarna (rc) uu aamusanyahay, saxaabigiina (rc) wuxuu yidhi :- taadii baa roonaydba, isagoo sii bixi raba ayaana albaabka cumar (rc) soo furay oo yidhi:- waxaan u maleeyaa inaad aniga ii socotay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Saxaabigii (rc) baa yidhi:- haa, balse waxa kugu dhacaaya markaan maqlay ayaan iska laabtay, kolkaas ayaa cumar (rc) wuxuu yidhi :- dharkayga ayay dhaqdaa, gogoshayda ayay hagaajisaa, awlaadayda ayay ii tarbiyaysaa, naftayda ayaan xumaan ugadhawraa IWL, Ilaahayna (swt) ma uusan ku amrin inay waxaas oo dhan ii samayso, sidee baan qeyladeeda iyo canaanteeda ugu dulqaadan waynaa maadaama iyaduba intaas oo dhibaato ah ay dartayda u marto, anna maxaa iidiiday inaan canaanteeda u adkaysan waayo!!!.

Ugu dambayn waa dhaqan wanaagsan loona baahanyahay inaan ku dayano, in badan oo badana waa in aynu indhaha ka laabnaa si loo helo nolol macaan qoyskuna uu sii dhisnaado, waana mid kamida albaabada ama irridaha farxadda iyo guusha ee qoyska!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DADKU MADAXDA MA RAADINAYAAN EE XAQOODA AYAY RAADINAYAAN!!!



Cumar binu-khaddaab (RC) Hoggaamiyihii Muslimiinta (Amiirkii Muuminiinta) ayaa isagoo maalin keligii ah la waydiiyay aaway ciidankaagii ilaalada ama gaadhka kuu ahaa iyo dadweynahii danta kaa lahaa ee xarumaha madaxda u talisa hor tubnaan jiray, markaasuu ku jawaabay :- dadku madaxda ma'raadinayaan ee xaqooda ayay raadinayaan, anna xaqoodii baan siiyay, sidaas ayaanana ciidan i ilaaliya ugu baahnayn dadkuna aysan ii raadinaynin!!!.

Xigmadana waxa aan ka qaadan karnaa in qofka madaxda ahi marka uu u caddaalad falo umadda uu xukumo oo xaqooda uu siiyo in uusan u baahnayn

gawaadhi labaatan ka badan oo tikniko ah iyo ilaaliyeyaal tiro badan oo daba yaaca iyo dadka raadinaya oo xafiiskiisa buux dhaafiya, inkasta oo haddii aad sida ugu sarraysa ugu caddaalad fasho kuwa aad xukunto, dhammaantoodna ay raalli kuwada noqdaan xukunkaaga, aanad aamin ka ahayn cadaw kasoo duula debedda oo ka xun wanaagga goobtaas iyada ah kajira, rabana in ay bakhtiiyaan iftiinkaas cadaaladeed ama maamul ee goobtaas kabidhaamay, sidaa daraadeedna ay marwalba muhiim tahay sugidda amniga madaxda Muslimiintu.

ILAAHAY (swt) soomaali ha u keeno hoggaamiye u caddaalad fala, waddani ah oo xoolaha umadda aan boobin, qabyaalad ku dhaqanka ka fog, umadda mideeya, dadka jilicsan ee masaakiinta ahna u naxariista oo si gaar ah wax u tara!!!.

(ALLAAHUMMA AAAMIIIN).

WAXAANU UQORAYNAA BIIL ILMO KASTA OO ISLAAMKA LAGU DHALO!!!



Cumar Binu-Khaddaab (Allah Haka Raali Noqdee) waa saxaabiga xagga fadliga ku Xiga Abuubakar Sidiiq (Allah Haka Raali Noqdee), Waxa Sharaf Ugu Filan Inuu Marar Badan Hadalkii Uu yidhi waxyi ka Soo Degay Oo Weliba Qaar ka Mid Ah Ay Maanta ka Mid Yihiin Qur'aanka La Akhriyo, waxaana La Iloobi karin In Rasuulku NNKH Uu Sheegay In Shaydaanku ka Cararo Wadada Uu Cumar Maraayo, Wuxuuna Ahaa Saxaabi Ilaahay swt ku Ciseeyay Islaamka.

Haddaba, Habeen Ayaa Madiina Waxa Yimid dad Socoto Tujaariin Ah, waxayna Yimaadeen Meel U Dhow Masjidka, Cumar Ayaa ka Codsaday

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Cabdiraxmaan Binu-Cowf In Dadkaas La Ilaaliyo, Wuuna ka Oggolaaday, Habeenkii Oo Dhanna way waardiyaynayeen!!!.

Waxa Dhawr Jeer Ooyay Ilmo (Cunug) Yar, Waxaana U Tegay Cumar Oo ku Yidhi Hooyadiis:- Maxaa Ilmaha ku Dhacay, Bal Aamusii?, Waxay Tidhi: Naaska Ayaan Ka Mashquulinayaa Oo Inuu ka Go'o Ayaan Rabaa, Cumar Ayaana Yidhi Ilmaha Ilaa Naaska Laga Gooyo Mucaawino Iyo Biil Looma Qoraayo, (Mana Aysan Garanaynin Hooyadu Qofka Ay La hadlayso Inuu Cumar Yahay)!!!.

Cumar Wuxuu ku Yidhi:- Meeqa Sano Ayuu Jiraa Cunugaagu?, kolkaas Ayay ku Tidhi:- Wuxuu Jiraa Intaas, Cumar Ayaana kolkaas Yidhi: Hoogaagee, Ilmaha Ha ku Dadajin Inaad Naaska ka Goyso, Subaxdii Ayuuna Masjidka Tegay, dadkuna May Garanayn Qiraa'adiisa Oohin Darteed, Markuu Salaadda ka Baxay Ayuuna Yidhi:- Cumar, Baas Baa kuu Sugnaaday, immisa Ilmood Oo Muslim Ah Ayaad Dishay, Intaas ka Dib wuxuu Diray Mid Dadka Ogeysiinaya Oo Dhahaaya:- Dadoow Ilmihiina Naaska Hore Ha Uga Goynina, waxaanu u Qoreynaa Biil Ilmo Kasta Oo Islaamka Lagu Dhalo!!!.

FG:- Cumar Ma Dilin Carruurta Islaamka, Laakiin Waxay Qisadiisu ku Tusaysaa Mas'uuliyadda Uu Dareemayay Inta Ay Leekayd!!!.

Bal sawiro, Hoggaamiyihii Islaamka Oo Waardiyaynaaya Dad Shacabkiisa ka Mid Ah, Asaga oo Awood u Leh In uu Dad u Saaro Arrinkaas, waxaase Laga Fahmayaa Qisada isdhuldhiggiisa Iyo isaga oo u Arka Inay ka Mid Tahay Shaqadii Uu Masuulka ka Ahaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)


Cadaaladda Cumar (Allah Haka Raali Noqde) Ayaa sidoo kale Laga Fahmayaa kadib Markii Uu Isaga oo Awood u Leh Inuu Ciqaabo qofka dumara uu haddana Arrinka ka Fiiriyay Armay Adiga Qiyaamaha Wax Kaaga Yimaadaan, Qisadu Waxa kale oo Ay Ina Tusaysaa Baahida Aan U Qabno Hogaamiyayaal Cumar oo kale Ah, Taas oo Aad manta moodo In Adduunka Laga Suuliyay!!!.

YAA ALLAH MADAXDA NOO HAGAAJI, XAQA IYO CADAALADDANA NOOGU HANUUNI.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MALAGA YAABAA IN AAD KAHOR-DHAQAAQDAY QOF KAA DA'WAYN!!!



Maalin maalmaha ka mid ah ayaa nin wuxuu u yimid Khaliifkii Islaamka Cali Binu-Abii Daalib, isaga oo ka ashtakoonaaya Irzaaqda oo Cidhiidhi looga dhigay, inta yar ee soo gasha oo Barakada laga Qaaday, iyo in lagu ibtileeyay Guul-darrooyin Burburiyay Rajooyinka uu Nolosha ka Damacsanaa, Intaas oo keliya kuma Joojin hadalka ee wuxuu isla Madashii ka Dalbaday Khaliifka bal inuu u Sheego Dembiga uu Arrintan ku Mutaystay Maadaama uu Nolosha khaatiyaan ka taagan yahay?!!!.

Khaliifkii Mu'miniinta Cali oo ka Jawaabaaya Cabashooyinka Ninka ka soo yeedhay ayaa ugu horayntii wuxuu ninkii Waydiiyay Su'aal ahayd:- Ma laga

yaabaa inaad ka hor Dhaqaaqday Nin kaa Da' wayn oo Waayeel ah?!!!, ninkii ayaana ku Jawaabay:- Maya, Markale ayuu haddana Khaliifkii Su'aal Waydiiyay ninkii kuna yidhi:- Ma dhici kartaa inaad Salaada Subax ka dib Seexatay?, ninkii ayaana ku Jawaabay:- Maya, haddana Khaliifkii wuxuu Su'aal kale ku Celiyay Ninkii kuna yidhi:- Suurtogal ma tahay inaad ka tagtay Waalidkaaga oo aad u Ducayso?!!!, ninkii ayaana wuxuu ku Jawaabay:- Nacam Haa, waxaan ka tegay inaan u Duceeyo Waalidkayga!!!.

Kadib Khaliifka oo Fahmay halka ay ninka Dhibaatadu kaga timid ayaa ku yidhi:- idhegayso oo xasuusnow, waxaan Maqlay Rasuulka CSW, oo dhahaaya:- Ducada Labada Waalid oo aad ka tagto waxay Jartaa Arzaaqda, hakala Bakhaylin Labadaada Waalid inaad ugu Ducayso Labo Daqiiqo oo ka mid ah Waqtigaaga Salaad kasta dabadeed.

Haddaba, Walaalka/Walaasha Muslimka ahow Waalidku Ciyaar maaha, Ogow waa kuwii u Sabab ahaa Allah swt ka Sakow Jiritaankaaga, waa kuwii Noloshaada iyo Mustaqbalkaaga usoo maray Halgan dheer, waa kuwii Dusha u dhigtay Dhibaato kasta oo kusoo Wajahda, waa kuwii Nafsadooda ka jeclaa Nafsadaada, sidaas darteed Hadday Waalidkaagu kuu Noolyihiin Fursad ayaad haysataa ee u Abaal gud, inkastoo aan la Gudi karin Abaalkooda, haddana u Muuji inaad jacayl u qabtid Jiritaankooda, haddii ay Dhinteena ugu Dedaal Ducada oo Allah swt uga bari inuu Naxariistiisa ku Arzaaqo, Dembigoodana uu Eebe swt u Dhaafo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

XIKMADIHII SAYID CALI (RC)!!!



Amiirkii Mu'miniinta Sayid Cumar binu-Khaddaab (Allah haka raali noqdee), ayaa waxa uu maqlay wiil ku ducaysanaya:- (inta wax xukmiso Allihii ugu xukumka wanaagsanaayow, nakala xukmi aniga iyo Hooyaday!!!), sayidinaa Cumar waa uu yaabay, waxaana uu u tegay wiilkii oo ku yidhi:- maxay tahay ducada aad ku ducaysanaysid?, wiilkii ayaana ku jawaabay:- Amiirkii Mu'miniintow, hooyaday uurka ayay igu qaaday, waa ay idhashay oo inuujisay, markii aan waynaaday ayayna i-inkirtay, oo ay itidhi kuma aan dhalin ee idhaaf!!!.

Sayid Cumar waxa uu yidhi hala keeno hooyadaas, waa la keenay, waxa uu waydiiyay sida ay wax u jiraan, waxayna ku jawaabtay:- ma aan dhalin wiilkan!!!, markhaati ma haysataa ayuu waydiiyay?, waxa ayna keentay walaalaheed oo iyana

ku marqaati kacay in wiilkan uu rabo in uu walaashood ceebeeyo, oo aysan dhalin, sayid Cumarna waxa uu amar ku bixiyay in wiilka xabsiga lugu tuuro, xabsiga ayaana loo qaaday wiilkii, markii ay dhexda sii marayaan ayaana waxa ka horyimid Sayidinaa Cali binu-abii Daalib (Allah haka raali noqdee), wiilkii ayaana sayid Cali la hadlay oo ku yidhi:- inaadeerkii Rasuulkow (Calayhi Salaatu wasalaam), waxa aan ahay mid la dulmiyay, sidan ayuuna Sayid Cumar igu xukumay!!!.

Sayid Calina waxa uu yidhi:- hala celiyo wiilka, wiilkiina waxa lugu celiyay Sayid Cumar, sayid Cumarna waxa uu waydiiyay:- maxaad wiilka usoo celiseen?, waxayna ugu jawaabeen adigu saw nama aadan amrin in aanaan Sayid Cali waxba ku caasin?, isla markiibana Sayid Cali ayaa u yimid Sayid Cumar, waxaana uu ku yidhi:- aniga ayaa xukminaya, xukum uu Alle swt raali ka yahay!!!.

Waxa uu u yeedhay hooyadii, markhaati la imow ayuuna ku yidhi, sidii oo kalena marqaatigii waxa ay isku raaceen in wiilkan aanay gabadhani dhalin, sayidinaa Calina waxa uu yidhi:- ka markhaati ahaada, wiilkan iyo haweeynaydan waan isku meheriyay, 400 oo dirham ayuuna meherku yahay!!!, waxaana uu kadalbaday in ay isu raacaan, halka aroosku ka dhacaayo!!!.

Islaantii waa ay qaylisay, oo ay tidhi:- naar, naar, ma waxaad ii guurinaysaa wiilkayga, wallaahi walaalkay ayaa igu daray aabbihii oo magaalada qariib ku ahaa, wiilkan ayaana dhalay, kadibna qoyskayga ayaa igu qasbay oo i amray in aan diido oo aan iska fogeeyo in aan wiilka dhalay, sayid Cumar (Allah haka raali noqdee) aayana iska ooyay oo yidhi:- haddii uuna Sayid Cali ahaan lahayn, Cumar waa uu halaagsami lahaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Xikmaddu waxa ay ku jirtaa inta kugu hareeraysan, ee noqo mid aqbala mansab kasta oo aad joogto, balse hanoqon mid iska indhatira xaqiiqada si aanad uhalaagsamin if iyo Aakhiroba.

YAA ALLAH DARIIQAAGA TOOSAN NAGU HANUUNI, AQOON DARRONA HANOOGU CADHOONIN.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ALBAABADA ILAAHAY SWT ISKAMA WADA XIDHAAYO!!!



Sida lasoo weriyo, nin kamid ahaa saxaabada iyo xaaskiisa oo safar ahaa ayaa waxa ay la kulmeen tuugo, tugadii ayaana ka furatay wax kasta oo ay wateen xittaa raashinkii ay cuni lahaayeen, markii ay raashinka ka qaateenbana waxa ay bilaabeen inay cunaan (malaha baahi aad u daran ayaa haysay), saxaabigii ayaa arkay kaabaha tuugada oo aan waxba cunaynin, markaas ayuuna saxaabigii su'aalay sababta uusan ula cunayn raashinka tuugada kale!!!.

Kaabihii baana ku yidhi saxaabigii:- waan soomanahay, ninkii saxaabiga ahaa oo yaaban baana ku yidhi:- adoo tuug ah maad soomaysaa, ninkii tuugada kaabahooda ahaa ayaana yidhi:- albaabaha Ilaahay swt iskama wada xidhaayo, xidhiidhkayga aan Ilaahay swt la leeyahayna ma rabo inuu wada go'o, hal irrid oo aan

reebtona laga yaabee in maalin aan ka galo oo laygu dembi dhaafo!!!, laba sanno kadib ayuuna saxaabigii xajka tegay waxuuna arkay ninkii berigii tuuga kaabahooda ahaa oo xajinaaya oo walibana daaci diinta u go'ay noqday!!!.

Waxaynu nahay bani'aadam qaldama oo la hubo inuu dembi galayo, sidaa daraadeed mar walba la hadh wax aad Ilaahay swt la hortagto oo wanaag ah, laga yaabee inay noqoto wixii laguugu dembi dhaafi lahaaye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MATAQAANNAA AMIIRKA KUUFA!!!



Xajaaj Binu-Yuusuf oo dawladdii ummawiyiinta waali/amiir uga ahaa Kuufa, gacan kulaylna ku caan baxay ayaa maalin isaga oo keligii ah oo iska lugaynaya magaalada waxay iska soo hor baxeen nin baadiyaha kasoo galay, xajaaj ayaana salaan kadib ninkii ku yidhi:- Ma taqaannaa amiirka Kuufa, maxaadse ka aaminsantahay?!!!.

Ninkii ayaana kuyidhi:- xajaaj baa la yidhaahdaa, lacnadda Eebbe, ta malaa'igta iyo ta dadkuba ha ku dhacdee!!!.

Xajaaj: Ma i garanaysaa?!!!.

Ninkii:- Maya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Xajaaj:- xajaaj Binu-Yuusuf baan ahay!!!.

Ninkii:- Adigu ma i garanaysaa aniga?!!!.

Xajaaj:- Maya!!!.

Ninkii:- Mawlaa Binu-Caamir baa la i yidhaahdaa, bishii saddex (3) jeer ayaan waashaa, maantana waa tii iigu darrayd oo xittaa waxaan ku hadlaayoba isma ogi mana garanaayo!!!, xajaajna intuu aad u qoslay buu dariiqiisa iska sii haystay, waxna ma yeelin!!!.

Hadal, ficil iyo dareenba waxa muhiim ah inta aanad falin inaad kafiirsato, si aanad hadhaw uga murugoon ugana qoomamoon natiijada kaaga timaadda.

INTA AANAD FALIN KAFIIRSO!!!.

CURWA BINU-MUXAMMED IYO RAADKII UU KATEGAY!!!



Markii uu Cumar Binu Cabdilcaziiz dalka Yaman u magacaabay Curwa Binu-Muxammed, ayuu Curwah meel fagaare ah kula hadlay Shacabka Yaman oo magaalada Sanca kusoo dhoweeyay, wuxuuna ku yidhi:- "Reer Yamanoow, waxaan maanta idiin imid aniga oo wata hal neef oo geel ah, ee maalinka aan idinka tegayo haddii aan la baxo iyada ka badan tuug ayaan ahay ee iska kay celiya, oo igula xisaabtama"!!!.

Labaatan sanno kadib ayaa Curwa laga bedelay dalka Yaman, wuxuuna kala tegay hal neef oo Geel ah, Seef iyo Kutub Qur'aan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Waagii ay madaxda iyo shacabku sharciga u sinnaayeen, madaxduna ay daacadnimo bulshada ugu adeegeysay ayaynu ka hadlaynaa!!!, imminkana xarumaha iyo xafiisyada dawladdu waxa ay noqdeen meelaha sida ugu dhakhsaha badan looga taajiro, usinaan sharcina haba sheegin!!!.

YAA ALLAH MADAXDA IYO HOGAANKA UMADABA NOO HAGAAJI.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ABU-XANIIFA IYO ROOMAANIGII!!!



Wakhtigii taabiciyiinta magaalada ugu wayn ee muslimiintu wax ka bartaan waxay ahayd magaalada Baqdaad ee haatan caasimada u ah dalka Ciraaq, sidoo kalena waxay ahayd magaalada laga maamulo dawlada Islaamka, maalin maalmaha ka mid ah ayaana waxa magaalada yimid nin ka socda boqortooyadii ruumka, kaas oo u sheegay khaliifka muslimiinta in uu hayo 3 su'aalood oo haday muslimiintu ka jawaabaan uu siin doono maal badan oo uu ka keenay boqorka Ruumka!!!, khaliifkii ayaa isugu yeedhay dhammaan culimadii muslimiinta iyo dhammaan wixii aqoonyahan ahaa, wuxuuna amray ninkii Ruumaaniga ahaa inuu su'aalihiisii soo daayo!!!.

Roomaanigii ayaa waydiiyay Muslimiintii halkaas isugu timid 3dii su'aalood ee uu hayay waxa uuna ku bilaabay:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

1) Ilaahay horaantiis maxaa jiray?!!!.

2) Ilaahay dhankee ayuu u jihaystaa?!!!.

3) Ilaahay muxuu hayaa hadda (iminka)?!!!.

Ruux hadla ayaa la waayay, shib iyo shib ayaa ka dhacday, xoogaa kadib ayaana wiil yar oo la fadhiyay aabihii istaagay oo yidhi:- Aabe anaa ka jawaabaaya su'aalahaas, anigaana idinka aamusiin doona, wiilkii yaraa ayaana fasax ka qaatay khaliifkii, markaasuu ku yidhi Roomaanigii:- ma taqaanaa sida wax loo tiriyo?, haa ayuu ku jawaabay, markaas ayuu wiilkii yaraa yidhi:- waxaan kaa rabaa inaad tiriso tiro illaa iyo toban ah, waana in aad ka bilowdaa kor adigoo hoos-hoos u tirinaaya!!!.

Roomaanigii ayaana bilaabay sagaal (9), sideed (8), toddobo (7), illaa uu ka gaadhay kow (1), markii uu kow gaadhay ayuu aamusay, wiilkii yaraa ayaana yidhi:- maxaa ka dambeeya kow?, markaas ayuu ku jawaabay:- "waxba, kow ayaana ugu dambeeya, wiilkii ayaana yidhi:- hadii ay tiro kow ugu dambayso oo aad dhaafin wayday, sideed markaa ku weydiisay wax jira ka gadaal midka keli ah, midka kowga ah, midka joogidda abidka ah, midka ugu horreeya, midka ugu dambeeya, midka daa'imka ah?", Roomaanigii ayaana la dhacay jawaabta cunugu yar!!!.

Cunugii yaraa ayaana bilaabay ka jawaabista su'aashii labaad taasoo ahayd:- Ilaahay dhankee ayuu u jihaystaa?, wiilkii yaraa ayaana yidhi:- shumac hala keeno kadib hala daaro, markii la daaray ayuu wiilkii waydiiyay:- ii sheeg halka uu holacu aadayo ama u jihaysanayo?!!!, wuxuuna ku jawaabay:- holacu waa iftiin aanan u jihaysanaynin dhanna waqooyi, koonfur, bari iyo galbeedka wuu ifinayaa, wiilkii ayaana ku jawaabay:- hadii iftiinka yar uu iftiiminayo dhammaan afarta jiho

uusanna ku ekayn dhanna, maxaad u malayn iftiinka nuurul-samaawaati, wal-ardi?, ninkii ayaa haddana la dhacay jawaabta wiilka yar!!!.

Cunigii yaraa ee xikmada Ilaahay swt ku manaystay intuusan waydiin su'aashi 3-aad ayaa wiilkii yaraa ku yidhi Roomaanigii:- adigu minbar ayaad fuushantahay, aniguna dhulka ayaan taaganahay, hase yeeshee anaa la iga rabaa jawaab celin, markaa miyeysan fiicnayn inaad soo degto si aan anigu minbarka u fuulo, si dadku dhammaantood ay u maqlaan jawaab celintayda?", roomaanigii ayaana arrintaas aqbalay oo ka soo degay minbarkii, wiilkii yaraa ayaana ku fadhiistay minbarkii uu kasoo degay, kadib ayuuna waydiiyay su'aashii 3-aad oo ahayd:- Ilaahay muxuu haaya iminka?!!!.

Wiilkii yaraa ayaa ku jawaabay:- hadda Ilaahay swt wuxuu sababay inuu beenaale ka so dejiyo minbar sare kuna beddelo kii asaga aaminsanaa, iminkana Ilaahayga aad waydiineyso waxa uu hayo wuxuu sababay inuu beenaale diintiisa ku jees-jeesaaya uu dhulka dhigo korna u qaado kii aaminsanaa, Ilaahayna swt maalin walba xaalkiisu waa sidii uu asagu doono!!!, ninkii roomaaniga ahaa ayaana asaga oo qalbi jab ku dhacay ku noqday dalkiisii, wiilkii yaraa ayaana Ilaahay swt sababay in uu noqdo Imaam aad loo xurmeeyo lagana qaato diinta Islaamka, wiilkii yaraa ee xikmadda badnaa ayaana noqday Imaamkii weynaa ee Islaamka ee loo yaqaan Al-imaam Abuu-Xaniifa Allaah swt haka raali ahaadee.

Xikmaddu kuma jirto waynaanta iyo da'da ee haka raadinin balse waxa ay ku jirtaa cidda uu Allah swt geliyo ee kaqaado!!!.

ILAAHAY SWT AYAAN KA XISHOODAY!!!



Wuxuu Imaamkii waynaa ee Imaam Dahabi kaga sheekeeyay kitaabkiisa Siyar Al-Axlaam qiso uu ku bilaabay sidatan:- dad badan ayaa safar wada galay, ayagoo safarkii ku gudajira ayayna xilli habeen ay tahay meel hawd (duur) ah iskaga hoydeen, markay isku diyaariyeen inay jiifsadaan ayaana waxa yimid Libaax, dhammaantood way boodeen oo geedad ayay fuuleen, markii laga reebo hal nin oo xilligaas salaatu-layl ku jiray mooyee!!!.

Libaaxii wuxuu ku kor wareegay ninkii salaadda tukanayay, ninkiina salaaddiisii ayuu iska sii watay oo kamuu bixin, ka dibna libaaxii isagoon waxba ku samaynin waxna yeelin ayuu iska baxay ama iska tegay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Kolkii uu salaaddii dhammaystay ayaana saaxiibadiis ku yidhaahdeen:- waar saaxiibow maad waalantahay, sow maadan arkaynin libaaxa?!!!, adiguna waad iska taagan tahay, kama baqaysid miyaa inuu ku cuno?!!!, markaas ayuu ku yidhi saaxiibadiis:- wallaahi waxaan ka xishooday Ilaahay swt, oo anigoo hor taagan Rabbigayga inaan ka cabsado khalqi/uun ka mid ah khalqigiisa!!!.

Hadba inta qofka Iimaankiisu leegyahay ama uu xooganyahay ayaa jaan-goysa ficiladiisa iyo hadaladiisaba lkn isagu ficiladiisa kuma jaan-gooyo iimaankiisa, sidaa daraadeed ku dedaal marwalba in aad iimaankaaga ku xoojiso cibaadada Alle swt.

ILAAHAYOW IIMAAN SUGAN NA SII, YAA RABBI.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

AL-MA'MUUN BINU-HAARUUN AL-RASHIID IYO MACALLINKII YARAANTIISA!!!



Al-Ma'muun binu-Haaruun al-Rashiid oo kamid ahaa khaliifadii soo maray dawladdii cabaasiyiinta, ayaa xilligii carruurnimadiisii maalin macalinkiisii aad u garaacay iyada oo aysan wax sabab ahi jirin, Ma'muun-na waxa uu waydiiyay:- macallin maxaad ii garaacaysaa?, macallinkiina waxa uu ugu hadal celiyay:- Aamus!!!, markasta oo Ma'muun su'aal waydiiyona macallinkuna waxa uu ugu jawaabaa:- Aamus!!!.

Labaatan sannadood ka dib markii loo dhiibay khilaafada, wixii ugu horreeyay ee uu qabtay waxay ahayd in uu macallinkiisi u yeedho, isaga oo waydiinaya:- macallin maxaad ii garaaci jirtay waagaan yaraa?!!!, macallinkiina isaga oo dhoolla-caddaynaaya ayuu ku yidhi:- waa xasuus dheer, ma aad ilaawin

miyaa?!!!, waxa uuna yidhi Ma'muun:- ma'ilaawin, qalbigana kama go'in!!!, waxa uuna yidhi macallinkii:- waxa aan kuu garaacayay in aad baratid in qofka dulman uu san waxba ilaawin!!!, ha dulmin qofna waayo dulmigu waa holac ka baxaaya qalbiga qofka la dulmiyay, kaas oo aan damayn xittaa hadii ay sannado badan ka soo wareegaan, hadda ayaadna u baahantahay in aad ka faa'iidaysatid casharkii maalintaa!!!.

Muu ahayn ficil wanaagsan, inkasta oo uu af-tahannimo u-isticmaalay jawaabtiisa ku aadan gefkii uu kagalay ardaygiisii yaraa, se macallinka wanaagsani waxa uu markasta ku dedaalaa sidii uu ardaygiisa ubarilahaa casharro wan-wanaagsan oo uu ku hagi karo noloshiisa inta uga dhiman, sidaa daraadeed ku dedaal macallin in aad quluubta ardaygaaga ku reebtid xasuuso wanaagsan oo anfaca noloshiisa inta uga dhiman, adigana kuu ahaada ajar kuu socda if iyo aakhiroba, halkii aad kureebi lahayd xasuuso noqda holac kabaxaaya qalbigiisa inta nolosha uga dhiman!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SALAAXU-DIIN AL-AYUUBI MA AHAYN CARAB!!!



Intii uu ku jiray dagaalkii dib-u-xoraynta Qudus, hal mar kuma seexan furaash, mar kastana waxa uu ku dul hurdi jiray marba mid ka mid ah fardihii uu ku dagaalami jiray, markii la yidhi:- Sayid Salaaxu-diinow waad daashay ee soo deg oo furaash ku jiifsona waxa uu yidhi hadalkiisii caanka ahaa oo macnihiisu ahaa:- (ma rabo ALLAAH SWT in ay u muuqato Salaaxu-diin oo jiifa iyada oo gaaladiina Qudus haysato)!!!.

Al-Naasir Salaaxu-diin Yuusuf inbu-Ayuubi waxa uu ku dhashay magaalada Tikrit, waxaana lagu aasay masjidka Umayad ee magaalada Dimishiq, asaga oo 56 jir ah, waxa uu xukunkiisii ku fidiyay Masar, Siiriya, Ciraaqda sare,

Xijaaz, Yaman iyo qaybo ka mid ah woqooyiga Afrika, kadibna dhulkii reer Falastiin, waxa uuna ka tegay 7 wiil.

Mudda hadda laga joogo in kabadan 800 oo sanno ayuu noolaa, waxa uuna go'aansaday in uu xoreeyo Qudus, dagaala badan oo ay dhibaato ka soo gaadhay kadibna waxa uu go'doomiyay magaaladii, waxa uuna kala dooran siiyay gaaladii in dagaalku sii socdo iyo in ay isdhiibaan si go'doonka looga qaado, lana amaan geliyo, ugu dambayntiina wuu jebiyay masiixiyiintii oo uu ka dilay tiradii ugu badnayd taariikhdooda oo dagaal kaga dhimata, boqorkii iyo ciidamo badan ayuuna dilay, waxa uuna soo af-jaray 88 sanno oo masiixiyiintu ay xakumayeen Qudus!!!.

Waxa uu xoreeyay badanaa gaaladii waayeelka ahayd, garoobadii ragoodu dagaalka ku dhintay iyo carruur badan oo wada masiixiyiin ahaa, bacdamaa masiixiyiintu ay dadka muslimka ah iyo yahuudaba ay isku si u qali jireena waxa ay ka baqayeen in uu ka aar-gudan doono iyo in uu wada gawraco, taasise ma dhicin, waxa uuna siiyay muddo 40 cisho ah in masiixi kastaa uu ku aado waddankii uu ka yimid, waxa uuna u diyaariyay ciidan sii gelbiya si nabadgalyadooda loo sii sugo, kuwii dagaalamayay ee la qabtayna waxa ay ku dambeeyeen suuqa addoonta!!!.

Waxa uu u ogolaaday in yahuuddu ay tegi karto macaabidyadooda magaalada, waxa uu qabsaday maalin Sabti ah, Axadiina waxa uu u ogolaaday in kaniisadahoodii ay furtaan, taa oo muujinaysa xoriyadda caqiidada iyo dadka laga

tirada badanyahay sida islaamku u dhawro haddiiba ay nabad kugula noolaanayaan oo iyaga laga nabad gelayo!!!.

FG:- Ogow Qudus ma aha magaalo Carbeed ee waa magaala Muslim, Ogow Salaahu-diin Carab ma ahayn ee waxa uu ahaa Kurdi Muslim ah!!!.

Ilaalinta goobaha muqadasaadka/lamataabtaanka ah ee Islaamku waa waajib saaran qof kasta oo Muslim ah goobta uudoono haku sugnaadee intii awooddiisa ah, gudashada waajibkii Allah swt kugu waajibiyay intii aad ka karikartona waa ta aad ku liibaanaysid if iyo Aakhiroba.

MAYE WEJIYADII QURXOONAA!!!



Boqor la odhan jiray Mutawakil oo xukumayay dawladdii Cabbaasiyiinta qarnigii saddexaad ee hijriga badhtankiisii ayaa waxa loo soo sheegay in uu inqilaab ama af-gembi soo wado sheekh la odhan jiray Cali Alhaadi oo ahaa duriyaddii Cali bin abii Daalib oo degganaa magaalada Saamaraa ee dalka Ciraaq, ninkii boqorka ahaa ayaana ciidan u diray in ay soo qabtaan sheekha gurigiisana ka soo baadhaan hub, ciidankii ayaana gurigii xoog ku jebiyay waxayna u tageen sheekhii oo dhulka fadhiya, qibladana u jeeda oo ducaysanaya, gurigiina waxay ka heleen hal maro oo uu xidhnaa iyo hal weel oo uu wax ku cuno/cabbo keliya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Waxay u keeneen boqorkii oo markaa sharaab cabaya, waxayna u sheegeen waxay soo arkeen, boqorkii ayaana koob sharaab ama cabitaan ah u soo taagay sheekhii, dabeedna sheekhii ayaa wuxuu yidhi:- Boqorow waxan weligay afkayga ma gelin ee iga daa!!!, boqorkii ayaana markaas ka dalbaday sheekhii inuu u gabyo, sheekhiina wuxuu u tiriyay gabay uu ku tilmaamayo nolosha qurxoon ee boqorada iyo tan qabriga ku sugaysa oo wuxuu yidhi gabay uu macnihiisu ahaa:-

- **Boqoradii ayaa u hoyday guryo qurxoon oo lagu ilaaliyo, laakiin mawdkii ayaa ka soo dejiyay dabaqyadii qurxoonaa oo god xabaal ah oo dhib badan ku riday!!!**.

- **Qof soo dul maray qabrigoodii ayaa yidhi:- meeye wejiyadii qurxoonaa ee daahyada lagu asturi jiray?!!!, qabrigii ayaana u jawaabay oo yidhi:- wejiyadaas dirxi ayaa ku dul dagaalamaya, wax badan bay wax cuneene, maanta iyagii ayaa la cunayaa!!!".**


Boqorkii ayaa markaa oohintii hayn waayay oo joojiyay sharaabkii wadaadkiina abaal marin siiyay!!!.

Adduunyadu hakuu noqoto keliyaata goob aad ugasii sahay-qaadato deegaanka rasmiga ah ee aakhiro, haddii kale maad fahmin xikmadda aad ujoogtid halkan (Ifka).

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAXAA KUGU KELLIFAY QAADASHADA DIINTA ISLAAMKA!!!



Yusuf Estes, waa shiikh maraykan ah oo islaamay 1991-kii intaas ka horna ka mid ahaa wadaadada kiristanka ee waawayn, Ilaahay swt ayaa siiyay nuurka islaamka oo qalbigiisii beddelay mar keliya, wuxuuna noqday muslim sax ah, wuxuu bartay shareecada islaamka, wuxuu u guntaday inuu dacwadda islaamka xambaaro, si aadana uga shaqeeyo sidii uu awelba diinta baadilka ah ee kiristanka ugu adeegayay, dadka kiristaanka ahi su'aasha ugu badan ee ay waydiiyaan ayaana ah:- maxaa kugu kellifay qaadashada diinta islaamka adiga oo ahaa wadaad wayn oo diinta kiristaanka loo daba fadhiisto?!!!, si cilmiyeysan oo farshaxanimo lehna waa u qanciyaa weydiiyaha markaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Maalin ayaa muxaadiro uu dad kusoo islaaminaayay ayaa dhammaadkii muxaadirada uu sheegay arrin aad u cajab badan dareenkeedana leh, taas oo ah:- in uu dalka Jermany mar keliya tawxiidka u qabtay intii hoolka soo xaadirtay oo tiradoodu dhammayd **1250 (kun laba boqol iyo konton)** qof tawfiiqda Alle swt!!!.


Haddaba maxaad diinta gashatay adigu, waxa jira xadiis Rasuulka scw ka sugnaaday oo macnihiisu yahay, (Iga gaadhsiiya dadka xittaa hal aayad), waa run oo waa maalgashi aan weliba faa'iido mooyee lagu qasaarayn, cidda fahamta ayaabase iska yar.

Yaa Allah nagu sug dariiqaaga toosan ee Islaamnimada.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CAT STEVEN'S IYO SIDII UU KUSOO ISLAAMAY!!!



Cat Stevens, heesaagii dunida caanka ka noqday sannadihii 1960 illaa 1970-meeyadii, xaafadda Marylebone oo ka tirsan magaalada London ee dalka Ingiriiska ayuu ku dhashay Bishii July 21-keedii sannadkii 1948-kii, ninkan magaciisii hore ahaa Cat Stevens markii uu soo islaamayna la magac baxay Yuusuf Islam ayaana isagoo ka hadlaya taariikhdiisa iyo weliba sida uu kusoo islaamay wuxuu yidhi sidan:- qoyska aan ka dhashay dhaqaale ahaan waxaanu ahayn kuwo iska meel dhaxe ah, waxaana xilligii aan yaraa waalidkay igeeyeen iskuul lagu barto mad-habka kaatoliga, markaas aqoon uma lahayn wax diin la yidhaahdo, xattaa islaamka, masiixiyaddu ma qirayso inuu jiro Rasuul Alle oo Nebi ciise ka dambeeya (waa sida nalagu baray iskuulada'e), sidaas darteed ma aanana baadhin xaqiiqada arrintan ku xusan diinta kiristaanka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Da'daydu markii ay ahayd sagaal jir waxaan ahaa mid ku fiican heesaha iyo qoob kacayaarka, aad baana u qancin jiray dadka idaawanaya, sidaasay tahay waxaan ahaa wiil xishoonaya oo jecel kelida, laakiin waxaan markasta ku dadaali jiray inaan fannaan noqdo, sidaas awgeed ayaa waxaan awooda isugu geeyay sidaan u noqon lahaa fannaan caan ah!!!.

Markaan gaadhay shan iyo toban jir waxaan bilaabay muusiga, aabahay ayaa wuxuu arkay inaan jeclahay muusiga, markaasuu ii iibiyay kaban, laba sanno kadibna waxaan ka sare maray fanaaniin badan, kadibna waxaan bilaabay inaan alifo heesaha, markaan gaadhay todobo iyo toban sanona waxaan suuqa usoo saaray Albamkii iigu horreeyay, aad ayuuna u faafay dadkuna wey la dhaceen.

Caan baan noqday oo waxaan helay lacag aan sidaan rabo ugu tunto, waxaana aad ucabi jiray khamriga iyadoo sidoo kalena la tumashada haweenka aan aad ugu waalnaa illaa markii dambe uu igu dhacay cudurka qaaxada ee "TB" oo aan dhakhtar la galay, sariirta dhakhtarka anigoo jiifa ayaana waxa aan bilaabay inaan maskaxdayda ka shaqaysiiyo, waxaan ku fikiray weynaanta Ilaahay swt iyo mucjisooyinka Rabbi swt, waxaan ogaaday inuu jidhkaygu baaba'aayo, nolosha adduunyaduna tahay imtixaan ay u dambayso baaba'a iyo dhammaad!!!.

Mid kamid ah saaxiibaday ayaa dareemay murugta iga muuqata markaasuu ii hadiyeeyay kitaab magaciisa la yidhaahdo Al-dhariiqu ilaa Al- majhuul oo macnihiisu yahay:- (jidkii aan la ogayn wuxuu ku dambayn doono)!!!, waana kitaabkii u horreeyay ee aan ka aqriyo noocan, si kastaba ha noqoteena kitaabku wuxuu ahaa mid aan ku indho kala qaaday xaga aakhiradayda!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Intaa kadib waxaan gudo galay inaan wax ka akhriyo kutubta falsafadda iyo diimaha, taasina waxay si tartiib-tartiiba iiga bixisay mugdigii, waxa siyaaday su'aalahaygii aan iswaydiinaayay, waxaan bilaabay inaan qaado heeso ujeedo ku salaysan, markaasay waxay noqdeen cajaladahaygii kuwo xaqiijiya ujeedo.

Waxaan akhriyay buudiyada iyo diimo kale kumana qancin, markaan ka quustay diimaha kale ayaana waxaan damcay inaan sameysto diin cusub!!!.

Waxa faafay cajaladahaygii, dad badan oo ku nool maraykanka ayaa la yaabay sidaan usoo saaray, waxaana noqday heesaa caan ah, waxaana la iga duubay cajalado heer sare ah, saas oo ay tahay waxaan dareemayay inuu iga maqanyahay shay inaan baadho ay waajib tahay, waxaan goostay in aysan i seejin caan noqoshadu iyo xooluhu waxaan baadhaayay.

Waxaan bilaabay in aan si tartiiba uga fogaado fanka, walaalkay devid ayaa u safray qudus si uu usoo siyaarto meelaha barakaysan, Masjidul-Aqsaa ayaa ka mid ahaa meelahuu soo siyaartay, markaasuu wuxuu soo ogaaday inuu masjidku ka badalan yahay kaniisadaha masiixiyada iyo meelaha ay yahuudu ku cibaadaysato.

Markuu walaalkay ka soo noqday safarkii wuxuu iiga sheekeeyay wuxuu soo arkay iyo waxyaabihii yaabka geliyay ee uu ku arkay Masjidka Al-Aqsaa, wuxuuna ii hadiyeeyay labo musxaf (mid carabi ah iyo mid ingiriis ku turjuman), waayo walaalkay wuxuu ogaa inaan baadhayo xaqiiqada, sidaas awgeed hadiyadan waxay ahayd hadiyad naftayda qaali ku ah!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Waxaan bilaabay inaan akhriyo Qur'aanka, waxaana dhabtii dareemay inuu yahay kitaab aniga la ii qoray, mana dareemin raaxo illaa aan ka dhammeeyay, markaasaan waxaan dareemay in ay tahay diintii aan baadhaayay, waxaan ka helay jawaabihii su'aalahaan qabay, kadibna waxaan akhriyay noloshii Nebi Muxammed scw, waxayna ii saamaysay si layaab leh, kadibna waxaan joogay sannad iyo badh oo aan islaamka akhrinaayay, intaasna muslimiinta ma dhex gelin!!!.

Sannad iyo badh kadibna kuma fikirin waxaan ahayn inaan noqdo Muslim, waxaana si dhaba u ogaaday inuu islaamku yahay Diintaydii, waxaana rumeeyay qowlkii Nebiga scw:- (dadku dhammaan waxay dhalanayaan iyagoo islaam ah, kadibna waxa bedelaaya qoyskooda), mid muslimiinta ka mid ah ayaana i tusay masaajidka Rejentbaark ee ku yaala magaalada London, halkaas ayaan aaday maalin jimce ah sannadkii 1977-kii, kadibna imaamka ayaan la kulmay waana islaamay, waxaana la baxay magaca Yuusuf Islaam!!!.

Waxa aan gebi ahaan joojiyay khamradii iyo sigaarkii, kadib markuu ii sheegay mid muslimiinta ka mid ahi inuu xaaraam yahay sigaarku, waxa kaloon ka go'ay la tumashadii haweenka, waxaana xoogoobay islaamnimadaydii!!!.

Intaan bilaabay qur'aanka akhrintiisa ayaa waxa aan bilaabay in aan tukado shanta salaadood maalin kasta, oo aan bixiyo sakada xoolahayga, macaanka Qur'aanka iyo midhihiisa ayaa iga deeqay wax walba, waxaana bilaabay barashada af-carabiga oo ah afkii qur'aanka kariimka iyo Nebi Muxammed scw.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Sannadku markuu ahaa 1979-kii ayaa waxa aan aaday Makka si aan usoo cumraysto, markaan cumraystay ee aan booqday meelaha dhaxal galka ah ee islaamku qiimeeyay ayaana waxaan ku laabtay Magaalada London, dabeedna waxaan guursaday gabadh muslimad ah oo aabeheed turki yahay hooyadeedna afgaanistaan tahay, waxaana meherka lagu qabtay Masaajidka!!!.

Intaas kadib markii aan islaamay waxaan horey ka bilaabay u shaqaynta dacwada iyo kobcinta islaamka muslimiinta ku nool dalka Ingiriiska iyo weliba meelo kale, waxaana Ingiriiska aan ka aasaasay iskuulo caruurta muslimiinta wax lagu baro iyo hay'ado caawimaadaha ka shaqeeya, ugu dambayntiina waxaan ogaaday liibaanta dhabta ah ee aan ku suganahay, **Allahu akbar**.


Hanuunka xaqqu waa mid katimaada xaga Rabbi swt kumana xidhna goob iyo xaalad toona, balse waxa ay kutimaadaa jacaylka Alle swt keliya, Allahna swt cid uu jecelyahay uunbuu uhibeeyaa siiyaana Iimaanka Islaam-nimada, inagase waxa laynooga baahanyahay hadba intii awoodeena ah in aynu lanimaadno sababtii, qaddarka Eebena swt waa halkiisa, Arrin kastaana waa caynkaas.

Yaa Allah noogu deeq nimcadaada Iimaanka iyo Islaam-nimada.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SUNET WILLIAM IYO SIDII AY KUSOO ISLAAMTAY!!!



Gabadhan kamuuqata sawirka sare waxa lagu magacaabaa sunet William, waa gabadh cir-bixiyeenad ah taas oo ku takhatustay kicinta dayax-gacmeedka, waxaanay u dhalatay dalka Maraykanka, waxyaabaha layaabka leh ee qisada nolosheeda kamidka ahna waxa kamid ah:- mar ay dayaxa tagtay oo ay soo laabatay ayay islaamtay, markii la waydiiyay sababihii ay u islamtayna waxay tidhi:- marka aan dayaxa tago ee aan dhulka soo eego waxa ii muuqda iftiinka iyo nuurka ka baxaya Makka iyo Madiina, dhulka kalena intiisa badan waxa uu ii noqdaa madaw, waxa kale oo intaas ay ku dartay haweenaydan cirbixiyeenka ahi in ay maqashay dhawaaqyo ay ka maqli jirtay masaajidada islaamka kuwaas oo ah Eedaanka!!!, **Allahu Akbar.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Allah swt waxa uu inbadan Qur'aanka kariimka ah dhexdiisa inagu dhiirigeliyaa in aynu ufiir-fiirsano aayaadka faraha badan ee kamuuqda caalamkan aynu kunoolahay dushiisa, kuwaas oo runtii mid kasta oo kamid ahibana uu kutusinaayo ama ay kadhexmuuqdaan mucjisaadka Rabbi swt iyo aayadahiisu, iyaga oo ka iimaanka lehna marka uu dhugto usii siyaadinaaya, ka iimaan-laawaha ahna daddii aanay ku jirin xumaan hoose oo aanu si badheed ah isu diidsiinayn xaqa umuuqda kufuraaya su'aalo farabadan oo uu naftiisa waydiinaayo kuna saabsan xaqa iyo dhinaca uu kaxigo, taas oo ugu dambayntana ku hagi karta hanuunka saxda ah iyo qaadashadiisa, sida qisadan aynu kor kusoo xusnaybana ina tusinayso.

Sidaa daraadeed qof kasta oo islaam ama bani-aadam ahbana waxa looga baahanyahay in uu dhug uyeesho aayaadka Rabbi swt ee sikin walba kamuuqda hareerihiisa, uuna casharo iyo cibrooyin joogto ah kaqaato.

Yaa Allah nakarsii dhugashada iyo ku cibro-qaadashada aayaadkaaga kawniga ah.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAQAAL - YAA KUDAYASHO MUDAN!!!



Marka aynu doonayno in aynu helno qof aynu kaga dayano nolosha dhinacyadeeda kala duwan oo aynu tilmaan kudayasho (role model) ka dhigano, noloshana horumar ballaadhan ka gaadhay, ayaad u malaynaysaa inuu Nebi Muxammed (scw) ka mudan yahay?, dadka qaar waxay u haystaan in Qu'raanka kariimka ah iyo Sunnadii Rasuulku (scw) tahay cilmi aan masaajidka dhaafin oo aan ka warramin wax dhaafsiisan cibaadada Rabbi (swt) iyo ka warranka maalinka qiyaame, laakiin arrintu intaa way ka gun wayn tahay!!!.

Waxa soo batay wakhtiyadan dambe dadka dhiirigalinta ka shaqeeya (Motivators), runtiina waa wax lagu farxo, wax-kasta oo bulshada usoo siyaadaana

waa badhaadhe iyo wanaag horumarka bulshooyinkana ka qayb qaadanaaya, hase-ahaatee waxa loobaahanyahay in dhiirigelintaasi aanay ku eekaan uun tan adduunyo, waana in Aayadani in badan qalbiyadeena ku jirtaa:- (Naf kastaa geerida way dhadhamin,waana loo oofin waxay shaqaysatay maalinka dambe, qofka laga badbaadiyo naar ee janno gala ayaa guulaystay, nolosha adduunyaduna may ahaan illaa wax yar)!!!.

Guusha dhabta ahi waa ta aakhiro inaga oo aan adduunyadana ka tagayn oo ka shaqaysanayna, laakiin qalbiga yayna innaga degin ee gacanta ha innaga ahaato, wax-kasta oo gaal gaadho waa inaan gaadhnaa oon dhaafinaa welibana, aynuna dheeraanaa halka aynu muhiimadda 1aad siinayno oo ah nolosha rasmiga ah ee dambe, daciifnimada umadda Islaamka haysataana waa in dad aynaan isku diin ahayn uynu u-daba fadhiisanno nolosheenna oo dhan, haday tahay:- waxaynu cunaynay, waxaynu xidhanaynay, waxaynu adeegsanayno, dhaqaalaheenna halka aynu gelinayno, hubka la adeegsado, dawada wax lagu daaweeyo iyo shay kasta oo noloshu ku xidhan tahay!!!.

Markaan nuxurka maqaalkan usoo gundo dego dadka guusha gaadhay marka tusaale loo soo qaadanayo waxaad badanaa maqlaysaa magacyada ay ka midka yihiin:- Bill Gates, Mark Zukerberg, Thomaz Edison, Morgan Freeman, Jack Ma, Nic Vujinic , Steve Jobs iyo qaar kale oo badan, balse horumarka uu Nebi Muxammed (scw) ka gaadhay adduun iyo aakhiroba cid ka gaadhay ma jirto, cid dib uga gaadhi doontaana jiri mayso, sidaa daraadeedna waxa loobaahanyahay haddaynu nahay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

umadda muslimiinta shakhsiga ugu horreeya ee inoo noqonaaya tilmaan kudayasho (Role Model) in uu noqdo Nebi Muxammed (scw) , bal suurayso qof keliya oo loo soo diray inuu baddalo bulsho leh:- dhaqan, diin, caado iyo nolol soo jireen ah awow illaa ka awow, aan wadan garab, gaashaan, wehel, hub, ciidan, maal, madaxnimo iyo wax kasta oo bani'aadam lagu khasbi karo ama lagu soo jiidan karo, kuna guulaystay quuluubta balaayiin qof oo dariiqiisa xaqa ahaa raacay!!!.

Wuxuu xaqiijiyay hadaf aan qofna xaqiijin, xattaa qoraalo ay sameeyeen taariikhyahanno, aqoonyahanka caalamka, dad caan dunidan ka ahaa/ah laakiin aan Muslimiin ahayn ayaa waxay qirayaan in qofkii ugu saameynta badnaa uguna waynaa xaga caqliga, maskaxda, hoggaaminta iyo akhlaaqdaba uu ahaa Nebi Muxammed (scw), waxaana raggaas kamid ahaa kuwan:- Michael Hart ayaa qoray sannadkii 1978-kii buug uu ugu magac daray "The 100 most influential persons in History" Boqolka qof ee dunida ugu saamaynta badan, Nebi Muxammedna (scw) wuxuu u doortay shakhsiga 1aad ee ugu saamaynta badan taariikhda adoomuhu intay soo taxnayd, isagoo ka hadlaya doorashadiisa uu kow kaga dhigayna wuxuu yidhi:- "Doorashadayda aan Muxammed (scw) u doortay inuu hoggaamiyo dadka dunida ugu saamaynta badan way is waydiin doonaan dad badani, wayna la yaabi doonaan akhristayaal badani, laakiin waa qofka kaliya ee si wayn taariikhda horumar uga gaadhay dhinac kasta"!!!.

Halgamaagi u halgamay xoriyadda reer Hindiya Mahatma Gandhi wuxuu yidhi sidan:- "Markii aan dhammeeyay akhriska qaybtii labaad ee taariikhda Nebi

Muxammed (scw), waxaan yaqiinsaday inuu ahaa qof muran la'aan ku hanan kara quluubta malaayiin qof", sidoo kale taarikhyahan caan ah oo u dhashay dalka Faransiiska oo la yiraahdo Gustav Lobon wuxuu yidhi:- "Nebi Muxammed (scw) wuxuu ahaa shakhsigii ugu waynaa ee taariikhda bani-aadanka soo mara"!!!.

Qoraa caan ah oo u dhashay dalka Ruushka oo la yiraahdo Leo Tolstoy wuxuu yidhi:- " Shareecadda Muxammed (scw) waxay xukumi doontaa adduunka oo idil, iyadoo ku xukumi doonta maskax iyo xikmad", sidoo kale gabyaa u dhashay dalka Ingiriiska George Bernard Shaw wuxuu yidhi:- "Adduunku maanta wuxuu u baahanyahay nin Nebi Muxamed (scw) oo kale ah, wuxuu xallin lahaa dhibaatooyinka adduunka ka taagan oo idil, wuxuuna ka dhigi lahaa adduunka mid lagu wada noolaado amni iyo farxad"!!!.

Jean-Louis Michon oo ah aqoonyahan Faransiis ah ayaa isna wuxuu yidhi:- "Islaamka amray jihaadka waa mid cafiya xittaa dadka diimaha kale haysta, maxaa yeelay Cumar Binu-Khaddaab oo ardaygii Muxammed (scw) ahaa markii uu qabsaday Qudus muusan dhibaataynin Kiristaankii ku noolaa Qudus", horumarka iyo guulaha lama illaawaanka ah ee uu soo hooyay Nebigeenuna (Muxammed (scw)) ma aha mid lagu soo koobi karayo afar eray oo maqaal lagu qoro, waxaana xittaa lagusoo koobi karin malaayiin maqaal oo lagaga hadlo!!!.

Nebi Muxammed (scw) wuxuu ahaa mid u naxariista dadka oo idil, wuxuu ahaa mid inaga oo idil inaga fekera, dhibta iyo cadaabtana inaga ilaaliya, habeen

ayuuna aad u ooyay Nebigu (scw) sida lasoo weriyay, Allah (swt) ayaana Jibriil usoo diray wuxuuna ku yidhi:- orod u tag Muxammed oo waxaad waydiisaa maxaa kaa oysiinaaya?, Nebiguna (scw) isaga oo oynaaya ayuu yidhi:- Ilaahow umaddayda, Ilaahow umaddayda, llaahow umaddayda badbaadi, markaas ayuu Ilaahay (swt) ku yidhi:- aamus marnaba Ilaahay kuma hoojinayee!!!.

Ilaahow ducada Nabigeena noo aqbal, Nebi Allow waanu ku jecelnahay, waana kuu xiisa qabnaa ee Ilaahay (swt) jannada hanagukaa tuso, aamiin yaa rabbi!!!.

Geba-gebada maqaalkeenan waxa aan jeclaystay in aan halkan kuugusoo gudbiyo qodobo kooban oo kaa caawindoona gaadhidda iyo hanashada himiladaada if iyo aakhiroba:-

- ❖ Ku bilow maalintaada salaadda subax iyo ducooyinka aroorta si aad u gaadho horumar!!!.
- ❖ Wad istiqfaarta waxay tir-tirtaa dunuubta, mar kastana maankaaga geli inuu Ilaahay swt keli yahay oo aan cidna loola shariik yeelin!!!.
- ❖ Ha joojin ducada waa xadhiga badbaadada'e!!!.
- ❖ Xusuusnow waxaad tidhaahdo malaa'ig ayaa qoreysa'e!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

- Niyaddaada wanaaji xattaa haddii aad xaalad xun ku sugantahay!!!.
- Haddii uu kugu bato wel-welka iyo fakarku waxaad tidhaahdaa:- "Laaxowla Walaa quwata illaa Billaah"!!!.
- Ku iibso lacagtaada ducada danyarta iyo jacaylka masaakiinta!!!.
- Sujuud khusuuc leh oo aad ku dheeraato ayaa kaaga fiican daaraha quruxsan ee dunida!!!.
- Ka fakar intaadan odhan, waxa jirta odhaah meel xun kaa tuurtee!!!.
- Iska ilaali habaarka kan dulman iyo illinta kaan waxba awoodin!!!.
- Naftaada daacadda Alle swt ku sandullee, illeen naftu xumaantay ku amartaaye!!!.
- Dhunko calaacalaha labadii ku dhalay aad liibaantide!!!.
- Ogow inuu mar kasta kula jiro kan ugu awood badan, uguna deeqtoon, waana Allaah kor ahaaye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!


ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- Wax aad dhibta u kaalmaysato waxa ugu fiican salaadda, ee salaadda laasim!!!.

Eebow dembigayaga iyo kii waalidkayaba cafi yaa Allah!!!.

Q: LABAAD, QISOOYIN JACAYL AH:-

MAGARANAAYO SIDA UU JACAYLKU U DHASHO!!!



Fyodor Mikhailovich oo ahaa Qoraa, Faylasuuf iyo Warfidiyeen noolaa qarnigii 19-aad oo u dhashay dalka Ruushka Isla markaana lagu tiriyo culimada ugu muhiimsan cilmi nafsiga ayaa waraaq aad u xiise badnayd oo uu u qoray gabadh uu jeclaa hadalladii uu ku yidhi ay ka mid ahayd:- “Jidka aad deggan tahay waxa ku nool 9 dumar ah oo kaa qurux badan, 7 dumar ah oo kaa dhaadheer, 9 dumar ah oo kaa gaagaaban iyo mid kale oo sida aad ii jeceshay si ka badan ii jecel laakiin anigu adiga ayaan ku jeclahay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Goobta aan ka shaqeeyo waxa joogta gabadh mar kasta ii dhoolla-cadaysa iyo mid kale oo mar kasta igu dhiirigelisa in aan la hadlo, gabadha hudheelka ka mudalabka ahi malab ayaa ay shaaha iigu dartaa halkii sonkorta, laakiin haddana anigu adiga ayaan ku jeclahay''!!!.

Ma garanaayo sida uu jacaylku u dhasho, ma garanaayo sida uu qalbigaygu uga tegay gabadha aad jaarka tihiin, gabadha hudheelka ka shaqaysa iyo gabadha iibisada ah ee uu adiga kuu doortay!!!.

In aad wax jeclaato iyo in lagu jeclaado labaduba waxa ay kamid yihiin nimcooyinka uu Rabbi swt bixiyo waxaana loobaahanyahay in milgohooda iyo maamuuskooda lamariyo, aananna lagu dheel-dheelin.

Udhibirsanow ka kalgacayl kuu qaada, siwanaagsana uqaabil, adna waxa kuu dhibirsanaan siwanaagsana kuu qaabili ka aad jeclaatee!!!

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ISAGA AYAA NOQON LAHAA MADAXWAYNAHA AMEERICA!!!



Barack Obama waxa uu in muddo ah daba-socday Michelle si uu gacanta ugu dhigo inantaas soo jiidashada badan, Michelle Robinson iyo Barack Obama Jacaylkoodu waxa uu noqday taariikh-gal, waxa uu u Sheegtay Jacaylkiisa Obama Goor Lagu Jiray xilliga xagaaga Sannadkii 1989-kii, goor-sheegtuna sheegaysay 5-tii Galabnimo, Goobtuna Ahayd Chicago Goob Maqaaxi ah, Jawi Qurux badana lagu jiray, waa uu u yimid, Waxaanuu u sheegtay Jacaylkiisa Isagoo Cabsi dareemayay xilligaas, Markii Ay Tidhi Bal Waan Ku Eegayaa Inaan Ku Qaabilikaro Weji furana Uu kala Kulmay illaa galabtii iyo fiidkii waa ay wada joogeen Waanay Wada Casheeyeen habeenkaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Habeenkaas Obama Waxay U ahayd Farxad Aan La Qiyaasi Karin, Kadib Markii Obama Soo Dhawayn Kala Kulmay Inanta Uu jeclaa, Garyaqaanada da'da yarayd, Quruxda Badnayd, Kaftanka Badnayd, soo jiidashada badnayd, ee Uu Mudada Raad-Guraayay, waxaanuu Go'aan-saday in uu qalbigeeda Dego, waana uu dedaalay, kadibna Waa uu ku guulaystay Jacaylkiisii, ugu dambayna Waxa Uu Ku talaalay jacaylkii, haasaawe iyo Hadiyado Badan Kadib!!!.

Jacaylkii waxa uu noqday Laba Daryaale, oo Michelle'na Waa Uu Ku dhacay, Obama xilligaas waxa uu ku jiray sannadka koowaad ee kuliyadda sharciga ee jaamacadda Harvard, waxa aanu shaqo la waday shirkad dhinaca sharciga ah oo lagu magacaabo Sidley Austin, Aakhirkiina Obama iyo Michelle waxa ay is guursadeen sannadkii 1992kii, Waxaanay noqdeen laba kamid ah Lamaanayaasha Dunida Ugu Quruxda badan Uguna Soo jiidashada Badan, waxayna isu dhaleen una jooga Laba Hablood Oo Qurux badan isla markaana Awlaad Jacayl ah.

Haddaba waxa jira odhaahyo badan oo fagaarayaal kala duwan uu Obama xaaskiisa ku tilmaamay waxaana kamid ah:- Barack Obama Isagoo Madaxweyne Ah Ayaa Su'aal Uu weydiiyay Nin Wariye ahi, waxaanuu ku yidhi:- mudane Madaxweyne Noo Sheeg Saaxiibkaaga Keliya Ee Aad leedahay, Macnaha Saaxiibka Kuugu Dhow Dunida?, Obamana Isma Dhibine Waxa Uu Si Fudud Oo Dhoola Cadayn iyo Khushuucle U yidhi Waa Xaaskayga Michelle Obama!!!, Waxayna Noqotay Jawaab Cajiib Ku Noqotay Weriyihii Iyo Dhammaan dhegaha Caalamka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Markii Uu ku guulaystay Kursiga Madaxweyne Ee maraykanka Doorashadii koowaad Isagoo lala Yaabanaa Shakhsiga Madow Ee Kursiga Ku Guulastay Ayaa la waydiiyay Su'aal U dhignayd Sidan:- Mudane Madaxweyne Sidee Ugu Guulaysatay Kursiga, Yaase ka dambeeyay Guushan?!!!, waxa Uuna ku jawaabay Isagoo Farxad Badani Ka Muuqato Dhoolla-cadaynayana Michelle Obama!!!, weriyihii Ayayna Xujo Ku noqotay Jawaabtii!!!.

Markii Uu Xilka Ka Tegay Kadib Ayaa La Weydiiyay Iminka shaqada Ugu Muhiimsan Ee Aad qabataa Waa Maxay?!!!, waxa Uuna ku jawaabay Shaqada Ugu Muhiimsan Ee Aan qabtaa Waa Farxada Michelle Obama!!!, mar kale ayaana Ay Cajiib Ku Noqotay Caalamka Jawaabahaa Jacaylka Wayn Xambaarsan Ee Obama Bixinaayay, tan iyo Intii Uu ka Tegay Xafiiskii Aqalka Cadna Obama Waxa Uu Aad ula Dalxiisaa Xaaskiisa iyo Welibana Labadiisa Hablood, waxaana markasta laga Qaadaa Sawiro Ay Xeebaha Dunida Dalxiis Ku Joogaan Iyo Goobaha Kale Ee dalxiiska.

Michelle Obama oo Iyaduna Sidoo kale ah Gabadh Kaftan Badan, Dadka Si Fudud ula Fal Gali karta, Aan isla waynayn, Jecelna Caawinta Dadka, Marar badana Kasoo muuqatay Fagaarayaasha ay ka heesayeen Fanaaniinta Hip-hopka iyadoo Qoob-kaciyaar samaynaysa Iyadoo ah Marwada Koobaad Ee Qaranka Maraykanka, ayaa maalin maalmaha kamid ah iyada iyo saygeeda Obama oo makhaayad ka cunteynaaya ayuu arkay obama ninka makhaayadda adeegaha ka ahaa oo si saa'id ah xaaskiisa ufiirinaaya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Wuxuu dareemay in ay jirto xaalad kabaxsan caadinimada arrintani, xaaskiisa ayuuna weydiiyay su'aal ahayd:- "ninkaas muxuu kaa eegayaa"?, kadib ayayna dhahday:- "intii aynaan aniga iyo adiga isbaran ka hor ayaan isjeclaan jirnay", Obama ayaana dhahay:- "haduu ku guursan lahaa xaas adeege makhaayadeed ayaad maanta ahaan lahayd", kadib ayay si dhiiranaan leh ugu tidhi:- "mayee isaga ayaa noqon lahaa madaxwaynaha Ameerica"!!!, Jacaylkooda Ay soo Bandhigeen 8-dii sannadood ee ay Maraykanka Madaxda u ahaayeena waxa uu ahaa Mid Taariikh reebay.

Qisadanina waxa ay ina tusinaysaa In Guulo badan oo uu gaadhay madaxwayne Obama ay ka dambaysay xaaskiisu, Garab taagnaydna Markasta, Meel kasta iyo xaalad kastaba " Raalliyo ninkii helaa Ragannimo Ku faana", Jacaylka Dhabta ahina inaanu Dhammaan heer-kasta oo nololeed oo ay galaan lamaanayaashu ayay tusaale utahay!!!.

Xaaskaagii ku garab-taagnayd, kuuguna samraysay duruufaha ad-adag markii aad lahalgamaysayna waa in aanad ku noqon abaal-laawe iyo liiddi marka ay noloshu ku wanaajiso!!!.

A**baal ninkii gala in loo gudaa gar weeye!!!.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DUKAANKA RAGGA LAGU IIBIYO!!!



Markii uu dhammaaday dagaalkii labaad ee adduunka oo ay rag badani ku le'deen (dhinteen) ayaa magaalada New-York ee dalka Maraykanka laga furay dukaan ragga lagu iibiyo, halkaas oo ay gabadhu ka iibsanayso ninkii ay ku qanacdo, irridka hore ee dukaankana waxa ku dheggan boodh sheegaya sida uu dukaanku u shaqeeyo oo ay ku qorantahay:- “Dukaankan oo ah fooq ka kooban 6-dabaq oo kala sarreeya waxaad wax ka iibsan kartaa hal mar oo keliya, dabaq kastana waxa ku qoran qiimaha iyo tilmaamaha raga dabaqaas laga helayo!!!, mar kasta oo aad dabaqa kor usii kortona waxa sii kordhaya tilmaamaha fiican ee aad wax ku xulan karto iyo qiimaha labadaba, waxaana laguu ogolyahay in aad wax ka xulato hal dabaq keliya, mana kusoo laaban kartid dabaq aad hore usoo dhaaftay"!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Gabadh ayaa soo gashay dabaqa 1-aad oo ay ku qorantahay:- "halkan waxaad ka heli kartaa rag shidan oo aan lahayn tilmaamo kale oo fiican oo lagu doorto", wayna sii socotay si ay rag kasii fiican u hesho!!!, waxayna tagtay dabaqa 2-aad oo ay ku qorantahay:- "halkan waxaad ka heli kartaa rag shidan oo dabeecad wanaagsan", kuma aysan qancinena way sii socotay!!!.

Waxay tagtay dabaqa 3-aad oo ay ku qorantahay:- "halkan waxaad ka heli kartaa rag shidan, dabeecad wanaagsan oo shaqaysta", wayna kasii socotay!!!, waxayna tagtay dabaqa 4-aad oo ay ku qorantahay:- "halkan waxaad ka heli kartaa rag shidan, dabeecad leh, shaqaysta, hanti leh, dhalinyaro ah oo aan xaasas kale lahayn" halkaasna kuma qancine, way kasii socotay!!!.

Waxay tagtay dabaqa 5-aad oo ay ku qorantahay:- "halkan waxaad ka heli kartaa rag shidan, dabeecad fiican, shaqaysta, hanti leh, nolosha fahamsan, dhalinyaro ah oo aan xaasas kale lahayn", halkaasna kuma hakane way kasii socotay!!!, waxayna tagtay dabaqa 6-aad oo ay ku qorantahay:-"Waxaad tahay gabadhii **31,456,712** ee dabaqan soo gaadha, dukaan-kana ka laabata iyada oo aan waxba iibsan, halkana kuma iibino wax rag ah, balse waxa dabaqan aanu usamaynay in aanu u cadayno in ay adagtahay in dumarka la qanciyo, ee iska laabo waadna ku mahadsantahay booqashadaada iyo wakhtigaaga labadaba"!!!.

Haa, dabeecada bani-aadamka rag iyo dumarba ayaa ah in uu ku fikiro siyaado iyo in uu marwalba wax sii siyaadsado, shaydaanka oo ay isku imtixaamanyihiina waxa uu ku dhiirigeliyaa marwalba in aanu yeelan qanaacad ee uu hore usii socdo ama wax waxan kasii fiican sii raadiyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Qofka bani-aadamka ahi rag iyo dumar kii uu yahayba waa muhiim runtii in uu yeesho qanaacad, naftiisana uu xuduudaha qaar ku xakamayn karo, kana hor istaagi karo in ay dheeraad sii raadiso, iyada oo haddana ay marwalba fiicantahay kasii hawl-galka xaalad xaaladan kasii fiican ama kasii wanaagsan, balse waxa ladiidanyahay ayaa ah ku talaxtagga arrimaha.

Ku dedaal kuxakamaynta naftaada xuduudaha qaar iyo ku tababaridda qanaacada dhanwalba oo nolosha ah oo ay noqoto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

FUDAYL BINU-CIYAAD IYO SAAXIIBKIIS SHURAYX AL-QAADI!!!



Fudayl Binu-Ciyaad iyo saaxiibkiis Shurayx al-Qaadi (Alle swt haw naxariisto labadoodabee) waxay kamid ahaayeen culimadii iyo haldoorkii Taabiciyiinta, maalin maalmaha kamid ah ayuuna Fudayl saaxiibkiis Shurayx ku yidhi:- Shurayxow see isku tihiin xaaskaaga?!!!, Shurayx ayaana ku yidhi: xaaskayga waxaan wada noolnahay muddo 20-sano ah, waligayna kuma arkin wax aan dhibsado!!!, Fudayl ayaana ku yidhi: Shurayxow siday ku dhacday inaad haweenay wada noolaataan 20-sano idinka oo aan weligiin isku dhicin ama is khilaafin!!!?.

Shurayx wuxuu ku jawaabay:- habeenkii ugu horraysay ee la ii guri-geeyay xaaskeyga ayaan ka arkay wanaag diineed iyo muqaal jidheed oo quruxsan, markaas

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ayaan u istaagay laba rakco oo salaatu shukri ah si aan Alle swt uga mahadceliyo nicmadan uu i siiyay, markaan salaama naqsanayay ayaana gadaashayda ka arkay iyadoo ila salaama-noqsanaysa, illeen way ila tukanaysay!!!.

Markaanu Salaada ka dhammaanay ayayna khudbo u istaagtay, furfurasho ka dib ayayna tidhi:- waxaan ahay Gabadh kugu cusub, ma aqaano dabeecadahaaga, ee ibar waxaad jeceshahay si aan u sameeyo, iina sheeg waxaad necebtahay si aan uga fogaado!!!, waxayna hadalkii kusoo gunaanaday Shurayxow reerkaaga kama aanad waayin gabadh aad guursato, aniguna reerkayaga kama aanan waayin oo waxa ku jira rag badan oo ii qalma, waxase Alle swt qoray in aynu labadeenu nolol wadaagno, ee Alle swt uga cabso xuquuqdayda oo igula dhaqan siduu Alle swt ku faray oo ah inaad wanaag igu heysato ama aad wanaag igu fasaxdo, ka dibna way fadhiisatay!!!.

Shureyx wuxuu yidhi:- anna waan istaagay waxaana ku idhi:- Wallaahi hadal fiican ayaad sheegtay, anigu waxaan jeclahay sidaas iyo sidaas, waxaana necbahay sidaas iyo sidaas, wixii wanaag ah oo aad iga aragto faafi wixii xumaan ahna ka gaabso!!!, kadib waxay igu tidhi:- sideen u soo booqanaa reerkayga iyo kaaga?!!!, waxaana ku idhi-: mar-mar dhif ah ayaan soo booqanaynaa si aysan inooga xiisa-dhigin!!!.

Waxay tidhi:- deriska adigaa kala yaqaanee ka warran, yaan u fasaxaa guriga, yaanse ka celiyaa?!!!, waxaana ku idhi:- reer hebel waa dad fiican, reer hebelna waa dad aan wanagsanayn!!!, Shurayx oo hadalka sii wata ayaana wuxuu yidhi:- sannad ka dib waxa nasoo booqday xaaskayga hooyadeed, waxaana usoo

dhowaynay si qurux badan, hooyadiina waxay igu tidhi:- Shurayxow ka warran xaaskaaga?!!!, waxaana ku idhi:- Maansha Allah, hooyo Gabadhaadu waa haweenay aad u qiimo badan, waxayna tidhi:- Shurayxow raggu dhib badan ayay kala kulmaan mana xakamayn karaan xaasaskooda mar hadday u suureeyaan si xad dhaaf ah, ee Gabadha si fiican isaga edbi, deetana waxay ku jeesatay gabadheeda waxayna kula dardaarantay Alle ka cabsi iyo in ay iga dambayso!!!.

Shurayx wuxuu yidhi: labaatan sanno oo aan xaaskayga wada noolahay waxaan ku wada noolnahay nolol kalsooni, raxmad iyo kalgacayl ku dhisan, weligayna hal-jeer ayaan arrin yar isku qabanay markaasna aniga ayaa ka qaldanaa, waana kacafis dalbay qaladkii aan ka galay.

Suubaneheenii Muxammed scw markuu raga kala dardaarmaayay qodobada ay ku dooran-karaan dumarka waxa uu bud-dhig uga dhigay Diinta, ooridu haddii ay diin leedahayna dhammaan waxyaabaha kale oo dhanna way koobsatay, sidaa daraadeed ku dedaal in aad gogol lawadaagto ubadkaagana hooyo uga dhigto oori Diin leh.

LAMMAANIHII KU BALLAMAY JANNADA!!!



Waxa Jirtay haweenay si baxaad leh u Jeclayd ninkeeda, waxay aad uga cabsan Jirtay In hadday Jannada Gasho, hadduu Rabbi swt u Qaddaro Ay Ninkeeda Waydo, haweenaydaasina Waxay Ahayd Ummu-Dardaa Ama xaaska Abii-Dardaa, haddaba Abii-Dardaa waxuu Ahaa Saxaabi Wayn oo Macruuf Ah, Laguna Naanaysi Jiray Kala Saaraha Umadda iyo Sayidka Dimishiq.

Ummu-Dardaa Ayaa u Istaagtay in ay Rabbi swt Barido Waxayna Tidhi Sidatan:- Allahayow Abuu-Dardaa Wuu Isoo Doonay, Wuuna Igu Guursaday Dunida, Aniguna Waxaan Kaa Dalbanayaa in Aad iigu Guurisid Jannada!!!.

Markay Sidaas Tidhi ayaana Abu-Dardaa Ku yidhi:- haddii aad Sidaas Doonaysid Anigana aan hortaa Dhinto Ha Guursan Gadaashay!!!, kadib Abu-Dardaa

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

(Allah swt haka Raali Noqdee), Wuu Dhintay, Ummu-Dardaana Waxay Ahayd Haweenay aad u Qurxoon aadna u Wanaagsan, waxaana soo doontay markiiba Mucaawiye (Allah swt haka raali noqdee) inuu Guursado, waxayna tidhi Ummu-Dardaa:- Wallaahi Maku Guursanaayo Adduunka Inta aan Ka Guursanayo Abuu-Dardaa Jannada Insha Allah!!!.

Waa sidaas Jacaylka Dhabta ah Iyo Ballanta Dhabta ahiba, qofka bani-aadamka ahina ficilladiisa kuma qaabayn karo waxa qalbigiisa ku jira balse waxa qalbigiisa ku jira ayaa qaabeeya ficilladiisa!!!, sidaa daraadeed Ilaali ballanka qoyska iyo ka umadaba!!!.

ILLAHAYOW ZOWJAATKA MUSLIMIINTA AH U NAXARIISO, YAA RABBI.

WALAALKAYOW MAXAAD UGUURSAN WAYDAY!!!



Nin la odhan jiray Najmu-diin oo ahaa amiirkii gobolka Tikriit ee dalka Ciraaq waqti dheer ayaa waxa dhacday in nin walaalkii ah oo isaguna la oran jiray Assadu-diin uu waydiiyay:- walaalkayow maxaad u guursan wayday oo aad xaas la'aan u tahay?!!!, Amiir Najmu-diin oo walaalkii u jawaabayay ayaana waxa uu yidhi:- walaalkayow waa run in aanan guursan oo aanan xaas lahayn waxaase jirta in aanan wali helin xaas ii wacan!!!, dabeedna Assadu-diin ayaa yidhi:- haddaba ma kuu doonaa gabadha uu dhalay nin boqor ahaa oo la odhan jiray Shah Bintu-Suldaan ama gabadh uu dhalay nin suldaan ahaa, kadibna Najmu-diin ayaa mar kale waxa uu yidhi:- iyaguna iima wacna!!!.

Assadu-diin oo la yaaban walaalkii Amiir Najmu-diin ayaa wuxuu yidhi:- haddaba yaa kuu wacan waayahaye?!!!, amiir Najmu-diina wuxuu ku jawaabay:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waxa aan doonayaa sawjad saalixa, gacanta i qabata illaa Jannada oo ii dhasha walad saalix ah oo noqda geesi Qudus dib ugu soo celiya Muslimiinta!!!.

Assadu-diin muu cajabin hadalkani, waxa uuna si adag u waydiiyay walaalkii:- yaa waxaa kuugu sheekeeyay?!!!, Najmu-diin ayaana yidhi:- qofka Allah swt niyad badhax tiran ku tala saarta, Allah swt ayaa ku arsaaqa wuxuu rabo!!!.

Haddaba waxa dhacday in maalin maalmaha kamid ah Amiir Najmu-diin oo la fadhiya Masaajidka Tikriit mid kamid ah culimada dalkiisa, ayaa waxa uu maqlay gabadh daaradda masjidka gadaasheeda kala hadlaysa Sheekha, Sheekhii ayaana ka cudur-daartay gabadhii Najmu-diin si uu ula hadlo, dabeedna Najmu-diin ayaa hadalkoodii soo gaadhay, Sheekhii oo leh gabadhyahay maxaad u diiday ninkaan kuusoo diray, markaasaa gabadhii waxa ay sheekha ugu jawaabtay:- run ahaantii waa nin Allah swt isugu daray qurux, lacag iyo mansab, balse iima wacna!!!, sheekhii ayaana ku yidhi:- oo haddaa maxaad rabtaa?

Gabadhii waxa ay ku jawaabtay:- waxaan rabaa oo aan doonayaa nin gacantayda ii qabta illaa Jannada oo aan u dhalo walad tarbiyad wacan lagu soo koriyay, noqdana geesiga Muslimiinta usoo celiya Qudus!!!, **Allahu Akbar**, waa isla erayadii uu walaalkii ku lahaa Najmu-diin, wuxuu diiday ina boqor iyo ina Suldaanba, iyaduna waxay diiday nin qurux, lacag iyo mansab intaba isku haysta!!!, labadoodubana waxay ka doorbideen ruux gacantooda qabta illaa Jannada una dhala wiil Muslimiinta Qudus usoo celiya.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Najmu-diin ayaa markuu soo noqday sheekhii waydiistay waxaan rabaa gabadhaas inaan guursado!!!, sheekhii ayaana ku yidhi:- waa miskiinad kamid ah dadka saboolka ah ee magaalada!!!, Najmu-diina wuxuu yidhi:- miskiinaduba waa taan raadinaayay muddo badan, sidii ayuuna ku guursaday Najmu-diin gabadhii, waxa ayna u dhashay wiil Muslimiinta wax badan u taray una soo celiyay Qudus, waana Salaaxuddiin Al-Ayuubi!!!, **Allahu akbar**.


Muhiimadda koowaad ee doorashada lammaanaha aad lawadaagayso nolosha ma'aha qurux, mansab iyo maal midna balse waa Diin, waana qodobkii uu inagula dar-daarmay si gaar ahna uu inoogu calaamadiyay suubaneheenii Muxammed scw.

Kudooro Diin, wixii kaloo dhanna waad kaheliye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

FIIRSI ULAHAW XOGAHA AAD BIXINAYSO!!!



Sheekooyinka cajibka ah ee ay taariikhdu xusto waxa kamid ah, in Saxaabigii Muqiira binu-Shucbah ahaa Alle swt haka raali noqdee oo kamid ahaa ragga carbeed ee caqliga iyo dumar-aqoonta lagu yaqaan uu nin ay saaxiib ahaayeen kala tashaday gabadh uu jeclaa oo uu rabay in uu guursado, kadibna ninkii ayaa saxaabigan kula taliyay in uusan guursan gabadhan oo aysan u qalmin, isaga oo ku ciladeeyay in uu hadda kahor arkay gabadhan oo uu nin shuminayo, sidaas ayuuna Muqiira uga rajo-dhigay guurka gabadhaas!!!.

Maalmo kadib ayaa Muqiira loo sheegay inuu gabadhii guursaday ninkii ay saaxiibada ahaayeen ee nacsiiyay guurkeeda, wuxuuna markiiba u tegay saaxiibkiis oo uu waydiiyay sababta uu u guursaday gabadhii uu sheegayay in uu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

arkay iyadoo nin shuminayo, kadinba ninkii ayaa Muqiira u sheegay in ninka shuminaayay ee uu gabadhan ku arkay ahaa Aabeheed!!!.

Dadkii Saxaabigan sidaa ugalay adi kuu daahimaayaan ee si fiican uga fiirso nooc kasta oo xog ah oo aad bixinayso, la wadaagayso saaxiibadaa iyo cidaha kaleba, ama sidoo kale cidaha aad mawduucyadaada nololeed latashi kala samaynayso!!!.

Intii awooddaada ah umeelday odhaahdaada!!!.

WAXA AAN GUURSADAY QALBIGEEDA SAAFIGA AH EE MA'AHAN MUUQAALKEEDA!!!



Waxay ahayd dharxayaysiiso Australian ah, jidhkeeda intiisa badan 65% wuu gubtay kadib markii ay lakulantay gubasho daran oo aad uculus, ninkeedii shaqooyinkii uu qaban jiray wuu joojiyay si uu iyada daryeel gaar ah ugu muujiyo, mar laga waraysanayay muuqbaahiyaha CNN-ta ayaana lawaydiiyay sababta uusan uga tegin oo uu weli udoonayo inuu lasii noolaado xaaskiisa?!!!, waxuuna yidhi:- waxa aan guursaday qalbigeeda saafiga ah ee ma'ahan jidhkeeda ama muuqaalkeeda!!!.

Jacaylka dhabta ahi ma aha muuqaalka ama jidhka qofka dumarka ah ee lajecelyahay balse wuu kaxeeldheeryahay kana qoto dheeryahay, sidoo kalena kamacno iyo mugba waynyahay, duruufaha iyo waayaha ad-adag ee aduunyada ee

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhinac ama siwada jir ah usoo wajaha labada lammaane ee metelaayana wuu kusii xoogaystaa balse kuma laangadheeyo ama kuma dhantaalmo!!!.

Hawaaro jacaylku!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SUNIIL MOHRAN IYO ANJALINA!!!



Suniil Mohran iyo Anjalina waa lammaane u dhashay dalka India, waxay ahaayen arday wax kawada barata Collage ku yaal dalkaasi, waxay iskala qalin-jebiyeen waxbarashada sare, kadib waxa u bilawday xidhiidh jacayl oo aad ay iskugu fahmeen waxayna isla qaateen nolol ku dhisan jacayl iyo farxad, waxaana dadka qaar ay la yaabi jireen isfahamka, farxadda iyo jacaylka ka dhaxeeya labadan lammaane heerka uu gaadhsiisanyahay!!!.

Muddo dheer bay sidaa kuwada socdeen illaa ay gaadheen heer ay ku heshiiyaan labadooduba inay isla aqal galaan, waxaana socotay qorshaha aqalkalkooda, midba midka kalena wuxuu ku dhiiri galinayay dhismaha noloshooda cusub iyo farxada aqal-galkooda!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Suniil Iyo Anjalina waxay ahaayen dad marwalba oo ay soo kacaan iska war haya sida uu xaalkoodu yahay balse subaxdaas maysan dhicin in la soo Waco suniil, waxa dhacday inuu aad uga wal-walo xaalada gacalisadiisa, wuxuu sugay muddo saacad ah walina ma uusan helin jawaab dhanka galisadiisa ah ama wicitaan si uu qalbigu ugu dego.

Markuu waayay muddo dheer hadalkeeda suniil wuxuu soo aaday guriga anjalina bal siduu xaalkeeda u ogaado, markuu soo gaadhay gurigana wuxuu arkay arrin argagax leh maadaama uu guriga anjalina gebi ahaanba uu gubtay, suniil waa uu shoogay wuxuuna dadkii deriska ahaa waydiiyay sida uu xaalku yahay, si kooban uunbaana loogu sheegay in gabadhii la geeyay dhakhtarka wayn ee dawladda xaalkeeduna uu aad u cuslaa!!!.

Suniil wuxuu si dhaqso leh ku yimid dhakhtarka wuxuuna la kulmay gacalisadiisa oo aad dabku u naafeeyay walibana jidhkeedu uusan meelna ka fiyoobayn.

Anjalina xilligaas waxay aad uga niyad jabtay jacaylkooda maadaama uu soo gaadhay dhaawac badalay quruxdii jismigeeda iyo muuqaalkeeda, lkn suniil mohran wuxuu qaatay tallaabo aysan filayn oo wuxuu isku dhiiri geliyay inuusan meelna uga dheeraan jacaylkiisa si uu u hanto xittaa hadduu muuqaalkeedu isbeddelay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Suniil iyo anjalina hadda waa lammaane ku faraxsan jecaylkooda iyo horumarkooda waxuuna gebi ahaanba ka saaray niyadjabkii iyo murugadii kasoo gaadhay shilkii dhacay, wuxuuna kugarab istaagay siday uga kudbi lahayd.

Shakhsiga kula jilaaya xidhiidhka dhabta ah waaka aanad garabkaaga kawaayin xaaladaha ad-adag ee kusoo wajaha waayaha nolosha, sida xaaladan ay lakulantay inantan aynu qisadeeda kor kagasoo sheekaynay, balse waaka ahaada garabkaaga, dhiirigeliyahaaga iyo buurta aad dhabarka ku haysid!!!.

Daacad ka ahaw xidhiidhka aad jilaysid!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAX-BADSO WAX-BEELBAY DHASHAA!!!



Gabadh ayaa waxa ay is dhahday bal tijaabi ninkaaga heerka aad ka joogto iyo sida uu kaaga masayri karo, waxayna udirtay niman, nimankii ayaana inta ay utageen waxay ku dheheen:- oo gorma ayaad gadatay gaadhigan madaw, isna inta uu yaabay ayuu ku yidhi:- haddaa ma mid kalaan wadan jiray sow kan uun mawadan jirin!!!, waxayna ku dheheen:- mid cagaaran ayaa shalay agyaalay gurigaaga, kadibna xaaskaaga ayaa gashay, xoogaa kadibna way soo laabatay!!!.

Wuu ka xanaaqay arrintaas iyada ah balse wax tallaabo ah ma qaadin maalintaas, maalin kale ayaa haddana isla sidii lagu dhahay, wuxuuna qabsaday xaaskiisa, wayna murmeen illaa ay gaadhay murankii xaafadda uu ka qabo gabadha,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

gabadhii ayaana aaday xaafada hooyadeed!!!, si ay maalmo usoo joogto, isagoo xilli galab ah socda ayayna ka hor yimaadeen nimankii una sheegeen:- xaafadda gabadhu hadda joogto inuu ag-taagan yahay gaadhigii cagaarnaa!!!.

Ninkii intuu xanaaqay ayuu aaday xaafaddii ay joogtay xaaskiisu balse muusan ugu tegin gaadhi lkn raad gaadhi ayuu arkay, xilli habeenimo ah ayuuna udhacay xaafadda, wuxuuna baadhay qolka ay gabadhu seeexato, wuxuuna arkay qol kaligeed ay jiifto, wuxuu galay jikada lana soo baxay middi markaa cusbayd, wuxuu la dultegay xaaskiisii oo huruda, wuxuuna kaga fadhiistay caloosha wuuna gawracay isagoo afkeeda barkin ku haya!!!, kadibna wuxuu isku dhiibay booliiska.

Wax badso waxbeelbay dhashaa, kafikir tallaabo kasta oo aad qaadayso iyo hadal kasta oo aad odhanayso xaqiiqaba ha ahaadee khiyaalna haba sheegin, kana fikir inta aanad tallaabo qaadin natiijooyinka gadaasheed kadhalan kara intii awoodaada ah, diinteena suubanina waxa ay ina faraysaa xittaa runta in aynu kafogaano haddii ay wax kharribayso, beenta ayayna inoo ogolaanaysaa hadday wax wanaajinayso!!!, dumarowna tijaabooyinka qaar ama badankooduba ma haboona ee iska daaya, laganayaabee in aad nafsadaadaba ku waydo sida gabadhan oo kale.

Xaqu isma buriyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

FADLAN INDHAHAYGA IIXAFID!!!



Waxa jirtay gabadh indhaha la’ oo nolosheeda oo dhan nacday maadaama aysan waxba arkaynin, qofka keli ah oo ay jeclaydna wuxuu ahaa saaxiibkeed, isagoo markasta agjooga wehelna u ah, waxayna tidhi:- maalin haddii aan indhahayga adduunka ku arki lahaa waxaan guursan lahaa saaxiibkay!!!.

Maalin ayaa qof ugu deeqay labadiisa indhood, hadda waxbay aragtaa oo u jeeddaa qof kasta saaxiibkeedna ka mid yahay, kadibna wiilkii ay jeclayd ayaa waydiiyay:- hadda wax waad arki kartaa oo adduunka waad u jeeddaa ee ma i guursanaysaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Gabadhii waa ay naxday markii ay aragtay in saaxiibkeed uu indhoole yahay, waana ay ka diiday inay guursato, saaxiibkeedna waa iska tegay isagoo ilmaynaaya wuxuuna waraaq yar ugu qoray sidan:- ”fadlan Indhahayga ii xafid”!!!.

Ballanqaad kasta oo aad qaadayso waa in aanad ku deg-degin ee aad inbadan ka fiirsataa, sifogna udhugataa xaaladaha ku xeeran iyo natiijooyinka dambe ee kadhalankara, Diinteenna Islaamkuna aad ayay u adkaysay ballanka iyo arrimihiisa, heer uu gaadhsiisanyahay in haddii adiga oo ballan aad cid uqaaday aan u oofin aad geeriyooto uu ballanqaadkaasi ku biiraayo daynta lagaa gudaayo, sidoo kalena waxa jira xaalado in aad wax ballanqaadaa aanay wanaagsanayn sida :- wakhtiga aad aadka umuraysantahay, wakhtiga aad aadka ufaraxsantahay, wakhtiga aad aadka ucadhaysantahay IWM, sidaa daraadeed kafiirso inbadan kahor inta aanad ballanqaad samayn, haddii uu ballanku dhaco oo uu guntamona waa waajib kusaaran fulintiisu ee intii awoodaada ah kudedaal insha Allah.

Inta aanad falin kafiirso!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

LAYDH WAYNAA!!!



Waxa ay tidhi:- habeen ayaa aniga iyo ninkaygu is khilaafnay, sidii aanu u doodaynay ayuu khilaafkii nala sii fogaaday, dabeeto inta aan ka xanaaqay ayaan damcay inaan qolkaba uga baxo, markii aan kadinka kasii baxaayay ayuuna xaga dambe ee dirica isoo qabtay, anna maan fiirinbee waxaan ku idhi:- isii-daa niyow, farahaaga iga qaad, waan kaaga baxayaa guriga wallaahiye, isii-daa, waar ma rabo hadalkaaga inaan dhagaystee farahaaga iga qaad, waardee masoo fadhiisanayaan ku idhiye maad isii dayn!!!.

Markaan saacad dhan buuqayay ayaan xagga danbe fiiriyay, waxaan arkay ninkaygii oo halkii uu fadhiyay aan kabasoo kicin, markaasaan eegay wixii igu dhagsanaa, shaw markii aan sii baxaayay ayuu handaraabka albaabku diricayga

qabsaday, anna waxaan moodayay isagii oo i maslaxaaya, laydh waynaa!!!, kadib intaan handaraabkii iska furay oo aan qoslay ayaan iskasoo ag-fadhiistay!!!.

Hubsiimadu waa mid kamid ah habdhaqamada ama dabeecadaha ugu muhiimsan ee bani-aadamka, tallaabo ama ficilkasta oo aad qaadaysona waxa muhiim ah in aad kahor qorshayso halkaad dhigi lahayd, sidoo kalena deegaanka kugu xeeran in aad hubsiimo iyo feejignaan sare kula macaamilooto iyana waa mid muhiim ah, marka ay sidaas tahayna umeelday ficilkaaga, hadalkaaga iyo dareenadaadaba!!!.

Hubsiimo halbaa lasiistaa!!!

KAHORTAG MAANTA QOOMAMADA BERRI!!!



Waxa aan u sheegay xaaskayga in aan jeclahay gabadh kale aanana awoodin in aan laba xaas lahaado sidaa awgeedna aan ku khasbanahay in aan furo iyada, waxay ahayd fal celinteedii mid degan, waxaana iga yaabisay in ay igu waafaqday in aan furo, balse waxa ay tidhi laba shardi baan ku xidhayaa arrinta aad iisoo bandhigtay, shardiga koowaad waa in aad dib u dhigto furriinka bil keliya illaa intuu wiilkeena imtaxaanku u dhammaanayo, shardiga labaad-na waa in aad igu qaado gacmahaaga maalin kasta muddo bil ah, iganasoo qaado qolka hurdada illaa albaabka guriga!!!.

Wuxuu yidhi:- waan ku waafaqay anoo layaabay codsigeeda, gabadhaan jeclaana waxaan ugu bishaareeyay in aan guursanayo bil kadib, waxaana qaadi jiray xaaskayga subax kasta, iyaduna qoortay i qabsan jirtay iyadoo dhoolla caddaynaysa,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

markaasuu wiilkayaguna daawan jiray muuqaalkaas, ayaamihii way socdeen, waxaan bilaabay in aan dareemo dareenka xaaskayga, iyaduna sidoo kale, kadib waxa dhammaatay bishii, waxay ahayd caato daran, kadib ayaa waxa aan go'aansaday in aan u sheego jacaylkaygii in aan jeclaystay in aan xoogaa xaaskayga garab-taagnaado, way i dhirbaaxday gabadhii aan jeclaa, waxayna ka baxday xafiiska iyadoo cadhaysan!!!.

Waxa aan ku noqday xaaskaygii anoo u sheegaya bishaarada, mise waxa aan arkayba iyadoo xaalad daran iyo daal ku jirta, waxayna ii sheegtay in ay kansar qabto muddo bilo ahbana uu hayay ayna iga qarinaysay iyadoo shucuurtayda ilaalinaysa, hadafkii ay iiga codsatay in aan qaado muddadii bisha ahaydna uu ahaa in uu dareemo wiilkeedu in uu aabihii jeclaa hooyadii, waxay ku dadaalaysay in aanay xumaan suurada wiilkaygu oo aanu dulmi u arkin furriinkeeda, sawir qurxoona ay kasiiso nolosha guurka, intaa kadib xaaskaygii naftiibaa ka baxday!!!.

Waan murugooday noloshiina way ii dhadhami wayday, gadaasheedna maan guursan diyaarna umaba ihi in aan guursado, waxa aan qasaaray markaan gacanta ku dhigay jawharad qaaliya misana aan daryeeli waayay!!!.

Ugu dambayn qofka sida dhabta ah kuu jecel waxa adag in uu kaa tago xattaa haddaad sababto in uu dhaawacmo, waxa aan dareennaa nimcooyinka marka ay inaga tagaan, in badan oo inaga mid ahina madareemaan nimcooyin badan marka ay haystaan, run ahaantiina waa nimco qaali ah haddaad hesho lammaane aad kuu jecel mar walbana ka fekeraya adduunyadaada iyo aakhiradaadaba, ee **kanahortag maanta qoomamada berri!!!.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DIB-JIRKII XAAKIMKA AHAA!!!



Wiilka dib-jirka ahi badiba dadka wuxuu ula muuqday in uu maskaxda wax ka qabo, kadib markay ku arkeen isagoo qashinka wax ka guranaya, dadkuse ma aysan ogayn in gaajo ka tan-badisay u gaysay, waxa kale oo aanay ogayn in uu bahdil kasta oo uu ku heli karo shaqo u maray oo meeshuu shaqada waydiistaba aan la dhagaysan ee la eego uskaga saaran oogadiisa iyo dharka uu qabo!!!.

Maalin isaga oo aad u gaajaysan ayuu soo fadhiistay meherad, meheraddaas waxa fadhiyay wiil ka dhashay reer maal Allah swt ku mannaystay, dib-jirkii ayaa soo ag-fadhiistay wiilkii ka dhashay reerka maalqabeenka ahaa, markuu arkay ruuxan uskagga badan ayuuna ku yidhi:- iga ag-fogow fadlan oo fadhiiso kuraastaas kale!!!, haye buu ugu jawaabay ee fadlan cashada iga bixi, waxaad

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

rabtidba cun ee fadhiiso meel iga fog ayuu ugu hadal celiyay, haye intuu yidhi ayuu ka durkay oo fadhiistay kursi yaalay meel u dhowayd oday isna fadhiyay maheradda!!!.

Gabadh lahayd meheradda oo aad u qiimaynaysay wiilkaas kasoo jeeda reerka maalqabeenka ah ayaa hadalkii maqashay oo debedda usoo boodday, iyadoo aad u xanaaqsan ayayna aflagaadaysay wiilkii dib-jirka ahaa oo u raacisay inaanu mardambe kusoo noqon meheradeeda oo uu urkiisa meelahaas kale la aado!!!, waxba lama murmin ee haye ayuu yidhi ee haatan fadlan cuntada noocaas ah isii, waxba ku siin maynee na dhaaf ayayna ugu jawaabtay!!!, odaygii ayaana ku yidhi maandhey meeshu waa meherad ee cuntada u keen laga baxshay, iyadoo is cun-cunaysa oo xanaaqsan ayayna cuntadii doontay!!!.

Odaygii ayaa dib-jirkii waydiiyay, sababta aanu uga xanaaqin yasidda iyo aflagaadada labadaas shaqsi u gaysteen oo aanu isaga celin, wuxuuna ugu jawaabay:- adeer ma ruux baan garaadkiisu inta uu leegyahay ugu xanaaqi karaa, haddaanay garan karin in aadamahu siman yahay oo damiir damqada wada leeyihiin oo shaqsi kastaa mudan yahay xushmad!!!, odaygii afka labadiisa fuq ayaa kala tegay, yaab uu la yaabay garashada, dulqaadka iyo xikmadda Allah swt siiyay dib-jirkaas!!!.

Odaygii cabbaar markuu indhaha kala fagiijiyay afkuna kala taagnaa ayuu su'aal kale ku ceshay oo ku yidhi:- maxaad u shaqaysan wayday oo adigoo garashadaas iyo dulqaadkaas Allah swt kugu mannaystay ku baday gaajadan iyo foolxumadan kaa muuqata, wuxuuna ugu jawaabay:- adeer sidaad haatan igu aragtay oo aanan cidna xumaan la jeclayn ma umalaynaysaa in aan naftayda qurux ka hagran

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

lahaa!!!, odaygii ayaana inta ay indhihiisa illin kusoo istaagtay ku yidhi:- maandhow raalli iga ahaw gefkii hore ayaan gef kuugu daraye!!!.

Odaygii intaas markuu yidhi ayuu u yeedhay wiilkii kale oo ka codsaday inuu usoo dhowaado, markuu u yimid ayuuna waydiiyay, sababta uu ugu yidhi wuxuu ku yidhi dib-jirkaas, wuxuuna ugu jawaabay:- in laygu sawiro ayaan nacsanaa ruux sidaas u eeg!!!, midda kale adeer dadka waalan lama soo dhowaysto, sababtoo ah dushay kaa fuulayaan, maalin kastana waa kusoo dabadhiganayaan, markaa waa la iska fogeeyaa!!!.

Odaygii ayaa ku ceshay su'aal kale oo ku yidhi:- maxaad ku garatay in uu waalan yahay, wuxuuna ugu jawaabay:- haddii aanu waallayn waa mashaqayste qudhmay oo dulli ah, hadalladaas wiilka taajirka ah leeyahay gabadhii markii hore dib-jirka aflagaadaysay iyo mid kale ayaa u qoslayay markuu jawaabahaas bixinayay, laba gabdhood oo kale oo la joogayna midina may qoslin oo aad iyo aad ayay uga cadhaysnaayeen jawaabahaas!!!.

Odaygii ayaa intuu fekeray go'aan saday in uu labada wiil su'aalo dhex dhigo, wuxuuna waydiiyay, isaga oo hab sharfoon ula hadlayay oo aanu midkoodna iska garan in la baratansiinayo:- maandhow haddaad u baahato gabadh in aad la sheekaysato maxaad ku odhan lahayd oo guur ahaan aad doonayso in aad guursato, wiilkii ladnaa ayaana ugu jawaabay:- waxa aan u ballan qaadi lahaa adduunkaas wax Alla waxay rabto oo dhan, dhar noocaad rabto, guri aad u qurux badan, nolol raaxo leh, waxaana ka dhiibi lahaa maal aad u fara badan, Odaygii ayaana ku ceshay intaas maxaa kuu raaca oo aad u ballan qaadi lahayd gabadhaas, wuxuuna ugu jawaabay:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

intaas wax kabadan oo ay ruux ka heli kartaaba ma jirto, iyadaaba nasiib leh hadday intaas hesho, labadii gabdhood ee u qoslayay ayaana yidhi:- maansha Allah yaaba heli kara nasiibkaas oo kale!!!.

Odaygii ayaana isla su'aashii waydiiyay wiilkii dib-jirka ahaa oo waliba ka codsaday in uu ka jawaabo, dib-jirkii ayaana yidhi:- adeer ninkaasi inta uu sheegayba gabadhu meeshay joogto waa ku haysataa, midda kalena xoolo la iibsanayo maaha ee waa shaqsi damiir iyo dareen leh, aniguna waxa aan u ballan qaadi lahaa in aanan weligay ciil badin iyada iyo ehelkeedaba, waxa kale oo aan u ballan qaadi lahaa si kasta oo aan uga xanaajiyo ama cid kaleba ugasoo xanaajiso in aanay waligeed oohin iyo murugo ku seexan, deeqdana Allah swt ayaa baxsha, maalinta aan helana waanu ugu mahad-naqi, maalinta aanu waynana waanu ugu mahad-naqi!!!.

Odaygii oo indhihiisa ay soo fuushay illin aad u xanuun badan, ayaana ku yidhi.:- adeer waligay cid maan baryin intaan noolaa, maandhow waxa guriga ii jooga laba gabdhood oo aan midna dhalay midna adeer u ahay, labadaas gabdhood indhahayga waan ka jeclahay, iyaguna iga daran oo naftay ii huri lahaayeen, waxa aan kaa baryayaa oo waliba aad iyo aad kaaga codsanayaa in aan wiilkayga kaa dhigto ee fadlan hayga diidin codsigaygaas iyo baryadaydaas!!!, waligayna waxa aan Allah swt ka baryi jiray in uu gabdhahaas iigu sahlo ruux inta aad sheegtay u samayn kara!!!.

Dib-jirkii ayaana ugu jawaabay Odaygii:- adeer Allah swt ayaa deeqda baxsha, ku odhan maayo maxaa aan siin karaa oo waa igu gef, sababta oo ah berri waxay la iman doonto ma ogi, adeer sida aad ii sharaftay Allah swt if iyo aakhiraba hakuu sharfo, agoon aan aabba lahayn baan ahay, Allah swt ayaana waxa aan ka baryi

jiray in aan helo Aabbe adiga oo kale ah iyo in uu ferej khayr qaba ii furo, adeer waan kaa aqbalay codsigaaga anigoo qalbi ahaan iyo niyad ahaanbana ku faraxsan!!!, waxaanse anna kaa codsanayaa in aadan dukaan i gayn oo iga beddelin dharkan aan qabo oo aadan i qurxin, sababtoo ah waa khayaamo aan labadeenuba gabdhahaas middaad igu daraysidba ku khayaamaynayno, odaygii ayaana yidhi:- maansha Allah, anna waan aqbalay, Ogowna hal mid maaha ee labadaba in aan kugu daraan rabaa!!!.

Labadii gabdhood ee aamusnaa ee ka xanaaqsanaa wixii dib-jirkaa lagu sameeyay iyo hadalkii wiilkii reerka maalqabeenka ah kadhashay ayaana is hayn waayay oo debedda meheraddii ay ku dhuumanayeen ugasoo booday, Odaygiina labadoodiiba isku duubeen oo ku yidhaahdeen:- Aabow annaguna waa aqbalnay, annaga oo qalbi ahaan ku faraxsan!!!, Allah swt ayaa ducadaadii noo aqbalay, odaygii ayaana qaatay bakooraddiisii oo ku yidhi intuu istaagay:- maxaad kasoo doonteen meheraddan, markaas ayay ugu jawaabeen:- Allah swt ayaa na keenay oo nala kulansiiyay in aanu maqalno khayrkan ee ugu mahad naq, ushana iska dhig oo fuli ballan-qaadkaagii!!!.

Odaygii oo farxad la dhoola-caddaynaaya ayaana yidhi:- maandhow wiilkan ku yasayay aabihiis aniguu shaqaale ii yahay oo hantidaas uu kuugu faanayay iga tabcaday, ruux iga maal badanna ma joogo waddankan, laga bilaabo maanta wax kasta oo aan leeyahay adigaa leh, anna aabbahaa ayaan ahay ee waligaa ahow sida qalbigaaga iyo niyaddaadu hadda yihiin, wiilkii ayaana dhoolla-caddeeyay oo yidhi:- adeer haddaan ku idhaahdo ma faraxsani been ayaan sheegay, waxaase Allah swt hibo ii siiyay in aanan aadame kala godbin oo aanan ruuxna ku qiimayn itaalkiisa

maal ahaaneed iyo awood ahaaneedba, Allaha swt aqbalay ducadaydii iyo taadiiba ayaana mahad oo dhan iska leh!!!.

Ruux walbow ogsoonow adduunkan waxa saaran Allah swt ayaa iska leh, ruuxii Allah swt daacad iyo baarri u noqda kuna samra hadba xaaladduu ku sugan yahay, Rabbina swt barya, Allahna swt ferej ayuu u furaa, wuxuuna ka irsaaqayaa meel aanu ka filanayn iyo meel uu filaayoba, waligaana ruux bani-aadam ah ha yasin madax kuu noqon doonaana ma ogide!!!.

JACAYLKAYGA HAAN QASHIN AYAAN KADHEX HELAY!!!



Booqortooyada dalka Sucuudi cabiya ayaa waxa wakhti xaadirkan aad ugu yar guurka ayadoo gabdhaha lagu guursado da'wayn oo illaa 30 jir markay noqoto ah, haddaba barnaamij lagasoo siidaayay kanaal kuwayti ah oo la dhaho **Ktv** oo lagaga hadlay dhibaatada guurka loo maro ayaa mid kamid ah dadkii soo wacay sheegay arrin layaabkeeda leh asagoo yidhi:- "anigu dhib uma marinba xaaskayga oo haan qashin baan ku dhex jeclaaday oo ka dhex helay"!!!.

Wuxuu yidhi:- maalin kulul anoo ka imid shaqadii oo baabuurkayga sita ayaan goortaan baarkin geliyay gaadhigii oo aan damcay in aan guriga galo baan arkay haantii qashinka ee noo dhaxaysay aniga iyo dariska oo foorarta, kadibna markaan toosi is idhi waxaanba ka dhex maqlay sanqadh, waan naxay balse waxa ka

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhex hadlay cod dumar, waxaana waydiiyay anoon fiirin:- “maxaa meesha ku geliyay”!!!, waxayna igu tidhi:- ayadoo qashin daadinaysa dhar asturana aan qabin buu iridku ka xidhmay waxayna ka cabsootay in aabaheed saa ku arko haday gargaraacdo irridka, balse ayadoo fikiraysa aan soo dhaqaaqay, ayna is tidhi intuu guriga gelayo ku dhuumo haanta!!!, kadibna intaan qoslay baan irridkii ka furay kadibna ku dhahay orod ku xarood waayahaye, balse markay soo baxday waxaanba arkay qorrax iftiinkeeda indhahaygu adkaysan waayeen oo waanba ku qallalay!!!, laba maalin kadibna Aabaheed baan kasoo doonay, halka isbuuc kadibna guurkayagu dhacay!!!.

Fuli amarrada Alle swt intii awooddaada ah, kana dheeraw xuduudaha Alle swt, adna waxa uu kuu sahli muraadadaada oo dhane, uuna kuu fududayn camaladaada if iyo aakhiroba’e.

Yaa Allah noo fudaydi ku qummanaanta hillinkaaga toosan.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA MAHADI USUGNAATAY RABBIGA AAN IGA DHIGIN QOLOF MADHAN!!!



Waxa ay ka shaqayn jirtay meherad lagu qaxweeyo, meheradda waxa iska lahaa gabadh kale oo aad u kibir badan oo aad uqallafsan, waxayna ahayd gabadh muuq ahaan aad u qurux badan, meheradda waxa soo fadhiisan jiray rag badan oo soo raacay muuqeeda, raggaas waxa kamid ahaa saddex nin oo midkood uu ahaa nin akhlaaq, maskax, garasho dheer iyo dabci wanaag hibo u lahaa, labada nin ee kalena mid kastaaba waxa guri u ahaa islawayni xadka ka baxsan, waxaana ay haysteen shaqo mushahar fiican leh, waxayna isku haysan jireen lahadalka gabadha meheradda leh ee muuqa qurxoon lahayd.

Muuq-dheer markii nimankaasi yimaadaan waxay xoogga saari jirtay siday usoo jiidan lahayd, xoog saarideeda waxa kamid ahaa inay qaylo iyo bahdil nafta

kaga goyso gabadha shaqaalaha u ahayd, si ay nimankaasi u arkaan inay tahay amiirad oo laga dambeeyo, waxa aad u dhibsan jiray bahdilka ay gabadhaas shaqaalaha ahayd ku haysay gabadhaa kibirka badani ninkii dabciga wanaagsanaa ee labadaas nin soo raaci jiray.

Maalin ayaa waxa dhacay in ay nimankii yimaadeen meheraddii iyadoo ay ka maqan tahay muuq-dheertii kibirka badnayd, waxayna ka dalbadeen sharaab, markii gabadhii shaqaalaha ahayd ay u keentay sharaabkii ayaana waxa soo gashay kibir-badantii meheradda lahayd, koobabkii sharaabka loogu keenayna intay midkood kor u qaaday oo dhinacyada ka eegtay ayay qaylo iyo cay dhegaha u saartay gabadhii shaqaalaha ahayd iyadoo ku eedaynaysay inay koobabku ahaayeen wasakh!!!.

Ninkii dabciga wanaagsanaa ayaa kor u qaaday koobkiisii oo ku yidhi:- Allah swt ayaa i-lehe wax wasakh ah iigama muuqdaan koobabkan, kibir-badan ayaana ugu jawaabtay maxaad adigu ka garanaysaa waxay yihiin adiga iyo gabadhaas ayaa isku maqaam ahe, raggan kale in koobabkan sidan u eeg wax loogusoo shubo raalli kama ihi, wuxuuna ugu war celiyay oo maxay i dheer yihiin labadan nin, waxayna ku tidhi:- naga aamus, war badan uma baahni, haddaad doonayso inaad ogaato sidaad kala tihiin adiga iyo labadan nin ee qiimaha badan eeg muuqaaga iyo darajadaada markaas ayaadna ogaan, waa yahay oo waad iga saxan tahay ayuuna ugu jawaabay, raalina ahaw mahadsanidna!!!, labadii nin ee kalena qosol ayay la dhaceen mana aysan garan inay wax ka yidhaahdaan xuquuqda gabadhaas shaqaalaha ah ee lagu xad-gudbay iyo dareenkeeda sida foosha xun loo dhaawacay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Ninkii dabciga wanaagsanaa fadhigii ayuu ka kacay, labadii kalena wuxuu ku yidhi jooga meeshiina, wuxuuna aaday meherad ku dheganayd, markuu meheraddii kale tegay ayuuna gabadh joogtay wuxuu ka codsaday inay siiso lambarka gabadha shaqaalaha ahayd ee ka shaqaynaysay meheradduu kasoo kacay, iyadoon su'aalo badan waydiin ayayna siisay lambarkii uu ka codsaday, wuxuuna ku noqday meeshii hore ee uu fadhiyay, markuu fadhiistay ayaana labadii kale ku camirteen iyagoo ku leh:- ma waxaad ka masayrtay sida naloo sharfay oo qosol ugu dareen, isagoon weli u jawaabin ayaana kibir-badan oo maqlaysay hadal tiigsi ah soo tuurtay iyadoo leh:- waa jacayl xaasid, intuu dhoolla-caddeeyay ayuuna ku yidhi:- Allah swt ayaa i-lehe inaad is leedihiin oo isku fiican tihiin waa run, maah-maah ayaana ah shimbirba shimbirkiisa ayuu la duulaa, waxaase mahad oo dhan iska leh Rabbiga swt aan iga dhigin qolof madhan!!!

Markay kasoo tageen oo uu tegay gurigii qiyaastiina ahayd waqtigii meheraddii la xidhi jiray, ayuu wuxuu wacay gabadhii shaqaalaha ahayd, markay ka qabatay oo uu isu sheegay ayuuna waydiiyay su'aal ah, walaal maxaa kugu kallifay inaad bahdilkaa ku jirtid maalin kastaba lagugu hayo, waxayna ugu jawaabtay:- walaal waxaan la noolahay hooyaday iyo laba wiil oo walaalahay ah, aabahay waa dhintay, aniga iyo hooyaday ayaa u dhar dhigannay inaan walaalahayo meel kasoo saarno, hooyaday yaanyo ayay suuqa la fadhiisataa anna meheraddaas ayaan ka shaqeeyaa, waxayna gabadhaasi igula kacdo iima muuqdaan, markay igu qaylinaysona waxaan qalbiga gashadaa oo sawirtaa labadii iga yar-yaraa oo iskuulkii kasoo rawaxay iyagoo faraxsan, markay i hortimaaddo ayaana qancaa oo illaawaa waxay daldalayso gabadhaasi!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Waxa kale oo uu waydiiyay inay adeero iyo abtiyaal leeyihiin:- waxayna ugu jawaabtay:- adeeraday waa lix waxayna naga dhaceen dhaxalkii awowgayo iyo kii aabbahayba, abtiyaashayna hooyaday way dayriyeen markii aabbaheed dhintay, si ay hantiduu ka dhintay ay keligood u hantiyaan waana laba nin, habar-yarana ma lihi iyo eeddooyinba, walaal fadlan igaddaa xasuusinta qisadan dhaawac wayn ayaana kasoo marnay, su'aal kalana hayga waydiin, wuxuuna ka codsaday inay uga jawaabto su'aal ahayd, haddii Rabbi swt maanta kaa gacan sarraysiiyo ehelkaagaa sidaas idiin galay oo ay ku mutaan, maxaad samayn lahayd!!!, waxayna ugu jawaabtay:- waxaan helo ayaan la qaybsan lahaa mana xumeeyeen, sababtoo ah waxay sameeyeenba iyagaan is hurrannahay oo dhiig wadaagnaa, waan cafin lahaa walaal oo ehel u noqon lahaa marnabana kama aargoosteen!!!.

Ninkii qisadii dhex martay isaga iyo gabadha iyo arrintii meheradda ka dhacday ayuu uga sheekeeyay waalidkiis, markuu u dhammaystiray ayaana hooyadiis ku tidhi:- Maandhow gabadhaas oo kale nin nasiib leh ayaa hela waxaana wanaagga uu kala kulmi doono usii dheer korinta agoontaas silica la baday ajarka ay leedahay, waa liibaan aakhiro iyo adduunba ah, aabbihiis ayaa isna ku yidhi:- maandhow Rabbi swt wuxuu kula kulansiiyay hooyadaa oo kale, hooyadaa ayaa Allah swt ugu deeqay garasho iyo dulqaad dheeri ah, samirkuna u raacsan yahay, haddaad gabadhaas heshona waxaad idheertahay agoontaas ajarkooda, waxaanse kaa codsanayaa inaadan iga qadin ajarkooda oo aad ii ogolaatid inaan koritaankooda iyo wanaajintooda ka qayb qaato, si taasi iigu suurto gashona fadlan gurigan waynaantu kabadatay soo deji oo ha degin guri kale!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Ninkii isagoo aad mooddo in janno loogu bishaareeyay ayuu sariirtiisii aaday, saq dhexe markii la gaadhay ayuu soo toosay oo soo wayso qaatay una istaagay salaatu layl isagoo Allah swt ka baryayay inuu gabadhaas ka dhigo marwadiisa, aroortii markii la gaadhay ayuuna gabadhii wacay wuxuuna ka codsaday inay u sheegto magaca hooyadeed iyo suuqa meeshay ka fadhiisato oo ay yaanyada ku gaddo, markay u sheegtay ayuuna aabbihiis kaxaystay, markay u tageen ayaana odaygii garasho dheeri ah isticmaalay oo maamadii kala wareegay waxay iibinaysay oo dhan kana codsaday inay la gayso gurigiisa oo la qaado!!!.

Maamadii gabadha dhashay oo aad u faraxsan ayaa ka aqbashay laqaadida alaabta, markay gurigii yimaadeen ayayna ku jaah wareertay quruxda iyo wanaagga adduun ee gurigaa ka muuqda, beerta ku dhextaal, meesha lagu dabaasho, meelaha lagu ciyaaro, kuraasta gudaha iyo beertaba dhex taal, iyadoo dawakhsan ayaana odaygii u yimi oo ku yidhi bal ina keen oo soo qaad qaybtaas, markaas ayuuna ulasoo dhaqaaqay qol guriga kamid ahaa, markay dhigtay ayuuna tusay saddex qol oo kale oo midba aanu ka dhicin kii kale!!!.

Markay kasoo baxeen ayuu ku yidhi kawaran qololkaas aad aragtay, waxayna ugu jawaabtay waa maal adduunyo, adduunna waa iska dhalanteed waxaase liibaana ruuxa maalkaas iyo addeecid Allah swt isku hela, odaygii aad iyo aad ayaa hadalkaasi u qanciyay wuxuuna ku yidhi:- afartaas qol adiga iyo caruurtaada ayaa iska leh, waxa keliya oo aan kaa codsanayaana waa inaad gabadhaada na siisid, waxayna ugu jawaabtay ha ifududayn oo salka hayga kicin waxaas aan suuqa la fadhiisto waan ku qanacsanahaye, Allah swt ayaana mahad leh.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Wuxuu ku yidhi:- Allah swt ayaan ku dhaartee waa iga dhab hadalkaasi, markay xaqiiqsatay inuu hadalku daacad ka yahay ayayna waydiisay waxay ku mutaysatay, isagoona muran la gelin ayuu uga sheekeeyay qisadii wiilkiisa iyo gabadheeda dhex martay, markay maqashayna iyadoo illin farxadeed kusoo istaagtay ayay tidhi:- Allah swt iga beeray gabadhaas ayaa mahad oo dhan iska leh, waxba kama ogayn bahdilkaas ay ku jirtay hase ahaatee waxaad ogaataa inaanan khasbayn ee ay iyada ku xidhan tahay aqbalaadda guurka wiilkaagu!!!.

Maamadii gabadha dhashay waxay ku noqotay gurigeedii, markay gabadheedii timi ayayna u tirisay waxay maanta la kulantay oo dhan, waxayna u raacisay inaanay dhaafsanayn maalkaas oo ku khasbayn guursiga ninkaas, waxay kaloo ka codsatay inaanay u aqbalin dartood, gabadhii ayaana ugu jawaabtay hooyadeed mar hore ayuu qalbigayga la baxay ee waxaanan marna awoodin inaan la hadlo isaguna ma garan inuu ila hadlo oo wuxuun iyidhaahdo, waxaan Allah swt ka baryi jiray inuu saygayga ka dhigo, xaqiiqdiina uma ogayn inuu maal leeyahay ee waxa ideeqay garashadiisa iyo akhlaaqdiisa Allah swt hibada u siiyay oo uu kaga horreeyay laba teneg oo soo raaci jiray!!!.

Maamadii mashxarad ayay ku dhufatay oo Allah swt u mahad naqday iyadoo leh Ilaahow adigaa wanaag nala doonay ee noo calaf, dhaaxaan silic iyo murugo dhex jiifnaye, gabadhiina waxa loo meheriyay ninkii, waxaana loo dhigay aroos qurux badnaa, waxa kaloona arooskaas lagu casuumay muuq-dheer iyo ehelkeedii dullaystay oo dhan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Muuq-dheer waa iska oyday iyadoo hiifaysa nafteeda oo ka calaacalaysa qiima darradeeda, waxayna go'aan ku gaadhay inaanay falkaas oo dambe ku kicin inta noloshadeeda uga dhiman, daacadda iyo adeecidda Allahna swt ay xoogga saarto, ehelkii gabadha silciyay iyaguna waxay ka qoomameeyeen foolxumaday carruurtaas agoonta ahayd kula dhaqmeen iyo wanaagga ay carruurtaasi ugu bedeshay!!!.

Arrimahaaga Allah swt si dhab ah ugudhiibo, sababtiina intii awooddaada ah lakaalay, kadib waxa hubaal ah in aanu adna Allah swt ku hoojinayn!!!.

RAJACTU!!!



Wuxuu yidhi:- goor la tukaday salaaddii maqrib ayaa waxa aan go'aansaday in aan magaalada bannaanka uga baxo, markaan magaaladii kasoo dhammaaday oo aan xoogaa socday ayaana baabuurkaan watay iftiinkiisu wuxuu qabtay gabadh madaxa lawyaha ku haysa oo meel buundo biyo mareen ah fadhida, iftiinkii intaan naaqusiyay ayaan soo ag-istaagay, markaan baabuurkii kasoo degay ayayna dhagxaan ii guratay iyadoo igu qaylinaysa, iskuma mashquulinin qayladeedii ee waxaan ku idhi jajabi gaadhiga haddaad rabto, cidladana kaaga tegi maayo anigoon hubsan inaad kaligaa tahay iyo in kale oo aanan xaalkaaga ogaan!!!.

Dhag-xaan ayay ooda igaga soo qaaday, nasiib wanaag aniga iyo baabuurkiiba midna wax kuma noqon, hadal badan iyo dood dheer kadib ayayna iga

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

aqbashay inay isoo raacdo, markay xasilooni heshay ayayna ii sheegtay dhibka ay dhabanada la haysatay waxayna tidhi:- walaal waxaan muddo wada soconay wiil aan aad u jeclahay, habeen habeenada kamid ah ayayna na dhaxmartay wixii dhaxmari lahaa labo is qaba, arrintaas dhacdayna waxaan ku qaaday uur, markaan wiilkii usoo tebiyay saamaynta ay xaajadii yeelatayna wax aanan ka filayn ayaan kala kulmay, anigana mustaqbalkaygii haba xumaado ee waxaanan ka samri karin calool xumada aan reerkaygii usoo hooyay, waxaana iigusii daran aabbahay iyo hooyaday oo xad dhaaf ii jecel, anigu markaa kahor hawlahaas oo kale maan gelin, isma dili karo oo naar wax loo badheeri karo maaha, ilmahan ma dili karo oo waa naar kale, reerkayga ma wijihi karo, waxaan sameeyo ayaan garan waayay waana sababta dhabanna-hayska igu ridday oo aan cidladan ugu soo baxay!!!.

Waxaan ku idhi:- ma intaas keliya, intaas ciqaab ka xun miyaa jirta oo gabadh ku iman karta, kuwa la kufsadaa idhaama ayay iigu war celisay, waxaan ku idhi:- haddaba xaalkaas ku qabsaday haka walwalin, waxaan kuu samayn warqad furriin ah idamka Alle swt, ilmahana waan kula korin, waxaanse kaa codsanayaa seddex arrimood, midda kowaad-inaad Allah swt u toobad keento, tan labaad-wiilkaad la sheekaysan jirtay inaad lambarkiisa isiiso, tan saddexaad-haddaad ka badbaado arrintan in aanad xaajadan oo kale dib dambe u guda gelin!!!.

Ballan qaad iyo wiilka lambarkiisiiba waa isugu kay dartay, waxaana kaloo ka qaatay lambarkeedii, igana war-dhowr ku idhi, gurigeedii meel u dhow markaan ku dejiyay oo aan ka dhaqaaqay ayaana wacay wiilkii ay ii sheegtay, nasiibkayguna wuxuu noqday nin iyaqaan, meeshaan u tilmaamayna wuu iigu yimid, qisadii oo dhan dhabta ayaan u saaray, waxaana usii raaciyay in haddii ilmahaasi dhasho uu noqon

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

doono ilma aniga la ii korinayo uuna yahay isaga ilmihiisa, anigoon hadal ka sugin ayaana ugu daray raganimadeeda ma leedahay oo sidaas aan anigu samaynayo ma samayn kartaa!!!.

Isagoo illini indhihiisa ka dareerayso ayuuna dhankiisa xaalka haysta ii bilaabay iguna yidhi:- walaal gabadhaas naftayda waan ka jeclahay, tan iyo maalintii xaalkaasi yimid asxaabtaydii waan ka go'ay, hurdada iskuma fiicnin, gabadha waxa dhalay reer aad u kulul, reerkeeda iyo kaayaguna waa dab iyo baasiin, hada kahor ayaana gabadh aan ilma adeer nahay reerkoodu qisadaas ku sameeyeen, haddaan reer-kayga arrintan u sheegona waxay i odhan waa sidaan rabnay, hadaan reerkooda waydiistona inay i dilaan ayaan qarka u fuulayaa, anigoon been kuu sheegayn middi intan soo qaatay ayaan damcay in aan isaga dhanba iska gooyo, walaal midda haysata mid ka daran oo murugo ayaan la jiif iyo joogba seegay!!!.

Hadalkii intaan ka kala gooyay ayaan ku idhi waxaad tahay fulay axmaq ah, waxaad eegtay arrinta adiga kugu imanaysa dhibta ay leedahay, ma aadan eegin midda iyada haysata, xalna waan kuu hayaa ee maad yeeli, waxaas oo dhan bannaanka idinka dhigaya lagana yaabo inay labada reer isusoo dhowadaan, marka hore danbigaas aad ku dhacdeen Allah swt uga toobad keen, marka xiga ma awoodi kartaa inaad soo samayso warqad furriin ah, cid meher kaa rabtaa majirto oo waad ogtahay inaydaan is mehersan, waxaadna ogaataa reerka gabadha dhalay markay ogaadaan inay uur leedahay oo ay qarracan hawada galaan, markay u sheegto inay nin is meher-sadeen kala tageenna in neeftii ku cabbudhsanayd kasoo baxayso oo sharaf dhacay dareemaan ka nafisayaan dagaalna aanay qaadayn!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxaana dhici karta in labada reer gogol isu dhigtaan, taasina keento in laysku kiin cesho ee adigu ma awoodi kartaa inaad soo qorto warqad furriin ah oo hal dalqad ah, hana kasoo dhigin saddex dalqo, si aanay u adkaan isku celintiinnu, waana hadaad gabadha jeceshahay!!!.

Wuxuu iigu jawaabay:- nin-yahow doqon fulay ah baan ahay, haddaan sidaad wax ii tustay wax u arki lahaa mar horaan samayn lahaa, daqiiqad kama daaheen, jacaylka aan u qabo walaal lama xisaabi karo waana ballan inaan warqaddaas kuu keeno ee goormaan kuu keenaa, waqti ayaan ballamiyay, waqtigii aan u qabtay ayuuna warqaddii ii keenay, iyadoo gabadhii iigu ballansantahay meeshii aan ku bartay ee ka baxsanayd magaalada!!!.

Waxaan soo kaxeeyay isagii oo ku dejiyay meel aanay ka arki karin, markaan u imid gabadhii ee ay baabuurka soo fuushay ayaana warqaddii faraha ka saaray, farxaddii qalbigeeda gashayna aadame ma qiyaasi karo, iyadoo rabta inay wax i waydiiso ayaana hadalkii ku cabudhiyay oo baabuurkii soo dhaqaajiyay, waxay bilawday aqrinta warqadii, mise magacii wiilka ay isjeclaayeen ayaaba ku xusan, way yaabtay oo dhahday ifahamsii ma dhabbaa:- anna waxaan ku idhi:- haddaad moodayso inaan magaciisa iska soo qortay wax yar isug, intaan baabuurkii ka degay ayaana isagii soo kaxeeyay oo u keenay, dareenkii farxadda iyo xanaaqa badnaa ee labadooda dhex marayna ruux walbow adigu sawiro!!!.

Reerkii gabadha dhalay waxay ogaadeen gabadhoodii inay uur yeelatay, waxay usoo saartay warqaddii furiinka ahayd, kadibna waxay uga sheekaysay xaaladdii dhacday, uguna dartay in furriinkooda uu sabab u ahaa baqdin ay ka baqeen

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

reerka ay iyadu ka dhalatay, culays wayn ayaa reerkii ka degay, gabadha aabbaheed ayaa guurtidii reerkiisa isugu yeedhay, waxayna go'aan sadeen inay gogol u dhigtaan reerkii wiilka, gogoshii markii la isugu yimidna waxa la isku bilaabay dagaal afka hadal ah, markii uu in mudda ah socday dagaalkaasi ayaana waxa la isku raacay in layska dhaahiyo falkii hore u dhacay, midda haatan taaganna aan waxba lagasoo qaadin, maaddaama uu furriinku yahay arrin banaan, waxaase taladii lagu darsaday in la isku cesho wiilka iyo gabadha labada reerna sidaas ku walaaloobaan!!!.

Wiilkii ayaa loo yeedhay, waxaana lagu amray inuu Rajactu dhaho oo gabadhii soo ceshado, markuu taas sameeyay ayaana reerkiii wiilka dhalay sooryo iyo xarrago (yarad) inay bixiyaan ballan qaadeen, waxayna codsadeen in lasiiyo muddo, gabadhana loosii hayo intay ugasoo noqonayaan, intaasi markay dhacday ayaana gabadhii iyo wiilkii oo xawaaraha qalbigoodu ku socdo aan aadame qiyaasi karin isoo waceen, waaxaanuna ku ballanay bartaan ku bartay gabadha, waxaana gorfaynay wixii lasamayn lahaa maaddaama aan meher hore jirin, waxaana ku taliyay inaan la isu tegin illaa inta ilmahaasi ka dhalayaan, markii ilmahaasi dhasho oo ay afartanka ka baxdona aan magaalada ka baxno oo magaalo kale ka samayno meher dhab ah, waxaase dhacday in muddaddii ay reerku is diyaarinta ku jireen in gabadhii ilmihii ka dilmay oo sitoosa uga soo dhammaaday, arrintaasina waxay noo sahashay inaan samayno meher dhab ah!!!.

Reerkii wiilka dhalay waxay keeneen geel yarad ah iyo sooryo waxayna codsadeen in gabadhii lagusoo wareejiyo, aqbalaad iyo is marxabayn ayaana halkaas ka dhacday, waxaana ka dhismay qoys laba is jecel oo xaajo ka xumaatay, toobadkeen-kii Allah swt ayaana wuxuu u sahlay in wax kastaaba u hagaagaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Bani-aadamow waxaad ogaataa in aadamaha dembi ka dhaco, waxaad kaloo ogaataa in shaydaan sikin walba uu diyaar uyahay qaladkaas dhacay in uu kadhigto waddo uu khaladaad kale oo badan kuugusii rido, raac tallaabooyinka samatabaxa belaayooyinka ee Allah swt inoo jideeyay, waana dariiqa keliya ee aad if iyo aakhiroba ku badbaadi karayside.

Yaa Allah camal kasta oo aanu samayno waxba kabiirimaayo haddaanad naxariistaada noogu deeqin, ee naxariistaada noogu deeq, nooguna dembi dhaaf.

WAA MAXAY FURAHA QALBIGA GABADHU!!!



Wuxuu isu'aalay waa maxay furaha qalbiga gabadhu?!!!, waxaanse ugu jawaabay:- haddaad ubaahato inaad ubax soo goosatid xaggeed kaso goosaneysaa?!!!, wuxuuna iyidhi:- dhul uu ubuxu qurxiyay, sidee ayaad dhulkaas ku geli lahayd ayaan haddana ku dhahay?, si tartiib ah ayuuna iigu jawaabay, sabab ayaan haddana ku idhi?, si aanan u dhaawicin ubaxyada ayuuna yidhi, adigu ma waxaad ubaahantahay ubaxyadoo dhan mise ubax keli ah ayaan haddana sii waydiiyay?!!!, runtii waxaan u baahanahay ubax qudha ayayna jawaabtiisii haddana noqotay!!!.

Sax, maxaad u dhawraysaa ubaxyada kale haddaad ubax qudha ubaahan tahay ayaan haddana ku idhi?, waxaan udhawrayaa ubaxa aan doonayo waa qayb kamida ubaxyada kale ayuu yidhi!!!, markasaan ku idhi waa taas su'aashaad i

waydiisay jawaabteedu!!!, wuxuuna igu yidhi:- ifahamsii, waxanaan ku idhi:- qalbiga gabadhu waa ubaxa keli ah ee aad rabto adiga oo haddana dhawraya ubaxyada kale si aysan u dhaawacmin, ubaxyada kalena waa qoyskeeda iyo asxaabteeda, haddaad qoyskeeda iyo asxaabteedaba aad wanaajisona waxaad si fudud ugelaysaa qalbigeeda, waxaadna hayn doontaa furaha qalbigeeda, kadibna wuxuu igu yidhi isagoo dhoolla-cadaynaaya:- hadda ayaan fahmay macnaha guud ee tusaalahaaga!!!.

Haddaad hanan wayday qalbiga boqoradaada, wanaaji qoyskeeda iyo asxaabteeda markaasna waxay ogaanaysaa sidaad qoyskeeda iyo asxaabteedaba aad u wanaajisay inaad iyadana u wanaajin doonto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA AAN KUNOOLAHAY GEERI IYO NOLOL DHEXDOOD!!!



Aad ayay uxannuun badan tahay marka naf Alle swt abuuray oo rajooyinkeeda dhisanaysay la rajo tiro, oo weliba kuwa sidaa samaynaya ay dunida kula joogaan, khadija Chenkiz oo ah gabadh qoraa Turkish ah, oo udoonanayd ayna wada aqal-geli rabeen weriyihii la waayay ee Jamaal Khashoggi ayaa sidan dareenkeeda u fasirtay:- "Kuwa i weydiinaaya xaaladayda, waxa aan ku noolahay geeri iyo nolol dhexdood, dhulka iyo cirka dhexdood, Jannada iyo Jaxiimo dhexdood, waxaan hurdada kala toosaa rajo, waxaana waayaa rajo kasta markay qorraxdu dhacdo, waxa aan geeriyoodaa maalin kasta kun jeer, Allaha noolow, Allaha soo jeedow isamirsii!!!".

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Ma garanayo sida aan ereyo ku filan ugu cabbiri karo bani'aadam qof kale oo dhiggiisa ah intuu dilo, googooyo hilbihiisa, kaddibna boorso ku guro!!!, waxa aanse dareemayaa in ruuxdaadu haddii ay caafimaad qabto ay dareemi karto!!!.

Inta aad nooshahay kadheerow dulmi kaaga taga haba yaraadee makhluuqaadkan Allah swt uu ku abuurtay kawnkan, haddii cidi dulmane noqonaysona doorbid in aad adigu noqoto ka dulmanaha ah, sidaas ayaadna if iyo aakhiroba ku badbaadi kartaa.

Yaa Allah qalbiga uga reeb!!!.

WANAAGGA DAREENKA DHABTA AH EE LAMMAANENIMO!!!



Shabakadda Al-carabia ayaa waxa ay qortay in haweenay u dhalatay Dalka Masar magaceeduna yahay Hiba Al-sayid Rajab ay dhabarka ku soo qaaday saygeeda ama ninkeeda oo xanuunsan iyada oo ku gaysay dhakhtarka!!!, Marwo Hiba ayaa waxa ay haysaa saygeeda oo aanay da'diisu aad u waynayn balse qaba cuduro dhawr ah, sidoo kalena waxa aan si fiican u shaqayn kelyihiisa waxaanay toddobaadkii saddex jeer gaysaa dhakhtarka si loo soo maydho ama loogu dhaqo kelyaha!!!.

Haddaba shabakada Al-carabia ayaa waraysi ay la yeelatay haweenaydan waxa ay ku sheegtay in ninkeedu uu taksiile ahaan jiray laakiin xanuunka hayaa uu

ku dhacay dhowaan, xilligaasi kadibna waxay sheegtay inay shaqo bilawday oo ay iyadu dabarto masaariifta reerkeeda iyo saygeeda bukaanka ahba!!!.

Hiba ayaa waxay sheegtay in saygeedu isagoo ka muragaysan xaaladda caafimaad darro ee haysa iyo daruufaha adag ee la soo gudboonaaday uu usoo bandhigay in ay warqadeeda ka qaadato oo ay kala tagaan, laakiin ay hibo diiday in ay sidaasi yeesho, waxa aanay sheegtay inay ku qanacsantahay xaaladda nololeed ee ay ku jirto wax kasta oo dunidan ka dhacaana ay gacanta Allah swt ku jiraan!!!.

Dhacdadan ayaa waxyaabaha laga baran karo ay kamid tahay waajibnimada qaddarinta iyo isku damqashada ka dhaxaysa lammaanaha nolosha wadaaga iyo wanaagga & dareenka ay leedahay garab istaaga ay is garab istaagaan marka midkood ay dhibaato soo waajahdo.

MAQAAL – NOLOSHU WAA JACAYL!!!



Ma umalaynaysaa in jaceylku yahay wax aan la kaantarooli karin?, ama aan laxakamayn karin?, jaceylku waa xaqiiq kugu qarsoon, sidoo kale waa qisso dheer, Jaceylku waa dareen ku abuurma qofka bini-aadamka ah, dareenkaas oo uu u qaadaayo ruux kale, waxa uuna wax ka beddelaa noloshiisa ayada oo uu kusoo kordhaayo isbeddel aad u ballaadhan, isbeddelkaasina waxa uu noqon karaa mid farxadeed ama mid murugo hadba marxaladda uu qofku ku sugan yahay markaas!!!.

Jaceylku waxa uu ku barayaa noloshu waxa ay tahay adiga oo casharo ka qaadanaaya marka uu kusoo wajaho, waa dareen aan la xakamayn karin, kaasoo ku

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

fida dhammaan xubnaha jidhka ayadoo ay xanuunsanayaan xubnahaasi qofkana ay ka lumayso fir-fircoonidii lagu yaqaanay, waxa uu kuu diidayaa cunnada, cabidda, hurdada, dhex galka bulshada iwm, intaas oo dhanna waa waxa aas-aaska u ah qofku in uu ku noolaado marxalad kaduwan marxaladdii hore ee uu ku noolaa!!!.

Jaceylka daawadiisu waa qofku ruuxa uu jeclaa inuu helo misana uu la aqal galo, waayo haddii uu ku guulaysto waxa u bilaabanaysa farxaddii in muddo ah ka maqnayd, waxa uuna dugsanayaa Jaceylkiisii, wixii laabta ka hurinaayayna waa ay u qaboobaysaa mar hadduu indho kalgacal ah ku eegaayo kuna fiirinaayo ciddii uu calmaday, mar kasta oo uu laabta galiyona dabkii ka shidnaa gudihiisu waxa uu isu bedelayaa neecaw udgoon iyo saxansaxo roobaad oo marna aanad ka daalayn inaad sanka la raacdo!!!.

Jaceylku ma aha wax afka laga sheego kaliya, balse waxa lagu muujiyaa dareemo iyo ishaarooyin kala duwan, haddaba sidee ayaa qof jacayl loogu abuuri karaa, bal aynu fiirino qodobadan kooban laakiin waxbadan oo ku saabsan mawduucan kaa anfici kara:-

1. **Si fiican u daryeel naftaada:-** Muuqaalka guud ee qofku wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa, in uu qofku soo jiito qofka kale, sida fiican ee aad u daryeesho muuqaalkaaga iyo caafimaadkaaga waa shayga ugu horreeya ee ay dadku arkaan, sidaa darteed waa inaad wakhti iyo dedaal u hurtaa qurxinta iyo kawar-haynta naftaada marka aad isku dayeyso inaad soo jiidato qofka

aad jeceshahay, si aad usoo bandhigto muuqaalkaaga ugu fiicanna badso maydhashada, samee jimicsi badan, cun cunto isku dheeli tiran, gasho dhar nadiif ah oo soo jiidasho leh, isla mar ahaantaana haka baqin hana ka cabsan inaad soo jiidato dareenka qofka kale!!!.

2. **Noqo qof naxariis leh:-** Si aad usoo Jiidato qofka aad jeceshahay waa inaad noqoto qof naxariis leh, ulana dhaqan dadka sida aad jeceshahay inay kuula dhaqmaan, waxa laga yaabaa inaad fudaydsato arrintan laakiin waa xaqiiq, haddii aad Jeceshahay inay dadku ku xushmeeyaan kuna qaddariyaanna waa inaad bilowdaa inaad ula dhaqanto dadka sida aad rabto in adiga laguula dhaqmo, sidaa oo kalena badanaa dadku waxay jeclaadaan qofka shaqsiyadda leh ee aadaabta leh, isla mar ahaantaana u naxariista dadka kale!!!.

3. **Eeg wejiga qofka aad jeceshahay gaar-ahaan indhihiisa:-** Marka aad qofka wadasheekaysanaysaan isku day inaad eegto qofka wejigiisa gaar ahaan indhihiisa, cilmi baadhis lagu sameeyay jaamacadda Harvard ee dalka Maraykanka ayaana tilmaamtay in lammaanaha aadka isu Jecel ay is eegaan 70% ka mid ah wakhtigooda marka ay wada sheekaysanayaan, marka dadku u wada sheekaynayaan si caadi ahna ay badanaa is eegaan 30% ama 50% wakhtigooda, haddaba eeg qofka aad jeceshahay 70% ka mid ah wakhtiga aad wada hadlaysaan, haddaad saas samaysona waxaad awood u yeelan doontaa inaad qofka khiyaanto maskaxdiisa, maskaxduna waxay ogtahay wakhtigii ugu dambeeyay ee qofku eego wakhti sidaa u dheer, waxaanay u turjuntaa in

qofkaasi jeclaa, waxayna bilowdaa inay sii dayso dheecaan loo yaqaano "Phenylethylamin" (PEA) kaasoo la mid ah dheecaanka ay sii daayaan nervous System-ka marka ugu horraysa oo Jaceyl inagu dhaco!!!.

4. **Noqo qof dareenkiisa qarsada oo aan la fahmi karin:-** Inta badan ee aad noqoto qof aan dareenkiisa la fahmin waxay badisaa in wax badan dadku kaa fikiraan, in wax badan qofku kaa fikirana waxay sababtaa inaad soo jiidato qofka aad doonayso inaad jaceyl ku abuurto!!!.

5. **Aragtidaada ku badi qofka:-** Cilmi baadhis ayaa waxa lagu ogaaday in dadku ay ka doortaan lammaane ay xidhiidhka wadaagaan dadka ay badanaa la kulmaan, haddii aanu qofku muddo dheer ku aragna waxa laga yaabaa in ay dhacdo inuu ku illoobo!!!.

6. **Badanaa dhoola-caddee haddii aad gabadh tahay:-** Cilmi baadhis la sameeyay waxa lagu ogaaday in raggu ay Jecel yihiin dumarka fur-furan ee si sahal ah loola qabsan karo marka loo eego dumarka dabeecada xidh-xidhan!!!.

7. **Samee wakhti cayiman oo aad maalin walba wacdo:-** Wakhti cayiman wac isla markaana si kedis ah u jooji dhammaan wicista, marka ay dadku sugaan wax ay rajaynayaan inuu dhaco isla markaana aan dhicinna waxay ka fikiraan

muddo aad u badan, qofka oo wax badan kaa fikiraana waxay sababtaa inuu kugu xidhmo, xiiso badanna kuu qaado, taas oo ugu dambayna sababta inuu ku Jeclaado!!!.

Haddaynu hore ugasii soconno marxaladda isasoo jiidashada, haddiiba ay dhacdo in shakhsigaa Allah (swt) uu calaf iskugukiin daro, saynu hore uxusnay si lamid ah waxa jira qodobbo lammaanaha uhorseedaya in ay ku noolaadaan inta nolosha uga dhimanna kuwada qaataan nolol farxad iyo rayn-rayni kabuuxdo, iyadoo taasi jirto haddana rag iyo dumar badan oo is qaba ayaa iskula dhaqma in ay isku yihiin sidii cadow oo kale, halkii ay ka ahaan lahaayeen asxaab!!!.

Ninku waxa uu isleeyay adiga ayaa atoore ah waxkasta oo aad dhahdona waa in la qaataa halka xaaskuna ay is leedahay ninkaaga la tartan oo xittaa waxyaabaha wanaaga ah ee uu sameeyana aysan ka mahad-celin, sidoo kale dumar badan ayaan la qancin karin oo baahidooda shaqsiyeed iyo midda qaraabadeeda aysan dhammaad lahayn, raga qaar xaasaskooda si xun ayay ula hadlaan oo xittaa qaar ayaa gacan u qaada, halkaa marka xaal uu maraayo haddaba bal aynu iswaydiinno maxaa talo ah si qoyskii unoqdo qoys farxad iyo rayn-rayn nolosha ku wadaaga?!!!.

1. **Ugu horrayn iswaydii waa maxay guurku?:-** Waxa nasiib darro ah in dad badan aysanba fahamsanayn sababta guurka iyo sida uu Ilaahay (swt) u macneeyay guurka, asagoo ku tilmaamay naxariis iyo jecayl, balse dad badan ayaan taas fahmin oo guurka u qaatay cadaawad iyo is nacayb joogto ah!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

2. **Ha noqon keligii taliye:-** Walow ninka raga ah Ilaahay (swt) ka dhigay madaxa reerka haddana ma ahan in uu noqdo keligii taliye oo go'aankasta keligii qaato, waxaana ragga laga doonayaa in ay dumarkooda si wanaagsan ula dhaqmaan, Rasuulka (scw) ayaana laga weriyay in uu yidhi:- "Muslimka ugu fiican xaga caqiidada waa kan dabeecada fiican leh, kuwa idiinkugu dabeecadda wanaagsanina waa kuwa dumarkooda si wanaagsan ula dhaqma"-Tarmidi!!!.

3. **Ku shirkooba go'aamada:-** Marka go'aan ku saabsan qoyska la qaadanayo waxa muhiim ah in wada tashi la sameeyo oo mid keliya uusan go'aan iska gaadhin, go'aanka si wadajir ah loo wada gaadhona qilaaf kama yimaado, qof kastaana waxa uu dareemayaa ahmiyadda uu ku leeyahay qoyska!!!.

4. **Haku xadgudbin xaaskaaga:-** Marnaba ha aflagaadayn saygaaga ama xaaskaaga, haku dhihin hadal hoos u dhigaya maskaxdeeda/diisa, ha u qaadin gacan, Rasuulka (scw) ayaana laga weriyay in uu yidhi:- "Sidee ayaad u garaaci kartaan xaasaskiina maalintii sidii adoon habeenkiina ula seexan kartaan?"!!!.

5. **Is xakamee markaad xanaaqdo:-** Xanaaqa sheydaanka ayaa ka faa'iidaysta, markaad xanaaqdo ha iska hadlin, oo haku hadlin hadalo aadan dhahdeen markaad caadi tahay, markaad xanaaqdona ha hadlin sidaadaba, oo sug intaad ka degayso!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

6. **Muuji dareenkaaga jacayl:-** Ragga iyo dumarka soomaalida waxa laga la'yahay inay isu muujiyaan dareenkooda jacayl, xittaa markay magaalada marayaana waxay u socdaan sidii dad kala cararaaya, waar Ilaahay swt ayaa isku kiin xalaaleeyay, ee isku muujiya dareenkiina, ku dheh waan ku jecelahay, muujinta dareenka jacaylkuna waxay kordhinayaan saaxiibtinimada qoyska!!!.

7. **La saaxiib xaaskaaga / seygaaga:-** Qaybtan waa muhiim, ma ogtahay waxyaabaha ay xaaskaagu/seygaagu xiisayso/xiiseeyo?, waxa muhiim ah in labada qof ee is qaba ay saaxiibo noqdaan oo midba midka kale ka warqabo, oo uu ogyahay waxyaabaha uu daneeyo, markaad ogtahay waxyaabaha uu seygaaga/xaaskaagu jecelyahayna/jeceshahayna way fududahay in aad ku caawiso iyaduna kugu caawiso!!!.

8. **Muuji mahad celin :-** Markii xaaskaaga/seygaaga ay/uu sameyso/sameeyo wax wanaagsan u mahad-celi oo umuuji sida aad ugu qanacsantahay hawsheeda/hawshiisa, ha dareensiin ninkaaga/xaaskaaga in uusan/aysan reerka faa'iido u lahayn oo waxyaabaha uu qabto/qabato ay macno darro yihiin, waxkasta oo uu qabto/qabato u muuji mahad-celintaada iyo sida aad ugu faraxsantahay waxqabadkiisa/waxqabadkeeda, haddii xaaskaagu dharka ay kuu dhaqdo, oo ay cuntada kuu kariso, oo ay ilmaha iskuulka gayso ha u qaadanin in ay si iswadis ah waxkasta u qabanayso, balse waa hawl wayn oo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

muhiim ay tahay in aad adigu booskeeda is dhigto kadibna aad dareento hawsha muhiimka ah ee ay kuu hayso!!!.

9. **Kala shaqee guriga:-** Rag badan oo soomaaliyeed ayaa lagu yaqaannaa in aysan guriga waxba ka qaban oo ay aaminsanyihiin in ay tahay hawsha dumarka, balse arrintaas waa qalad, waxaana muhiim ah in raggu ay xaaskooda ku caawiyaan guriga, waxaana muhiim ah in dumarku aysan ka dhigin hawsha mid qasab ah balse aad isku daydo in aad ninkaaga ku xiise-geliso in uu hawsha guriga wax ka qabto!!!.

10. **Xidhiidhku waa muhiim:- MUHIIM MUHIIM MIHIIM,** aad iyo aad ayuu xidhiidhku muhiim u yahay, waa in aad la hadashaa xaaskaaga, waa in aad la hadashaa ninkaaga oo aad u sheegtaa wixii dhibaato ah oo jira, haddii labada qof aysan wada hadlin oo aan laga wada hadlin cabashooyinka waxay tagaysaa meel aan waxba laga qaban karin, balse markii la wada hadlo waxa la gaadhi karaa in xal la helo inta ay dhibaatadu yartahay!!!.

11. **Iska ilow wixii hore:-** Haddii aad hore isku dagaasheen ama wax kale idin dhex mareen balse laga heshiiyay marna ha soo qaadan, fadlan iska ilow guud ahaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

12. **Ku qanacsanow noloshaada:-** Haka masayrin nolosha ay ku nool yihiin dadka idinka lacagta badan, dumar badan ayaa ragooda kadeeda kadib markii ay ka masayraan nolosha dumar kale, hoos u fiiri dadka kaa faqiirsan oo tusaale ku qaado, Ilaahayna (swt) ugu mahad-celi nicmadiisa, kuna qanacsanaada noloshiina!!!.

13. **Ninkaaga wakhti sii:-** Rag badan ayaa ka cawda in xaasaskoodu ay telefoon ku waaleen, haddii uu ninkaagu yar mashquulo ma ahan in uusan ku jeclayn ama uu ku khayaamayo, balse waa muhiim in aad aaminto xaaskaaga ama ninkaaga oo aad u ogolaato wakhti uu hawlihiisa ugaarka ah ku maamulankaro!!!.

14. **Qiro khaladkaaga:-** Marka aad khalad samayso qiro oo raalli-gelin ka bixi, markii xaaskaaga ama ninkaagu uu khalad sameeyona u samee mar-marsiinyo ama cudurdaar, hana kasooqaadin wax wayn oo u raadi xal!!!.

15. **Ilaali sirta qoyskaaga:-** Arrintani waa mid dadka badankoodu ay ogyihiin balse mararka qaar ayaa dhacda in xadka laga gudbo, hakala sheekaysanin reerkaaga dadka kale, dumarka khaasatan waxay jecelyihiin in ay ninkooda uga sheekeeyaan dumarka kale, ha samaynin taas, arrinta reerkaaguna waa khaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!


ururiyaha buugga:- cumar hong-kong


16. **Qoyska wanaagsani way isu samraan:-** Samirka, cafiska iyo isku dulqaadashadu waxay qayb wayn ka yihiin badbaadada qoyska, muhiimadduna waxay tahay ula dhaqan xaaskaaga/ninkaaga sida adigu aad jeceshay in laguula dhaqmo!!!.

Nolol wanaagsan oo badhaadhe iyo barwaaqo ku gedaamantahay ayaan idiin rajaynayaa dhammaantiin.

Q: SADDEXAAD, QISOOYIN QUBANE AH:-

JASIIRADDII KANEECADA BADNAYD!!!





Markii aan Dalkayga hooyo ee Singapore Ra'iisul wasaare ka noqday waxa i hor-yaalay in aan kala doorto in aan dantayda keliya fiirsado, aniga iyo reerkeyguna ku raaxaysano hantida qaranka, wakhtiguna iga dhammaado aniga oo aan waxba u qaban shacabkayga iyo in aan daacad u noqdo Dalkayga iyo Dadkayga, uguna adeego si hufan, Dalkaygana kasoo saaro caalamka saddexaad kunasoo daro tobanka Dawladood ee ugu hodansan caalamka!!!.

Waxaan doortay tan dambe ee ah in aan wax-qabad muuqda uga tago Dalkayga iyo Dadkaygaba!!!, sidaas waxa yidhi Mr. Lee-Kuan-Yew oo sannadkii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

1959-kii Ra'iisul wasaare ka noqday dalka Singapore oo masaafadiisu tahay **719KM** oo iskuwareeg ah, xilkana la wareegay dalka oo dhinac kasta ka bur-bursan, markaasna kasoo baxay gacanta gumaystihii Ingiriiska, balse sabab u noqday Alle swt ka sakow in dalka Singapore kasoo baxo liiska dawladaha ugu faqrisan caalamka, uuna safka hore kasoo galo dalalka ugu hodansan, ugu horumarsan, ugu maamulka fiican, uguna bilicda quruxsan caalamka!!!.

Lee Kuan Yew oo dadka intooda badan ay ugu yeedhaan aabaha alkumay misana Alle swt ka sakow lugaha u taagay wadanka Singapore, waxa uu ahaa shaqsi si wayn loogu xasuusto doorkii horumarka lahaa ee uu waddankiisa ka qaatay kana mid dhigay dalkiisa dawladaha loogu yeedho caalamka koowaad ee dhaqaalaha iyo tiknoolojiyadda ku tallaabsaday!!!.

Dalka Singapore oo ah jasiirad ku taala konfurta bari ee qaarada Aasiya, konton sanno ka badan ayaa ka soo wareegtay markii laga eryay federaalkii ay kuwada jireen dalka Malaysia oo shidaal iyo macdanta jaandiga (Tin) iyo khayraad badan oo kale lahayd xilligaas, halka Singapore ay ahayd jasiirad kaneeco badan oo wax khayraad ah aan lahayn!!!.

Haddaba, konton sanno ka dib jasiiraddii Singapore waxa lagu tilmaamay bulshadda abid intii taarikhda la garanaayo jirtay ee ku guulaysatay in ay horumar nololeed oo heerkaas gaadhsiisan ku gaadho muddo kooban oo konton sanno ah ama fac keliya ah!!!, sannadkii 1965-kii dadkii ku noolaa jasiiradda la yidhaahdo Singapore-na dakhliga qofka ku soo hagaaga waxa lagu qiyaasay **shan boqol (500) oo dollar** sannadkii, konton sanno kadibna waxa dakhliga qofka

jasiiraddaasi ku nool lagu qiyaasay **shan iyo konton kun (55,000) oo dollar**!!!, jasiiraddaasina waxa ay ka mid tahay dalalka adduunka ugu hodansan maanta, waxaana la iswaydiiyaa sidee ayay ku gaadhay horumarka intaas leeg iyada oo wax khayraad ah aan lahayn?!!!.

Dadka ku nool jasiiraddaasi waxa ay ku guulaysteen inay helaan hoy ay galaan, cunto, caafimaad, tacliin iyo shaqo, waana inta qofku u baahan yahay, boqolkiiba sagaashan 90%-na waxa ay ku jiraan guryo ay iyagu leeyihiin, jaamacadda lagu barto maaraynta iyo maamulka dawladnimada oo ku taalla Jasiiradaasi oo loogu magac-daray hoggaamiyihii dalkaas Alle swt ka sakow horumarka gaadhsiiyay ee Lee Kuwan Yew school of Government, barafasoor wax ka dhiga ayaana sababta lagu gaadhay horumarka intaas leeg ku soo koobay saddex qodob, wuxuuna yidhi:-

1) **Xukunka dalka oo ku jira gacanta xubnaha bulshada ugu aqoon iyo maskax badan:-** waxa looga jeedaa in dalku uu la soo baxo muwaadiniintiisa ugu aqoon badan ee ugu maskax badan ee ugu habboon xilalka dalka oo xukunka loo dhiibo iyo qofkii shaqo loo dhiibayo oo imtixaan aqooneed ku hela oo ku mutaysta ee aan saami-qabiil, reernimo iyo tolnimo lagu xulan oo lagu dooran!!!.
2) **Kasoo dheegashada bulshooyinka kale:-** waxa looga jeedaa in aan la isku mashquulin in nidaam dawladnimo oo cusub la ikhtiraaco, dhibaato kasta oo dal la soo darista waa la soo arkay oo dad ayaa la soo kulmay oo xal u helay, raadso kuwaas oo soo qaado sida ay ku furdaamiyeen adoo ku salaynaya waayahaaga, dunida aad ku nooshahayna tijaabooyinka hirgalay ee lagu

guulaystay ka soo qaado, shalaad baratee waa la shubi jiraye-sida loogu heeso marka ceelka loo shubayo xoolaha!!!.

3) **Hufnaan iyo daacadnimo:-** waxa looga jeedaa dalalka habaarku ku dhacay ee saboolnimadu raagaadisay waxa sabab u ah musuqmaasuqa, mar haddii la xalaalaysto xoolaha dalkaas, dalkaasi ha ka sugin horumar iyo bulsho hodan noqota, waa in madaxdu dufanka farahooda iyo dharkooda ka ilaashataa haddii kale waa haddii kale!!!.

Haddaba waxa jirta in maalin Mr. Lee-Kuan-Yew uu saxaafadda kaga hadlay tabaha iyo xeeladaha siyaasadeed ee ka caawiyay in uu waddankiisa ka baxo dunida saddexaad kuna biiro wadamada horumaray, waxaana xasuusta kalmadihiisa diiwaanka galay kamid ahaa:- Annagu hadii aanu nahay reer Singapore waxa aanu dhisnaa goobaha caamka ah ee wax lagu akhristo sida Maktabadaha oo kale laakiin iyagu (waa madaxda dalalka dunida saddexaade) waxa ay lacagta ay xadaan ku dhistaan guryo waawayn, Annagu waxa aanu iibsanaa Buugaagta balse iyagu waxa ay iibsadaan hubka, Annagu waxa aanu dhammaan la dagaalannaa nooc kasta oo dembi ah illamaa inta aanu ka cidhib tirno halka iyagu ay ku mashquulaan oo keliya in ay qabtaan tuugada yar-yar ee taagta daran!!!.

Hoggaamiye Lee Kuan Yew oo ahaa nin hankiisu sarreeyo markii uu xukunka waddankiisa Singapore qabtay waxa uu ka mid ahaa wadamada ugu faqiirsan caalamka oo kaneeco badan hase yeeshee hoggaamintiisa wanaagsanayd ayaa u suura gelisay wax ka yar muddo konton sannadood ah in uu ka dhigo dalalka duniga ugu qanisan horumar dhinacyo badan lehna ku tallaabsado!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)


Mr Lee Kuan Yew waxuu geeriyooday Bishii March 23-kedii Sannadkii 2015-kii.

La kala dheeree orodse maaha!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

TIJAABADII GUUSHA!!!



Dr. Mahathir Muxammed keliya ma ahayn siyaasi ruug caddaa ah, laakiin waxa uu ahaa mufakir iyo qoraa, waxa uuna leeyahay buug uu qoray, waxaanuu lahaa aragti cad oo uu ka haystay halka uu rabo in uu gaadhsiiyo waddankiisa, markii uu xukunka la wareegayna waxa uu kasii ambaqaaday halkii ay joogtay Malaysiya, waxaana uu ku bilaabay inuu diraaseeyo oo uu baadho taariikhda horumarineed ee wadamada Aasiya, waxaana uu arkay in Japan ay tahay wadamada ugu horumar sarreeya, iyada ayaanuu tusaale ka dhigtay, isaga oo dhawr jeer caddeeyay in Japan ay tahay tusaalihiisa xaga horumarka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Dr. Mahathir waxa uu arkay istaraatiijiyadda Japan oo kaalin sare kaga jirta xaga wax-soosaarka wershahadaha caalamka iyo dhinac kasta oo wax-soosaariseedba, Japan dhawr jeer ayaa wax-soosaarkeedu ka batay isku gaynta wadamada bariga Aasiya oo dhan, oo uu ku jiro Shiinuhu waqtiyadii siddeetamaadkii, waxaana Japan ay ahayd tusaalihii dawladaha iyo dadyawga Aasiya ee xaga horumarka!!!.

Hoggaamiyahani waxa uu ogaaday in siyaasadda Japan ee wax-soosaaridu tahay inay soo saaraan ‘‘alaab tayo fiican oo qiimo jaban’’, taas oo ka caawisay inay ka suuq fiicnaato alaabta lagu sameeyo Yurub iyo Mareykanka ee qiimahoodu qaaliga yahay, waxaanay ku guulaysatay in ay qabsato suuqyada Aasiya iyo Africa, intaas waxa dheeraa in uu raacay hab la diraaseeyay oo uu u raacay samaynta wershadaha, waxaanuu helay dad ah hoggaamiyeyaal fiican oo la garab taagnaa hiil iyo hooba si uu horey ugu socdo dariiqa ama dhabahii horumarka!!!.

Dr. Mahathir waxa uu xilka qabtay labaataneeyo sanno kadib markii waddankiisu lasoo noqday xoriyadda, mudadaasna waxa uu qaaday tallaabooyin wax ku ool ah oo dib u dhisid iyo tayayn ah, taas oo asaas u noqotay horumarkiisa iyo tusaalaha uu Japan ka dhigtay oo u jeexday dariiq cad oo uu u maro horumarinta dalkiisa, taas oo uu taariikhda ku galay, waddankiisana soo gaadhsiiyay heer Malaysiya lagu tiriyo mid ka mida dawladaha wax-soosaarka ugu badan leh caalamka, sida mucjisada ahna usoo galay saaxadda horumarineed ee xagga tiknoolajiyadda iyo dhaqaalahaba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Dr. Mahathir horumarka uu gaadhsiiyay Malaysia ee la xusi karona waxa kamid ah:- waxa hoos u dhacay heerkii faqriga ama saboolnimada oo ahaa 52% dalka Malaysiya sannadkii 1970-kii wax ka badan kala badh dadka waddankaasina ay ahaayeen fuqaro, waxa uuna gaadhsiiyay 5% sannadkii 2002, dakhliga iyo dhaqaalaha soo gala mawaadinka Malaysiyaanka ahna waxa uu ahaa 1247$ sannadkii 1970-kii waxa uuna gaadhsiiyay 8862$ sannadkii 2002, waxa hoos u dhacday shaqo la'aanta illaa ay gaadhay 3% keliya, waxbarashada hoose, dhexe iyo sare, markii uu xilka qabtay malaysiya waxa ay lahayd 5 Jaamacadood, markii u ka degay xilkana waxa ay gaadheen 80 Jaamacadood oo 40 ka mid ah xukuumaddu leedahay!!!.

Hoggaamiyuhu waaka jiheeya xoogga iyo khaydaardka ummaddiisa ugana faa'iideeyaa dhanka qumman ee horumarka, bulshona waxa ay horumar bulsho oo lataabankaro samaynkartaa keliyaata marka ay hesho hoggaamiye wanaagsan oo dantiisa shakhsiga ah kahorraysiinaaya ta guud ee bulshada.

Ha dooran madaxwayne, se dooro hoggaamiye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAO ZEDONG IYO HALGANKII HIMILADIISA!!!



Isaga oo wiil dhallinyaro ah oo da'diisu 22 jir tahay, sannadkii labaad ku jira Jaamacada ayuu waxuu ku fekeray inuu beddelo guud ahaan dalkiisa hooyo ee Shiinaha oo dhibaatooyin baaxad wayn leh ay ka jireen waqtiyadaas, bal qiyaas arday yar oo jaamacad ku jira oo dhaqaale aan haysan, ciidan aan haysan oo misana sidaa u fekeraaya!!!.

Wiilkii dhallinyarada ahaa ee hankiisu aadka u waynaa magaciisu waa Mao Zedong waxuuna bilaabay inuu u halgamo sidii uu u suuragelin lahaa waxii uu ku taamayay ee ahayd in guud ahaan Shiinaha uu ku beddelo iyadoo ugu dambayntiina ay u suuragashay uuna ku guulaystay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Hoggaamiye Mao Zedong dalka Shiinaha waxa uu ka noqday Madaxwayne sannadkii 1949-kii, waxaana lagu tilmaamaa ninkii buddhigaha u ahaa shiinaha maanta ee horumarka balaadhan ku tallaabsaday!!!.

Dhallinyaroy doorkiina qaata oo u sara-kaca badbaadada ummadihiina idinkoo Allena swt kaashanaaya, talosaaranaayana dedaalkeedana la imanaaya.

Dhallinyadaru waa quwadda ummad kasta!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

FRANKLIN D. ROOSEVELT IYO HALGANKII HIMILADIISA!!!



Marka aad akhridid taariikhda iyo kifaaxa daran ee uu dadka adduunku soo maray, gaar ahaan dadka uu laxaadkoodu kala dhiman yahay waxa aad ogaanaysaa in rag iyagoo laxaadkoodu uusan dhammayn inta ay dedaaleen han sarena yeesheen ay gaadheen yoolal ay hiigsanayeen iyo mansabyo sare, waxaana dadka taariikhdu ay xustay kamid ah Franklin D. Roosevelt, waa Madaxwaynihii 32-aad ee dalka Mareykanka hoggaamiya, waxaana uu dhashay bishii January 30-keedii sannadkii 1882-kii.

Markii uu waxbarshadiisa dhammaystay ayaa wuxa uu isu sharraxay aqalka odayaasha ee Maraykanka, dabeedna waxa ku dhacay sannadkii 1921-kii cudurka loo yaqaano Faaliga (Stroke), kaas oo curyaan ka dhigay, iyada oo taasi ay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

jirto haddana kama uusan tanaasulin yoolkiisii, wuxuuna ku qaabilay geesinimo iyo dhabar adayg, iyadoo aad moodayso in aanu wax xanuuni ku dhicin ayaana Rosevelt bishii January 1 markii ay ahayd sannadkii 1929-kii loo doortay in uu noqdo Guddoomiyaha gobolka New York, iyadoo sidoo kalena dedaalkiisii isagoo sii wata bishii March 4-teedii sannadkii 1933-kii uu noqday Madaxwaynaha dalka Mareykanka!!!.

Ufiirso akhriste qof cudurka faaliga uu hayo oo lugihiisa aan isku taagi kirin ayaa intuu tartan adag galay uu ku guulaystay madaxwaynaha dawladdii adduunka ugu xooga badnayd wakhtigaas, maxaase ka dambeeya oo darajo ah marka dhinaca siyaasadda la eego madaxwayne?!!!.

Madaxwayne Rosevelt waxa uu ahaa ruug caddaa siyaasi ah oo dalkiisa iyo dadkiisaba horumariyay, wuxuuna noqday madaxwaynaha keliya ee dalka Mareykanka soo maray ee la doortay 4 jeer, wuxuuna intii uu noolaa in badan uu isku dayay in uu caafimaadkiisa daryeelo xanuunka ku dhacayna ka soo kabto laakiinse waa ay u suurta geli wayday illaa uu ka geeriyooday bishii April 12-keedii sannadkii 1945-kii isagoo 63 jir ah.

Kawarran haddii Madaxwayne Rosevelt uu odhan lahaa nin laxaadkiisu uu kala dhiman yahay baan ahay waxbana ma qabsan karo ee aan nolosha iyo horumarkeeda ka quusto, waxa hubaal ah in uusan gaadheen heerka uu nolosha ka gaadhay, waxaana muhiim ah in mar kastaba uu qofku ka dheeraado quusashada nolosha, ogowna Alle swt oo la talo saarto iyo dedaal baa dad kala sarraysiiyay ama kala horumariyay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

NOQO MUWAADIN DHAB AH, HALKII AAD KANOQON LAHAYD DABADHILIF CALOOSHII USHAQAYSTE AH!!!



Waxa ay iibisay diyaaraddii gaarka ahayd ee madaxda lagu qaadi jiray, waxa ay iibisay 35 baabuur oo nooca Mercedes Benz loo yaqaano ah kuwaa oo lagu qaadi jiray wasiirada, lacagihii kasoo baxayna waxa ay ku celisay qasnaddii dawladda, mushaharkeeda ayay hoos u dhigtay 30%, waxa ay iibisay dhulal safaarado iyo hanti ay dawladdu ku lahayd dalalka debedda si ay lacagta adag ugu soo celiso dalka!!!.

Marka ay debedda u safrayso waxa ay raacdaa duulimaadyada caadiga ah, dadkeeda ayaana ay ugu khudbadaysay:- in aanay weligood lacag ka amaahan doonin Bangiga Adduunka, xittaa haddii ay baahi u dhimanayaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Waxa ay cashuurta ka dhaaftay dadka dakhligoodu yaryahay, si dakhligooda wax-soosaar u kordho, waxa ay la dagaalantay dhammaan noocyada musuqa, dalkeeda oo dhowaan kasoo baxay dagaal sokeeye ayayna ka dhigtay dal kamid ah dalalka soo koraya!!!.

Waxa ay u safartay Ruushka si ay u dhiiri geliso xulkooda Qaranka, markii ay gaadhay Sutshina waxa ay diiday in ay fadhiisato meesha ay fadhiistaan madaxda, waxa ayna doorbiday in ay jamaahiirta dhex fadhiisato!!!, hal mar oo uu ku adkeeyay Ra'iisul Wasaaraha Ruushka Midvediv ayayna fadhiisatay qaybta hab maamuuska gaarka ah leh ee ay madaxdu ka fadhiistaan garoomada, markii ay xulkeedii ka badiyeen Ruushka Semi-final-kii ciyaaraha koobka adduunkana waxa ay la dabaal degtay ciyaariyahanada xulka Qarankeeda!!!.

Sheekadeedu aad ayay u dheertahay, waana madaxwaynihii (Ra'iisul wasaarahii) Croatia-Kolinda Grabar-Kitarović!!!, waana gabadh malaayiin rag ah ka sarraysa kuwaas oo calooshooda ka doorbiday dalalkooda!!!.

Noqo muwaadin dhab ah halkii aad kanoqon lahayd dabadhilif calooshii ushaqayste ah!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

QOF KASTAA WAXA UU QAADANAYAA WAXA KAMAQAN!!!



Nelson Mandella markii uu jamacadda dhiganaayay ayaa waxa macallin u ahaa nin caddaan ah heerka yasmada dadka madowna aad ayay u sarraysay, maalin ayaana Mandella wuxa uu ag-fadhiistay macallinkiisii lagu magacaabi jiray peter isaga oo xilligii nusasaacaha wax ku cunaaya beerta jaamacadda, macallinkii ayaana ku yidhi mandella:- saw ma ogid in aysan is ag-fadhiisan waxna isla cunin shimbir iyo doofaar?!!!, mandella ayaana ku yidhi:- macallin doofaarkii wuu kaa tegay, wuuna ka ag kacay!!!.

Macallinkii oo qaadan la sida dhibka yar ee jawaab fudud loo siiyay ayaa markii fasalkii lagu laabtay istaajiyay mandella wuxuuna waydiiyay su'aal ahayd:- haddii aad jid ka hesho sanduuq lacag ah iyo mid xikmad ah keed qaadan lahayd,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

keedse kategi lahayd?!!!, mandela oo aan isdhibin ayaana ku yidhi:- midka lacagta ah!!!, macallinkii oo qosol jees-jees ah ku jira ayaana yidhi:- bal doofaarkan fiiri, ma xikmad ayaad lacag dhaafsan lahayd?!!!, mandella ayaana ku yidhi:- macallin qofkastaa wuxa uu qaadanayaa waxa ka maqan, (micnaha adigu xikmad la'aan ayaad tahay, lakiin anigu xikmad iyo garasho waan haystaa)!!!.

Muu ladagaalin mana uu aflagaadayn balse haddana si xikmadaysan ayuu uga guulaystay, isaga oo weliba adeegsanaaya jawaabaha odhaahihii ama su'aalihii dhankiisa kaga imanaayay!!!, guushuna kuma jirto habdhaqanada ku salaysan caadifadda iyo kafalcelinta ama jawaabaha aan kafiirsiga lahayn, balse waxa ay kujirtaa isticmaalka falcelinaha xikmadaysan hadba xaaladda lagu suganyahay!!!.

UROONAANTA DADKA!!!



Mahatma Gandhi ayaa raacay tareen, markuu lugta hore la helay ayuuna tareenkii dhaqaaqay, kadib mid ka mid kabihiisii ayaa dhulka ku dhacday mana ay fududayn in uu kabta kadhacday soo qabsado illeen tareenku ma joogsanayee, Gandhina wuxa uu durbadiiba ku dhaqaaqay inuu kabtii kalena ku tuuro halkii ay tii hore ku dhacday!!!, dadkii tareenka saarnaa oo aad ula yaabay falkaas, una haysta Gandhi in uu caqlidarro sidaas u sameeyay ayaana waydiiyay:- waxa kabtiisii oo ka dhacday ku kallifay in uu tii kalena ka daba tuuro?!!!, sidaasna ku kabo beelo?!!!, si sahlan ayuuna ugu jawaabay:- "kabtii hore sooma ceshan karo oo ma awoodo waxase aan awoodaa in ninka hindiga ah ee kabtaas heli doona aan ku caawiyo in uu tan labaadna la helo oo sidaas uu laba kabood oo ku socosho iyo labisgalba ah u helo"!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Samee samafal intii awooddaada ah, haba kugu liidaan kuwa maangaabnimada usaaxiibka ahiye, waxaana hubaal ah kuwa liidani in ay iyaga yihiin balse adigu marwalba aad tahay kaqumman, haba isdiidsiiyaanena waa mid ay iyaba ogyihiin!!!.

Karoonow iskafiirinta indhaha bulshahda, cidda keliya ee aad iska eegayso ama aad raalligelinaysaana ha ahaato Allah swt!!!.

FAQRINIMO XORRIYAD WADATA AYAAN KA JECLAHAY HANTI LAYGU ADDOONSADO!!!



Madaxwayne Axmad Sekou Toure oo ka mid ahaa Hogaamiyayaashii ugu horreeyay Afrika ee diiday isticmaarka iyo gumaystayaashii reer yurub gaar ahaan Faransiiska oo dalkiisa gumaystay ayaa sannadkii 1957-kii waxa dhacday markii aftida loo qaaday dalalka uu gumaysan jiray Faransiisku ayaa reer Guinea Conakry waxa ay diideen gumaysigii, waxayna xorriyadoodii qaateen bishii Oktober 2-deedii sannadkii 1958-kii, Faransiiskiina wax alla wixii dalka yiilay oo qalab ahaa waa ka qaatay, xattaa nalalki jidadka sudhnaa waa la siibay si nolosha loogu dhibo dawladda cusub!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Markii xaalku sidaas noqday ayaa Madaxwayne Axmad Sekou Toure waxa uu yidhi hadal taariikhda galay oo ahaa:- **Faqrinnimo xorriyad wadata ayaan ka jecelahay hanti laygu addoonsado!!!.**

Wakhtigaas oo haatan muddo qarni kudhow laga joogo weli qaaradda afrika madaxda hogaamisa inyar mooyee intooda badan si dadban ayaa reer galbeedku ugu taliyaa iyaga oo la aaminsiiyay in aysan marnaba ka maarmin kaalmada ay siiyaan dalalkii gumaysan jiray, waynuse rajaynaynaa in ay inoosoo baxaan hogaamiyayaal geesiyiin ah oo hal adag, diida oo maya yiraahda fara-gelinta ay inagu hayaan shisheeyaha beesha caalamka isugu yeedha!!!.

In aad yeelato mab'da ah halka aad marwalba kaduulayso kana shidaal qaadanayso, ahna halka aad ulaabanayso marka arrimuhu adkaadaan waa muhiim, haddii kale dabaysha ayaa marba jiho kuula kici!!!.

10 DAQIIQO AYAA AAN IDIN SIINAYAA SI AAD SIFIICAN UGAGA BOGATAAN MIDABKAYGA!!!



Madaxwayhinii Senegal Leopold Senghor, ayaa 1935-kii macallin ka noqday dalka Faransiiska, wuxuuna ahaa nin aad u madaw, ardayda loo geeyayna weligood nin madaw ma aanay arag, wuxuuna ka baqay in ay ku mashquulaan muuqaalkiisa oo ay fahmi waayaan dersiga ugu horreeya ee uu bixinaayay, markuu soo galay fasalka ayuuna ku yidhi ardaydii:- **"Toban daqiiqo ayaa aan idin siinayaa inaad si fiican uga bogataan midabkayga, ka dibna waxa aynu bilaabaynaa dersiga!!!".**

Xaaladaha ad-adagi waxa ay kaaga baahanyihiin hal-adayg iyo wajahaad cilmiyaysan hadii kale waxa aad qorshaynaysaa fashilkaaga!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SULAYMAAN BINU-CABDI MALIK IYO NINKII REER BAADIYAHA AHAA!!!



Niccollo Machiavelli oo ahaa qoraa iyo faylasuuf loogu yeedho aabihii cilmiga siyaasadda ee casriga ah ayaa laga hayaa:- “habka ugu horreeya ee lagu qiimeeyo garaadka ama caqliga ruuxa xukunka haya waa in la eego dadka uu isku xeeray ee la taliyayaasha u ah”, waxaana marar badan dhacda in hoggaamiyaha oo niyad wanaag iyo samaan ka talinaya, wax-qabadna diyaar u ahi uu ka tallaabsan kari waayo dadka ku xeeran oo aanu dareensanayn in ay dabar ku yihiin doonistiisaas fiican!!!.

Sulaymaan Binu-Cabdi malik oo ahaa hoggaamiyihii toddobaad ee dawladdii Umawiyiinta ayaa inkasta oo uu ahaa hoggaamiye caddaaladda iyo maamul wanaagga lagu arkay awgeed jacaylka ay dadkiisu u qabeen uu gaadhay in

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ay ku naanaysaan ‘Furihii khayrka’, haddana ay weli jirtay in laga cabanayay dadka uu isku xeeray, waxase uu noqday hoggaamiye garaad ama caqli badan oo dhegaystay dhaliisha kuwa ku xeeran loo jeedinayo, kana feejignaaday!!!.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaana nin reer miyi ama reer baadiye ahaa oo la kulmay hoggaamiye Sulaymaan Binu-Cabdi malik waxa uu fursaddii uga faa’iidaystay in uu amiirka u sheego dhaliisha dadka ku xeeran iyo khatarta ay leedahay haddii aanu ka feejignaan, wuxuuna ku yidhi:- “Amiirkii muuminiintoow, hadal baan ku odhanayaa, ee haddii uu kula xumaado jidhka isgeli oo adkaysi u yeelo, ogowna oo si kasta ha u qadhaadhaado ee haddii aad warkaygaas ogolaato wax aad jeclaato ayaa aad ka dheefi doontaa”!!!.

Amiirku markii uu ninkii u fasaxay hadalkii, waxa uu ninkii reer baadiyaha ahaa yidhi:- “Waxa aad isku xeertay rag diintoodii dhaafsaday adduunyada aad adigu u hayso, si ay adiga kuu raalli-geliyaana Alle swt cadhadiisa u badheedhay, waana rag aakhiradoodii xumeeyay oo adduunyadooda camirtay”!!!.

Xikmad-badanahan reer baadiyaha ahaa marka uu Amiirka u sheegay ceebta ay leeyihiin ragga uu isku xeeray, waxa kale oo uu uga digay khatarta ay ku keenayso amiirka haddii aanu wax ka qaban, isaga oo arrinkaas ka waaninayana waxa uu yidhi:- “Raggaas ha ku aaminin waxa Alle swt adiga kugu aaminay (Madaxnimada), waa rag aan dan ka gelayn in amaanada ku saarani dayacanto iyo in ummadda khasaare iyo burbur ku dhaco, waxa aad ogaataa in aad adigu ka mas’uul tahay dembiga ay galeen kuwaa kugu xeerani, laakiin iyagu aanay ka mas’uul ahayn

debmiga adigu aad gashay, oo uu adiga keli kugu yahay, dadna waxa ugu doqonsan ruux aakhiradiisii u xumeeyay adduunyo dad kale helayaan darteed"!!!.

Haddaba, hoggaamiye kasta waxa ku xeeran dad ay taladooda iyo sheekadoodu saamayn ku yeelato go'aamada iyo fikirka uu dalka ku hagayo, nasiibdarrose waxa in badan dhacda in dadkaas hoggaamiyeyaasha ku xeerani ay noqdaan kuwo fursadaas uga faa'iidaysta danahooda gaarka ah oo keliya iyo dad u samaysan marin habaabinta hoggaamiyaha iyo in ay mansabyada loo dhiibo ka hodmaan!!!, dadkaasi qaranka waxa ay ku yihiin hagardaamo, waase haddii aanu hoggaamiyuhu noqon ruux baraarugsan oo cidda uu diranayo iyo cidda warka u keenaysaba uga xogogaalsan waxa uu u diranayo, ama aanu lahayn tabo uu ku hubin karo xogtooda iyo dabeecadda ah in wax kasta oo soo gaadha uu maankiisa la kaashado!!!.

Muhiimaddu waxa ay tahay in hoggaamiye kastaa wanaag iyo xumaan waxa uu yeelanayo, sida uu xukunkiisu noqonayo iyo taariikhda u qormaysaaba ay noqonayso mid ku jaango'an hadba nooca ay yihiin dadka ku xeeran, ee uu talada ka qaato, sirtana u dhiibto iyo sida uu ka yeelo talooyinka iyo aragtiyaha uga imanaaya dadkaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

UKALA HOR-MARI SIDA AY UKALA MUDANYIHIIN!!!



Taariikhda miilaadiyada kahor 221-sanno ayuu Boqorkii Shiinaha ee xilligaas Mr. Qin-Shi-Huang bilaabay dhismaha derbi dheer oo illaa maanta ah kan ugu dheer taariikhda aadamaha!!!, darbigan oo dhererkiisu gaadhayo 24,000KM, balaciisuna yahay 3.6-Mitir wuxuu dhismihiisu qaatay ku dhowaad 300 oo sanno, ujeedka shiinuhu u dhisay derbigana wuxuu ahaa in uu ku ilaaliyo xuduudihiisa, ugana gaashaanto weerarro gaadmo ah oo uga imanayay dhanka Boqortooyadii Mangooliya oo uu dagaal adag kala dhexeeyay!!!.

Markii uu derbigu dhammaaday kadib, boqol sanno gudahood waxay ciidamada Mangooliya shiinaha kusoo qaadeen saddex weerar, waxayna ka gudbeen derbiga iyaga oo aan daloolin, xoogna ku gelin, kuna dhibtoon gelitaankiisa, waayo waardiyaha ayay siiyeen lacag laaluush ah kadib markii noloshooda la dabooli

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waayay oo mushahar ku filan la siin waayay, waxa ayna si fudud uga galeen irridaha derbiga!!!.

Waxa ay ku mashquuleen dhismaha derbiga, waxa ayna hilmaameen dhisidda waardiyaha derbiga!!!.

Dhacdadaas uu la kulmay dalka Shiinahu waa uu ka faa'iidaystay khaladkii dhacay waxaana ay u guntadeen madaxdoodu in bulshada aqoon ahaan iyo dhaqaale ahaan ay u dhisaan, gaar ahaana ciidanka iyo shaqaalaha dawladda la daryeelo, iyaga oo maanta ka mid ah dalalka ugu horumarsan dunida!!!.

Waa muhiim in la dhiso dadka gaar ahaan ciidamada iyo shaqaalaha dawladda, lana daryeelo, mushaarooyin fiicanna la siiyo si aanay musuq-maasuq ugu kacin dalkooda hooyana ay u aaminaan, aanayna u khiyaamin, bulshadana ay ugu shaqeeyaan uguna adeegaan si hufan, waxaana la yidhaahdaa horumarka dhaqaale ee dal wuxuu kordhaa marka dakhliga muwaadinku kordho, taasi oo nolosha muwaadinka saamayn ku yeelata!!!.

Ukala hor-mari sida ay ukala mudanyihiin!!!

UHALGAMIDDA HADAFKAAGA!!!



Nin Boqorradii boqortooyinkii hore ka mid ahaan jiray oo la odhan jiray Taymuur Lin ayaa waxa dhacday in isaga oo hoggaaminaya ciidamo uu watay ay dagaal ku jabeen oo laga adkaaday, dabeedna waxa uu nafta kula cararay meel god ah isaga oo quus ah oo aad u niyad jabsan, markii uu cabbaar godkii ku jiray ayuuna waxa uu arkay qudhaanjo yar oo meel fuulaysa oo dhagax sii koraysa oo marba soo dhacaysa iyada oo mar walbana ku celisa marka ay soo dhacdaba!!!.

Ninkii boqorka ahaa intii uu eegayay ama fiirinayay qudhaanjada ayaa waxa uu arkay muddo 17 jeer ah oo ay soo dhacday qudhaanjadu iyada oo aan marna quusanayn waxaana u suura gashay in markii 18-aad ay ka gudubtay derbigii, dabeed waxa uu ka fekeray ninkii boqorka ahaa waar aniguna hal mar oo qudha ayaa dagaal la igu soo jebiyay oo waan is dhiibayaa miyaa, qudhaanjana 17 goor ayay jabtay oo

weli ma quusan, markaasuu yidhi:- aniguna waa in aanan quusan oo ku celiyaa dagaalka isaga oo markii uu dagaalka ku noqdaybana guulaystay dhul badana furtay ama qabsaday!!!.

Dulucdu waxa ay tahay si qofku hadafkiisa uu u gaadho waa in uusan marna niyad jabin si kasta oo dhibaato ay u qabsato isla markaana aanu is dhiibin oo dadaalkiisa uu sii wadaa, siina labanlaabaa, Allena swt uu talo saartaa.

ALLAH SWT UBANDHIGO MURAADKAAGA!!!



Yaraantoodii ayay saaxiibo ahaayeen, mid ayaa noqday madaxwayne, halka midka kalena uu ka noqday macallin, kadib kii macallinka ahaa waxa ka xanuunsatay xaaskiisa oo sakaraat gaadhay, dhakhtarka ayuuna geeyay, waxana lagu yidhi qaliin ayaa lagu samaynayaa balse lacag fara badan oo uusan awoodin ayaa loosheegay, wuxuuna intaa u raaciyay dhaqtarkii lama qalayo illaa aad keento lacagtaas!!!.

Xaafadduu aaday isaga oo murugaysan, wuu yara fakaray, wuxuuna go'aansaday in uu saaxiibkiis aado una dan-sheegto, iskana dhaadhiciyay in uu wax kasta u qabanayo, wuuna baxay maalintii ugu horaysayna kaantaroolka ayaa laga soo celiyay asaga oo lagu dhahay shirbuu kujiraa, wuxuuna aaday mid madaxda kamid ah kuna yidhi:- iigey madaxwaynaha, mashquulbaan ahay ayuuna ku yidhi, saa mid

kaluu utegay isaga oo isna kuleh iigey madaxwaynaha, hadda ayaanba magaalada ka safri rabaa fursadna mahayo ayuu isna ku yidhi!!!.

Wuxuu sameeyo ayuu garan waayay kaantaroolkii ayuuna ku laabtay, saa ciidamadii ayuu ku dhahay arrin muhiim ah ayaan karabaa, xaaskayga ayaa geeri iyo nolol udhaxaysa asagana yaraantayadii ayaanu saaxiibo ahayn, adeer waxaas kabax oo kulaabo bartaad katimid ayayna ugu jawaabeen, ninkiina asaga oo murugaysan ayuu gurigii iskasoo aaday, waxayna ahayd maalin jimco ah, wuxuuna isku diyaariyay salaada jimco, safka hore ayuuna fadhiistay, saa wuxuuba is yidhi waar Ilaahay swt maad baridid, Allah swt ayuuna baahidiisii usheegtay uuna ka baryay in uu baahidiisa udaboolo!!!.

Wax yar kadib waxa timid madax rabtay in ay ku tukadaan masjidka, waxaana kamid ahaa madaxwaynaha, safka hore ayayna fadhiisteen ninkiina markii salaada laga baxay ayaa madaxwaynihii wuxuu arkay saaxiibkii oo safka kujira, intuu soobooday ayuuna habsiisay, saaxiib seetahay iyo xaalwaraysi laysku ilmeeyay ayaana dhexmaray, way is raaceen waana isla qadeeyeen, wuuna usheegay in xaaskiisu xanuunsantahay iyo lacagta laga rabo, lacagtii ayaana lasoo siisay, qalliinkiina xaaskii waa lagu sameeyay wayna caafimaaday!!!.

In badan ayuu bani-aadam baryayay waxna maysan uqabanin halka halmar oo uu Allah swt baryayna fadhigiisa loogu keenay muraadkiisii, wax walbana Allah swt ayay gacanta ugu jiraan ee bari waxna waydiiso, halkii aad bani-aadam diciif ah kabaryilahayd.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

TUUG DHERGAY AYAA KA KHARASH YAR TUUG CUSUB!!!



Madaxwayne ayaa ka war helay in wasiiradiisa mid kamid ahi uu lugta kula jiro musuq-maasuq, kadib waxa uu amray in asaga oo feedho-qaawan lagu xidho tiir, kadibna lamariyo malab, isla markiibana waxa weerar kusoo qaadday xayn shinni ah oo isugu daray qaniinyo iyo durid, markii ilaalada goobta ku sugnaa ay nasasho tageen ayaana waxa usoo dhawaaday xog-hayihiisii iskuna deyay in uu ka caydhiyo shinnida, wasiirkii ayaana diiday kuna yidhi:- shinnidani way iga dharagtay, haddaad iga caydhisona waxa ii iman doona kuwa kale oo aad u gaajaysan, taas oo igusii kordhinaysa xanuunka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Arrintii ayaa waxa maqlay Madax-waynihii, wuxuuna isla markiiba amray in laga furo xadhiga, laguna celiyo kursigiisii iyo jagadiisii, maxaa yeelay wasiir tuug ah oo dhergay ayaa aad uga kharash yar wasiir cusub oo tuug ah oo gaajaysan!!!.

Weligeedba dunida inta xun ayaa kabadnayd inta wanaagsan, inta badanse madaxda wax doorata waxa ku adkaata doorashada inta yar ee wanaagsan, badina ay ku sababto caqabado kaga yimaada deegaanka kuxeeran aawadeed iyo ballanqaadyo aan habboonayn oo uu soosameeyay wakhtigii uu halganka ugusoo jiray kursiga!!!.

Kadheeraw goob-walba, goor-walba iyo xaalad-walba ballanqaadyada aan habboonayn, intii awooddaada ahna kudedaal in aanu si taban kuu saamayn deegaanka kugu xeerani, markaas ayaadna kamidho-dhalin kartaa yoolashaada wan-wanaagsan, aadna uxulan kartaa goob-walba cidda aad u-aragto in ay munaasabka ku tahay!!!.

IN UU KHAYRKU KU JIRO AYAA LA’ARKAA!!!



Nin boqor ah ayaa wasiirkiisu wuxa uu ahaa mid markasta oo mushkilad ay magaalada ka dhacdo ama meel kale waxa uu dhihi jiray:- in uu khayrku kujiro ayaa laga yaabaa!!!, boqorkiina arrintaas iyada ah wuu dhibsaday, haddaba maalin maalmaha kamid ah ayaa uu boqorkii oo ugaadhsi aaday gammuunkii uuganayay (tuurayay) farta kaga dhacay, kana gooyay fartii, markaas ayuu wasiirkii yidhi:- In uu khayrku kujiro ayaa la' arkaa, boqorkiina wuu xanaaqay askartii ayuuna ku yidhi:- hala xidho, markaas ayaa xabsiga loo taxaabay, intii jidka lasiiwaday ayaana waxa uu yidhi:- in uu khayrku kujiro ayaa la' arkaa!!!.

Maalin dambe ayaa boqorkii oo ugaadhsanayaa waxa uu lakulmay ciidamo qofka ay arkaan dilaya si ay ugu dhawaadaan asnaamtooda, gacanta ayayna kudhigeen, markii ay birayn lahaayeen ayayna arkeen fartiisa oo go'an, markaas ayay

dheheen:- kani waa mid ceeb leh ee naga siidaaya ma astaahilo in asnaamteena loo bireeyee!!!.

Boqorkii waxa uu yidhi:- hala ii keeno wasiirkii, markii lookeenayna waxa uu ku yidhi:- waan ogaaday fartii iga go' day in ay khayr ii ahayd!!!, ee adiguna markii xabsiga laguu waday waxa aad tidhi:- In uu khayrku kujiro ayaa la arkaa, ee muxuu yahay khayrkaasi isna?, wasiirkiina waxa uu yidhi:- markii adiga lagu qabtay ee farta go' an lagugu ceebeeyay hadaadan ixidhi lahayn oo aan kula socon lahaa anay idili lahaayeen ileen anigu ceeb malihiye, markaa xabsigu khayr ayuu ii ahaa!!!.

Hadaba maadaama oo aynu nahay dad muslimiin ah waa in aynu kuraalli noqonnaa qaddarta Alle swt, wax fiicanna aynu karajaysanno Allah swt oo aynaan dhihin maxay san iigu dhacday ama maxay san unoqon wayday, laakiin aynu Allah swt ugushukrino nicmo kasta ee uu inasiiyay kuna sabirno wixii dhib ah ee uu inagu imtixaamayo.

Yaa Allah imtixaanka Adduunyada iyo ka aakhiroba noofududee!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

OOFINTA BALLANKA!!!



Waxa uu kusoo noqday boqorku qasrigiisii habeen uu Jiray qabow darani, waxa uuna arkay waardiyihiisii oo ahaa oday waayeel ah isla markaasna aan haysan dhar adag oo uu qabowga Iskaga difaaco, Boqorkiina waxa uu usoo dhawaaday Odaygii waardiyaha ahaa isaga oo su'aalayana waxa uu ku yidhi:- miyaadan qabowga dareemayn?, Odaygiina wuu u Jawaabay, wuxuuna yidhi: Haa!!!, waan dareemayaa qabowga Laakiin Ma Haysto Dhar Adag oo Aan Qabowga Iskaga Celiyo, Mana Awoodo Wax aan Kusoo Qaato (ku Iibsado)!!!.

Boqorkii Waxa uu ku yidhi:- Marka aan Gudaha Galo Ayaan Adeegayashayda Mid Ka Mid Ah Kuugusoo Dhiibi-Doona Maro Adag oo Aad Dhaxanta Ka Huwato, Odaygii Miskiinka Ahaana Ballan-Qaadkii Boqorka wuu Ku

Farxay, wuxuuna ku yidhi:- Haye Boqorow, Boqorkiina Waxa uu galay gudaha Qasriga Wuuna Hilmaamay Ballantii uu Odayga Miskiinka Ah Ka Soo Qaaday, Wuxuuna soo Xasuustay Subaxdii Markuu Waagu Beryay Odaygii Miskiinka Ahaa, wuxuuna yidhi:- Waar Bal Odaygii Waardiyaha Ahaa ii Keena?, Ilaaladii Boqorkuna Waxa ay Dooneen Odaygii, Waxa ayna uTageen isaga oo Naftii ay Kabaxday Qabow Dartiis, Agtiisana uu yaallo Qoraal uu Qoray, Wuxuuna ku Qoray Qoraalka Sidan:- Boqorow Waxa aan Ahaa Mid udul-qaata Qabowga Habeen Kasta, Laakiin Waxa aad ii Ballan-Qaaday Dhar Qabowga Iga Celiya, Balse Ballan-Qaadkaas Waxa uu Jidhkayga Ka Qaaday Awooddii uu Qabowga Iskaga Celin Jiray, Waadna i Dishay!!!.

Haddii aad Ruux Wax uusan Haysan u Ballan-Qaado, Waxa ay Ka Dhigan Tahay Adiga oo Ka Qaaday Awooddii uu Waxaas uga Kaaftoomi Jiray, Ee Hakaga Bixin Ballanta aad Kaqaaday, Adigu Ma Ogid Muhiimadda uu agtiisa ka leeyahay Arrinkaaasiye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

BAKHAYL IYO FULAY MIDNA MA-IHI!!!



Nin ayaa safar dheer oo uu soo galay kadib yimid magaalo uu Boqor katalin jiray, markiibana inta uu suuqa dhex istaagay ayuu ku dhawaaqay kalmadahan:- "bakhayl iyo fulay midna ma ihi, bakhayl iyo fulay midna ma ihi"!!!, warkii ayaana loo geeyay boqorkii, markaa ayuu yidhi:- iikeena ninka deeqsinimada iyo geesinimada isku darsaday, waxa aan uguurin gabadheyda'e"!!!.

Boqorkii ayaa loo geeyay ninkii, waxa uuna waydiiyay:- ma adiga ayaan bakhayl iyo fulay midna ahayn?, waxa uuna ku jawaabay:- " Haa Boqor", boqorkii ayaana uguuriyay gabadhiisii, waxa uuna aroos qiimo badan uga dhigay qasrigii boqortooyada!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Maalintii dambe oo uu arooska-baxay ayaa Boqorkii u yeedhay afar nin oo fardoolay ah, geesinimadoodana ay ahayd kuwo uu ku kalsoonyahay, waxa uuna ku amray wiilka gabadhiisa guursaday ee geesinimada sheegtay faras iyo waran in la siiyo oo ay baxaan, marka la joogo suryo Libaax oo ahayd meel ay fadh-fadhiyaan Libaaxyo dad-qaad ahina ay dib ugasoo laabtaan, haddii inta uu degto Libaaxa Jilibka u dhigtana ay ku noqdaan oo ay ka gaadhaan Libaaxyada badan ee halkaa ku sugan si ayna u kala dafin, waana Geesi, haddii uu ka soo daba cararana ay keenaan waa beentii oo waa Fulay'e!!!, balse markii ay ka soo carareen ayaa inta uu Faraskii ka degay uu Jilibka u dhigay Libaaxyadii oo warankii isula baaciyay, markiibana waa ay ku soo noqdeen oo ay kasoo wadeen ayaga oo ogaaday in uu run sheegayay oo uusan fulay ahayn!!!.

Boqorkii markiiba waxa uu wiilkii ku amray in uu ka guuro oo magaalo ka fog dego isaga oo toddoba Rati u raray oo biyo iyo raashin isugu jiray, magaalada markii uu saacado ka socday ayaana waxa ka horyimid reero dhibaato ay ka muuqato oo oon iyo gaajo bestood la ah, inta uu joojiyay awrtii ayuuna raashin iyo biyo siiyay, hal ratina u qalay, hal saac markii ay socdaan ayaana haddana waxa ka hor yimid dad badan oo ay dhibtii oo kale ka muuqato, waxa uuna sidii oo kale u qalay rati kale isaga oo raashin iyo biyo wixii uu hayayna siiyay!!!.

Dadka dhibaataysan waxa ay ahaayeen kuwo isdaba qulqulayay, markii uu hal rati u hadhay ayuuna boqorkii amray in laga gaadho oo loo keeno, markii Boqorkii loo keenay ayuuna waydiiyay:- "Wiilkaygiiyow ma tihid bakhayl iyo fulay midna ee maxay ku dhacday in aad noqon waydo?"!!!, markaas ayuuna sheekadan bilaabay in uu uga sheekeeyo Boqorkii, wuxuuna yidhi:- waxa aanu ahayn reero uu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Ilaahay swt siiyay xoolo afar adduunyo oo si wayn u dhaqan, Geel, Lo iyo Adhiba, waxaana jiray in reerkayaga ay qabiil kale col ahaayeen oo ay dagaalami jireen, kadib habeen ayaa afar rag ah oo aan kamid ahaa loo diray ceelasha in ay kasoo arooraan maadama cabsi lagu jiray, iyada oo ay saddexdii kale ceelka shubayaan aniguna aan waardiye ahay ayaan halmar ku baraarugay rasaas is qabsatay, dhulka ayaan isku tuuray oo aan dhabacday, madaxa haddaan kor u qaadayna waxa aan arkay saddexdii saaxiibaday ahayd oo mayd ah, ceelka dushiisana yaala, kuwaas oo aanay nafiba dhulka ula dhicin!!!.

Waan orday waxa aana isku tuuray ceel Mas wayn looga caagay oo aan laga dhaansan, meel dhexe oo ceelka jambiyadiisa ah ayaan lugta lahelay waxaana qabsaday karkaar, maskii oo ka yaabay waxa ceelka gudihiisa ku soo dhacay ayaana isoo aaday, isaga oo xabadkayga kusoo dul socda illaa uu sankayga dhegta iga saaray bal in aan ahay geed ceelka kusoo dhacay iyo in aan ahay wax nool ayaa intii aan neefta isku celinayay si uusan Masku ii cunin raggii cadawgayga ahaa kusoo ordeen ceelka waxa ayna dheheen:- "wakaas, wakaas"!!!, iyaga oo toosh igusoo ifinaaya, bahal xabad ahna igu soo rideen, markaa ayaa Maskii sankayga neefta ka dhegaysanayay inta ay madaxa uga dhacday xabaddii ceelka gudaha ugu tuurtay!!!.

Baftii Maska markii ay maqleen ayayna dhaheen:- "Waar inaga keena wakaas oo waa dhintaye"!!!, markaas waxa aan fulay u noqon waayay, Ilaahaygii swt labadaas cadow ee Maskii rabay in uu i cuno iyo xabaddii rabtay in ay idisho isu bixiyay ayaan ogaaday in marka uu rabo in uu nafta iga qaadi karo oo cid kale oo wax iyeeli kartaa ayna jirin, sidaas ayaana fulay u noqon waayay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Markaa ayaa iyana la waydiiyay:- "maxaad bakhayl u noqon wayday", sheekadii ayuuna halkii kasii waday, isaga oo leh:- subixii ayaan ceelkii ka soo baxay, reerkii ayaana soo aaday mise habeenimadii ayaa la miray oo xoolihiina la dhacay, gurigaygii ayaana dul imid oo ay mayd yihiin Afadaydii iyo wiil yar oo aan dhalay!!!.

Waan soo lugeeyay, reerka walaalkay oo deganaa meel lix saac loo socdo ayaana soo aaday, markii aan u imidna waxa aan u sheegay dhibaatadii nasoo gaadhay iyo in reerihii la baabiiyay, waxaana ka codsaday in uu xoolo isiiyo, balse waxa uu ii ogolaaday lax caato ah oo uu duuf ka daadanayay, taas oo raaci kari wayday xoolihii kale ee ceelasha loo arooriyay!!!, waxa uuna iyidhi:- " jidka kusii mar"!!!.

Iyadii ayaan soo watay, markii aan saacado badan socday ayaa intaan meel fadhiistay aan madag dab ka baxsaday oo inta aan qashay laxdii caatada ahayd aan dubasho ugu dhaqaaqay, aniga oo hilibkii cunaya ayaana waxa iga daba yimid walaalkay oo reerkiisii inta la weeraray xoolihii laga dhacay illeen dadka aan cadowga nahay kuwo dagaal qabiil naga dhexeeyo ayaanu ahayn, oo isku mid ayaanu u ahayn aniga iyo walaalkay’e, waxa uuna igu yidhi:- "walaal laxdii xumayd ee aan saaka kusoo siiyay ayaa maanta wax inoo wada ah"!!!, waxa aan bakhayl u noqon waayayna waxa weeye, Ilaahaygii swt xoolihii uu walaalkay iga lexejeclaystay kabaday in aanu wado cuno hilibka laxdii caatada ahayd ee duufku kasocday ayaan ogaaday in aanan ceshan karin wax uu iga qaadayo, sidoo kalena aan la ii diidi karin wax uu isiinaayo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Boqorkii waxa uu u magacaabay lataliyaha Qasriga Madaxtooyada isaga oo ka dhigtay hawl-wadeenkiisa gaarka ah kadib markii uu ogaaday in uu run sheegayay!!!.

Wax uu Allah swt kuu qoray cidina kaama baajin karto, wax aanu kuu qorina cidina kuguma keeni karto, sidoo kale wax uu Alle swt ku siinaayo cidina kaama celin karto, wax uu kuu diidanyahayna cidina kuma siin karto.

ABAAL NIN-GALA IN LOOGUDAA GAR-WEEYE!!!



Sida lasoo weriyo nin Boqor ah ayaa waxa uu rabbaayadeeyay 10 Ey oo dad cun ah, si uu ugu tuuro wasiiradiisa gef ka gala si ay u cunaan, haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayaa mid wasiirada kamid ahi waxa uu boqorka kula taliyay aragti aan toosnayn oo uusan boqorku ka helin, markaas ayuu go'aan ku gaadhay boqorkii in eyda loo tuuro, wasiirkii ayaana yidhi:- muddo 10 sanno ah baan kuu shaqaynaayay ee ma sidaas baad iigu abaalgudaysaa!!!, waa hagaage boqorow waxa aad isiisaa 10 cisho oo keliya inta aanad go'aanka fulin, boqorkiina waa uu ogolaaday!!!.

Wasiirkii waxa uu u tegay waardiyaha rabaayadeeya eyda waxa uuna ka codsaday in uu eyda rabbaayadeeyo muddo 10 cisho ah, waardiyihii ayaana

waydiiyay waxa uu ka dheefayo, wasiirkiina waxa uu ugu war-celiyay:- mar dambe ayaan kuu sheegidoonaa!!!.

Wasiirkii waxa uu bilaabay in uu eyda daryeelo, cunto siiyo, u qobeeyo isla markaana kudedaalo wax kasta oo farxad geliya, markii 10 cisho dhammaatay oo fulinta go'aankii la gaadhay ayaana wasiirkii lagu xidhay meel eydu kujireen, iyadoo boqorkuna la daawanayo shaqaalihii kale, balse waxa boqorku la yaabay waxa uu arkay ee ah in eydu ku foorarsadeen wasiirka labadiisa lugood hoostooda oo u eg in ay u abaalgudayaan!!!, Boqorkii ayaana waydiiyay wasiirkiisii;- maxaad eyda ku samaysay?, markaasuuna ugu jawaabay:- waxa aan u adeegay 10 maalmood mana aysan hilmaamin adeeggaas, adiguse 10 sanno ayaan kuu adeegaayay waxaas oo dhanna waad illowday!!!, Boqorkii ayaana madaxa raariciyay isaga oo garwaaqsaday farriinta wasiirka, waxa uuna u fidiyay cafis!!!.

Ha u iloobin wada dhaqanka saaxiibadaa, reerkaaga iyo bulshada kaleba, arrin mar dhacday oo aanad ubogin darteedna ha uxumayn wakhtigii wacnaa, si aanad u waayin dadka dad kuugu dhow iyo xusuusihii wanaagsanaa, shimbiruhubana waxa ay cunaan qudhaanjada, marka shimbiruhu dhintaana waxa dib u cuna qudhaanjooyinka, waayuhuna waa isged-gediyaan ee cidna hoos ha u dhigin!!!, kamase dhigna haku go’aan qaadan dhacdooyinka kugu xeeran ama kugu hareeraysan, ee waa kafiirso inbadan go’aan qaadasho kasta!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DIINTEENU WAA NASTEEXO!!!



Nin boqor ah oo magaalo katalinaayay ayaa masaajid wayn waxa uu kadhisay xaafaddiisa uu deganaa, masaajidkii waxa iimaam kanoqday ooloodhiibay nin cod-macaan oo qur'aanka ku qushuuca dadkana ka oysiiya khushuuca dartiis, wuxuuna aqrinjiray suurado dhaadheer, lkn waxa arrinkaas dhibsaday ninkii Boqorka ahaa ee masaajidka dhisay, wuxuuna kuyidhi askartiisii:- iimaamka salaada nagu dheereeya markasta halaykeeno, askartiina iimaamkii ayay sookexeeyeen, Boqorka gurigiisii ayayna keeneen, wuxuuna kuyidhi:- iskajir oo haddii aad mardambe salaadda nagudherayso xabsiga ayaan toos kuu dhigayaa, waxa aadna amar uqabtaa halki rakcaba in aad labo aayad uun kutujisid, haddii aad kabadisidna way kuudhammaatay ee iska jir!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Ninkii iimaamka ahaa arrinkaas aad ayuu uga xumaaday, wuxuuna yidhi:- Boqorow warkaaga ayaa jira, waana kumaqlay, sida aad tidhaahdo baana samaynayaa!!!, intaas kadib waxa laysugu yimid masjidkii, waxaana lagalay salaaddii maqrib, iimaamkii fataxada markuu dhammeeyayna waxa uu sooqabsaday labo aayadood oo aad uganixiyay ninki Boqorka ahaa ee amarka bixiyay, iyadoo macnahooda guudna uu ahaa:- **waxa ay dhahayaan kuwii lahaystay (Aakhiro) Rabbiyow waxa aan addeecnay madaxdayadii iyo kuwii noowaawaynaa (ee naxakumijiray) waxayna naga lumiyeen jidkii, ee Ribbiyow sii kuwaas laban-laab cadaab ah lacnad wayna lacnad**!!!.

Waxa lamaqlay qof oynaaya oohin aad udaran illaa salaaddii laga baxayay, illeen qofkii oynayay waaba Boqorkii oo markii ugu horraysay la arkay isaga oo salaadda ku khushuucsan, intaas kadibna Boqorkii waxa uu utegay iimaamkii masjidka wuxuuna kuyidhi:- waan kubaryayaa ee cishaha markii lagaadho labo aayad maahane suurad dheer nagu tuji, haddaad rabtona rakcadda koowaad Al-baqro noogudhammee, rakcadda labaadna Aal-cimraan kusiixeji, lkn waan kubaryayaaye icafi sida aad doontidna yeel, shiikhaygiiyowna adaa masjidka ka imaam ah!!!.

Ogow oo haddii aad istidhaahdo waad sarraysaaye kutumo inta kaa hoosaysa inuu jiro sarreeyaha aan laga sarraynin ee ah kan ugu sarreeya, ka kawayn uguna wayn wax walba, kana sarreeya, kuna dedaal marwalba iyo goor kastaba adiga oo aan xaqa kaleexanayn haddana in aad isticmaasho xeeldheeri.

Yaa Allah nafahamsii wanaagga isdhul-dhigga!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA AAD HAYSATAA 5 SAAC!!!



Waxa ay qalad ka galeen Boqorka, wuxuuna ku xukumay dil toogasho ah, dadkii ayaa mudaharaaday kana diiday xukunkaas, Boqorkii qaraar wuxuu ku gaadhay in la imtixaamayo labadaas nin, hadday ku guulaystaan way badbaadayaan, hadday ku guul-darraystaanse waa la dili, dadkii ayaana yidhi:- waa maxay imtixaankaasi, Boqorkii ayaana yidhi:- berri subixii ha isku yimaadaan wax Alla iyo wixii ku nool magaalada, waxa la aadi duleedka magaalada halkaas oo ay ku yaallaan labada geed ee ugu wayn magaalada, waxa loo qaban doonaa 5 saac in ay ku jaraan, hadday ku jari waayaan way udhammaatay, hadday ku jaraanse way badbaadeen!!!.

Subixii ayaa lagaadhay, waxaana lategay goobtii lagu ballamay, waxaana yimid dadwaynihii, saraakiishii, madaxdii iyo Boqorkiiba, labadii nin waxa loo kala

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhiibay laba faash iyo laba masaarood, haye ka hawl gala arrintaas iyada ah ayaana layidhi, muddada aad haysataana waa 5saacadood, wayna bilaabantay!!!.

Nin ayaa isla markiiba ku bilaabay faashka geedkii, kii kalena wuu iska fadhiistay, dadkii, madaxdii iyo Boqorkiibana yaab ayaa kasoo hadhay, dadkii ayaana ku qayliyay:- waar badbaadso nafsadaada oo qabo hawsha, dhag jalaqba uma uuna dhigine saacaddii koowaad ayaa dhammaatay, ninkani waa iska fadhiyaa weli, kii kalena waa wadaa hawsha, tii labaad ayaa dhammaatay, tii saddexaad ayaa dhammaatay, tii afraad markay ka dhimantahay 30 daqiiqo ayuuna istaagay kii fadhiyay, dadkii ayaana yidhi:- muxuu xilligan ka istaagi!!!.

Waxa uu codsaday mandaraq cusub iyo seef cusub, dadkii iyo madaxdii iyo Boqorkii ayaana yaab ay ku noqotay, tolow muxuu ku samayn doonaa, waa lookeenay, kadibna geedka salkiisa hoose ayuu saddex meelood ka qoday waxaana soo baxay saddex xidid oo waawayn, seeftii ayuuna soo qaatay wuxuuna jaray saddexdii xidid mise geedkii ayaaba mar qudha iska dhacay, 10 daqiiqo ayuubana ku jaray geedkii!!!.

Meesha wax Alla wixii joogay filan waa ayaa ku dhacay, afka ayay gacanta saareen, indha taag ayaa kasoo hadhay, waxayna bilaabeen midba midka kale in uu eego, muddo daqiiqado ah ayaana la aamusnaa oo xittaa hadalkii iyo sheekadii lawada joojiyay yaab dartiis, kii kalena markay ka dhinnayd 10 daqiiqo wakhtigii dhammaadka ayuu geedkii dhinac utuuray asagiina daal dartiis dhinaca kale udhacay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Maskaxda uu Allah swt kusiiyay isticmaal oo adeegso, waddankaaga wax ugu qabo, diintaada wax ugu qabo, dadkaaga wax ugu qabo, waxaana hubaal ah in haddii aad si qumman u adeegsato maskaxdaada aad muddo yar ku baddali doonto wax wayn, sida ninkanibana uu toban daqiiqo ugu jaray geedka ugu wayn ee magaalada!!!.

Ufikir si qumman!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA AAD HAYSATAA 6 SAAC!!!



Nin faqiir ahaa oo ka kalluumaysan jiray badda ayaa maalin maalmaha kamid ah waxa uu aaday badda sidii ay caadadiisuba ahayd, markii uu soo qabsaday hal xabbo oo kalluun ah ayuuna guriga la aaday, kadibna waxa uu bilaabay in uu jeexo, saa markuu jeexay wuxuu ku dhex arkay jawhar qaali ah, wuu kabixiyay wuxuuna kuxasaystay meel, markii uu cunay mallaygii ayuuna wuxuu soo qaatay jawhartii, dhankaa iyo suuqa markii uu la yimid ayuuna ninkii ugu taajirsanaa goobtaas ulategay, wuuna tusiyay, ninkii taajirka ahaana wuxuu ku yidhi:- ma gadan karo oo waa qaali ee utag Boqor hebel, nin ayuuna u tilmaamay!!!.

Boqorkii loo tilmaamay ayuu utegay wuuna tusiyay, Boqorkii ayaana ku yidhi:- waan kaa gadan isagoona uraaciyay:- bakhaarkan waxa ka buuxa dahab noocyadiisa kala duwan, cunto iyo sariiro dahab ah, markaas waxa aad haysataa 6

saac ee gal bakhaarkan waxa aad doontana ka qaado, 6 saac marka ay kuu dhammaatona waad kasoobixi bakhaarkan waxbana kuma lihid, ninkiina qosol ayuu sameeyay, ma 6 saac dhan ayaanba fursad uhaystaa?, 2 saac gudahood ayaabaan ku dhammayn waxa bakhaarka kujiraba!!!.

Waxa bilawday 6-dii saac, ninkiina markuu galay bakhaarka indha taag iyo qosol ayuu bilaabay, wuxuu layaabay cuntada meesha taala, wuxuuna is dhahay gaajo ayaa ku haysa ee adoo gaajo ku haysona wax ma guri kartide marka hore wax cun!!!.

Wuxuu bilaabay in uu wax cuno, cuntadiina majoojinin illa uu ka dibiro, markuu dhergay, waliba dhereg xad-dhaaf ah ayuuna eegay saacadda mise waxa udhiman 5 saacadood, ma dhawa ayuu is yidhi, xoogaa seexo kadib soo toos oo gur alaabta, sidaas ayuuna naftiisa ugu sheekeeyay kuna qanciyay!!!.

Wuu seexday siduu uhurday ayaana waxa toosiyay boqorkii, wuxuuna ku yidhi:- toos 6-dii saac way dhammaatay, ninkiina mar qudha ayuu soo booday, naxdin darteedna wuxuu yidhi:- hal faraanti oo dahab ah oo qudha aan qaato Boqorow, may, boqorkiina wuu ka diiday sidiina ayaa meeshii looga saaray!!!.

Haddaba, isaga waaba loo sheegay oo waxa lagu yidhi:- 6-saac kadib waad kabixi bakhaarkan balse adiga waxa lagu keenay dunidan waxaana lagu dhahay ushaqayso jannada laakiin xilligii aad kabixi lahayd laguuma sheegin, adoo xaaladdaas kujirana kawarran haddii wax aan ku khusaynin oo aan aakhiradaada faa'iido u lahayn aad 24/7 ku mashquusho!!!, magaranaysid xilliga aad kabixi

dunidan ee hurdada ka kac oo ushaqayso raalli-gelinta Alle swt ama iska hurud oo malakul-mawdku haku toosiyo, deetana lasoo bood halmar-halmar-halmar!!!.

Lakaladheeree orodse ma'aha!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (3)

MANA CABSI GELINDOONAAN WAX CARSHIGA KA HOOSEEYAA!!!



Halgamaagiii waynaa ee reer Liibiya Allah swt ha u naxariistee Sheekh Cumar Mukhtaar oo la dagaalamayay gumaysigii Talyaaniga ee dalkiisa hooyo kusoo duulay sannadkii 1911-kii ayaa qaar daba dhilifyo gumaysiga u adeega ahaa waxa ay ku yidhaahdeen:- Sheekh Cumarow sidee ayaad ula dagaalamaysaa Talyaaniga oo dawlad wayn ah haysatana diyaarado dagaal oo aadan adigu haysan!!!, markaasaa wuxuu waydiiyay:- diyaaraduhu ma waxa ay ku duulaan Carshiga ka kor mise hoostiisa?!!!, waxayna dheheen:- Carshiga hoostiisa, dabeedna waxa uu ku yidhi:- maadaama oo carshiga midka ka korreeyaa uu nala Jiro mana cabsi gelin doonaan wax Carshiga ka hooseeyaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Lahaanshaha yaqiin xoogan oo sax ahi waa mid kamid ah furayaasha iyo albaabada guusha ee if iyo aakhiroba, sidaa daraadeed xooji oo kori yaqiintaada xagga Rabbi swt asbaabtii ama sababihiina la-imaw, waad guulaysan if iyo aakhiroba'e.

Yaa Allah iimaanka nagu sug.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

LUKA MODRIC IYO HALGANKII HIMILADIISA!!!



Markii uu ahaa 6 jir awowgii ayaa la toogtay, qoyskiisuna waxa uu noqday qaxoonti, wuxuuna ku koray codadka /dhawaaqa bambaanooyinka iyo hardanka madaafiicda, tababarayaasha ayaa u sheegay in uu aad u tamar yar yahay oo aanu lahayn awood jidheed oo usaamaxaysa ciyaaraha kubbadda oo uu aad u jeclaa, islamarkaana ay tahay wax aad looga xishoodo in lagu dhex arko garoomada lagu ciyaarayo, balse arrintani waxba uma dhimin hammigiisii iyo hadafkiisii ahaa in mar uun lagu arko isaga oo ka ciyaaraya garoomada ugu waawayn dunida, lagana daawanayo shaashadaha sida tooska ah usoo tebinaya ciyaaraha, isla markaana uu guulo taariikhiya usoo jiido dalkiisa hooyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)


Luka Modric ayaa ugu dambayn Croatia ku hoggaamiyay fiinalka koobka Adduunka ee ugu horreeyay oo ay ciyaarto Croatia isaga oo ah hoggaamiyaha (Captan) xulka kubadda cagta ee Croatia!!!.

Xaalad-kasta, dhibaato-kasta iyo caqabad-kasta oo damacda in ay kaa hor-istaagto gaadhidda yoolkaaga iyo hadafkaaga ha isu dhiibin ee si geesinimo leh uwajah adi oo Allah-na swt talo saaranaaya si aad ugaadhid hadafkaaga.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DR. DAAHA XUSEEN IYO HALGANKII HIMILADIISA!!!



Dr: Daaha Xuseen waxa uu ahaa aqoonyahan aad u dhisan, suugaan yahan carbeed iyo mufakir kasoo jeeda dalka Masar, wuxuuna dhashay bishii november 15-keedii sannadkii 1889-kii, waxaana uu indha beelay isaga oo afar jir ah, hase yeeshee dadaalkiisii uu Eebbe swt la garab galay kadib waxa u suura-gashay in uu kaqaatay shahaadada sare ee Phd Jaamacad ku taala dalka Faransiiska, wuxuuna ahaa ninkii aasaasay Jaamacadda Alexandria ee dalka Masar, wuxuuna ka noqday maamule!!!.

Sidoo kale Dr: Daaha Xuseen sannadkii 1950-kii ayaa waxa uu noqday Wasiirkii Waxbarashada ee dalka Masar, wuxuuna qoray kutub faro badan isaga oo sidoo kalena laga dhaxlay xigmado aad u badan, magiciisuna caan ka noqdey dunida!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Dr: Daaha Xuseen isaga oo lixaadkiisu kala dhiman yahay ayuu dadaalay, Allahna swt garab-galay, marna aanu niyad jabin, isna dhiibin, ka dibna maqaam sare gaadhay, adigaaganse lixdiisii laxaadba ay udhammaystiranyihiin halkee lagaa haystaa, waase halkee caqabadda kugu hor-gudbani!!!, shan daqiiqo keligaa gaar isula bax waana muhiim in aad jawaab uheshid su'aashan!!!.

Caqligii wanaagsani itaal in uu karoonyahay, bal eegoo ufiirsada!!!.

WELIGII KAMUU QALIN-JEBIN JAAMACAD!!!



Nikola Tesla sannadkii saddexaad ee jaamacaddiisa simistar-kiisii labaad wax dhibco ah muu keenin, waxaana ay taasi ku kelliftay in uu halkaas ku joojiyo damaciisii ahaa in uu helo shahaadada heerka koowaad ee jaamamacadda, iyada oo ay sidaa tahay haddana waxa uu noqday hal-abuure, injineer koronto, injineer farsamo, fiisikisyahan iyo dadka aqoonta uleh dejinta qorshayaasha mustaqbalka!!!.

Haddaba sidee ayay ku dhacday arrintani?.

Nikola Tesla 10 july 1856-kii ayuu ku dhashay xaafadda Ismiljan ee gobolka Lika oo ka tirsanaa boqortooyadii Austria, waa meel hadda ka tirsan wadanka Croatia, aabihii waxa la odhan jiray Milatin Tesla, hooyadiina Duka Tesla,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waxa la sheegaa hooyadii Duka Tesla in ay lahayd xirfadda makaanikada isla markaana ay samayn jirtay qalabka guryaha, waxa kale oo ay ahayd gabadh gabayda oo abwaanad ah.

1861-kii ayuu bilaabay waxbarashada galaaskiisii koowaad, 1862-kiina waxa ay isaga iyo qoyskoodiiba uguureen Gospic Lika, oo uu ku qaatay dugsigiisii hoose iyo dhaxeba, 1870-kii Tesla iyo qoyskoodii waxa ay mar kale uguureen waqooyiga Kaarloofak (karlovac) si uu halkaa uga sii wato waxbarashadiisii Dugsiga sare, waxbarashadiisii dugsiga sarena waxa uu ahaa arday aad ufirfircoon oo isla markaana aad uxiisaynayay maadada physics-ka, sababta oo ah waxa saameeyay macalinkiisii maadadaa dhigi jiray, waxyaabaha laga sheegona waxa kamid ah in uu awood ulahaa inuu dusha ka xisaabiyo xisaabta Integral Calculus, taasina waxa ay sababtay in macallinmiintiisii iskuulku uga shakiyaan in uu si uun qish usameeyo oo aanay suuragal ahayn inuu dusha ka xisaabiyo.

1873, Nikola Tesla waxa ku dhacay xanuunka koleeraha waxaana lagu celiyay deegaankii uu kasoo guuray ee Ismiljan, waxa uu ujiifay xanuunka 9 bilood, iyada oo xaaladiisu gaadhay heer quus ah, aabihii ayaana ku maaweelin jiray isaga oo quus ka taagan in haddii uu xanuunka ka kaco uu udiri doono iskuulka ugu fiican cilmiga injineerinka oo uu jeclaa wiilkiisu, nasiib wanaagna waxa uu kasoo kacay xanuunkii waxaana uu halkaa kasii watay waxabrashadiisii dugsiga sare.

1875-kii waxa uu deeq waxbarasho ka helay machadka Austerian polytechnic, waxaana la sheega in sannadkiisii koowaad aanu maqnaan xittaa hal xiisad oo kamida xiisadihiisa, waxaana uu ku guulaystay dhibco aad usarreeya oo

laba jibaar kabadan intii looga baahnaa inuu ka keeno ugu yaraan sagaal maaddo, taas oo ku kalliftay in dhiinkii kulliyadiisu uu waraaq u diro aabihii, waraaqdana waxa ku qornaa:- inankaagu waa xidig heerka koowaad kujira!!!, farxad ayuuna ladhacay odaygii Tesla ee dhalay wiilka, maalinba waayaha aduunkuna waa nooce shalay quus ayuu taagnaa maantana dabaaldeg ayuu ujoogaa isaga oo ku raaxaysanaya wacdaraha wiilkiisu ka dhigayo waxbarashada, berri 'se sida ay noqon mooyi!!!.

Sannadkii labaad ee jaamacaddiisa Nikola waxa uu khilaaf soo kala dhex galay isaga iyo mid kamida macalimiintiisa oo la odhan jiray Poasschl, waxayna isku qabteen masalo, isla sannadkaasna waxa uu bilaabay in uu shaqeeyo saacadaha uu iskuulka ka maqanyahay, waxaana la sheegaa 3:00 Am illaa 11:00 Pm inuu shaqo kujirijiray oo xattaa maalmaha fasaxa ee wiigu ay kujireen illaa ay gaadhay in macallimiintiisu waraaq kale udireen aabiihi oo ay kaga codsanayaan in wiilkan haddii aan iskuulka laga saarin uu dhiman doono oo shaqo iyo waxbarasho udhiman doono!!!.

Mashquulka soo wajahay waxa ay keentay in sannadkii saddexaad uu dhaco oo aanu xattaa hal maado baasin waxaanuu lumiyay deeqdii waxbarasho, taasina waxa ay ku keentay inuu gebi ahaanba iskaga baxo jaamacadda isla markaana waxa la sheegaa inaanu weligii jaamacad ka qalin-jebin!!!.

1878-kii waxa aad uxumaaday xidhiidhkii isaga iyo qoyskiisa waxaanuu go’aansaday inuu magaaladaba iskaga tago si uu uqariyo inuu jamacaddii dhacay, sannadkaasna asxaabtiisu waxa ay uhaysteen inuu isku tuuray webiga Mur River, waxaana uu tegay magaalada Maribor isaga oo halkaa ka helay shaqo kale!!!, 1879-

kii ayuuna abihii kaga dabategay si uu ugusoo celiyo guriga waa 'se uu kadiiday inuu soo noqdo, inkasta oo isla sannadkaa boolisku ku soo celiyeen si qasaba, maxaa yeelay bilaa sharci ayuu ku galay magaaladaas!!!.

1880-kii waxa geeriyooday aabiihii Mulatin Tesla, waxaana geerida abiihii kadib adeeradii go'aan ku gaadheen inay kabixiyaan haddana jaamacad kale oo layidhaahdo Charles-Ferdinand University, hase ahaatee iyadana muu dhammaysan waanuu dhacay sababtoo ah luqada lagu dhigto oo ahayd luqadda giriiga, halkaasna waxa uu kujoojiyay inuu jaamacad dambe galo, waxaana uu 1881-kii uguuray magaalada Budapest ee caasimadii Hungery, waxa uuna markiiba halkaa ka bilaabay shaqo uu ka helay shirkadda Tivadar Puskas ee talefoonada, waxaana uu halkaa ka qabtay shaqo ka yaabisay madaxdii shirkadda!!!, 1882-kii ayaana loo wareejiyay qaybta shirkadda ee caasimada dalka faransiiska ee Paris, waxaanuu halkaa iyana kasoo hooyay guulo aad uwaawayn!!!.

Tani waxa ay keentay in maamulihii shirkadda Edison ee mareykanka uu soo codsado in Nikola Tesla la keeno maraykanka si uu wax uga qabto cillad ama dhibaato ku timi mashiinadii shirkadda Edison ee laydhka ee magaalada Newyork!!!, lix bilood ayuuna aamusni ku shaqaynayay isaga oo markaa aan garanayn waxa uu la kulmi doono haddii uu ku guuldaraysto hawsha loo diray, waxase uu halkaa ka gaadhay guulo aad uwaawayn, waxaana lagu abaal mariyay $50,000 oo kabaxsan mushaharkiisa, waxaana loo diray shaqooyin kale oo dheeriya, waana halkan meesha ugu dambayntii keentay in Tesla uu helo lacag isla markaana khibrad uu wax ku ikhtiraaco iyo dhammaan aqoontii uu kusoo kordhiyay cilmiga injineerinka oo kuwooda ugu muhiimsan la'aantood aanay maanta dunidu hurumarkan gaadheen,

ikhtiraacyadiisii iyo aqoontii uusoo kordhhiyayna waxa uu ku helay bilado aad ufara badan, waxaana kamid ahaa bilada Nopel peace price!!!.

Tesla waxa uu ku dhintay Magaalada Newyork bishii January 1943-kii,

Ogow in mar, laba iyo seddexba inaynu kufnaa aanay ka dhignayn inaynu nolashiiba ka dhacnay, waa inaan garawsanno in qofka iskuulka ama jaamacadda dhacaa aanay ka dhignayn in noloshiisiiba dhammaatay, waxaana hubaal ah inta aad nooshahay inaad xaqiijin karto waxbadan oo kamid ah riyooyinkaaga haddii aad karti, dedaal iyo talo saarasho Rabbi swt latimaaddo, Allah-na swt uu kugusimo.

Dedaalaa X.Cabbaas wuu gaadhaa, wuuna dhaafaa!!!

WAXA LAGAADHAY XILLIGII AAN USHAQAYN LAHAA DADKAYGA IYO DALKAYGA!!!



Sir Fazle Hassan Abed waa 80 jir u dhashay dalka Bangladesh isaga oo 50-kii sanno ee ugu dambeeyay noloshiisa ka shaqaynayay siduu u yarayn lahaa faqriga iyo jahliga ku habsaday dalkiisa iyo dalal kale oo kuyaalla Asia iyo Africa, kuwaas oo la daaladhacaya Faqri, Jahli iyo dhibatooyinka dib-udhaca oo dhan, wuxuuna sannadkii 1972-kii markii ay Bangladesh ka madaxbannaanaatay Pakistan go'aansaday inuu u shaqeeyo dadkiisa, waxaana markuu ku dhashay go'aankaasi isaga oo ka hadlaya uu yidhi:- "waxa aan dib ugu soo noqday dalkayga hooyo ee Bangladesh oo 10 million oo qof qaxooti ay yahiin, markaas ayaan go'aan ku gaadhay in ay tahay xilligaan caawin lahaa dadkayga reer Bangladesh ee aan u shaqayn lahaa dalkayga"!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxa uu kasoo tegay shaqadiisa isaga oo markaa ka mid ahaa maamulka sare ee shirkadda dhinaca shidaalka ee Shell Oil, wuxuuna iibiyay guri uu ku lahaa magaalada London si uu uga qayb qaato wax ka qabashada mushkilaadka waddankiisa, wuxuuna aasaasay hay'adda BRAC oo ah hay'ad aan dawli ahayn taas oo uu ku bilaabay tiro yar oo shaqaale ah iyo caawin aan badnayn sida in xoolo yar ama shinni la siiyo dadka aadka u faqiirka ah, haddana BRAC waxa ka shaqeeya shaqaale dhan 115,000, waxayna ka hawl-gashaa 12 waddan, waxayna adeegyo kala duwan oo ay ka mid yihiin waxbarasho, caafimaad, tababaro iyo lacago siisaa 138 million oo qof!!!.

Adeegyada waxbarashada ee ay hirgelisay waxa ka mid ah:- 8,700 oo ah dugsiyo asaasi ah, 3,200 oo dugsi oo lagu barto waxbarashada aan tooska ahayn, waxa kamid ah iskuullo 11 million oo arday ah ay kasoo baxday, 1,400 oo ah meelaha lagu barbaariyo ubadka ka yar 5-ta sanno, waxa ay lacag ka badan $1.6 billion oo dayn ah siisay 5 million oo Bangladesh u dhashay, taasoo si togan wax uga badashay noloshooda!!!, mid ka mid ah waxyaabaha ugu waawayn ee uu bilawgiiba ku fikirayayna waxa kamid ahaa caruurta ku dhimata da'da ka yar 5-ta sanno oo 1980-meeyadii Bangladesh ay caafimaad darro ugu dhimanayeen 1 kamida 4 tii caruur ah ee ka yar da'da 5 jirka, hooyooyin iyo dhallaan badan ayayna u fidiyeen adeegyo caafimaad.

Hay'adda BRAC waxa ay sannadkii 2016-kii soo gashay kaalinta koobaad ee NGO-yada adduunka, halka kaalinta labaad ay ku jirtay dhakhaatiirta aan xuduuda lahayn (Doctors Without Borders), kaalinta 9-aadna ay ka gashay Save the Children, kaalinta 12-aadna Grameen Bank!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Fazle Hassan Abed 50 sanno oo uu dalkiisa iyo kuwo kaleba ka shaqaynayay horumarkooda waxa uu ku mutaystay abaal marino badan oo caalami ah, mar wax laga waydiiyay waxqabadkiisa iyo siduu u arkona wuxuu yidhi:- "Farxad waxa iigu filan markaan dib u eego halkay 1970-meeyadii joogtay Bangladesh iyo maanta halkay marayso, waxaana arkay isbeddel wayn, in aan hore u soconaana way inoo taal"!!!.


Waxa laga yaaba inaad wada taqaanaan ninkan iyo dadaalka uu ugu jiro horumarinta dalkiisa iyo dadkiisaba, waxase ugu muhiimsan ee aynu isku xasuusinayno qisada Fazle Hassan Abed waa in uuna qofna ka niyad jabin ama joojin waxa uu u qabanayo bulshadiisa inuu yaryahay awgeed, ninkanina waxa uu kasoo bilaabay waxqabadkiisa meel hoose, maantana waxa uu marayaa halkaynu kasoo sheekaynay, marar badan ayayna dhacdaa inaynu u baajino wax yar oo aynu qaban karno in uu yar yahay, waxase hubaal ah wixii yar ee la joogteeyaa inuu wax wayn noqdo kaas oo ummadda oo dhan wax wayn ka beddeli kara!!!.

Muhuumaddu waa joogtaynta!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

GUULAYSTIHII AAN QUUSAN!!!



Magaciisu waa Henry ford, waxa uu dhashay bishii July 30-keedii sannadkii 1863-kii, waxaana uu ku dhashay Green field township Michigan ee dalka Mareykanka, waxa uu wax kabartay machadka Bryant stratton college iyo Detroit business institute, waxa uu noloshiisa ka bilaabay meel hoosaysa, waxa uu sheegay in ka badan 5 jeer in uu ku guuldaraystay hiigsigii uu ka lahaa nolosha, dedaal iyo adkaysi badan iyo isaga oo aan ka quusan in uu guulaysto ayuuna ku hantay inuu yeesho warshadda dunida ugu fiican ee soo saarta gawaadhida ama baabuurta ee lagu magacaabo “Ford”, waxaana ay warshadaasi soo saartaa malaayiin baabuur ah sannad walba!!!.

Henry ford waxa uu sidoo kale ahaa qoraa qoray buugaag farabadan, kuwaas oo dunida caan ka noqday oo ay kamid yihiin “My life and work” oo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

micnaheedu yahay ‘nolashayda iyo shaqadayda’, waxaana uu soo saaray buugan sannadkii 1922-kii, sidoo kalena waxa uu soosaaray buuggii la magac baxay “Maanta iyo Berri” saddex sanno kadib qoristiisii buugga “My life and work”!!!.

Henry ford waxa uu ka mid ahaa 16-ka qof ee dunida casriga ah ugu hodansan, dakhligiisana waxa lagu qiyaasi jiray 188 illaa 199 billion oo Dollar, murtiyaha qiimaha badan ee laga dhaxlayna waxa kamid ah:-

- Isku imaantinku waa bilow, sii wada jirkuna waa horumar, wada shaqeyntuna waa guul!!!.
- Fikraddu waa shaqada ugu adag ee la qabto, taasina waa sababta dad tiro yar ay isugu hawlaan!!!.
- Badi dadku waxa ay waqti iyo tamar badan ku bixiyaan ka wareegista dhibaatada halkii ay isku dayi lahayeen in ay xalliyaan!!!.

Herry ford waxa uu geeriyooday bishii April 7-deedii sannadkii 1947-kii isagoo 83 jir ah guulo badana ka gaadhay hankiisii.

Waa in aadan quusan, juhdi iyo dedaal badanna aad geliso kuna bixiso ka midha-dhalinta riyadaada, iyada oo ugu dambayntiina adkaysi iyo dedaal kadib rumoobi doonta haddii Alle idmo!!!

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ADIGA OO KELIYA AYAA OG WAXA AAD AWOODID IN AAD QABATO!!!



Aad ayay xaaladda dhaqaale ee noloshu ugu adkaatay illaa uu gaadhay inuu xado dahabka xaaskiisa oo uu iibsado, nolosha ayaa aad ugu adkaatay illaa uu waayo meel uu seexdo, wuxuu seexan jiray goobaha gaadiidka laga raaco ee magaalada New York, ma uu awoodin inuu kiro iska bixiyo, mana uu iibsan karin cunto uu ku noolaado, noloshiisuna waa ay sii adkaatay illaa markii dambe uu isku deyay inuu iib u geeyo eygiisa goob qamriga lagu cabo, wuxuuna waayay lacag uu ku quudiyo eyga, markii dambena wuxuu iskaga iibiyay $25 oo keliya, wuxuuna sheegay inuu goobta ka dhaqaaqay isagoo ilmaynaaya!!!.

Laba toddobaad kaddib wuxuu arkay ciyaar feedh ah oo udhaxaysay Mohammed Ali Clay iyo Chuck Wepner halkaas oo uu ka helay dhiirigelin uu ku

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

diyaariyo qoraalka Filimkii caanbaxay ee “ROCKY”, wuxuuna qorayay qoraalka Filimka 20 saacadood si uu u-iibsado, waxaana loo gaadhay qoraalka $125,000 laakiin isagu wuxuu watay hal codsi kaasoo ah in qoraalka Filimka laga iibsado isla Filimkana uu ka noqdo Jilaaga ama ninka Filinku ku socdo, wuxuuna doonayay inuu Actor ama Jilaa ka noqdo ROCKY, Laakiin dadkii doonayay inay Filimka iibsadaan waa ka diideen waxayna doonayeen inuu Filimka Actor ka noqdo Jilaa la yaqaan!!!.

Qoraalkii ayuu qaatay isagoo diiddan in Filimkiisa uu qof kale Jilaa ka noqdo, usbuucyo kaddibna Shirkaddii Filimka rabtay ayaa damacday in ay kasiisato qoraalka $250,000 isna wuu ka diiday, waxay haddana ugaadhay $350,000 haddana wuu ka diiday, waxayna u sheegeen inay rabaan oo kaliya Filimka inuu ka iibsado laakiin aysan isaga doonayn inuu Actor ama Jilaa ka noqdo, wuxuuna yidhi:- Maya waa inaan ka mid noqdo dadka ku jira Filimka., waqti yar kaddibna shirkaddii waa ogolaatay waxayna uga iibsatay qoraalka Filimka $35,000 islamarkaana uu Jilaa ka noqdo!!!.

Filimka ROCKY wuxuu noqday Filimada ugu hadal-haynta badan dalka Maraykanka, isna Actorka ugu wanaagsan ayuu Filimkaas ku noqday, wuxuuna aad u jeclaa eygiisa uu duruufta darteed isaga iibiyay, goobtii qamriga ee uu ku iibiyay eyga ayuuna taagnaa 3 maalmood isagoo sugaya in la soo marsiiyo eyga, wuxuuna meel kore ka arkay ninkii uu ka iibiyay oo wata eygii kana codsaday inuu dib uga iibsado eyga maaddaama oo uu duruuf markii hore isaga iibiyay, gorgortan kaddibna waxa laga siiyay $15,000 isla eygii $25 hore looga siistay!!!, maantana ninkaas waddooyinka seexan jiray dahabka xaaskiisa ka xaday, eygiisana iska iibiyay markii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

uu waayay wax uu siiyo waa mid ka mid ah Jilaayaasha ugu magaca-dheer adduunka!!!.

Jilaagan dhibaatada adag la kulmay Sylvestar Stallone ama Rambow isaga oo arrintaa ka hadlaya waxuu yidhi:- Dadku waxay doonayaan wax-soosaarkaaga laakiin adiga kuma rabaan, waa adduun qallafsan, haddii aadan hore caan u ahayn ama taajir dhib badan ayaad la kulmi doontaa, albaabadu waa kaa xidhnaan doonaan, dadku waxa ay xadi doonaan farxaddaada waxayna burburin doonaan rajooyinkaaga, waxaad noqon doontaa qof aan waxba haysan, waxaadna qaban doontaa shaqooyin yar-yar si aad nolosha usamata-bixiso!!!.


Ma awoodi doontid inaad noloshaada quudiso, waxaana hoy kuu noqon doona waddooyinka, waana wax dhacay laakiin marnaba ha u ogolaan inay burburiyaan riyooyinkaaga wax kastoo kugu dhaca, sii wado riyadaada xattaa haddii ay rajooyinkaaga kaa burburiyaan, ma jiro qof og waxa aad awoodid inaad qabato, se adiga oo kaliya ayaa og, dadkuna waxa ay xukmiyaan muuqaalkaaga iyo waxa aad haysato!!!.

Marnaba ha isdhiibin xattaa haddii ay kula gaadho inaad dharkaaga iibiso oo aad eeyaha la seexato laakiin inta aad nooshahay sheekadaadu ma dhammaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAAD GUULAYSAN KARTAA!!!



Buugga '**YOU CAN WIN'-'WAAD GUULAYSAN KARTAA'**, ayaa waxa uusoo tebinayaa qisadan:- waxa jiray nin iibiya buufimaha iyaga oo midabyo badan oo kala duwan ah, marka suuqa iibsashada buufinka uu hoos u dhaco ayaana uu hal buufin cirka u sii dayn jiray, carruurta ayaana marka ay arkaan buufinkaas cirka duulaya, waxa ay jeclaysan jireen in ay ayaguna helaan buufin, sidaas ayaana carruurtu kaga iibsan jireen, suuqiisuna kor ugu qaadmi jiray!!!.

Maalin ayaa waxa u yimid inan ama wiil yar oo waydiiyey:- in buufinta midabka madow lihi ay kor u duuli karto sida kuwa kale?!!!, ``Wiilkaygiiyow maaha midabka iyo muuqaalka waxa kor u qaadaya ama hoos u dhigaya buufinka ee waa waxa ku dhex jira buufinkaas (hawada)`` Sidaasna waxa ku jawaabay ninkii!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Sida buufinka waxa ku dhex jira ay kor ugu qaadayaan ama hoos ugu dhigayaan, ee aysan ku xidhnayn muuqaalka ama midabka sare, sidaas si lamid ah waxa ah dadka, iyaga oo horumarka ama dib-udhiciisa nololeed ay keenayso waxa ku jira maskaxdiisa iyo sida uu ukala sarreeyo qaab fikirka dadku!!!, ``Waxa ugu wayn ee la ogaaday qarnigan waa in qofku wax ka baddali karo heerka noloshiisa isaga oo wax ka badalaaya qaab-fekerkiisa``, Sidaasna waxa yidhi William James oo ah bare sare jaamacadda Harvard!!!.

Dadku waxa ay in badani yaqaanaan awoodda iyo saamaynta ay leedahay wanaag u fekeridu, laakiin in yar ayaa yaqaan saamaynta iyo awoodda hoos u dhac ee ay keeni karto xumaan u fekeriddu, labadoodubana qofka waxa ay u kala kexeeyaan labo jiho oo kala duwan, sida wanaag-u-fekeriddu kor ugu qaado qofka noloshiisa, ayaa ay xumaan-u-fekeridduna guul darro ugusoo jiiddaa shakhsiga!!!.

Cilmi baadhis laga sameeyay jaamacadda Harvard ayaa lagu ogaaday in marka qofka shaqo loo doorto ama dallacsiin loo sameeyo, boqolkiiba sideetan iyo shan uu ku gaadho hab-fekerkiisa wanaagsan, keliya boqolkiiba toban iyo shanna ay ku timaado caqli-badnaanta ama aqoonta qofka!!!.

Qaab-fikirku waa waxayaabaha ugu muhiimsan nolosha, waxa uu saameeyaa dhankasta oo nolosha qofka ah, ha ahaato dhanka nolol shaqsiyeedkiisa ama nolol shaqeedkiisa, maareeyuhu ma noqon karaa maareeye wanaagsan haddii uusan la iman qaab-fikir wanaagsan?!!!, ardaygu ma noqon karaa arday wanaagsan isaga oo aan la iman qaab-feker wanaagsan?!!!, waalidiinta, macallimiinta,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ganacsatada, shaqaalaha iyo dadka shaqaalaysiiya midkoodna ma ku wanaagsanaan karaa doorkiisa isaga oo aan la iman qaab-fikir wanaagsan?!!!.

Aasaaska guushu waxa uu kuxidhanyahay qaab-fekerkaaga, xirfad iyo aqoon kasta aad lahaatidbee, haddii qaab-fikirku sidaas muhiim ugu yahay guulaheenana, mayna ahayn in aan dib u eegno qaab-fikirka nolosheena, aanna kafiirsanno sida qaab-fekerka qof walba uu u saamaynayo noloshiisa!!!.

Xafiis, waxa uu ahaa nin beeralay ah oo ku nool waddan ka mid ah qaaradda Afrika, waxa uu ahaa nin ku qanacsan kuna faraxsan noloshiisa, maalin ayaa waxa u yimid nin xigmad badan, waxa uuna uga waramay qaalinimada dheemanka, ``Hadii aad haysato dheeman leeg suulkaaga waxa aad yeelan kartaa magaalo adi kuu gooni ah, hadii aad haysato dheeman feedhkaaga leegna waxa aad samaysan kartaa waddan dhan``, sidaas waxa yidhi ninkii xigmadlowga ahaa, kadibna waa uu iska tegay!!!.

Xafiis, qanac la`aan iyo farxad la' aan ayaa ku abuurantay, waa ninkii beertiisa iyo noloshiisa ku qanacsanaa, waxa uu go`aansaday in uu beertiisa iibiyo reerkiisana ka safro si uu u raadiyo dheemman, waxa uu maray Afrika oo dhan isaga oo aan helin wax dheemman ah, waxa uu u gudbay Yurub, nasiib darro sidoo kale waxba waa uu ka waayay Yurub oo dhan, markii dambe isaga oo maraya waddanka Spain ayaa waxa ka dhammaaday niyaddii raadinta dheemmanka uu u qabay, waxa kaloo ka dhammaaday sahaydiisii, sidoo kale waxa uu noqday mid muuqaal ahaan dhammaaday, daalayna, ugu dambayntiina waxa uu isku tuuray webiga magaalada Barcelona ee waddanka Spain, sidaas ayaa uuna ku dhintay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Dhanka kale ninkii iibsaday beertiisa ayaa maalintii dambe isaga oo tog beerta dhex mara ka waraabsanaya geeliisa, waxa qorraxda soo baxaysay iftiinkeedu dhalaaliyay dhagax ka mid ah kuwii qarka togga saarnaa, dhagaxiina waxa uu bilaabay in uu cawarayo qofka eega, ninkii ayaa qaaday dhagaxii isaga oo u bogay quruxdiisa balse aan garanayn waxa uu yahay, dhagaxiina waxa uu saaray meel gurigiisa ka mid ah, si uu u daawado quruxdiisa!!!.

Isla galabkii ayaa waxa gurigiisa yimid ninkii xigmadlowga ahaa, waxa uuna ku yidhi:- waar ma ninkiibaa soo noqday?!!!, maya balse maxaad ii waydiisay?!!!, saas waxa ku war celiyay ninkii guriga deganaa, sababta oo ah waxa ii muuqata dheemmankii uu raadinayay oo guriga meel ka saaran, waana aqaan oo marka aad mid dheeman ah aragtid kuwa kalena waa aad garan kartaa!!!, waxa ku warceliyay xikmadlowgii, maya ee anaa dhagaxan beerta ka dhex helay oo guriga ku quruxsaday, kuwo kale oo badan ayaana aan beerta ku arkay ee inakeen aan kusoo tusee, ninkii ayaa sidaas ku yidhi xikmadlowgii!!!.

Beertii ayaa la isku raacay waxaana laga qaaday dhawr dhagax kadibna loo geeyay dadka dheemanka yaqaana, waxaana la ogaaday in beerta uu iska gaday ee uu doonayay in uu dheeman ka doonto ay ku fadhiday dhul wayne dheemman ah!!!.

Haddaba waa maxay farriinta qissadani?:-

- In marka hab-fikirkeenu wanaagsan yahay aynu ku dul soconno dhulwayne dheemman ah, fursaduhuna ay yahiin kuwo cagaheena ku hoos jira, umana

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

baahna in aan meel kale aadno si aan u helno fursad meeshaas ka bannaan, ee aynu ku dedaalno in halka aynu joogno aynu fursado ka abuurno!!!.

- Marka aannan aqoon u lahayn fursaddu waxa ay tahay waxa dhacaysa in fursaddu wejiga kaa dhirbaaxdo adna aadan xattaa eegin, ogaanna in waxa ku dhirbaaxday ay tahay fursaddii oo iskaa tusaysa, waxa aan u baahanahay oo dhamina waa in aan barano aqoontii aynu ku aqoonsanlahayn fursadda.
- Cawska beeraha hadba waxa cagaar badan midka kaa fog ee aadan dul taagnayn, mar-mar dhif ah waa ay dhacdaa in cawska beerta kale ee kaa fog uu yahay mid laga waraab badiyay kan beertaada, laakiin ogow inta badani waa bidhaanta waxa saas ka dhigay ee maaha xaqiiqda!!!.
- In badan nolosha waxa innaga luma fursadaha dhabta ah iyada oo cagaheena ku hoos jirta, annaguna aan caydhsanayno bidhaan-beeneed meel fog ka muuqata!!!.
- In badan inta aad eegayso cagaarka beerta kale, ayaa qofka kalena eegayaa cagaarka cagahaaga ka hooseeya ee beertaada, qofkaasina in badan ayuu ku qanacsanaan lahaa in uu beertaada tiisa ku bedesho!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

U-ADEEGIHII FUQARADA AFRIKA!!!



Dr. Cabdiraxman Al-Sumayd, u-adeegihii fuqarada Afrika, waxa uu ku dhashay kuna barbaaray dalka Kuwayt sannadkii 1947-kii, wuxuuna shahaadada koobaad ee Jaamacadda ka qaatay jaamacadda Baqdaad ee dalka Ciraaq oo uu ka bartay cilmiga caafimaadka iyo qalliinka guud, kadibna wuxuu Jaamacadda Mc Gill ee dalka Canada kaga takhasusay cudurada ku dhaca uur-ku-jirka iyo dheef-shiidka, wuxuuna kasoo shaqeeyay dhakhtaro ku kala yaalla Canada, Kuwayt iyo Ingiriiska.

Mar uu safar ku tegay dalka Malaawi oo dhaca qaaradda Afrika ayuu kusoo arkay malaayiin sabool ah oo ay daashadeen Faqri, Cudurro iyo Jahli, wuxuuna Indhihiisa kusoo arkay Hay'ado Kirishtan ah oo dadkaas gar-gaar siinaya, balse baahida haysa uga faa'idaysanaya inay Kirishtaameeyaan, wuxuuna bilaabay inuu

hadh iyo habeen ka fikiro sidii uu farqiga iyo jahliga uga badbaadin lahaa dadka ku nool qaaradda Afrika.

Sannadkii 1981-kii wuxuu Dr. Cabdiraxmaan aasaasay Hay'adda Africa Muslims Agency (Lajnatu Muslimii Ifriiqiya), oo waagii dambe magaceeda u bedeshay Direct Aid (Al-Coownul Mubaashir), oo ah Hay'ad samofal oo gar-gaarka iyo faafinta dacwadda Islaamka ka fulisa qaaradda Afrika.

Ku dhowaad 30-sanno oo uu shiikhu Afrika shaqadan ka waday waxa sababtiisa kusoo islaamay in ka badan 11-Milyan oo qof, Al-Sumayd wuxuu Afrika ka dhisay 5700 oo Masjid, wuxuu ka qoday 9500 oo Ceel, wuxuuna ka aasaasay 860-Iskuul iyo 4-Jaamacadood, wuxuu ka furay 204 xarumood oo lagu barto Diinta Islaamka, wuxuuna qarashka waxbarashada ka dhiibay in ka badan 95-Kun oo Afrikaan ah!!!.

Dhanka Soomaaliya, kadib heshiis dhex maray Hay'adda Direct Aid iyo Wasaaraddii arrimaha dibadda ee Soomaaliya ayay hay'addu xarun ka furtay Muqdisho 1986-kii, balse burburkii dawladdii dhexe iyo dagaalkii dhex maray Kuwayt iyo Ciraaq ayaa sababay inuu xafiiskaasi xidhmo bilawgii 1991-kii, waxaana dib loo furay dhammaadkii 1992-kii, wuxuuna xafiisku xoogga saaray waxbarashada, daryeelka Agoonta iyo hirgelinta mashaariic horumarineed iyo kuwo dhismayaal ah oo uu ka fuliyay toddobo gobol!!!.

Dhanka waxbarashada, burburkii kadib wuxuu xafiiska Hay'addu magaalada Muqdisho ka furay Iskuulada Tadaamun, Abuu-Xaniifa, Maxamud-Xarbi

iyo Axmed-Guray, Beledweyne wuxuu ka furay Iskuulka Sh. Maxamed Macallin iyo Al-Aqsa, Buula-mareer wuxuu ka furay Iskuulka Al-Faaruuq, Kismaayo wuxuu ka furay Iskuulka Faanoole, Magaalada Hargeysa wuxuu ka furay Iskuullada Irshaad, waxaana Iskuuladaas hadda dhigta 14,270 arday!!!.

Sannadkii 1992-kii illaa maanta, xafiisku wuxuu deeqo waxbarasho siiyay oo uu qarashka Iskuulka ka bixiyay 55,230 arday oo isugu jirta Agoon iyo kuwo ka dhashay qoysas danyar ah, wuxuuna lacagta waxbarashada heerka koobaad ee Jaamacadda (Bachelor) ka dhiibay 513 arday oo Soomaaliyeed iyo 71-arday oo uu ka bixiyay qarashka waxbarashada heerka labaad ee Jaamacadda (Master+PhD)!!!, waxa iyana xusid mudan in Hay'adda Dr. Al-Sumayd ay muqdisho ka furtay Jaamacadda SIMAD oo kamid ah Jaamacadaha ugu tayada fiican Soomaaliya!!!.

Alle swt ha u naxariisto Dr. Cabdiraxmaan Al-Sumayd, kadib sannado badan oo uu u adeegayay fuqarada Afrika wuxuu 2013-kii xanuun ugu geeriyooday dalka Kuwayt isaga oo 66-jir ah, wuxuusa weli ku noolyahay qalbiyada fuqarada Afrika iyo Muslimiinta Caalamka.

Kudayo kuwa mudan in lagu daydo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KELLI AYAAN UGU BAAHANAHAY XAASKAYGA!!!



Weligaa ma u malaysay in hadafyadaadu ay yihiin qaar aad u adag oon la gaadhi karin?, weligaa ma istidhi in aad ka waynaatay waqtigii aad hadafyadaada gaadhi lahayd?, weligaa ma isku dayday in aad gaadho hadafyadaada haddana ma quusatay oo ma rajo dhigtay ka hor inta aadan gaadhin?, haddii aad 'HAA' kaga jawaabtay mid kamid ah su'aalahaa waxa aad u baahan tahay in aad ogaato sheekada Larry Swiling!!!.

Larry Swiling waa nin 77 jir ah, waana nin naxariis badan oo xaaskiisa si aad ah u jeclaa, waxa ay isqabeen xaaskiisa 57 sanno, waxaanuu gaadhay heer aanu qiyaasi karin sida ay noloshiisu noqon lahayd iyada la'aanteed!!!, balse nasiib xumo xaaskii Larry waxa ku dhacay kelyo xanuun waxaana loo sheegay in kelli ka mid ah kelyaha xaaskiisu ay shaqadii joojisay, ayna tahay in dhakhtar la dhigo.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Larry wuxuu ogaa in haddii xaaskiisa loogu deeqo kelli ay badbaadi karto balse muu garanayn cid uu kelli uwaydiiyo oo ugu deeqda xaaskiisa, markii uu daydayay waxoogaa qof kelli u saara xaaskiisa nasiib umuu yeelan in uu helo, balse wuxuu sameeyay wax layaab leh, wuxuu qaatay loox uu ku qoray:- **"kelli ayaan ugu baahanahay xaaskayga"!!!**, waxaanu iskaga dhejiyay xaga hore!!!, wuxuuna bilaabay inuu socod ku maro waddooyinka saacado badan maalin walba, sidoo kale Larry wuu shaqayn jiray, waxaanuu socdaalkiisa uu ugu daydayayo kellida xaaskiisa uu bilaabi jiray kadib markuu dhammeeyo shaqaadiisa!!!.

Wuxuu lugeeyay in ka badan 250 mile, maalin ayaa wuxuu lugeeyay 15 mayl iyadoo cimiladu aad u xumayd aadna u kulalayd, sidoo kale waxay dhibaato ka haysatay oo xanuunayay jilbaha, waxaana ku adkayd inuu xataa lugeeyo, dadkuna waxay ugu deeqayeen lacag balse wuxuu ugu jawaabayay:- " waad ku mahadsantihiin, waxa aan xaaskayga u rabaa oo keliya kelli si aan u badbaadiyo"!!!, wuxuu lugaynayay sannad dhammaystiran!!!, Illaa uu noqday 78 jir, HAA, sannad dhan ayuu raadinayay markii ugu dambaysayna wuxuu helay qof ugu deeqa xaaskiisii kelli, waanu badbaadiyay xaaskiisii!!!.

Wuxuu badbaadiyay xaaskiisii uu jeclaa sababtoo ah wuxuu lahaa rajo iyo go'aan dhagax ah, waayihii adkaa ee uu waajahayna waxa kamid ahaa:-

- ❖ Waqti muu haysan sababtoo ah wuxuu gudanayay shaqadiisa maalinlaha ah.
- ❖ Lacag ku filan muu haysan xaaskiisuna waxay u baahnayd 4000 dollar bishiiba si loo daweeyo.
- ❖ Da'diisu waxay ahayd 78 jir.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- Wuxuu raadinayay way adag tahay in la helo.
- Xaaladdiisa caafimaad may ahayn mid saa u fiican.

Bal haddaba adigu isku noqo oo waamaxay cudurdaarkaagu?!!!, miyay hadafyadaadu dhab ahaan adag yihiin in la gaadho?, immisa mayl ayaad u lugaysay si aad u gaadho?, immisa jir baad tahay?, miyaad u dagaalamaysaa waxaad dhab ahaan urabto nolosha?, haddii aad ugu dagaalami lahayd waxa aad doonayso si la mid ah sidaa uu Larry ugu dagaalamay inuu xaaskiisa u badbaadiyo waxa hubaal ah in aad gaadhi lahayd hadafkaaga!!!.

Waa wax aad u fudud inuu qofku la yimaado cudur-daar uu ku eedayn karo qof dhibaatooyinka isaga haysta, inaad naftaada been u sheegtaa waa mid ka mid ah wadooyinka ugu dhaw ee kugu hogaamiya guuldarrada, haddii aad rabto in aad ogaato sida ay dhab ahaan u dhacdo guushu tixgeli sheekooyinka dadka guusha gaadhay, sida ninkan Larry Swilling ee 78 jirka ah ee u lugeeyay 250 mile si uu u badbaadiyo xaaskiisa kuna guulaysatay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MUWAADIN-NIMADU WAA DAREEN LAHAANSHIYO!!!



Marwo Caaliya Maxammed, waxa ay shaqaale ka ahayd maktabadda ugu wayn magaalada Basra ee dalka Ciraaq sannadkii 2003-dii, waxaana dhacday in ciidamadii Ciraaq ay soo galaan maktabaddii dabeedna korkeeda ayay ka dhigteen dhufays ay dayuuradaha iskaga dhiciyaan, kadibna marwadan ayaa codsatay kutubta, qoraalada iyo muuqaallada qaaliga ah ee maktabadda yaalla in gurigeeda loo raro, si looga badbaadiyo burburka ay dagaalladu sababi karaan!!!, nasiib xumo-se soo jeedinteedii iyo codsigeediiba waa laga diiday, laakiin-se waxa ay go'aansatay in ay buugta habeen-nimo la baxdo, oo ay u tahriibiso meel ay ku nabadgelayaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Sidii ay sheegaysay ayaa dhacday oo maktabaddii waa la burburiyay, laakiin nasiib wanaag marwo Caaliya waxa ay badbaadisay in ka badan **30.000** (soddon kun) oo buug, qoraalo iyo xogo kale oo muhiim ah!!!.

Waxa haddaba dhacday in haweenay qoraa ah oo u dhalatay dalka Ingiriiska laguna magacaabo Janet Wynter ayaa markii ay sheekadan maqashay waxa ay qortay buug ay carruurta reer Yurub ugu talo-gashay in ay ka bartaan geesinnimada iyo muwaadinnimada ku jirta sheekada marwo Caaliya Maxammed, waxayna u bixisay "The Librarian of Basra" kaddibna waxa buugga loo rogay masrixiyad lagu soo bandhigay dhawr masrax oo caalami ah!!!.

Maktabaddii Basra dib ayaa loo dhisay, marwo Caaliya Maxamned-na buugaagtii ayay kusoo celisay, waxaana maamulaha guud ee maktabadda laga dhigay marwo Caaliya Maxamed!!!.

Muwaadinnimadu waa dareen lahaansho, sidaa daraadeed udareen, una daryeel hanti kasta oo kadhaxaysa umadda sidii aad udaryeeli lahayd haddii ay adiga mulkigaaga kujiraan, silamid ah sida ay marwo Caaliya Maxammed-ba udaryeeshay hantidii kadhaxaysay, una dhaxaysay umaddeeda!!!

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HARUKA NISHIMATSU IYO JAPAN AIR-LINES!!!



Mr. Haruka Nishimatsu oo ahaa maamulihii hore ee shirkadda dayuuradaha Japan Air Lines oo xilkaasi hayay sannadihii 2006-dii illaa 2010-kii ayaa go'aan ku gaadhay intii uu xafiiska joogay in uu mushaharkiisa hoos uu u dhigo si uu u noqdo mushaharka ugu yar ee uu qaato masuul noocan oo kale ahi dunida!!!.

Maamulahani muddadii uu xilkaasi hayay ma iibsan gaadhi ama baabuur uu shaqada ku yimaaddo waxaanuu adeegsan jiray gaadiidka caadiga ah ee ay raacaan dadwaynuhu sida Basaska iwm, waxa kale oo uu dhaqan u lahaa in marka shaqaalaha shirkaddu maalintii ay makhaayadda shirkadda Japan Air Lines-ka qadaynayaan uu


Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

isagu istaago halka ugu dambaysa, isaga oo jeclaa in shaqaaluhu dhammaadaan kadibna isagu qaato raashinkiisa, waana arrin shaqaaluhu ay ku barteen!!!, markii uu shaqada ka tegayay ayayna shaqaaluhu aad uga xumaadeen iyagoo dareemayay sidii fiicnayd ee uu ula dhaqmi jiray, waxayna sheegeen in ay weligood xusuusan doonaan uuna qalbiyadooda baaqi ku ahaan doono!!!.

Qofka leh shaqsiyad wanaagsan xittaa geerida dabadeed waxa uu baaqi ku ahaadaa quluubta iyo qalbiyada kuwii uu wanaajiyay, sidaa daraadeed lahaw shaqsiyad wanaagsan, ulana dhaqan dadka iyo bulshada kaleba sida aad rabto in adigaba laguula dhaqmo!!!.

WAXA AAN RABAA IN AAN QIYAASO HEERKA DULQAADKAYGA!!!



Qarnigii 16aad Filasoof u dhashay dalka Talyaaniga oo adduunka oo dhan berigaas aad looga ixtiraami jiray looguna tegi jiray talooyin iyo aqoon kororsi, lana odhan jiray Galileo Galilei**,** ayaa waxa dhacday in maalin maalmaha ka mid ah ay gurigiisa usoo martiyeen niman aqoonyahano ah oo ugu yimid la tashi, markii ay raggii soo fadhiisteen ayuuna xaaskiisa u yeedhay kana codsaday in ay cabitaan u keento martida, xaaskiisuna iyadoo ka jawaabaysa codsiga ninkeeda ayay martidii u keentay cabitaankii.

Ninkii Filasoofka ahaa ayaa arkay in xaaskiisu weelka ay cabitaanka ugu keentey martida uu wasaq yahay oo aanu nadiif ahayn, dabeedna waxuu xaaska

waydiiyay:- weelku wasaq miyaa ka muuqata?, markaas ayayna xaaskiisu iyadoo rabta in ay eegto ama fiiriso salka hoose ee weelkii uu cabitaanku saarnaa ayay cabitaankii foorarisay, dabeedna waxa dhacday in raggii martida ahaa iyo ninkeediiba ay ku dul-daadisay!!!.

Martidii iyagoo yaaban ayay su'aal weydiiyeen ninkii Filsasoofka ahaa, waxaana ay ku yidhaahdeen:- maxaa xaas kaaga dhigay qofka noocan ah?, isagoo ka jawaabaaya su'aasha ay waydiiyeen raggii martida u ahaa ayuuna yidhi:- **waxa aan rabaa oo aan doonayaa in aan ogaado ama qiyaaso heerka dulqaadkaygu inta uu leegyahay ama gaadhsiisanyahay**!!!.

Dulqaadku waa shay aad u qiimo badan loona baahan yahay qofku inuu ku tababaro naftiisa iyo inta ku hareeraysanba sidii uu dulqaad badan uyeelan lahaa, waana mid kamid ah qodobada lagu qiimeeyo shaqsiyadda wanaagsan.

Udulqaado kuwa mudan in loo dulqaato, si adna gefafka kaa dhacaaya laguugu cudurdaaro!!!.

UBADHEEDH NOLOSHA!!!



Sida sawirka idiinka muuqata, waxa aad aragtaa askari Maraykan ah, magaciisu waa Mike, waxa uu dhafoorka iska saaray baaskoolad isaga oo raba inuu is dilo, askarigan waa shiishyahan loosoo tababaray shaqo ah inuu Ciraaq ku dilo nin ay aad udoonaysay dawladda Maraykanku, shaqadii loo igmaday ayaana fashilmatay, kadib markii ay seegeen hawshii ahayd inay soo dilaan ninkii loo diray oo iska caabin wayn ay kala kulmeena waxay usoo carareen meel ay ku gabbadaan isaga iyo askari saaxiibkiis ahi!!!.

Waxa ay si kedis ah kusoo galeen dhul saxare ah oo wada miinaysan, saaxiibkiis ayaa miino ku istaagay kadibna way ku qaraxday, lugna waa ay goysay, isaguna waxa uu ku istaagay miino kale, waxaana uu la xidhiidhay kooxdii badbaadin

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

lahayd ee meesha keentay, waxaana loo sheegay in muddo 45 saacadood ay ku qaadanayso in loo yimaado!!!.

Waxa uu isku dayay inuu kala furo miinadii, waana uu ku fashilmay, nafsaddiisiina waa ay is dhiibtay, waxaana uu go'aan ku gaadhay in uu isdilo oo baskooladdiisii ayuu dhafoorka iskaga qabtay iyada oo ay la foolxumaatay inuu si foolxun ugu dhinto saxaraha!!!.

Waxa maskaxdiisa hor imanayay farriimo xusuus ah, isagoo qoyskiisii la jooga, isagoo waalidkiis la sheekeysanaaya, markii dambe ayaana waxa u yimid nin reer baadiye ah oo lugtu go'antahay oo wata gabadh yar oo uu dhalay, ninkaas ayaa isagana waxa lugta goosatay miinooyinka ku xabaalan saxaraha!!!, waxaana uu Mike ku dhiirrigeliyaa inuu miinada ka koco oo nolosha u badheedho oo geesinimo muujiyo, isku day badan kadibna waa uu ku qancin waayay, habeenkii markii la gaadhay ayaana waxa Mike soo weeraray Yey, xabbad ayuuna iskaga dhiciyay!!!.

Mike waxa uu gaadhay xaalad isdhiibitaan, daal, harraad, baqdin, walwal iyo rajo xumo darteed, waxaana uu markii uu naf ka quustay isku qanciyay inuu qaato taladii ninkii reer baadiyaha ahaa oo ahayd inuu miinada ka boodo waxkastaaba ha dhacaane, markii uu ka kacayna waxa uu filayay ugu yaraan inay lug ka goosan doonto, mabaysanse qarxin!!!, waxaana uu bilaabay inuu fiiriyo waxa uu ku taagnaa, mise waa daasad yar oo sidii miina ula eekayd, miinabana kuma uusan taagnayn!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Xusuusnow taladii ninka reer baadiyaha ahaa ee Mike la hadlayay ee ahayd:- u badheer nolosha, hana ka cabsan nolosha, geesinimona muuji, laganayaaabaa haddii lagu yidhaahdo kaaryoon suuqa kabo ku gad faa'iido badan ayaad ka helaysaaye, in aad is tidhaahdid dadkaa kula yaabi oo aad bulshadada ka cabsatid!!!, bulshada aad ka baqaysidna ogow adigaa u maqane!!!.

U badheer nolosha, hana ka cabsan nolosha, geesinimona muuji!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

JEANNE LOUISE IYO QASRIGEEDII PARIS!!!



Jeanne Louise Calment waa haweenay asal ahaan u dhalatay dalka Faransiiska, taasi oo inta la ogsoon yahay ah qofkii ugu da'da waynaa taariikhda dalkaasi iyadoo uu cimrigeedu gaadhay **122 sanno iyo 164 maalmood,** waxaana ay ku noolayd guri wayn oo ay iyadu leedahay, kaasi oo ku yaalay badhtamaha magaalada Paris, halkaas oo ay kula noolayd gabadheeda iyo wiilka ay dhashay gabadheedu oo ah labada qof ee had iyo jeer ka caawiya waxyaabaha quseeya baahideeda gaarka ah.

Walow ay Jeanne usoo joogtay waayo badan ayaa haddana waxyaabaha qariibka ah ee laga diiwaan geliyay taariikh nololeedkeeda oo gebi ahaanba ah mid aan la soo koobi karin waxa kamid ah heshiiskii dhex maray iyada iyo nin garsoore ah markii ay Jeanne jirtay da'da 90-ka sanno, kaasi oo dhigaya in ninka garsooraha ahi uu bil kastaba siiyo Jeanne lacag dhan **2,500 oo Dollar**, balse taasi beddelkeeda

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

uu qaato hantida ay Jeanne leedahay marka ay naftu ka baxdo maadaama oo uu u arkayay in ay d'a wayntahay oo aysan waqti badan sii noolaan karin!!!.

Caadiyan waa uu qabsoomay heshiiskii lagu ballamay oo weliba lagu kala saxeexday sifo sharci ah taasi oo usaamaxday Jeanne in ay billawdo ursiga lacagtaasi, laakiin 30 sanno kadib waxa dhacday in ninkii garsooraha ahaa uu sameeyay xisaab xidh kor u dhaaftay labo jibbaar qiimaha uu gurigaasi ka joogo suuqa xilli ay Jeanne tahay mid nafta baaqi ku ah oo xittaa awood u leh in ay howlaheeda gaarka ah u qabsato si madax-bannaan!!!.

Ugu dambayntii garsooraha laf ahaantiisa ayaa geeriyooday maalmo kadib markii ay Jeanne u dabaal degtay sannad guuradii 122-aad ee ka soo wareegatay dhalashadeeda, waxaana halkaasi ku soo idlaaday dhaxalkii faa'iido doonka ahaa ee lagula wareegi lahaa gurigii qasriga ahaa ee ay lahayd Jeanne!!!.

Nuxurka ku jira qissadan waxa kamid ah in aadan marnaba faa'iido ka raadinin dhimashada qof kale oo ay ajashiisu ku jirto gacanta Rabbiga wayn ee abuuray aadamaha oo dhan, maxaa yeelay cidna ma ogaan karto midka labadiina ku horrayn doona dhimashada ama geerida!!!.

RABBI SWT AYAA QADDARA GEERIDA!!!



Julie Shann waa haweenay Ingiriis ah waxaana ku dhacay cudurka Cancerka iyada oo 55 sanno jir ah, waxa ay aaday dhakhtar waxaana lagu sameeyay baadhitaan, kadibna dhakhaatiirta ayaa u sheegay in ay dhiman doonto muddo 5 cisho gudahood ah!!!, waxa ay bilowday in ay isu diyaariso geeri iyadoona ku dhaqaaqday in ay dib u iibiso alaabtii gurigeeda taalay oo dhan si ay ugu maarayso munaasabadda aaskeeda oo dhici doonta 5 cisho kadib sida loo sheegay!!!.

Haweenaydan ayaa muddo todobaad ah waxa ay ku jirtay xaalad aad u adag iyo murugo iyadoo waqtigeeda intiisa badana ku qaadanaysay in ay ilmayso ama baroorato, balse xaaalku waa isbaddalay markii lagaadhay xilligii ay u shegeen dhakhaatiirtu, waxa ayna is aragtay haweenaydii ayadoo dareemaysa firfircooni iyo caafimaad, waxayna markale ku laabatay dhakhaatiirtii, waxaana baadhitaan dambe

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

oo lagu sameeyay lagu ogaaday in aysanba qabin wax cudur ah xittaa cancerkii markii hore ay qabtay!!!.

Geerida Rabbi swt ayaa qaddara mana jirto cid kale oo jaan-goyn kartaa, xaalad adag oo aad gashaana kama dhigna in ay geeridii kuusoodhowaatay, sidoo kalena xaaladaha badhaadhaha iyo caafimaadku kama turjumayaan in ay geeridu kaa durugsantahay.

Marwalba iyo ilbidhiqsi-walba ahaw mid udiyaarsan imaatinka geerida!!!.

HAKU KEDSOOMIN AQOONTA GAABAN EE AADAMAHA!!!



Waa muwaadin udhashay dalka Garmalka, magaciisuna waa Stamatis Moraitis, 1975-kii ayuu kudhacay cudur dilaaga ahi, waxuu aaday dalka Maraykanka si uu isku soo daaweeyo, waxaana loo sheegay in uu hayo cudur halis ah oo aan daawo loohayn, 6 bilood kadibna uu dhimanaayo, wuxuu kusoolaabtay dalkiisa Garmalka si uu ehelkiisa ulaqaato wakhtiga yar ee u hadhay sida loosheegay, beer uu lahaa ayuuna iska sii fashay asagoo isdhahaya dadka kaa dambeeyaa haka faa'iidaan.!!!.

Muddo yar kadib wuxuu dareemay in uu soo fiicnaanayo marba marka ka dambaysa, Ilaahayna swt wuxuu qaddaray in uu siinoolaado, 37 sanno kadib muddadu markii ay ahayd 2012-kii ayuuna ulaabtay dalka Maraykanka si uu ulasoo


Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

hadlo dhakhtaradii ku dhahay 6 bil kadib waa aad dhimanaysaa, nasiib darrose ma uusan lakulmin waayo ayagii ayaa wada dhintay oo qofna kama hadhin!!!.

Allah swt naxariistiisa haka quusan hana ku kadsoomin ee dedaalka wad illaa aad lakulmayso geerida!!!.

INGVAR KAMPRAD IYO DHAMMAADKII NOLOSHIISA!!!



Bishii Janaayo 27-keedii sannadkii 2018-ka waxa Magaalada Smaland ee Dalka Sweden xanuun ugu geeriyooday Ingvar Kamprad oo sannado badan kamid ahaa tobanka qof ee ugu hantida badan caalamka, sidoo kalena ahaa qofka ugu hodansan dalka Sweden, wuxuu ahaa milkiilaha sharkadda caalamiga ah ee IKEA, iyada ayuuna geliyay waqtigiisii ugu badnaa, wuxuu aas-aasay isagoo 17 sano jir ah, wuxuuna dhintay ama geeriyooday isaga oo 91-jir ah.

Ingvar wuxuu ka tegay hanti dhan $73-Bilyan, hayeeshee kuma uusan raaxaysan oo wuxuu ku noolaa guri yar oo fillo ah, wuxuuna xidhan jiray dharka kuwa raqiiska ah ee nooca hudhaydhka ay soomaalidu utaqaano, wuxuuna raaci jiray

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

gaadiidka dadwaynaha iyo gaadhi duq ah oo uu haystay in kabadan 20-sanno, sidoo kalena wuxuu diyaaradda karaaci jiray qaybta shacabka!!!.

Haddaba isaga oo kujiray nolosha noocan ah, uusanna wax rajo ah ka qabin raaxo aakhiro, hantidiisan tirada badan ee uu soo tabcaayay waxa ay kari wayday, mana aysan karaynin inay hal maalin, hal bil ama hal sanno ku kordhiso noloshiisa ifka!!!.

Sunnaha addunyadu waakaas, maalinta ay gaadho wakhtigii aad kaboqooli lahaydna majirto habayaraatee cid kugu mara-tuuri karkaa, ee fadlan ka tabaabulshayso inta aanay adiga oo mooggan kugu kedin imaatinka geeridu!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SARIIRTA UGU QAALISAN DUNIDA!!!



Steve Jobs oo dalka Maraykanka cudurka kansarka ugu dhintay sannadkii 2011-kii, ahaana mid kamid ahaa shakhsiyaadka hal-abuurkoodu beddelay wejiga qarnigan 21-aad, dunidana u jeediyay jihada ay maanta u socoto, ahaa aas-aasaha iyo agaasimaha guud ee sharikadda Apple ee soo saarta kombiyuutarada iyo moobeelada gacanta sida:- iphone, iPad iyo iPod, wuxuu intuusan naf-bixin isagoo jiifa dhakhtarka qoray ereyo cibro ugu filan qof kasta oo juhdigiisa isugu geeya inuu dhaqaale sameeyo, erayadii ugu dambeeyay ee Steve-na waxa kamid ahaa:-

- Waxa aan halka ugu sarraysa ka gaadhay caalamka ganacsiga iyo dhaqaalaha, noloshayduna waxa ay calaamad guul iyo horumar u tahay dad badan, hadda oo aan jiifo sariirta dhakhtarkana waxa aan soo xusuusanayaa noloshaydii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

tagtay, waxaana ogaaday in guulihii, hantidii iyo abaal-marinadii aan ku faani jiray aysan waxba ka taraynin dhimashadayda dhow!!!.

- ❖ Kadib sannado badan oo aan dhaqaalo aruuris kusoo lumiyay, hadda ayaan fahmay in si kasta oo qofku hanti u sameeyo uu soo seexan doono sariirta aan maanta jiifo, fadlan haddaad ku joogto waddadayda jooji raadinta hanti badan, waayo waxa ay kaa dhigaysaa qof daciif ah oo liita sidayda oo kale!!!.
- ❖ Ma taqaannaa sariirta dunida ugu qaalisan?, aniga ayaa kuu sheegaaya oo waa sariirta dhakhtarka, haddii aad lacag leedahay waxa aad kiraysan kartaa qof kugu kaxeeya gaadhigaaga, balse ma ijaaran kartid qof kaala wareega xanuunka iyo jirrada aad u dhimanayso!!!.
- ❖ Haddii aad hanti leedahay waad helaysaa wax kasta oo lacag kaaga xidhan, balse halka shay ee aadan dib u helaynin haddaad lumiso lacagna aadan ku iibsan karini waa Nolosha!, Nolosha!, Nolosha!!!.

Diinteenna suubban ee Islaamku inagama reebayso in aynu shaqaysanno ama xoolo tabcanno, waybase ina faraysaa si aynaan unoqon kuwo baahan, balse waxa ay udejisay nidaamyo iyo xeerar aynu raacno, ka nidaamyadaas raacay ayaana ah ka liibaanay if iyo Aakhiroba, kana faa'iideeyay labada daaroodba, kase kaleexday waxa ay uhorseedday guuldarro iyo hoog ah if iyo Aakhiroba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

LAGAYAABAA IN UU KHAYRKU KUUGU JIRO!!!



Sheekh Dr. Muxammed Rateb al-Nabulsi oo ah caalim u dhashay dalka Suuriya ayaa waxa uu yidhi:- waxa aan mar la kulmay mid kamid ah Dhakhaatiirta ugu waawayn ee ku takhasusay culuumta caafimaadka, dabadeedna waxa uu iiga sheekeeyay qisso ku dhacday hadda ka hor, waxuuna hadalkiisa ku billaabay:- aniga oo arday ah oo Jaamacadda dhiganaaya ayaa waxaan booska koowaad ka fadhiistay gaadhi ugu badnaan qaada shan qof, kadibna waxa noo yimid nin uu itaalkiisu yar yahay oo inta uu albaabka soo furay isagoo aan cidna la hadlin ku dhegay dharkii aan xidhnaa oo intuu itukhuntukhiyay igu tuuray gaadhiga ama baabuurka bannaankiisa, wakhtigaas uu ficilku dhacaayona waxa ninka la socday saaxiibkiis oo aan xittaa igu odhan ka deg gaadhiga!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Dhakhtarka oo sii wata hadalkiisa ayaa yidhi:- wallaahi haddii uu i dhihi lahaa kasoo deg gaadhiga marnaba ma dareemi lahayn murugo, laakiin waxa aan ka cadhooday in ay iga soo qaadeen sida duqsiga oo kale, waxa i asiibay xanuun aan ku sigtay inaan u dhinto, run ahaantii haddii aan haysan lahaa hub waan dili lahaa sababtoo ah waxa ay iila dhaqmeen si fool xun!!!.

Gaadhigii waa uu dhaqaaqay anigoo dhulka taagan, waxa aan sugay baabuurkii kale oo aan u taagnaa inuu yimaaddo muddo labo saacadood ah, dad badan ma uu sidin gaadhigan dambe waxaana ii fududaatay inaan si dhaqso ah ku fuulo oo aan fadhiisto mid kamid ah kuraastii faaruqa ahayd, si kastabana markii aanu ka baxnay goobtii ayaa waxa dhacday in aanu waddada kusii aragno gaadhigii oo rogmaday ama gaddoomay ayna ku dhinteen shantii rakaabka ahayd ee saarnaa oo ay ku jiraan raggii xoogga iiga saaray gaadhiga!!!.

Il-bidhiqsiyo gudahood ayuu isku beddelay dareenkeygu waxaana billaabay inaan u mahadnaqo Rabbi Subxaanahu Watacaalaa oo musiibadan iga kor yeelay, waxaanna xaqiiqsaday aayaddii Qur'aanka kariimka Eebbe swt inoogu sheegay, oo macnaheedu ahaa:- **waxa laga yaabaa inaad jeclaataan shay uu sharkiinu ku sugan yahay, si lamid ah inaad karahsataan shay uu khayrkiinu ku jiro.**

Ku qanac wax kasta oo oo kula soo gudboonaada inta aad ifka ku nooshahay, waayo waxa suurta gal ah inuu khayrkaagu ku jiro, sidoo kale ha saluugin wax aad sugaysay oo ku seegay, maxaa yeelay waxa dhici karta inuu shar kuu yahay oo lagaa xijaabay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA AY IIFIIRIN-JIREEN SIDA XAWAYAANKA!!!



George McLaurin, waa ardaygii ugu horreeyay ee Afrikan ah oo ay aqbasho inuu wax ka barto Jaamacadda Oklahoma ee dalka Maraykanka sannadkii 1948-kii waxaana lafadhiisiyay meel gees ah si uusan ugu dhawaan ardayda caddaanka ah, laakiin George wuxuu dedaal badan kadib kamid noqday saddexda arday ee waxbarashada ugu wanaagsan uguna sharafta badan Jaamacadda!!!.

George wuxuu yidhi:-‘waxay ii fiirin ama eegi jireen sida inaan ahay xayawaan, ilama aanay hadli jirin, macallimiintuna waxay iila dhaqmi jireen sida inaanan ka mid ahayn ardayda, su'aalaha aan weydiiyana iigama aanay jawaabi jirin’!!!, aad ayaana udadaalay mana niyad jabin illaa markii dambe ardaydii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!


ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

caddaanka ahaa ay isoo raadiyaan si aan casharrada ugu sharraxo, su'aalahana ugaga jawaabo!!!.

Ugu dambayntii George McLaurin waxuu yidhi:- ‘adiga ayay tahay inaad kala xulato in liiditaankooda aad ku niyad jabto ama aad iyaga saamayso si ay isku dhiibaan’!!!.

Markasa oo aad la kulanto wax ku niyad jebiya ha isdhiibin ee dedaalkaaga sii laba jibbaar si aad u gaadho hadafkaaga!!!.

NINKII DAMEERKU GARASHO DHAAMAY!!!



Wakhtigii dawladdii ummawiyiinta, ayaa waxa jiray nin Carab ahaa oo la odhan jiray Saalax Ibnu-Shamsudiin, ninkani waxa uu ahaa nin jaahil ah balse haddana isla toosan oo aan ogayn in uu jaahil yahay kelidiina isla qumman, waxa uu ahaa nin af-miishaar ah oo dadka hadal ku dar-dara, balse aan aqoon lagu majeerto lahayn, waxa uu muran kol kasta la dultaagnaan jiray dadka uu markaa aqoonta ku tuhmaayay si loo moodo in uu wax yaqaan, dadkana waxa uu u necbaa qofka yidhaahda:- "Waxba garan maysid ee wax barro", jaahilnimadii ayuuna ku gaadhay da'da 40-ka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Ninkani waxa uu caan ku ahaa oo gaadiid u ahaa Dameer, dadka degaankuna waxa ay la yaabi jireen ninkan aan aqoonta lahayn balse haddana isku haysta in uu wax yaqaanno, gurigiisuna wuu kadurugsanaa goobta laysugu iman jiray!!!.

Haddaba waxa dhacday in maalin maalmaha ka mid ah uu goobtii suuqa yimid isaga oo lugaynaaya oo aan dameerkii saarnayn, waxa la waydiiyay waxa ku dhacay dameerkiisii ee uu usoo raaci waayay, waxa uuna dadkii u sheegay in uu waayay dameerkisii oo uu ka lumay, kadib nin degaanka caan ka ahaa, gabyaana ahaa ayaa dadka u sheegay in aanu dameerku iska lumen, balse uu iskaga tegay Saalax Ibnu-Shamsudiin oo uu duday, sababna ay u tahay jaahilnimada ninkani, gabyaagii ayaana si xikmadaysan usoo gudbiyay cabashadii dameerka isagoo ka hadashiinaaya dameerkii kana dhigaya in uu farriin ka tegay intaanu tegin ka hor, waxa uuna yidhi dameerkii hadal gabay ah oo macnihiisu ahaa sidan:-

- Dooda tagistaydu maaha baad iyo biyo aan waayay, waase caddaalad aan waayay, waan duday, la joogista Ibnu-Shamsuddiinna waxaan ka doortay in duurka waraabuhu igu cuno oo hilbahayga la waayo!!!.

- Haddii maanta caddaaladi dunida ka jirto, aniga ina Shamsuddiin dushayda ma koreen ama ma fuuleen, balse aniga ayaa dusha isaga ka kori lahaa, waayo, anigu waxa aan qirsanahay oo aan ogahay in aan dameer ahay, balse isagu ma oga in uu jaahil yahay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Maalintaas wixii ka dambeeyayna waxa degaanka looga yaqaanay "Ninkii dameerku garasho dhaamay ama ka caqli badnaa"!!!.

Waxa jirta in meelo badan oo bulshadu ay ku kulanto ay waayahan aad ugu bateen dad sida ninkaa ah, kuwaas oo iyagoo jaahiliin ah goob kasta muran iyo jikaar la taagan wax kasta oo aanay aqoon u lahayna iskaga hadlaaya, dhabtiina waa dhaqan aan wanaagsanayn loona baahan yahay in la joojiyo, soomaaliduna waxa ay ku maah-maahdaa:- Caqligaaga oo yar aamusnaan ayaa lagu kabaa.

Ka ahadal wixii aad aqoon uleedahay, wixii aanad aqoon ulahayna kagaabso ugana dambee cidda aqoonteeda leh ama ehelka u ah!!!.

CABDILLAAHI BINU-MUBAARAK IYO HAWEENAYDII DANYARTA AHAYD!!!



Cabdullaahi binu-Mubaarak wuxuu ahaa nin wanaagsan, wuxuuna doonay inuu soo xajiyo, safarkiisa kahor ayuuna soo macasalaamaynaayay asxaabtiisa, asagoo jidka dhex socda ayuuna arkay wax argagax geliyay, xubnihiisana uu la qaadi kari waayay, wuxuuna arkay xilli mugdi ah haweenay meel biyo wasakh ahi fadhiyaan ka jiidatay digaag bakhtiyay, ayadoo isqarinaysana sii dhaqaaqi rabta, wuxuuna ku yidhi:- addoontii Allaahayey maxaad samaynaysaa, waxayna ku tidhi:- addoonkii Allow, khalqiga Alle swt u dhaaf!!!.

Wuxuu ku yidhi:- Allaah ayaan kugu dhaarshaye ii sheeg sheekadaada, waxayna ku tidhi:- haddaad Alle swt igu dhaarisay waan kuu sheegayaa, oohin ayay iscelin kari wayday intaysan hadlin kahor, waxayna tidhi:- waxaan ahay haweenay

garoob ah, waxaan hooyo u ahay afar gabdhood oo dhimasho udhaw gaajo darteed, gaajada ayaa gubaysa beerkooda, waxaan gar-garaacay dadka albaabadooda, waxay naxariisi ku jirto ma aanan arkin, waan iska soo dhaqaaqay anigoo casho uraadinaaya ilamahayga, wuxuu Alle swt igu irsaaqay digaagadan baqtiga ah, waana ii xalaal oo wax kale ma haysto, ma adigaa midanna igu haysta!!!?, intaas markay tidhi ayuuna oohin iscelin waayay Cabdullaahi binu-mubaarak, wuxunua siiyay xoolihii uu ku doonayay in uu kusoo xajiyo dhammaantood!!!.

Haweenaydii aad ayay ufaraxday wayna umahadcelisay, ilmeheedii bay aaday, Cabdullaahina gurigiisa ayuu aaday!!!.

Dadkii xujaajta ahaa way bexeen wayna soo guteen waajibkii xajka, markay baladka kusoo laabteen ayayna uwada mahadceliyeen Cabdullaahi binu-Mubaarak, waxayna dheheen:- khayr Allah swt hakugu abaal mariyo ma aanaan fadhiisanin meel illaa waxaad ahayd mid wax nooga sheega, cilmiga uu Alle swt kusiiyay si wanaagsan ayaad noogaga faa'iidaysay, aad ayayna ugu mahad celinayeen iyagoo mid mid laabta u galinaayay!!!.

Cabdulaahi aad ayaa uu u yaabay waayo waakii ka baaqday xajka, maalkiisana ku sadaqaystay haweenaydii agoonta haysatay, wax uu ku jawaabo ayuu garanwaayay, hal qof iyo labona maaha ee dadkii xajka ka soo noqday oo dhan ayaa dhaammaantood isaga u mahad celinaaya!!!, wuxuuna kuwareeray xaalkiisa iyo xaalkooda, laakiin ma uusan doonaynin inuu sheego sirtii uu uga baaqday Xajka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Habeenkii markii uu jiifsaday ayaa riyo waxa ugu yimid nin wejigiisa uu nuur kasoo baxayo wuxuuna ku yidhi:- nabad galyo korkaaga ha haato Cabdullaahiyow, sow magaranaysid qofkaan ahay anigu?, waa Muxammad Rasuulkii Alle swt, Ilaahay swt ayaa ku karaameeyay markaad karaamaysay haweenaydii, Alle swt wuu ku asturay markaad asturtay islaantii ilmaha agoonta ah lahayd, khayrr Allah swt ha kugu abaal mariyo, Alle swt wuxuu abuuray Malak suuradaada oo kale leh kaasoo raacay dadkii Xajka ka aaday baladkaaga, lana joogay intay soo xajinayeen oo dhan, midkastoo kamid ah wuxuu helay ajarka hal Xaj, adigana wuxuu Alle swt ku siiyay ajarka 70 Xaj!!!.

Allah swt wuxuu yidhi;- isu naxariista markaas ayaan anna idiin naxariisanayaaye, unaxariiso ku kasta oo dhibaataysan intii awooddaada ah, markaas ayuu adna Allah swt arrimahaaga oo dhan kuu hagaajinayaaye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA AAN LASOO NOQDAY KABIHII XUNAYN!!!



Nin reer miyi ahaa oo ka mid ahaa carabtii hore ayaa mar uu magaalo usoo safray waxa uu u yimi nin kabo-tole ah oo magaciisa la odhan jiray Xunayn, waxa aanuu ka baayacay laba kabood, ninkii reer baadiyaha ahaa iyo kabo-tole Xunayn waxa ay muddo isku mari la'aayeen qiimaha kabaha, sida muuqatana Xunayn waxa uu ka cadhooday ama ka xanaaqay ninkan reer miyiga ah oo uu ku arkay inuu aad bakhayl u yahay, iyadoo markii uu qiime aad uhooseeya oo aanu raalli ku ahayn uu ku qasbayna haddana aanu ka iibsan oo iskaga tegay!!!.

Ninkan reer baadiyaha ahaa oo lagu tilmaami jiray bakhaylnimo xad dhaaf ah in kasta oo uu xiiseeyay kabahan haddana waa uu u quudhi kari waayay lacagtii loogu sheegay qiimahooda, sidaa awgeed waa uu iskaga tegay oo ma uu qaddarin

waqtigii badnaa ee uu la gorgortamayay Xunayn iyo qiimihii hoose ee isagu uu qabsaday ee laga oggolaaday!!!.

Xunayn oo ah kabo tolihii oo arrinkan aad uga cadhooday ayaa markiiba ka fikiray xeelad uu kaga aargoosto ninkan reer baadiyaha ah, wuuna dabagalay si uu ulasocdo goorta uu ka baxaayo magaalada, meel kasta oo uu kasii adeeganayo iyo cid kasta oo uu sii marayaba waa uu daba socday, markii ay gaadhay xilligii uu reerkiisa ku noqon lahaa ayuuna ninkii reer miyiga ahaa kabaxay magaaladii isaga oo wata awrkii oo uu safar fiican kusoo rartay!!!.

Xunayn markii uu si fiican u fahmay jidka uu ninkii magaalada uga baxay ayaa isaga oo iska qarinaya inta uu ka dheereeyay, uu jidka uu soo marayo meel ah oo xagga hore sii ahayd dhigay mid ka mid ah labadii kabood ee ninkan reer miyiga ahi ka baayacay, haddana inta uu hore usii socday ayuu meel cabbaar usii jirta dhigay kabtii labaadna, isna meel aan halkan dambe ka fogayn ayuu geed ugu soo gabbaday!!!.

Markii uu ninkii reer miyiga ahaa waxoogaa soo lugeeyay isaga oo wata awrkiisii oo uu ku raran yahay safarkii uu magaalada kala yimi ayaa uu si lama filaan ah u arkay kabtii koowaad, inta uu yara dul istaagay oo uu aad u eegay, ayuu is waydiiyay:- ‘Kabtu kabtii u’ekaa!!!’, laakiin waa kab keliya oo anfac uma ay lahayn sidaa awgeed waa uu iska dhaafay, markii uu haddana cabbaar socday ayaa uu mar labaad kusoo baxay kabtii labaad oo taalla waddadii, inta uu dul istaagay oo uu hubiyay in kabtu kabtii hore teedii kale ay tahay ayuu iswaydiiyay sida ay kabahani halkan ku yimaadeen, waxa aanuu isku qanciyay in qof kale oo reer baadiye ahi uu

kabahan soo iibsaday, kadibna markii uu halkan safarka ku marayay ay kabahan midiba mar ka dhacday!!!.

Inta uu isku canaantay sababta uu kabtii hore uga yimi ayaa uu bakhaylkii reer miyiga ahaa go'aan ku gaadhay in uu awrka sii xidho kadibna doonto kabtii kale ee uu soo dhaafay si ay ugu noqdaan kabo uu intifaacsado!!!.

Xunayn oo udhuumanaayay ayaa markii uu ninkii reer baadiyaha ahaa tegay si uu kabtii hore u soo qaato isna waxa uu furtay awrkii rarnaa ee ninka reer miyiga ahaa sii xidhay, waxa aanuu kula noqday magaaladiisii!!!.

Ninkii reer miyiga ahaa oo kabtii sita ayaa kusoo noqday goobtii uu awrka ku xidhay, si uu kabtii labaadna u qaato, awrkiisana ukaxaysto, laakiin nasiib darro awrkii rarnaa ma joogo, waa uu raadiyay meel uu usaarana waa uu garan waayay, isaga oo daalay ayaanuu maalin kadib reerkiisii kusoo noqday isaga oo sita laba kabood, awrkii iyo safarkii saarnaana sidaa ku galbadeen!!!.

Ninkii reer baadiyaha ahaa markii la waydiiyay waxa uu magaaladii kala soo noqday iyo sababta faro-madhnaanta baddayna waxa uu si kooban ugu jawaabay:- "waxa aan lasoo noqday kabihii Xunayn", eraygaas oo noqday hal-kudhig carbeed oo illaa maanta caan ah, looguna soo tusaale qaato ruux kasta oo damac galay awgii iyo isaga oo islahaa wax badso awgeed hantidiisii ku waayay!!!.

Ka fogow damaca badan iyo bakhiilnimada saa'idka ah, waayo wax kasta oo xadkooda ladhaafiyo dhibaato ayuunbaa looga dhacaa!!!.

XUKUNKII RIYADA!!!



Magaciisu waa Clarence Moses una dhashay dalka Maraykanka, wuxuu 28 sanno u xidhnaa kadib markii gabadhi ay ku dacwaysay inay riyo ku aragtay isaga oo kufsanaaaya!!!, iyada oo kudacwoonaysa in ay sifiican u aqoonsato wejigiisa uuna isaga ahaa ninkii ugu yimid riyada ee kula kulmay hurdada!!!.

Waa daliil cad oo kutusinaaya cadaaladda ninka cad iyo sida uu ugu tunto xuquuqda bani-aadamka ee uu dunida inteeda kale kasheegto!!!.

Ha aaminin sida diinteenna suubaniba inoo sheegtay sheegashooyinka afka ah ee ay inagu asqaysiiyaan marka ay fagaarayaasha ka faanayaan, balse goob-walba iyo goor-walba taxadirkaagu ha ahaado mid sarreeya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

BAL ADBA!!!



Randian wuxuu sannadkii 1871-kii ku dhashay British Guiana oo ahayd waddan uu gumaysto Ingiriisku hadase xorowday kana mid ah dalalka ku yaala laatiin America, ninkanina wuxuu dhashay isaga oo aan lahayn lugo iyo gacmo, jirkiisuna yahay madax, calool iyo xubinta taranka oo keliya!!!.

Wuxuu noqday qoraa magac leh aadna ugu xeel dheer 4 luqadood (Ingiriisi, Jarmal, Faransiis iyo Hindi) loogana dambeeyo, wuxuuna ku caan baxay samaynta sawirada gacanta iyo xirfado kale oo ka dhigay nin bulshada dhaxdeeda ka muuqda!!!, wuu guursaday wuxuuna dhalay 4 carruur ah, ugu dambayna wuxuu ku

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhintay da’da 63 jir isaga oo saamayn wayn kaga tegay deegaankii uu ku noolaa iyo adduunkaba!!!.

Bal haddaba adigu hoos isu fiiri oo eeg laxaadkaagu in uu kala dhimanyahay iyo in uu kuu dhanyahay, kadib iswaydii adiga iyo Randian ka dhab ahaan laxaadkiisu kala dhimanyahay!!!.

Bal adba!!!.

GUUSHU WAXA AY KUU JIRTAA INTA DEDAALKAAGU GAADHSIISANYAHAY!!!



Magaciisu waa Nick Vujicic asalkiisana waxa uu kasoo jeedaa Serbia laakiin dhalasho Australia ah ayuu haystaa, wuxuu ku dhashay xanuunka loo yaqaano "Phocomelia" oo ah in qofku ku dhasho gacmo iyo lugo la'aan, markii waalidiintiisa loo sheegay xaaladda uu ilmahoodu ku dhashay way diideen in ay arkaan ama ay qaataan oo ay korsadaan maadaama ay aad uga walwaleen siday u korin lahaayeen cunug curyaan ah oo lugo iyo gacmo aan lahayn, laakiin usbuucyo kadib way kaxaysteen!!!.

Inkasta oo qoyskiisa iyo qaraabadiisu ay aaminsanaayeen inuu weligiis qof ku tiirsanaan doono, laakiin Alle swt ayaa siiyay awood isku filnaansho ah intuu yaraaba, wuxuu bartay sida loo istaago isagoo wajigiisa cuskan jiray, wuxuu haddana

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

bilaabay inuu qaybtiisa hoose ku xamaaran karo sidii qof socon kara oo kale, haddana wuxuu bilaabay inuu meeshii luguhu ka maqnaayeen uu gacmo ahaan u isticmaalo, intaas markay qoyskiisu arkeen iyo maskaxda uu Alle swt siiyay ayaa waxay go'aansadeen inay iskuul geeyaan!!!.

Ardaydii iskuulka ay isla dhigan jireen wuu ka maskax badnaa oo si dhakhso ah ayuu uga baxay Iskuulkii, kadib wuxuu galay Jaamacadda Griffith University isagoo 21 sanno jir ah, wuxuuna ka qaatay laba shahaado jaamacadeed, wuxuuna ku takhassusay Cilmiga xisaabaadka iyo qorshaynta maaliyadda oo ah laba cilmi oo dunida qaali ka ah!!!.

Waa nin dunida safiican looga yaqaanno oo aad u safar badan kana jeediya casharro dhiirigelin ah jaamacado kala duwan, waana nin casuumaad ka helay madaxda aduunka qaar ka mid ah sida madaxwaynada dalka Singapore, madaxwaynaha dalka Uruguay iyo Madaxwanaha dalka Taiwan!!!.

Wuxuu aad uga sheekeeyaa dhibaatooyinkii yaraantiisa soo maray, xilligii ardayga uu ahaa iyo siduu uga midha-dhaliyay dadaalkiisii uu rabay inuu ku xaqiijiyo inuusan faciisa waxba ka hoosayn, waa nin xaas leh waxaana u joogta laba carruura, wuxuu illaa iyo hadda ku guulaystay dhawr billado sharafeed oo uu ku mutaystay buugaag uu qoray, filimaan uu jilay iyo casharro uu ka jeediyay jaamacado!!!

Illaa iyo hadda wuxuu qoray 7 buug oo dhiirigelin u badan kuna saabsan in nolosha qofka aysan xad lahayn, in qofka ay ku jirto awood u baahan inuu iska

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

raadiyo kadibna bannaanka usoo saaro iyo in aad saamayn ku reebi kartid jiilkaaga adiga oo aan lagaa filanaynin iyo kuwo kaleba!!!.

Hadalladiisa saamaynta yeeshay waxa kamid ah:- lacagtu ma bogsiin karto qalbigaaga, lacagtu kuma siin karto hadaf, marabo gacmo iyo lugo ee waxaan rabaa hadaf, marabo gacmo iyo lugo ee waxaan rabaa nabad, marabo gacmo iyo lugo ee waxaan rabaa in aan mucjiso u noqdo qof kale!!!.

Haddaba akhristow ogow guushu waxa ay kuu jirtaa hadba inta dadaalkaagu gaadhsiisan yahay, weligaana nolosha haka niyad jabin ee noqo qof han sare leh oo dedaala mar kastana Alle swt talo saarta!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (3)

HARAJO-BEELIN EE DEDAAL!!!



Saynisyahanka mucjisada ah ee Ingiriiska u dhashay Stephen Hawking ayaa mar uu u dabbaaldegayay gu'gii 76 ee cimrigiisa waxa uu maxadka boqorktooyada ee London ka jeediyay khudbad cilmiyeed uu kaga hadlay murugada iyo qulubka, waxa aanuu farriin u diray dhammaan dadka dunida ee qaba dhibaatooyinka nafsadeed iyo caafimaad darrada dhimirka, waxa aanuu sheegay in aanay jirin murugo iyo xaalad nafsiya oo uu qofku weligii ku waarayo, balse ay xaalad kastaa waqti iskaga eegtahay, mar kastana rajada caafimaad ay badan tahay!!!.

Saynisyahankan naafada ah oo sida sawirkiisa ka muuqata uu madaxa oo keliyi shaqaynayo ayaa khudbaddan ka hor akhriyay dad tiradoodu tahay 400 oo ruux oo isugu yimid in ay dhegaystaan hadalkiisa si ay uga faa'idaystaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxa kale oo uu ka sheekeeyay guulaha uu gaadhay intii uu noolaa, sida uu caqabadaha ka hor yimi uga gudbay iyo waxyaabaha ufududeeyay la noolaanshiyaha naafonimada ka dhalatay cudurka dhifta dunida ku ah ee 'Motor Neuron Disease (MND)' oo laga helay sannadkii 1963kii, waxaana hadalladiisii ka mid ahaa:- In kasta oo aan la kulmay nasiibdarrada ah in uu igu dhacay cudurka 'MND' haddana wax kale oo kasta aad ayaa aan ugu nasiib badnaa, isaga oo si gaar ah uxusay takhasuskiisa cilmiga Fiisigiska oo uu sheegay in aanu xanuunkiisu mar keliya caqabad ku noqon.!!!.

Hawking waxa uu sheegay talooyinka kale ee ay tahay in uu raaco qofka doonaya in uu ka badbaado qulubka iyo warwarka, isaga oo taladaas jeedinaya ayaana uu yidhi:- "waxa iyaduna muhiim ah in aanad cadhoon si kasta oo ay noloshu kuugu adkaato, waayo cadhadaasi waxa ay keeni kartaa in aad rajo beesho", isaga oo ka hadlaaya xalka ugu fiican ee lagaga hortegi karo niyad-xumada ka dhalata guuldarrada iyo caqabadaha nolosha ayaana waxa uu sheegay in sida ugu fiicani ay tahay in aynu nolosha u qosolno, waxaana hadalladiisii ka mid ahaa:- "haddii aad ku qosli-waydo naftaada iyo guud ahaan noloshaba waxa dhici karta in ay rajada oo dhami kaa dhimato"!!!.

Hawking waxa loo aqoonsan yahay mid kamid ah saynisyahannada dunida casrigan ugu waawayn, waxa aanuu aragtiyo badan oo kusoo kordhiyay sayniska, sannadkii 1963-kii markii laga helay cudurkan oo dila unugyada maamula muruyqada iyo dareen-wadayaashana waxa ay dhakhaatiirtu sheegeen in uu noolaan karo ugu badnaan laba sanno, maadaama oo cudurkan lagu yaqaano in qofka uu ku dhaco uu ku dilo muddo shan sano gudahood ah, laakiin taasi may dhicin oo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

hadalladiisan aynu kor kusoo xusnaybana saynu soosheegnay waxa uu kajeediyay sannad-guuradii dhalashadiisa ee 76aad!!!.

Ha rajo beelin ee dedaal intii awooddaada ah, Allahna swt talo saaro!!!.

KELIYA ISKU DAY!!!



Gabadhan magaceedu waa jessica cox, kanasoo jeedda gobolka Arizona ee dalka Maraykanka ayaa sannadkii 2008 waxa ay noqotay gabadhii ugu horraysay ee diyaarad duulisay ayada oo aan lahayn gacmo ama lixaadkeedu aanu dhammaystirnayn, iyada oo runtiina indhaha caalamka ku noqotay arrin mucjiso iyo ugub ku ah!!!.

Keliya isku day, qorshe iyo joogtayna ku lammaanee, Allahna swt talo-saaro, saas markaad samaysona ixtimaalku waxa uu ubadanayaa dhanka guushaada!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

GACMO WADA-JIRBAY WAX KU GOOYAAN!!!



Sawirka sare waxa ka muuqda nin xambaarsan nin kale, waxaana lagu qaaday magaalada Dimishaq ee dalka Suuriya sannadkii 1889-kii, Maxammed oo indhool ah ayaa wuxuu xambaarsanyahay saaxiibkiis Samiir oo curyaan ah, labadan nin ayaana waxa ay kusoo koreen nolol Aabbe iyo Hooyo la'aan ah, hal guri ayayna ku wada noolaayeen, waxayna ka wada shaqayn jireen hal makhaayad!!!.

Mid kastaa wuxuu cuuryaan ka ahaa xubno muhiim ah, balse waxay ku heshiiyeen in ay isdhammaystiraan, Maxammed oo indhool ahina wuxuu lugo u yahay oo uu dhabarka ku xambaarsanyahay Samiir oo isaguna ah curyaan aan socon karin, Samiir isaguna wuxuu indho u yahay Maxammed, isaga ayaana arkaya wadada una tilmaamaaya dariiqa uu marayo markay socdaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Kadib sannado badan oo ay sidan ku wada noolaayen waxa dhintay Samiir, waxayna geeridiisu murug ku reebtay Maxammed oo isna usbuuc kadib u dhintay murugtii iyo dareenkii uu ka dhaxlay geeridii sxbkiis!!!.

Noloshu waxa ay leedahay dhadhan fiican marka aad ifka ku heysato sxb wanaagsan oo aad nafta wadaagtaan!!!.

Gacmo wada-jirbay wax ku gooyaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ADOO DHAXAL REEBI-KARA HANOQON DHINTE AAN LATEBIN!!!



Fatehemi Hamami waa gabadh farshaxanad ah oo u dhalatay dalka Iran, waxay naafo ka tahay cagaha iyo gacmaha, muddadii ay ku jirtay geedigeeda waxbarasho nololeed waxay la kulmi jirtay takoor badan oo dhanka muuqaalkeeda ah, kagana iman jiray ardeydii ay kuwada jireen dugsiyadeedii dhexe, hoose iyo sare, balse taasi kamay hor-joogsan hayaankeedii iyo halgankii dheeraa ee ay ugu jirtay nolosha!!!.

Waxay dugsigii sare gashay iyada oo kasoo kabatay qalal dhanka lugaha ka gaadhay, waxaanay wax ku qortaa lugteeda midig, waxay noqotay farshaxanad wayn oo caan ka ah dalka Iran, waxay sawirtay taswiiro badan oo indhaha bulshada

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

reer Iran si wayn usoo jiitay oo isugu jira kuwa deegaanka ka hadlaaya, kuwa tacliinta ka hadlaaya, kuwa caafimaadka ka hadlaaya iyo weliba ku madaxda Iran ah!!!.

Waxayse hadda ku guulaysatay inay lugteeda midig ku sawirto xiddiga caanka ah ee reer Portugal Cristiano Ronaldo oo dunida kubadda cagta daawata si wayn ay u xiisayso qaab ciyaareedkiisa cajiibka ah!!!.

Farshaxanaddan oo saxaafaddu mar wax ka waydiisay waxay sawirka xiddigan u dooratay ayaa waxa ay ku jawaabtay:- " runtii marka ciyaarhannada dunida laga hadlaayo wuxuu ku jiraa kuwooda ugu naxariista badan dadka muslimiinta ah, waana sababta aan sawirkiisa u doortay, waxaanaan Alle swt ka baryayaa inuu islaamiyo"!!!, waxaase iyaduna mucjiso kale noqotay markii sawirkan la tusay ciyaaryahanka laftiisa oo markii 5aad ku guulaystay xiddiga kubadda cagta adduunka, isaga oo wejigiisa farxad wayni ay ka muuqato ayaana waxa si lama filaan ah uu ugu ballan-qaaday dhismaha qasri wayn oo ay nolosheeda ku noolaato iyo adduun badan oo lagu ilaaliyo laguna baxnaaniyo hab-nololeedkeeda!!!, isaga oo sheegayna in garoonka Santiago bernabeu stadium uu ku marti qaadayo!!!.

Adoo dhaxal reebi-kara ha noqon dhinte aan la tebin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAAD QABAN KARTAA!!!



Gabadhani waa Zuly Sanguino oo ah gabadh udhalatay dalka Colombia, kana mid ah dadka wax ka dhigta ama barta xarumaha sawirada, waxayna kaalmaha koobaad u gashay dad badan oo Ilaahay swt u dhammeeyay laxaadkooda, mar lawaraystay ayayna tidhi:- dadka qaarkood waxay aaminaan hadduu qofku adimadiisa waayo inaanay noloshiisu waxba ahayn lkn qofka dhibtu haysato ayaa garanaaya sida ugu fudud ee uu wax ula qaybsan lahaa bulshadaa ay markii hore ahaayeen nolol wadaag, hadda waan faraxsanahay, laga yaabaa inaan ka faraxsanahay qaybo badan oo laxaad qaba oo wax qabsan-l'a ama noloshooda wax ka baddali-l'a ayaga oo Ilaahay swt laxaadkooda u dhammeeyay"!!!.

Badal noloshaada, tusaalena ka dhigo gabadhan kalsoonida buuxda ayada oo laxaadkeedu aanu dhammayn, waayo waxa ay laxaad ka dhigatay oo ay aamintay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

nafteeda oo ay kalsooni ku qabtay inay nolosha wax ka baddali karto iyadoo dhibban!!!.

Waad qaban kartaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KAFIKIR SAAD HORE UGU SOCON LAHAYD, HANA KU MASHQUULIN DHALIILAHAAGA!!!



Ninkani waa Huang Guofu, waxa uu u dhashay waddanka China, waa uu laxaad la'yahay, haddana kama uusan quusan noloshiisa, laakiin waxa uu qalbigiisa ka dhaadhiciyay inuu wax kasta qabsan karo isaga oo haddana ay laxaadkiisu kala dhantaalanyihiin!!!.

Haddii uu hankaagu wayn yahay wax kasta waa aad awoodda inaad qabsato, muhiimna ma'aha inaad noloshaada ka quusato, waa inaad naftaada sidaad hore ugu wadi lahayd ka fikirtaa!!!.

Kafikir saad hore ugu socon lahayd, hana ku mashquulin dhaliilahaaga!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KALA DUWANAANTU MA'AHA MUUQAALKA, BALSE WAA QALBIGA IYO QULUUBTA!!!



Axmed Al-Sawafiri waa macallin Falastiini ah, waxa uuna labadiisa lugood iyo gacanta bidix kuwaayay duqayn ay Israa'iil ku beegsatay gurugiisa, saas oo ay tahay haddana muu joojin dadaalkii iyo shaqadiisii macallin-nimo, waxa uu waxbaraa jiilkaa soo kacaya welibana isaga oo naafo ah, maalin badhkeed kama maqnaado, waxa uu jecelyahay inuu wakhti badan la qaato ardaydiisa isaga oo ku faraxsan inuu la joogo ardaydiisa wakhti kasta!!!.

Dadku kuma kala wanaagsana aaburka Alle swt iyo lixaadka oo u dhammays ahaada, lkn waxa lagu kala duwan yahay qalbiga iyo quluubta!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXAAN DOONAYAA INAAN NOQDO GABADHA ADDUUNKA UGU DHEERAYSA!!!



Wilma Rudolph waxa ay ka dhalatay qoys sabool ama faqiir ah oo degganaa gobolka Tennessee ee dalka Maraykanka, markii ay jirtay afar sanno ayaa sambabada cudur daran kaga dhacay, kadibna waxa ugu darsantay cudurka dabaysha (booliyada) dhinac ayaana qallalay, waxa lugta lagaga xidhay qalab ilmaha curyaanka ah lugta lagaga xidho, qalabkaas oo toosiya, dhakhtarkiina waxa uu u sheegay in aysan suurtoobi doonin in ay tallaabo qaaddo!!!.

Wilma hooyadeed ayaa dhiiri-gelisay, waxa ayna u sheegtay in awood Rabbi swt uu u dhaliyay, dhabar-adayg iyo aaminaad ay wax walba oo ay doonayso ay awoodi kartona ay samayso, wilma ayaana hooyadeed ku tidhi:- ``Waxa aan doonayaa in aan noqdo gabadha adduunka ugu dheeraysa``!!!, markii ay sagaal sanno

gaadhay ayaana ay iska tuurtay qalabkii lugta lagaga xidhay, kadibna qaaday tallaabadii ugu horraysay, waana tallaabadii uu dhakhtarku yidhi:- ma u suurtoobi doonto!!!.

Saddex iyo toban sanno markii ay gaadhay ayaa ay kaqayb qaadatay orodkii ugu horreeyay, mid labaad, saddexaad, afaraad iyo kuwo kale oo badanba waa ay kaqayb qaadatay, markastana iyada ayaa noqonaysay qofka ugu dambeeya, kama aysana daalin illaa ay gaadhay in ay maalintii dambe noqotay qofka ugu dheereeyay!!!.

Markii ay gaadhay shan iyo toban sanno ayaa ay tagtay Jaamacadda Gobolka Tennessee, halkaas waxa ay kula kulantay tababare layidhaahdo Ed Temple, waxa ay ku tidhi:- ``waxa aan doonayaa in aan noqdo gabadha adduunka ugu dheeraysa``!!!, Temple ayaana ku yidhi:- ``adiga iyo niyadaadan wax idin celin karaa majiraan, intaana waxa dheer aniga ayaa kugu caawinaya``!!!.

Maalin ayaa timid markii ay tartanka koobka olombikada adduunka ay usoo baxday, waxaana lagu aadiyay qofka ugu dheereeya tartankaas, Wilma waxa ay la tartantay gabadh layidhaahdo Jutta Heine, waa qof aan weligeed laga badin, tartankii koowaad waxa uu ahaa kan boqolka mitir ah, Wilma ayaana ka guulaysatay Jutta, waxa ayna halkaas ku heshay hal billad oo dahab ah!!!.

Mar labaadkii waxa la oroday orodka labada boqol ee mitir ah, iyada oo markii labaadna Wilma ay ku guulaysatay kuna heshay billad labaad oo dahab ah!!!, qaybtii saddexaad ee tartanka ayaa loo gudbay markale ayayna iskusoo bexeen Jutta

iyo Wilma, balse Wilma ayaa u oroday sidii biriqdii, si dhakkhso ahna ku dhaaftay Jutta, mar saddexaadna ku guulaysatay billaddii saddexaad ee dahabka ahayd!!!.

Taariikh ayaa ay noqotay, gabadhii yarayd ee dabayshu martay ee lugta iyo gacantu qalalnayd, ayaa noqotay gabadha adduunka ugu dheeraysa tartankii olombikada iyo sannadkii 1960-kii!!!.

Haddaba maxaa laga baran karaa Wilma?, waxa ay ina baraysaa in dadka guusha gaadhay aysan dhibaato la`aan ku gaadhin guushooda, balse ay dhibaato hortaalay dheef u beddeleen, darbi isku gudbayna ay ubeddeleen wax ay ku taageertaan oo ku fuulaan guushooda, waana dad diiday in niyad-jabka iyo guuldarradu ay hoos u dhigaan!!!.

MARNABA HAKA QUUSANIN NOLOSHA!!!



Markii aan indhaha beelay aniga oo d'a yar ayaa maalin baa waxa aan maqlay eedaday oo hooyaday la hadlaysa una malaynaysa in aan hurdayo iyadoo ku tidhi:- miskiinkii Cabdicasiis ahaa sidee ayuu ku heli doonaa shaqo uu ku noolaado?, durbadiiba marka aan ka bogtay hadallada xanafta leh ee kasoo yeedhay eedaday ayaa waxa aan si dhaqso leh ugu Jawaabay:- axadkii uu Alle swt nooleeyo isaga ayaa quudiya oo ka yeela mid deeqtoon!!!.

Sheekh Cabdicasiis Bin Cabdillaahi Bin Baz waxa uu araggiisa ku waayay caabuq indhaha ka haleelay markii uu jiray da'da 16 sanno isaga oo muddo afar sanno kadib ahna gebi ahaanba beelay aragga taas oo keentay in laxaadkiisu uu kala dhantaalmo marka uu gaadhay da'da 20-ka sanno.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Sheikh Cabdicasiis oo kusoo koray agoonnimo, dadku waxa ay ugu yeedhi jireen agoonkii aragga beelay, maadaama oo uu aabihiis dhintay markii uu jiray saddex sanno oo keliya, sidaas ay tahayna marnaba Cabdicasiis kama Joogsan inuu hiigsado himiladiisa isaga oo isku arkay inuu nolosha ka gaadhi karo halka ugu sarraysa balse looga baahan yahay inuu dhagaha ka furaysto cid kasta oo ku tilmaanta inuu yahay indhoole aan waxba qabsan karin!!!.

Sheekh Cabdicasiis oo asal ahaan kasoo jeeda Boqortooyada Sacuudi Carabiya kuna dhashay magaalada Riyaad bishii november 21-kedii sannadkii 1910-kii ayaa dhanka kale ka yimid qoys magac wayn ku leh fidinta Diinta Islaamka, sidaas daraadeedna waxa uu dardar geliyay barashada Qur'aanka, Fiqqiga, Hadith-ka iyo Tafsiirka!!!.

Duruuf kasta oo soo marta waxa uu ugu adkaysan jiray sidii uu meesha kaga saari lahaa shakiga ay dadku geliyeen awooddiisa, isaga oo ku qasbi jiray naftiisa habeen iyo maalinba in uu joogteeyo daraasadda iyada oo hadafkiisa ugu waynina uu yahay maalin uun in uu aamusiiyo dadkii lasoo taagnaa in Cabdicasiis laf ahaantiisa uu u baahan yahay cid xanaanaysa oo ceebtiisa asturta!!!, waana uu ka midho dhaliyay waxbarashadii waxa uuna dadaalkiisii noqday mid lagu najaxo, taas oo u horseeday inuu ku siffoobo Caalim looga dambeeyo Diinta Islaamka!!!.

Sheekh Cabdicasiis muddadii uu nolosha baaqiga ku ahaa waxa loo doortay inuu noqdo Muftiga ugu wayn ee ka arrimiya Boqortooyada Sacuudi Carabiya, isagoo xilkaasi la wareegay sannadkii 1993 illaa intii uu ka geeriyooday sannadkii 1999-kii, waqtigaas oo ay da'diisu ahayd 88 sanno!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Marnaba haka quusanin nolosha, hana dhegaysanin waxa dadka kale kaa aaminsan yihiin adiga oo ku dadaalaya keliya inaad Rabbigaaga swt saaxiib ka dhigato, ogsoonowna laxaadka dhabta ahi waa qalbiga, waana meesha ku gaadhsiin karta maqaam kasta oo aad damacsantahay inaad soo taabato!!!.

Allah swt keliya talo saaro, horena usoco adiga oo sababtii la imanaaya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KU XAMDI-NAQ NIMCOOYINKA RABBI EE AAN XADDIGA LAHAYN!!!



Axmed waa 28 jir ku dhashay nabar xangulaha ah oo awgii uu u noqday naafo aanu qaarka dambe oo dhami shaqaynayn, inkasta oo dhakhtarro badan la tusay xaalkiisa in ka badan 20 qalniinna uu galay, haddana waxba iskama ay beddelin xaalkiisa, maalintiisu waxa ay ku bilaabataa salaadda subax oo ay hooyadii u toosiso, inta ay qaaddo ayay geysaa suuliga ama musqusha si uu ugu soo diyaar garoobo salaadda, kaddib waxa uu tukiyaa salaadda subax!!!.

Salaadda kaddib, noloshiisa maalinlaha ah waxa ay ku bilaabataa kuna dhammaataa hooyadii oo dhabarkeeda ku sidda, iyada ayaa subaxdii sii xambaarta oo dugsigii hoose iyo illaa uu heer jaamacadeed dhammaysanayay dhabarkeeda ku gayn jirtay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waa uu ka qiiraysanyahay, aadna uga naxsanyahay culayska uu hooyadii kuhayo sannadahaa badan ee uu noolaa, isaga oo ilmaynaya ayaanuu saxafi ka socda talefishanka Al-carabiya uga sheekeeyay dareenkiisa iyo sida uu uga naxo marka uu hooyadii dhabarka u fuulayo iyo marka iyada oo daallan ay dejinayso, dabcan isaga oo og in gu' kasta oo isaga u kordhaa uu iyadana da' iyo taagdarro u kordhinayo, xammilkii ay culayska u lahaydna sii yaraanayo!!!.

Waxa uu jecelyahay oo uu ku ducaystaa in Alle swt ku simo isaga oo mar uun ka degay dhabarka hooyadii oo nool, cilmiga uu bartayna uu sida qayrkii ugu shaqaysanayo, laakiin kalsooni ayuu isku qabaa, culayskaas iyo naafonimadaas haysana waxa uu u arkaa in ay tahay imtixaan Alle swt, waxa aanuu ku rajo-waynyahay in uu ka gudbi doono, isaga oo arrimahan ka hadlayana waxa uu yidhi:- "xaaladdayda aan ku jiro waa qaddarka Alle swt, raalli ayaana aan ku ahay, waxa aan ka soo qaadaaba in ay tahay nimco Alle swt isiiyay, Alle swt ayaa ku mahadleh, nimcada kale ee noloshaydu waa hooyaday", isaga oo ilmada ceshanaya ayuu hooyadii jalleecayaa oo uu ka codsanayaa in ay ka saamaxdo dhibta uu u arko in uu ku keenay!!!.

Hooyadan hal-adayga iyo geesinimada badan waxa ay ku guulaysatay in ay wiilkeeda keliya ee naafada ah u rumayso waxa ay awooddo ee qayrkii haysto oo ay waxbarashadu ugu horrayso, laba sanno ka hor ayuu ka qalinjebiyay jaamacadda oo uu ka qaatay shahaadada koowaad ee cilmiga ganacsiga, isaga oo warfidiyeenka u sheegaya shaqada uu qaban lahaa haddii uu helana waxa uu sheegay in uu diyaar u yahay wuxuuna yidhi:- "Shaqo kasta oo xaaladdayda [naafonimada] ku munaasab ah diyaar ayaan u ahay"!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Axmed hooyadii iyada uma xisaabsana dhibtii dabiiciga ahayd ee hooyonimo kaddib muddada dheer ee ay ilmaheeda usoo samirtay, waxa keliya ee u daran ee ay sheegtay in ay habeen iyo dharaar ka warwartaana waa in dhimashadeeda kaddib aanu wiilkeedu silic arag, sababta warwarka ugu wayn ku haysa ayaana ah in wiilkeedu aanu haba yaraato ee waxba qabsan karin oo uu yahay ruux ubaahan cid uu boqolkiiba boqol noloshiisa ugu tiirsanaado, laakiin Axmed isagu maniyad xuma, waxa aanuu Alle swt ka filanayaa in ayaamaha udambeeyaa ay noqon doonaan kuwo usida bishaaro iyo badhaadhe nololeed!!!.

Ku xamdi naq laxaadka dhammayska tiran ee uu Rabbi swt kugu deeqay, kuguna mannaystay, hana ku mashquulin waxyaabaha iska yar-yar ee aad nolosha tebayso, markaas ayaadna dareemaysaa xasiloonida nolosha!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

XUSUUSO KUWA KAA HOOSEEYA!!!



Waa aabbo dan-yar ah oo ay udheertahay naafonimo, waxa ka xanuunsaday cunugiisa keliya, isaga oo aan haysan gar-gaar iyo cid gacan qabtata toona ayaa waxa uu ku waday dhakhtarka, isaga oo kusoo qaaday, kuna riixaaya baaskiilkiisii naafonimada, nasiib darrose intii uu jidka ku jiray ayay naftu ka baxday, uuna dhintay wiilkii!!!, **Innaa-lillaah.**

Markasta oo ay kusoo wajahdo xaalad adagi xasuuso dadka ama kuwa kaasii hooseeya adiga, ee aan awoodikarin xittaa inta aad adigu awoodi karto, badina mahadnaqa Eebbe swt ee ah nimcooyinka faraha badan ee uu kugu deeqay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MARNABA HAKA QUUSAN RAXMADDA ALLE SWT!!!



Gabdhani waxa ay dhalatay ayada oo naafo ah, waxayna martay dhakhtarro badan, waxaana lagu yidhi:- waa dabiicii Alle swt oo lagama dawayn karayo sidan, nasiib wanaagse waxa la geeyay waddanka Germany ayada oo dhakhaatiir badan oo garmal ahina ay kari wayeen ayaa waxa ku guulaystay hal Digtoor, kaas oo ka yaabsaday dunidan aan maanta ku noolahay, iyada oo wax lagu abaal-mariyo lagaran waayay, waayo abaal-marin kasta waa uu kasarreeyaa, sababtoo ah naf bani-aadam ah oo sidan u dhibbanayd ayuu aqoontiisa iyo sababta Alle swt ku daweeyay!!!.

Haddii xaalad adagi kusoo wajahdo, albaabo badanina ay kaa xidhmaan Allah swt ayaa albaabadiisu aanay xidhmin oo kuu furaya albaabka meesha ay

noloshu kaa xigto ama waxaa aad u baahantahay ee marnaba haka quusan raxmadda Alle swt!!!.

Yaa Allah naxariistaada noogu gar-gaar.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

EEBOW WAXAAD IGA QAADDAY NIMCADII SOCODKA EE NIMCADA HOOYONIMADA HA IIDIIDIN!!!



Waxay ahayd gabadh lugaha naafo ka ah socodna aan awoodin, wiil deriskeeda ah ayaa gabadhii dabeecad iyo dhaqan wanaag ku jeclaaday inuu mehersadana ka codsaday, gabadhii markay farxadda hooyadeed u sheegtay ayayna hooyadeed ilmaysay waayo horaa hooyada loogu sheegay in gabadhani madhalays ahaan doonto weligeed, markaas ayaa hooyadii tidhi:- waa khasab inaad wiilkan guur-doonka ah u sheegto inaadan dhalayn ilmo ama carruur!!!.

Gabadhii ayaa tidhi:- hooyo habeen walba markaan tukado ayaan Ilaahay swt ka baryi doonaa inaan hooyo noqdo, hooyadii ayaana ugu jawaabtay:- hooyo maxaad saadaal iyo mala-awaal isugu maaweelinaysaa dhakhaatiirtii oo dhami

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waxay isku raaceen inaad madhalays ahaan doonto weligaa, runta u sheeg wiilka waxbana haka qarine!!!.

Gabadhii way yeeshay talada hooyadeed waxayna wiilkii u sheegtay in madhalaysnimo u dheertahay naafanimada, balse wiilkii wuxuu ku adkaystay inuu guursado xattaa haday madhalays naafa ah tahay, sidaas ayuuna ninkeedii ku noqday, halkaas ayayna gabadhii habeen walba markay tukato ku ducaysan jirtay:- "Eebow waxaad iga qaadday nimcadii socodka ee nimcada hooyanimada ha ii diidin", ducadan ayayna 14 sanno ku ducaysanaysay kamana aysan daalin!!!, Allah-na swt wuu u aqbalay ducadeedii, labo mataana ah ayuuna ku sharfay, halkaas ayayna farxad iyo hooyanimo ku noolaatay.

Xikmadaha runtii kuduugan qisadana waxa ka mid ah:-

- In runtu horseed u tahay guusha.
- In ducada la joogteeyo Allah swt aqbalo.
- In aan naxariista Alle swt marna laga quusan.
- In Eebbe swt lagu kalsoonaado IWM.

WAXA AYNU WADA SAARANAHAY HAL DOON!!!



Maalmo kadib markii uu dhammaaday dagaalkii labaad ee adduunka ayaa waxa dhacday in dad tuban xarun tareenka laga raaco kuna taalla waddanka Jarmalka uu qalalaaso ama rabshad ka dhex sameeyay nin diiday inuu safka ka istaago meesha ku habboon, taasi oo dhalisay buuq fara badan oo sababi gaadhay gacan ka hadal, haddaba mid kamid ah dumarkii goobta joogay ee tareenka sugaayay ayaa inta ay ninkii soo qabatay si gooni ah ula hadashay kuna tidhi :- walaalkayga qaaliga ahow waxaan dhibaato aad u baaxad wayn kala kulanay oo ku khasaarnay dagaalkii, waxaan burburinay magaalooyinkeennii, waxa dhintay dadkeennii, gaar ahaan dhalinyaradeennii, waxa la kufsaday dumarkeenna, gaar ahaan gabdhaheennii, laakiin ma lumin anshaxeennii, waana midka keliya ee aan maanta dib ugu dhisi karno waddankeenna ee ku laabo booskii aad ka timid, dabeedna

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ninkii hadalkii haweenayda ay reer Jarmal isla ahaayeen ayaa aad u saameeyay qalbigiisa waana ka yeelay codsigeedii!!!.

Dhacdadaasi waxa ay ina baraysaa in badi waddan kasta oo ku yaalla adduunka uu soo maray dagaallo caalami ah iyo mid sokeeye intaba balse ummadaha badankood ay ku dadaaleen in marna aysan anshaxa iyo dhaqankooda ka tegin, dadyowga dunida dhibaato kasta oo ka dhex dhacday halgan adag kadib waa ay heshiiyeen iskana ilaaween waxii hore ee dhacay iyagoo ku dedaalay in ay ka tashadaan aayahooda dambe!!!.

Marka laga hadlaayo dagaalada qadhaar ee xalka laga gaadhay kuwa tusaale loosoo qaato waxa kamid ah derbigii Berlin ee kala qaybin jiray Jarmalka oo ugu danbayn la dumiyay dadkiisuna ay gacmaha is qabsadeen, taasi oo muddo gaaban kadib u sahashay in Jarmalku uu kamid noqdo quwadaha ugu sarreeya adduunka dhan kastaba, sida:- Waxbarashada, Caafimaadka, Militariga, Ganacsiga, Warshadaha iyo Tiknoolojiyadda!!!.

Haddaba maxaa inoo diiddan inaan iska qabanno midka khaldan si loo helo bulsho midaysan oo ka tashada arrimahooda, una dhaqaaqa in ay nabadda gacantooda ku soo celiyaan iyadoo danta guud laga eegaayo, sida suubanaheennii Muxammed NNKH laynoogasoo weriyayna waxa aynu wada saaranahay hal doon, haddii ka daloolinaaya aynaan iska qabanna waa ay inala wada degaysaa!!!,

Aynu iska qabanno ka qaldan, keenna saxanna dhiirigelinno!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CAQLIGU HAKU SHAQEEYO!!!



Nin dalxiise ah ayaa dalka Mexico u dalxiis tegay, waxa uu arkay dad reer Mexico ah oo kalluumaysato gudaha dalkooda uun ka shaqaysata ah, laakiin kalluunka ay soo qabanayaan uu yahay mid aad u tayo badan oo ah noocyada dunida laga jecel yahay, waxa uu waydiiyay:-"Waqti intee leeg ayaa uu kalluumaysigu idinka qaataa"?, waxa ayna u sheegeen in uu waqti aad u yar ka qaato, kadibna waxa uu waydiiyay:- "Maxaa idiin diidaya in aad waqtiga kalluumaysiga badisaan, si kalluun intaa iminka ka badan aad u qabsataan?, kalluumaysatadiina waxa ay dalxiisihii u sheegeen in waqtigaas yari ku filan yahay oo ay ka helaan dhaqaale ay ku dabbari karaan noloshooda iyo nolosha qoysaskoodaba!!!.

Dalxiisihii waxa uu kalluumaysatadii deegaanka waydiiyay:- waxa ay waqtiga badan ee usoo hadhay ka shaqeeyaan?, waxa aanay ugu jawaabeen:- "waa

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

aanu seexannaa oo nasannaa waqtiga badankiisa!!!, waxa aanuna helnaa waqti aanu la qaadanno qoysaskayaga oo carruurta aanu maaweelinno, waxna la cunno, inta badan waqtiyada galabtiina waxa aanu isugu wareegnaa booqasho iyo salaan aanu ugu tagno ehelka iyo asxaabta, mararka qaarkoodna habeenkii waxa aanu isugu nimaadnaa ciyaaro iyo maaweelo dhaqameed.

Dalxiishii ayaa isaga oo yaabban waydiiyay:- "Anigu waxa aan cilmiga maamulka ku haystaa shahaadada heerka labaad ee jaamacadda oo aan ka qaatay jaamacadda HARVARD ee dalka Maraykanka, markaa waxa aan idinka caawin karaa wax badan oo ah horumarinta kalluumaysiga iyo wax-soosaarka, markii ay waydiiyeen talada uu u hayana waxa uu ugu jawaabay:- marka koowaad waa in aynu ugaadhsiga waqtigiisa badinaa, kadib kalluunkaas badan ee aad soosaartaan wixii suuqan Mexico kabadan waxa aynu u dhoofinaynaa debedda dalka, waa aynu is abaabulaynaa oo wadajir ayaa aydun ushaqaysanaysaan una wadaagaysaan wax-soosaarka, lacagta ka soo baxda ee horena waxa aad ku iibsanaysaan doonyo iyo maraakiibta kalluumaysiga!!!.

Dadkii waxa ay ninkii waydiiyeen:- kadib maxaa xiga?, waxa aanuu ugu jawaabay:- marka aad noqotaan shirkad wayn oo kalluunka dhoofisa oo hanti iyo qalab badan oo kalluumaysi leh waxa idiinsoo tartami doona warshadaha dunida ee kalluunka kashaqeeya, dakhli badan ayaa idinsoo geli doona, tuulahan inta aad iskaga tagtaan ayaa aad u guuri doontaan caasimadda Mexico ama caasimadaha kale ee dunida sida Washington iyo New York idinka oo hanti iyo lacag leh oo nolol raaxo badan haysta idinka iyo ubadkiinuba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Kalluumaysatadii ayaa dalxiisihii waydiiyay:- waqti intee leeg ayaa hawshani ku dhamaystirmaysaa oo midhaheedaas u dambeeya lagu gaadhi karaa?, waxa uuna ugu jawaabay:- labaatan ama illaa shan iyo labaatan sanno, kadib waxa ay waydiiyeen:- markaa maxaa xiga?, inta uu dhoolla caddeeyay ayuuna ugu jawaabay:- marka ganacsigiinu aad u waynaado waxa aad saamiyo ku darsan doontaan sayladaha adduunka, malaayiin doollar ayaana aydun saacado ku faa'iidi doontaan!!!.

Dadkii deegaanka ee kalluumaysatada ahaa iyaga oo yaabban ayaa ay haddana ninkii waydiiyeen:- malaayiin dollar, markaa lacagta intaas leeg maxaa aanu ku fali doonnaa?, waxa uuna ugu jawaabay:- marka aad intaa heshaan inta aad hawlgab noqotaan ayaa aydun iska nasan doontaan, nolol deggan oo buuq iyo dhib aan lahayn ayaana aydun karaadsan doontaan tuulihiinan xeelliga badda ku yaalla, hurdo, ciyaar, maaweelo ayaad ka dhergi doontaan qoysaskiinana waqti fiican ayaa aad la qaadan doontaan, saaxiibbadiin iyo dadka ehelkiina ahna waqti ayaa u heli doontaan!!!.


Intaas kadib kalluumaysatadii waxa ay ugu jawaabeen dalxiisihii:- annaga oo aad kuu ixtiraamayna, kuuna qaddarinayna waxa aanu kuu sheegaynaa in sheekadaadii dheerayd ee daalka iyo tacabka badan aad soo marisay ay ku soo dhammaatay uun halkii aanu joognay maanta, markaa intan aad leedahay sannado badan kadib ayaa idinka oo daalay aad kusoo noqon doontaan waa inta aanu iminka annaga oo xoog ah samayno iyo sida aanu hadda unoolahay, sidaa awgeed waxa ay su'aashu tahay, waa maxay sababta caqligalka ah ee aanu muddo 25 sanno ah daal

iyo tacab u gelayno annaga oo ku dambaynayna uun halkii aanu ka dhaqaaqnay oo ah halka aanu hadda joogno!!!.

Gebagebadii, muhiim ma'aha tallaabada aad qaadaysaa balse waxa muhiim ah isbeddelka ay naftaada iyo inta kugu xeeran kagaysanayso!!!, haddii aad tallaabooyin badan oo aad umalaynaysay in ay horumar kuu yihiin aad samayso balse xaqiiqo ahaana aad halkii hore uun taagantahay, waa run oo hal ayaad bacaad kulisaysay!!!.

Caqligu haku shaqeeyo!!!.

SIRTU WAA ISDHUL-DHIGGA!!!



Kadib sannado badan oo uu farshaxanka baranaayay ayuu sawiray farshaxan cajiib ah, kadibna wuxuu dhigay goob fagaare ah wuxuuna ku dul qoray:- "fadlan haddii ay wax qalad ah kaaga muuqdaan sawirkan, ii calaamadi si aan u saxo", wuxuuna ag dhigay qalin, galabkii ayuu ku laabtay meeshii wuxuuna u tegay sawirkii oo wada calaamaysan una ekaaday mid kale, maalinkaas ayuu ka niyad-jabay farshaxanka, wuxuuna u tegay macallinkiisii oo uu u sheegay inuu ka tegayo farshaxanka maadaama ay calaamadaha dadku u sheegayaan inuu wada qaldanyahay farshaxankiisu!!!.

Macalinkii ayaa u sheegay inuu yahay farshaxaniiste khatar ah, wuxuuna kula taliyay inuu isla sawirkii dhigo isla meeshii, balse uu beddelo ereyada uu ku dul qoray, wuxuuna usoo jeediyay inuu ku qoro:- "fadlan haddii uu qalad kaaga muuqdo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

icaawi oo iga sax qaladka, kana dhig sida ay kula tahay", sidii ayuu sameeyay galabkii ayuuna u tegay farshaxankii oo sidiisii ah oo aanu qofna taaban, wax qalad ahna ka sixin, macallinkii ayuuna usheegay inaan wax qalad ah laga sheegin farshaxankiisii, macallinkii ayaana ku yidhi:- dadka badankood waxa ay jecelyihiin inay ceeb uraadiyaan wax kasta oo ay arkaan, balse waxay dhaliishoodu dhammaanaysaa markii aad ka codsato inay xal ukeenaan ceebta ay sheegayaan!!!.

Sirtu waa isdhul-dhigga, isdhul-dhigguna waa qodob ay diinteenna suubban ee Islaamku inbadan inagula dardaaranto, inaguna dhiirigeliso, sidaa awgeed noqo mid isdhuldhiga wakhti-walba iyo xaalad-walba oo ku habboon!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DHIIG AYAA DABOOLAY WEJIGIISA!!!



Cubayd Aagaa Al-Kackajii waa xeeryaqaan udhashay dalka Suuriya, dhiig ayaa daboolay wejigiisa, gadhkiisa caddaanka ah iyo timihiisaba, dhibtu waxay ka muuqataa indhihiisa, dareenkiisa iyo jidhkiisa, saddex maalin kadib sawirkan geeridiisa ayaa la baahiyay, wuxuu ku dhashay guriga awowgiis 1930-naadkii, aabihiis ayaa geeriyooday isaga oo 14 jir ah, hooyadiis ayaana soo barbaarisay, magaalada Raqqa ayuu ku dhammaystay dugsiga hoose, isaga oo dugsiga sare uga aflaxay magaalada Xalab, deetana bilaabay kulliyadda sharciga ee Jaamacadda Xalab, qareenka magaalada Raqqa ayuu noqday, sidoo kale maamulaha mu'asasadda "Intermetal" ee qalabka dhismaha.

Shaqadii ayuu ka tegay, kumana biirin siyaasadda ee wuxuu ujeestay noolaynta iyo kashaqaynta dhul & beero ay lahaayeen waalidiintiis, wuxuu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

kawarhayay inkabadan 50 qoys, isaga oo caan ku ahaa deeqsinimo iyo taakulaynta kuwa taagta daran.

Markii dagaalada lagu hoobtay ay ka bilowdeen dalkiisa hooyo ee Suuriya magaalada uu deganaa inta ugu badan dadku way ka carareen, laakiin isagu ma bixin, qaar kamid ah asxaabtiisa ayaana ka codsaday in uu soo baxo, laakiin 'maya' ayuu ku adkaystay!!!.

Wuxuu u geeriyooday dhaawac kasoo gaadhay duqaynta ciidanka isbahaysiga, kadib markii la waayay goob caafimaad iyo dhakhaatiir dawaysa, baraha bulshada "si gaar ah Twitter-ka" ayaana si aad ah loogaga hadlay geeridiisa, iyada oo qeyb ka mid dareenka dadkii kahadlay arrintan iyada ahina uu ahaa sidan:-

A. Waa ay iga tirmi la'dahay muuqaalka qofkaas si kasta oo aan isku ilowsiiyo, in uu qofkan dhintay daqiiqado kadib sawirka xalay kahor ma ogayn!!!. Ziad Majed.

B. Haddii sawirka & magaciisa la kala reebi lahaa waxa aan ku tilmaami lahaa qof dadkii Greek-gii hore ah!!!. Assaf Alassaf.

C. Aadamahu agab kala duwan ayuu u isticmaali jiray farshaxanka sida:- Shamaca, Dhuxusha, Saliidda iyo midabada kala duwan ee biyaha, tani (dhiigga) waa agabka cusub ee farshaxanka Suuriya!!!.

Sida Allah swt uu inoogu sheegay kalaamkiisa kariimka ah ee Qur'aanka daadinta dhiigga bani-aadamku waa arrin adag, diinta Islaamkuna ay meel adag ka taagantahay, naf Islaam ahna haba sheegin iyada, illaa Allah swt uu gaadhsiiyay

daadinta dhiig Muslim in ay ka fududahay in uu dunida dhanba laabo, sidoo kalena waxa iyana xusid mudan waajibnimada asbaabta samatabaxa masiibooyinka ee kaasaaran naftaada iyo nafaha kaleba intii aad awoodid.

Allah swt haku ilaaliyo, ee ka dheerow in aad gacan ku yeelato daadinta dhiig Muslim ama bani-aadamba, ficil, hadal iyo dareenba!!!.

Yaa Allah naga badbaadi in aanu ku dhacno cadhadaada!!!.

MALALA YUUSUF IYO YEYDII DAALIBAAN!!!



Waxa ay dhalatay taariikhdu markay ahayd 12 July 1997-kii, xilli roob uu qabsaday xaafaddii ay ku dhalatay, waxa ay ku dhalatay magaalo caan ah oo la yidhaahdo Mingora, laakiin waxa ay kusoo bar-baartay magaalada ay aadka u jeceshahay ee Swat oo dhacda waqooyi galbeed waddanka Pakistan, waxa la dhashay labo wiil, hoyadeed iyo aabaheed oo ifka ku nool.

Malala Yuusuf waa gabadh degan, xishoodkuna uu udheeryahay, shanta salaadood tukata, marwalbana kitaabkeeda ayay ku wadan jirtay boorsadeeda, aadna ujecel waxbarashada oo ay weligeed ku riyoon jirtay in ay horumar ka samayso, markii ay jirtay 8 sannona (2005), waxa aabaheed Yuusuf uu dhihi jiray waad yartahay ee iska joog guriga intaad kasoo weynaanayso, laakiin ayadoo da'daas jirta

uma aysan cuntamin hadalada aabaheed, wayna ilmayn jirtay inta ay qol isku soo xidho!!!.

Aabaheed sidoo kale waa macallin bare ka ahaa iskuul ku yaalla magaalada Swat, markay soo waynaatay aabaheed oo ifka gabdhiisa ugu jeclaa ayaa waxa uu geeyay iskuul, taas oo unoqotay maalin taariikh u leh oo ay aad ugu faraxday, waxa ay jeclayd in ay barato farsamada gacanta ama Electronic, laakiin aabaheed wuxuu jeclaa in ay barato siyaasadda, hase ahaatee gabadhan reer Pakistan marnaba ma aysan rabin in ay takhasus ku samayso cilmiga siyaasadda, inkastoo amarka aabaheed ay u hogaansami jirtay!!!.

Waxa ay ahayd gabadh qur'aanka barata sidoo kalena si joogta ah u aada iskuulka, waxbarashadeeduna ay ahayd mid heer sarraysa, waa ruux nafsiyan u jecel barashada cilmiga, waxaana intaas u dheer in ay jeclayd wax qoridda oo markay yarayd la dhihi jiray qoraa sare!!!.

Dagaal ayaa wuxuu ka qarxay Swat, waxaana magaalada soo weeraray ururka Daalibaan, waxaana magaalada laga saaray askar yar oo dawladda Pakistan ka tirsan oo magaalada joogay, Malala iyo qoyskeeduna waaku adkaysteen in aysan qaxin oo ay magaaladooda ku dhintaan, Allah-na swt waaku badbaadiyay, waxa ayna markii ugu horaysay la qabsatay jawiga magaalada oo ay si buuxda u maamulayeen kooxda ururka Daalibaan, iyadoo iskasii wadatay waxbarashadeeda oo ay u arkaysay muhiimadda kowaad ee nolosheeda madaama uu Nabigeenu NNKH amaanay qofka cilmiga leh.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Amaro adag ayaa Daalibaan kasoo baxayay oo ku saabsan in xijaabka la qaato iyo kuwo kale oo umaddu markaaas ay u arkayeen in ay wanaagsan yihiin, walow qoyska Malala iyo inta badan gabdhaha reer Swat ay ahaayeen kuwo horey u xijaabnaa, laakiin Malala oo da'deedu yarayd ayuu aabaheed yuusuf ka ilaalin jiray gabadhiisa waxyaabaha ka soconaya magaalada, ugu dambayna wixii amaro ahaa ee ururkaas kasoo baxaayay waxa ay isugu soo biyo shubteen in laga bilaabo 12 October 2011 gabdhaha degan magaalada Swat aysan aadi karin iskuul, xittaa gurigana aysan uga bixi karin sabab la'aan!!!.

Maalin ayaa ayadoo aad u faraxsan ayay timid gurigooda, waxa ay raadisay aabaheed oo ay rabtay in ay u sheegto inay u gudubtay fasal kale, laakiin aabaheed wuu murugaysnaa maalintaas, maadaama oo uu kawarhayo in ururka Daalibaan ay joojiyeen waxbarashada dumarka iyo gebi ahaanba aadida iskuulka ee gabdhaha, kadibna waxa ay Alle amarkiisa si kedis ah raadiyaha uga maqashay iyadoo gurigooda joogta nin ururka ka tirsan oo afka Pakistan ku sheegaya in gabdhuhu aysan aadi karin iskuulka, gabadhii lagu arkana ayadoo iskuul aadaysa ay la kulmidoonto seefta Daalibaan!!!.

Sidoo kale maamulayaasha iskuulada ayaa loogu hanjabay in iskuuulaadka ay u fasaxaan gabdhaha, waxaana dhacday in Malala ay raadiso aabaheed markii ay la kulantayna waxa ay waydiisay hal su'aal oo ahayd sidan:- "aabe ma gabdhaha ayaa dad xun ah?", **w**uxuuna isagoo murugaysan ku yidhi:- "Maya", waxayna markale waydiisay aabaheed:- "haddii aysan gabdhuhu dad xun ahayn maxaa iskuulka naloogu diidayaa?, wuuna ka jawaabi waayay, waxaana dhacday in uu dejiyo gabadhiisa, laakiin waa ay oysay, wexayna hoosta ka gashay hooyadeed oo ay ku

dhahaysay ayadoo ilini ka qubanayso:- "hooyo ma gabdhaha ayaa dad xun ah, anigu waxaan rabaa in aan waxbarto hooyo"!!!.

Daalibaan ayaa magaalada ka fuliyay falal naxdin leh, sida in meelo fagaare ah lagu garaaco gabdho xijaaban, qaarkood dhulka inta la jiifiyo ayaa laga garaacayay badhida maadaama oo la sheegay in ay isku dayeen inay aadaan iskuulka, halka gabdho jira da'da 16 illaa 19 sanona loo taxaabay xabsi!!!.

Maalin ayaa waxa dhacday in Telefishan kamid ah kuwa Pakistan uu soo daayay gabadh si xun loo dhirbaaxayo, waxaana lagu sheegay in ay ku qaylinaysay:- "Iskuul ayaan rabaa", waxaana muuqaalkaas si wadajir ah u daawanayay qoyska Malala, Aabaheed ayaana Telefishanka damiyay, laakiin Malala oo daawanaysay ayaa qolkeeda u carartay, Aabaheedna wuxuu ka warhayay haddii gabadhiisu ay daawato muuqaaladan oo kale in ay kasii darayso!!!.

Malala iskuul la'aan waxay ahaatoba go'aan ayay qaadan kari wayday, maadaama da'deedu ay yarayd, laakiin magaalda Swat ayaa waxa ka dhacay markale dagaal lagu hoobtay, taas oo Malala iyo qoyskeedu ay awoodi waayeen in ay ku noolaadan gurigooda, waxaana dhacday in ay kasoo baxaan Swat oo ay yimaadaan Islamabat oo ah caasimadda Pakistan, lagana ogol yahay waxbarashada gabdhaha maadaama oo ay maamulaysay dawladdu, laakiin Malala oo kasoo jeeda qoys iska tabar yar ayaa waalidiinteed awoodi waayeen in gabadhooda iyo labada wiil ee la dhashay ay kawada bixiyaan fiiga ama lacagta iskuulka, waxaana dhacday In 6 bilood gurigooda ay iska joogtay, maalin walbana way isla hadli jirtay, waxayna badsan jirtay muuqaalada waxbarashada, iyadoo ku taamaysa in ay tiigsato heerka ay rabto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxa ku safe-garaysnayd in daqiiqad aysan noqon qof waxbarasho la'aan ah, hase ahaatee 6 bil ayay guriga iskaga jirtay inkastoo ay ku ceshan jirtay buugaagteedii hore iyo aabaheed oo guriga wax ugu dhigi jiray, bilooyin kadibna Dawladda Pakistan oo la wareegtay Swat iyo Daalibaan oo weli magaalada ku dhuumaalaysanaysa ayaa waxa dhacday in ay aabaheed u timaaddo kana codsato in ay dib ugu laabtaan magaaladoodii, laakiin qorshahaasi maskaxdiisa kuma jirin, wuuna diiday go'aanka gabadhiisa da'da yar, balse tuugmo badan oo ay tuugtay aabaheed ayaa markii dambe wuxuu ogolaaday in Swat oo weli xaaladeedu aanay fiicnayn ay ku laabtaan, taasoo ay aad ugu faraxday, maalintii ay soo bixi rabeen habeenkii ka horreeyay ayayna fikirtay, waxayna qaadatay go’aan adag, wuxuuna go'aankaasi noqday mid taariikhdeeda layaabka leh saamayn ku yeeshay!!!.

Waxa ay go'aan ku gaadhay in marka ay ku laabtaan Swat ay bilowdo iskuulkeeda, xittaa iyada kaligeed maahee waxa ay doonaysay in gabdhaha weli cabsidu ku jirto ee iskuulka aanan aadi karin ay ku dhiiri-geliso in si wadajir ah ay wax u bartaan, taariikhdu markii ay ahayd 24 May 2012 ayaana qoyska reer Yuusuf oo Malala ay ku jirto waxa ay dib ugu soo laabteen Swat, laakiin sidii hore ma aha magaaladu oo muddo kooban gudahood ayay wax kastaa isku bedeleen, mana la aqoonsan karo xaafadihii magaalada, burburka magaalada ayaana ahaa mid ka ilmaysiiyay Malala iyo Aabaheed!!!.

Waxa ay bilowday iskuulkeeda, isla usbuucii xigayna waxay isku keentay tiro gabdho ah oo asxaabteeda kamid ah iyo dumar kale oo u baahnaa in keliya la dhiiri-geliyo, waxaana magaalada mar qudha ka curtay duufaantii Malala ee ciwaankeedu ahaa "AADA ISKUULKA", inkasta oo goobaha wax lagu barto aysan

gabdhuhu ku aadi jirin dirayska lagu aqoonsado ardayga maadaama Daalibaan ay magaalada weli ku dhuumaalaysanayaan, haddana ololaha Malala ee ahaa in birmagaydadu waxbartaan meeshiisa ayuu kasii socday, heer gudaha magaalada inta badan gabdhihii daganaa ay u wada kaceen aadida iskuulaadka!!!.

Muddo kadib waxa dhacday in Weriye BBC ka tirsan uu booqdo Swat lana kulmo Malala iyo qoyskeeda, wuxuuna kasoo diyaariyay barnaamij soconayay 32 daqiiqo isagoo waraysiyo iyo taariikh kooban ka qaaday gabadhan da'da yar oo markaas isagu "wariyaha" uu u arkaayay wax layaab leh in inan 15 sano jir ah (2012) ay u ololayso waxbarashada dumarka, Malala oo karti muujisay iyo cabsi la'aan ayaana barnamijkaas waxa hadaladeeda lagu xusuusto kamid ahaa:-

- "Waxa aan nahay muslimiin, aqoontu wax ceeb ah ma ahan, mana ahan dembi, diinta islaamku waxa ay ku dhisan tahay waa aqoon, anagoo dumar ah in naloo diido waxbarashada waxa ay ila tahay "!!!.
- "Anigu waxa aan ahay gabadh yar lkn mustaqbalkayga iyo kuwo kale ee ila midka ah waa inaan ka fikirnaa, ma cabsanaayo, kamana cabsanaayo dhimashada, Allah swt ayaa mahad leh"!!!.
- "Qof walba oo naf ay ku jirto ha noqdo wiil ama gabadh waa in uu helaa waxbarasho, aqoontu waa qayb kamid ah nolosha, fadlan aada oo aan aadno iskuulaadka"!!!.

Markaas ma aysan ka warqabin in barnaamijkaas ay bixisay uu adduunka ku faafayo, waxa ay isaga haysatay mid la iska qaaday uun, laakiin mar-qudha ayaa caalamka laga wada daawaday barnaamijka oo BBC NEWS ka baxay, Daalibaan oo

barnaamijkaas daawatay ayaana wax talaabo ah aan qaadin muddo badan, hase ahaatee dadka indha-indheeya dhacdooyinka ururkaas ayaa sheegayay in ay wax soo wadaan goortay ahaataba!!!.

Maalinba maalinta kasii dambaysa waxa ay sii xoojinaysay ololeheeda waxbarashada, gaar ahaan dumarka, waxaana ay xittaa sii diyaarinaysay in carruurta yar-yar ee soo koraya lagu baraarujiyo aqoonta, halkii ay mustaqbal la'aan noqon lahaayeen, waxa ayna guri-guri u geli jirtay iyadoo waalidiinta xaafadaha kala hadli jirtay in carruurtooda aysan kala baqin waxbarashada, waxayna la ciyaari jirtay carruurta da'doodu u dhaxayso 8 jir illaa 11 jir, kadibna waxa ay ku dhihi jirtay:- "iskuulka aada, haddii iskuulka aad aadaan hadhow waxaad noqonaysaan madaxwayne, dhakhtar, ingineer IWM", markaas ayay carruurtu u sheekaynaysay, midba wuxuu rabo ayuuna soo ridanayay, taas oo ay aad ugu faraxday in naf waliba ay u baahantahay aqoon!!!.

Muddo kadib sidii Malala iyo gabdhihii kale ay u aadayeen iskuulka ayaa 9 october 2012 waxa dhacday dhacdo tii ugu xumayd, uguna darnayd ee soo marta nolosha Malala, dhacdadaas oo ahayd midda maanta ka dhigtay gabadh caan ka ah dunida, oo inbadan ay ku daydeen kartidii iyo dhiiranaantii ay u muujisay in iyada iyo gabdho kale ay helaan waxbarasho, maalintaas waxa ay ku beegnayd galab talaada ah, waqtiga 3:40 galabnimo, iyada iyo 3 kamid ah gabdhaha ay saaxiibada la tahay ayaa waxa ay saarnaayeen gaadhi nooca tiyootada loo yaqaano ee qaybta dambe laga fadhiisto, waxayna waqtigaas ka yimaadeen ama kasoo rawaxeen iskuulka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Rag laba ah oo dhalinyaro ah ayaa gaadhigii istaajiyay, waxayna u tageen darewalkii oo ay ku dhaheen:- "gabdho nala dhashay ayaa gaadhiga saaran ee mala hadli karnaa?", darewalkii ayaana ku jawaabay:- "haa la hadla", laakiin mid ayaa qaybta dambe ee gaadhiga u dhaqaaqay, wuxuuna soo aaday qaybtii gabdhahu ay fadhiyeen, inta uu soo kor istaagay gabdhihii ayuuna ku yidhi:-"Waa tuma Malala ?"!!!.

Malala oo wakhtigaas sheeko u waday saaxiibadeed ayaan wax cabsi ah qabin, xittaa uma aysan haysan in wax buuran ay jiraan, wax caadi ah ayay la ahayd in la dhaho:- waa tuma Malala, madaama 2012 ay jirtay da'da 15 sanno, kadib Malala oo jawaab bixin rabta oo dhihi rabta:- "waa aniga Malala" ayaa ninkii bastoolad lasoo baxay, kadibna wuxuu marka hore hal xabad kaga dhuftay sujuudda, kadibna xabad kale ayuu kaga dhuftay caloosha qaybta bidix, xabaddii saddexaad ayuu haddana garabka kaga dhuftay, weliba qaybta ka korraysa wadnaha, **"SUBXAANALLAH"!!!.**

Kadib waxa dhacday in uu xabado ku afuufo gabdhihii kale, darewalka oo xabadihii maqlay ayaa gaadhiga xoog u waday isagoo nafsadiisa meesha kala soo cararay, xoogaa markuu raggii kasoo cararay ayuuna gaadhiga joojiyay isagoo u tegay gabdhihii oo la wada laayay, wuxuuna geeyay fadhiisimadii ugu horreeyay ee askarta dawladdu ku lahaayeen magaalada si loola ogaado, Askartii Pakistan ayaana deg-deg dhakhtar ula cararay ardayda gabdhaha ka koobnaa, dhakhtarkii dawladduna wuxuu sheegay in gabdhihii kale ay badbaadeen oo dhaawacoodu uusan buurnayn marka loo fiiriyo dhaawaca Malala oo ahaa mid quus taagan oo dhiigeedu aad u daatay, madaxeedana xabaddii lagu dhuftay ay ku jirto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Saxaafadda adduunka, hay'adihii xuquuqda aadamaha iyo wadamada caalamka ayaa si dhaqso ah uga hadlay dhibaatada Daalibaan ay u gaysteen inantan yar ee udoodaysay xuquuqda waxbarashada, gaar ahaan gabdhaha, boqoraddii England Queen Elizabeth ayaana bixisay amar ahaa in Malala si deg-deg ah lagu soo qaado oo la keeno UK, laguna dabiibo dhakhtarka gaarka ah ee loogu magac daray boqoradda waddankaasi ee Elizabeth Hospital!!!.

Waxa dhacday in iyada oo weli koomo ku jirta, dhaawac halis ahna qabta iyo dhammaan reerkooda oo la socda la keeno Ingiriiska, si halkaas ay uga hesho waxqabad wanaagsan oo xaga caafimaadka ku aadan, Qaramada midoobay ayaana shir ka qabtay dhacdadii lagu toogtay gabadha yar, sidoo kale qaar kamid ah madaxda caalamka ayaa ka hadlay, wadamada islaamka iyo ururka Jaamacatul Carab ayaana si kulul ucambaareeyay dhibaatada Swat ka dhacday!!!.

Intaas ay dunidu hadal hayeen taariikhda gabadhan yar iyo toogashada loo gaystay oo wali ay ka nooshahay, iyadu waxa ay ku jirtay koomo oo nidaamkii maskaxda ayaa ka maqnaa, cuntada waxa lagu siin jiray tuunbo ay ka qaadanayso sanka, sidoo kale saxarada qaab kale oo laga ciishoodo ayaa looga qaadi jiray, aabaheed oo warbaahinta la hadlayay xilli uu dhakhtarka la joogay inantiisa yar ayaa isagoo oynaya wuxuu yidhi:- "Malala nolosheeda hadda markaan arko ma qiyaasi kartid saan noqonaayo, sidan in ay wax u dhacayaan kama warqabin, balse Allah swt ayaan talo saartay oo mahadsan"!!!.

Koomo sidii ay ugu jirtay oo xaalad xun ay ku sugnayd isla markaasna adduun-waynuhu ay hadal hayeen magaca Malala, iyaduna aysan ka warqabin ayaa

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

maalin waxa dhacday in iyada oo uu la joogo walaalkeed kayar ay indhaha kala qaaddo, **MAANSHA-ALLAH**.

Tallaabo-tallaabo ayay usoo kabanaysay xaaladeeda caafimaad, Allah swt ayaana ka kiciyay dhaawacii kasoo gaadhay dhacdadii foosha xumayd ee ay lakulantay, halgankeedii udoodista iyo u-ololaynta waxbarashada gabdhaha ayayna halkii kasii waday, iyadoo sanaddii 2014 iyadoo 17-jir ah noqotay qofkii ugu da'da yaraa ee ku guulaysta laguna abaalmariyo abaalmarinta caalamiga ah ee **Nopel Peace Prize** ee nabadda, iyadoo laagu aqoonsanayo halgankeeda ku aadan waxbarashada gabdhaha iyo carruurta, iyadoona weli siiwadda dedaalkeeda kaashanaysana sanduuqa loogu magacdaray iyada ee **Malala Fund**, waxayna u ololaysaa gabdhaha ku nool wadamada ay colaaduhu kajiraan!!!.

Allah swt talo saaro, arrimahaagana gebi-ahaanba udhiibo, intii awooddaada ahna dedaal, kadib waa hubaal in aanu makhluuqna kaa hor-istaagi-karin hiigsiga hadafyadaada!!!.

QALBI-JAB!!!



Wuxuu ahaa sawir qalbi-jab ku riday Caalamka, waa Aabbe siiriyaan ah, wuxuu xambaarsanaa gabadhiisa yarayd, wuxuu gacanta ku hayay xoogaa Qalimaan ah, wuxuu la wareegayay magaalada si looga iibsado, kadibna xoogaaga shilimaadka uu ka helo uu gabadhiisa ugu quudiyo!!!.

Wuxuu kasoo cararay dagaaladii Siiriya, wuxuu qaxooti ku ahaa waddanka Lubnaan, waxa keliya ee uu heli karayay ayaana ahaa dhawr Qalin, waxa wax kasta ugala wayn in uu u helo wax uu gabadhiisa yar siiyo oo cunto ama cabitaan ah, sababtoo ah murugada iyo xanuunka ugu wayn ee Aabbe dareemo waa in uu arko carruurtiisa oo gaajoonaysa!!!.

Aabahaa waa la caawiyay kadib markii dad ducaysan oo sawiradaa arkay lacago u uruuriyeen, laakiin waxaynu usoo qaadanay qisadiisa in aynu muujino in

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Aabayaal badani ay sidaa yihiin, waxay u dhabar adaygaan duruuf kasta, waxay la dhafraan ka fikirka mustaqbalka ubadkooda, waxay la dhididaan in carruurtoodu farxad ku noolaato, waxay u dhibtoodaan siday mustaqbalka awlaadooda u dhisi lahaayeen!!!.

Dhallinyaroy iyo akhriste kastow ogaada, in Aabbe dhibkaa kaasoo maray, hana ugu abaalgudin dheel-dheel iyo dhalanteed in aad ku noolaato, haddii uu maanta kaa hooseeyona ugu roonow ducada iyo Alla bariga!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

UDHUG-YEELO KAHOR GO'AAN QAADASHADA!!!



Wiil ayaa waxbarashada heer ka gaadhay, waxa soo dhowaaday xilligii uu qalin-jebin lahaa, aabihiis ayaa waxa uu ka codsaday in uu gaadhi u iibiyo maalinta xafladda kahor, si uu asxaabtiisa wakhti ugula qaato, aabbihii ayaana ku yidhi:- aabo waa la khayrayaa ee iga war sug anigaa hadiyad ku siin doonee!!!.

Maalintii xafladdu dhici rabtay ayaa aabbihii wiilkii wacay, kadibna waxa uu siiyay bushqad iyo ubax isku dhex jira oo hadiyad uu uga dhigay, wiikii ayaana ku yidhi:- aabbo wixii aad adduun lahayd ma intan ayaad iga siisay maanta, wuuna ka tegay bashqaddiina ka dhaqaaqay, mar dambana uma uusan soo noqon ,maxaa yeelay waxa uu qaaday cadaawad tii ugu xumayd!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Wiilkii oo reer leh ayaa maqlay in aabbihii dhintay markaasuu tegay guriigii aabbihii ee uu waagii hore ka cadhooday, markuu gurigii tegayna waxa uu arkay baqshaddii uu aabihii hadda kahor siiyay, markaasuu kala furay mise waxaaba dhex-yaal furihii gaadhigii uu aabihii ka dalbaday!!!.

Hubsiimo hal baa la siistaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MUSHKILADAHAAGA DHINAC KALE UROG OO KA EEG, FURSADONA KADHALI!!!



Nin Oday ah ayaa barxadda gurigiisa la fadhiistay joornaal uu akhriyayay, naftiisa wuxuu markaa ugu sheekaynayay:- wallee maanta cid aan u ogalaanayo inay iga qasto fasaxayga ma jirayso, fasaxayga waan ka faa'idaysanayaa, isagoon intaa dhaafin ayaa wiil yar oo uu dhalay u yimid oo ku yidhi:- aabe, goormaan maanta dalxiiskii aadaynaa, Odaygii wuxuu xusuustay inuu wiilkiisa u ballan-qaaday inuu maalinka jimcaha ah dalxiis gaynayo, laakiin uma uusan joojin oo joornaalkiisii ayuu iska sii akhristay, in yar kadib wuxuu arkay maabka caalamka oo ku sawiran bog kamid ah joornaalka, markaasuu soo jaray sawirkii maabka, dabadeedna wuu jeex-jeexay, wuuna isku dhex yaaciyay, wiilkiisii yaraa buuna u dhiibay, wuxuuna ku yidhi:- haddaad maabkan siduu ahaa ka dhigto oo aad isku hagaajiso waan ku dalxiisinayaa maanta!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Wiikii yaraa wuxuu qaatay boggii jooraalka ahaa ee jeex-jeexnaa, meel buuna la fadhiistay, odaygu wuxuu islahaa haddii xittaa juqraafiiste loo keeno saacado ayay ku qaadanaysaa hagaajinteeda, laakiinse cabbaar kadib wiilkii yaraa inta uu aabihii u yimid buu ku yidhi:- aabbe fiiri waan isku hagaajiyaye, Odaygii intuu eegay buu arkay inuu si sax ah u dhigay maabka oo uu isugu hagaajiyay, yaab, odaygii wuxuu waydiiyay wiilkiisa:- aabbe sidee baad ku hagaajisay, wiilkii yaraa baana yidhi:- aabbe markii aad ii dhiibtay joornaalka jeex-jeexan ayaan dhinaca dambe waxaan ku arkay sawir waji qof ah, markaasaan waxaan fahmay haddii aan sawirka wajiga isku aad-aadiyo maabka xaga hore kaga yaallaana wuu isku beeg-beegmanayaa, sidaas baana ku hagaajiyay!!!.

Mushkiladahaaga dhinac kale u rog oo ka eeg fursadona ka dhali!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

NOQO DHEG-MAAL!!!



Waxa ay tidhi:- Aabbo tan iyo intaan caqliga yeeshay khaasatan markaan noqday gabadh kaamil ah waxaan dheehanayey hab u dhaqanka adiga iyo hooyo, inkastood waalidkay tihiin oo milicsigaan idin milicsado markasta indhahayga buuxinayaan farxad, haddana waxaan la khushuucaa sida aad u wada dhaqantaan, markay indhahaygu qabtaan adigoo hooyo dhabanada ka dhunkanaya, naxariis ayaa qalbigayga maaxata, waxa ilma iga keenta markay hooyo kor kuu eegto iyadoo indhaheeda aad ka akhrisanayso jacayl baaxad wayn kuna dhahayso;- Allahii saygayga iigakaa dhigay ayaa mahad iska leh!!!.

Aabbo dhaqaale ma haysanno oo asxaabtay maraday maanta soo gashadaan bil kale ma qaataan aniguna saddex maro ayaan leeyahay, sidaas oo ay tahayna asxaabtaydu ma haystaan farxadda habeen iyo maalin qalbigayga qoysa, farxaddaas

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

oo ay abuurtay dhaqanka aad kuwada dhaqantaan adiga iyo hooyo, aabo hadal badnidayda yaanan sii wadine sidee ku helaa nin iila dhaqma sida aad hooyo ula dhaqanto!!!.

Wuxuu yidhi:- aniga iyo hooyadaa laba alwaax baanu nahay, adiguna ma alwaax anigoo kale ah ayaad rabtaa, gabadhii ayaa qosol ku dhufatay, kuna tidhi Aabaheed:- waxaan rabaa nin sidaada oo kale gabadhaada alwaax baan ahay ku dhaha oo uga qosliya, wuxuu yidhi:- maandhey horta xaajiyaddayda hayga caayin, kor iima eegto oo intay iga dheertahay waad aragtaa, quruxda Allah swt ku abuurayna waad u jeeddaa oo ma jirto ruux dumar ah oo muuq ku gaadha, waxaan kaaga sheekayn maalintii iigu horraysay ee aan hooyadaa arkay:- waxaan soo raacay baabuur, basaskan iyo baabuurtan yar-yar ee lagu safraa ma jirin, baabuurtan aad waaraadka iyo candhamaydlaha u taqaan ayay booskooda joogeen iyagaana la raaci jiray.

Baabuurkaas dad badan ayaa saarnaa sonkor ayuuna siday, hooyadaa shidhkay ku jirtay anna kor ayaan saarnaa, maalin markaanu socdaal ku jirnay ayaa baabuurkii ku jabay meel cidla ah, geed ayaa rakaabkii isugu yimaadeen, anigu rag aan ku jiro ayaa geedka ugu soo horraynay, annagoo geedkii fadhina oo markaa dad badan ah ayaa waxa soo muuqatay hooyadaa oo laaf-yoonaysa, Allow adaa wayn, qurux iyo shacniga ka muuqanayay raggii meesha fadhiyay oo dhan ayaa wada eegay, anigaa ugu faqiirsanaa oo baabuurka baryaan kusoo raacay, raggii oo wada eegaya markay aragtay ayay laafyootay, adduun, adduun, wagaas sidiina oo kale habluhu ma ahayn ee si habsami ah ayay u socon jireen!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Geedkii ayay soo gaadhay, markaas ayaa boos hoos qurxoonaa meel la fadhiistana ku wacnaa oo aan fadhiyay ayaa rag hooyadaa iska gadayay xoog iiga qadeen, markaas ayaan kacay oo ku idhi raggii:- miskiin ayaa miska la fuula leh ee wakaase bal waxaan rabbi idiin qorin ku hela, mid ayaa iga daba hadlay oo yidhi:- dumarku ixtiraam ayuu kaa mudan yahay, waa kula dhasheen, waa ku dhaleen oo waliba ubad kuu dhalaan, waxaan ugu jawaabay:- intaas aad sheegtay ragguba waa u yihiin, waa la dhasheen, oo dhaleen oo wax wada dhalaan, dhanka kalena markaad eegtid, raggaaba adduunkan kusoo hormaray oo Nebi Aadam NKH ayaa ka horreeyay Xaawo!!!.

Hadalkii ayuu ku noqday oo yidhi:- waa runtaa intaasi waxaadse ogaataa in dumarku ragga ka jilicsan yihiin oo aanay awoodi karin waxa raggu awoodo ama u dulqaato, markaas ayaan dhoolla-caddeeyay oo ku idhi:- ixtiraamkaad ii sheegaysay ma yasidbaa, waxaad ogaataa dumarku inay ragga ka awood badan yihiin kun jeer, aroortii adigoo khuurinaya ayay hurdada ka kacaan, gurigaas aad aragtay dayrkiisa gudo iyo debedba ayay xaaqaan, waxay dul fadhiistaan inay quraac kuu sameeyaan, markay dhammeeyaan ayay kuu keenaan iyagoon weli afka gelin, markaad dheregtid ayay wixii aad reebtay cunaan!!!.

Shaqadii halkii ayay ugasii socotaa, waxay bilaabaan inay alaabtii dhaqaan, markay dhammeeyaan ayay adeeg doonaan, kabacdi waxay u hawl galaan inay qado kuu sameeyaan, markaad qadadaas ka laacdid ayaad sariirta fuushaa oo khuuro bilowdaa, iyaduna waxay bilowdaa alaab dhaq, siday isaga daba laabanayso ayaa casarkii la gaadhaa, markaas ayay casariye dabka kuu saartaa, markaad qac shaahaas kasiisid ayay kuu soo saartaa dhar ay kuu dhaqday oo kuu kaawiyadaysay, adigoo

udgoon kaasoo kamkamaayo ayaad magaalada umuran-doonataa iyaduna hawshii cashada ayay u qalab qaadataa, markaad cashaysid ayay alaab dhaq gashaa, iyadoo daal tabcaan la ah markay dhankaaga soo seexato ayaad haddana inaad nafisto ku bilowdaa iyadoon dareenba taag u hayn, waxa intaas usii dheer wallac, sagaal bilood iyo fool adduun oo aan laga wada sheekayn karin!!!.

Ubad ayay dhashaa midba meel ka qaylinayo, raalli gelintooda iyo qancintooduna u dheertahay, waadiga leh way jilicsan yihiine waxaad ii sheegtaa ninkeennee ayaa intaas samayn kara hana isku dayin inaad i tidhaahdid waan usoo xamaalnaa, sababtoo ah intee ayaad maalin kasta aragtaa oo dumar ah oo u xammaalaya ubadkooda iyo kii ka dhalayba, anigoo hadalkii sii wada ayuu iga kala gooyay oo igu yidhi:- waxaad ka hadlaysaa waa shaqo dumar oo waa u abuuran yihiin, markaasaan ugu jawaabay waa runtaa oo ragga makhaayadaha wax ka kariyaa malaha iyaguna waa u abuuran yihiin wax karintaas, hooyadaa maahee dhowr kale oo dumar ahaa oo meesha fadhiyay ayaa qoslay oo yidhi:- Rabbi afka kuma gooyo caqligana hakuu siyaadiyo, haddii raggu sidaada oo kale wada ahaan lahaayeen maxaan farxad kuwada noolaan lahayn haddaan dumar nahay!!!.

Waxaan ugu jawaabay:- eeddaas raggu malaha ee waxa iska leh dumarka, sababtoo ah markay carruurtooda barbaarinayaan waxay shaqadaas dusha ka saaraan gabdhaha wiilashuna hadday jikada galaan waxay ku yidhaahdaan maxaa jikada ku geliyay ma naag baad tahay, waxay aroortii toosiyaan gabdhaha oo ku amraan inay quraac sameeyaan iyagoo ku leh:- naa kakac oo wiilasha quraac u samee, markay quraacda sameeyaan ayaa hurdada laga kacshaa wiilasha oo labiskii iskuulka oo loosii diyaarshay gashadaan oo quraacdaan, markaas ayaa gabadhii bilowdaa inay

labbiskii soo qaadato iyadoo balaq-balaq leh oo waqtigii karin iyo weel dhaq kaga dhammaaday, haddaad simi lahaydeen oo kuwada barbaarin lahaydeen hab cadaaladeed oo midkoodba maalin leeyahay ka shaqaynta guriga dumarku kuma jireen cadaabtaas aan loo ogayn ee dusha ka saaran maalin kasta!!!.

Islaan ayaa i waydiisay haddaad sidaas u aragtid adigu maxaad samaysaa guriga aad ku nooshahay, haddaad gabdho walaala ah leedahay oo la nooshahay amase aad xaas leedahay oo la nooshahay, waxaan ugu jawaabay:- xaas malihi waxaanse la noolahay saddex gabdhood iyo afar wiil oo walaalahay ah oo iga wada yar iyo hooyaday, agoon ayaannu nahay, hooyadayo rag bannaanka ayay iska dhigtay markii aabbahayo dhintay, waxay gaddaa khudaarta, anna dhagax ayaan ka xammaashaa oo waxaan ballan naftayda ah ku maray inay walaalahay wax bartaan oo aan hooyaday gacan kasiiyo!!!.

Hooyo aniga ayaa u diiday inay guriga ka shaqayso, subaxdii anigaa kaca oo quraacda u diyaariya, iyagana waan toosiyaa oo waxaan ku khasbaa inay akhristaan casharkay shalay soo barteen, markay quraacdaan oo aadaan dugsiga ayaan u xammaalasho tagaa buuraha, markuu soo dhawaado wakhtigii qadadu ayaan soo aadaa guriga oo qadada u karshaa, cashada iyo nadiifinta dhammaantood midba maalin ayuu leeyahay, iyaguna waa awlaad baarri ah oo muran kama keenaan mana aha waxaan anigu sameeyay ee waxa sidaas noo barbaarisay hooyaday, rabbigay swt cadaabta haka xoreeyee!!!.

Nin ayaa soo booday oo yidhi:- waxaad isku darsatay wax Rabbi swt laga magan galo oo ah, xamaali qaab daran iyo nimow-naagnimo, markaas ayaan ugu

jawaabay:- intaas ayaan Allah swt ku caabudaa uguna mahad-naqaa maalin iyo habeenba, aabaa hooyaday kula dardaarmay inay carruurtiisa u caddaalad samayso, hooyadayna qalbi ahaan walaalahay way wada sintay gabdho iyo wiilalba, aakhiro la i su'aali maayo xaqdarro aan walaashay ka galay, waalidkayna lama su'aalayo caddaalad xumo ay carruurtooda kula dhaqmeen!!!.

Islaan meesha fadhiday ayaa qiirootay oo Allah swt u mahad-naqday iyadoo ilmaynaysa, waxayna tidhi:- waxaan la ilmaynayaa garaacidda aan ku hayay gabdhahayga anigoo ku garaacaya oo u dullaynaya wiilasha aan dhalay, wiilashaas oo ka xoog badan ayaan ku khasbaa inay dharkooda dhaqaan oo u kaawiyadeeyaan, wiilashaasina intay banaanka cayaar u doontaan ayay soo wasakheeyaan dharkaan walaashood ku dilay!!!.

Hooyo ma’ahi ee waxaan ahayn hooyo xun, waxaase mahad leh Rabbiga swt baabuurka naga jebiyay ee geedkan isoo fadhiisiyay oo imaqashiiyay weedhahaas xikmadda iyo qiimaha badan ee ninkaasi ku hadlay, waxaana ballan Allah igu ah inaan gabdhahayga ka dhaahiyaa dhibtaan u gaystay, waxaanse kuu sheegayaa hooyadaa waa nasiib badnayd oo aabbahaa Allah swt ha u naxariistee ayay heshay, adigana wallee middii ku heshaa nasiib yeelatay, intaan qoslay ayaan ku idhi:- maxay igu falaysaa waxaan usoo hoyan anigoo sidii orgigii u uraya sidaan dhagax usoo jabinayay, foolxumana carruurtaa markay i eegto sasta!!!.

Islaantii ayaa qososhay oo tidhi:- haddaan dumar nahay armaanba jecelnahay urkaas aad sheegayso, dhammaan dadkii ayaa wada qoslay rag iyo dumarba markay intaas tidhi, waxayse sii raacisay maandhow gabadhayda in Allah

calafkeeda kaa dhigo, kadib hooyadaa ayaa ku kala goysay hadalkii oo dhahday eeddo bal ducada u kaadi, aan doodda dhagaysannee raggan dhex maraysa, oday hooyadaa ag-fadhiyay iyo islaantii ayaa qoslay, raggii iyo dumarkii kale ma aysan garan ujeedka hooyadaa, anigana wadnahaa si xadka ka baxsan garaac bilaabay, islaantii oo u hollatay inay hadasho ayaa odaygii hadalkii ka boobay oo hooyadaa ku yidhi:- kawarran haddaan ducada islaanta ka dheerayno, hooyadaa ayaana qososhay oo tidhi:- cawo iyo ayaan badanaa haddaan ka dheerayno, odaygii ayaa intuu dhankayga soo eegay wuxuu yidhi:- ninkaagaan carruurtu ka sastow kawaran haddaan hadda kuu meherino gabadhan raggaas oo dhan darteed surku u qalloocmay siday u eegayeen!!!.

Intaan dhoolla-caddeeyay ayaan ku idhi:- adeer dhurwaa ayaa waxa lagu yidhi:- dhurwaayow weligaa ma naxday, markaas ayuu yidhi:- maya, waxa lagu yiri iyadoo gudcur dam ah oo aan waxba la arkayn miyaan juglay agtaada ka boodin, dhurwaagii ayaa ugu jawaabay:- taasi maaha naxdin ee waa dhimasho, haatan adeer taasi maaha farxad ee waa feedho iyo wadna xanuun, odaygii intuu qoslay ayuu wadaad u dhowaa ku yidhi:- wadaadoow gabadhan anigaa dhalay, waxaana rabaa inaad ninkaa u meherisid, wadaadkii waa aqbalay hooyadaana markii la waydiiyay meherkeeda waxay ku jawaabtay oo meher ka dhigatay Kitaabka Qur’aanka, intaas markay dhacday ayaa islaantii waxay odaygii ku tidhi:- gabadhaada quruxda Rabbi swt ku abuuray waxay ku darsatay garasho iyo qiimo dheeraad ah, Allah swt ayaana isugu daray labadaas, maantana waxa Allah swt ugu daray inuu siiyo nin qiima badan, anigiina waan isku xishooday!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Maandhey ma ogtahay markay hooyadaa soo socotay markaan eegay inaan hoosta ka idhi:- indhahaygoow waxba hays raacinina waxaad arkaysaan, qoraalka Rabbi waa meeshiisa, hase ahaatee muuq iyo maal gabadhi raacdo meesha kuma hayno ee haygu abuurina waxaanan helayn, maxaadse indhahaygoow ka ogtihiin in quruxdaasi qiimo u raacaan iyo inkale, qurux aan qiimo lahaynina waa qalfoof madhan, maandhey haddaad nin wanaagsan doonaysid indho-maal ha noqon ee dheg-maal noqo, qalbigana u ogolow inuu dhegahaaga raaco oo aanu indhahaaga raacin, indhahaagu muuq iyo maal ayay kuu hoggaamin, dhegahaaga iyo qalbigaaguna wanaag ayay kuu horseedi!!!.

Hooyadii ayaa meel udhow ka hadashay oo dhahday waan idin maqlayay, waxaase aabbahaa kaa qariyay inaan u sheegay markii meesha laga kacshay ee uu yidhi:- miskiin baa misko la fuulo leh, in dhegahayga iyo qalbigayguba dhankiisa raaceen oo markii dooddii hoos loosii raariday aan bilaabay inaan Allah swt ka baryo inuu saygayga ka dhigo oo aanu i dhaafin, maalintaas maalin iiga farxad badana noloshayda masoo marin, abaalna Allah swt ayaan ugu hayaa, isagaa iga aqbalay ducadaydii, maandhey anigaa dheg-maal ahaa, aabbahaa af-maal ayuu ahaa ee noqo dheg-maal qalbigana u ogolow inuu dhegahaaga raaco!!!.

Qalbiyada dadka Allah swt ayaa gacanta ku haya marwalbana waxa ay xukumaan sida qumman, haku raaco qofku ama shaydaan ha habaal mariyee, sirtuna marwalba waxa ay ku jirtaa noqoshada dhegayste marwalbana uu dhegaysigiisu kabadanyahay hadalkiisa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Dedaal intii awooddaada ah, intii awooddaada ahna Rabbigaaga swt raalligeli, adna waa hubaal Allah swt arrimahaaga adduun iyo aakhiroba in uu dhammaynaayo!!!.

Yaa Allah nagu hanuuni jidka toosan!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (3)

AABBO ADIGU GACANTAYDA QABO!!!



Galab galbaha kamid ah ayaa aabo iyo inantiisa oo ka tallaabayay goob buundo ah oo aad u cadhiidhi ah ayaa aabihii wuxuu u baqay inantiisa inay meesha ka dhacdo waxa uuna ku yidhi:- aabo gacantayda si adag u qabso hana ka fuqin oo hasiidaynin, gabadhii yarayd ayaana waxay ku jawaabtay:- aabo adigu gacantayda qabo, wuu yaabay waydiiyayna sababta ay sidaas u dhahday, waxayna ku tidhi:- aabo waxa laga yaabaa inaan anigu cabsado una adkaysan waayo cidhiidhiga oo aan kaa fuqo, kunasiidaayo, balse adigu wax walba hadday dhacaan gacantayda marnaba ma siidaynaysid!!!.

Waa in aad u dhiibatid gacantaada dadka ku jecel, sidoo kale arrintani waxay muujinaysaa in waalidku yahay mid mar walba u naxariista ilmihiisa aadna u jecel, sidaa daraadeed waxa la doonayaa in mar walba waalidka la xushmeeyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MA NAXARIIS AYAY KATAHAY AABBAHA, MISE NAXARIIS DARRO!!!



Abe ayaa waxa ka xanuunsaday wiilkiisa waxaana kasoo baxay fin malax wada, aabihii habeenkii waa seexan waayay taaha iyo xanuunka wiilkiisa haya dartiis illeen waa beer wax dhalaye, wuxuu wacay saaxiibkiis una sheegay dhibka haysta wiilkiisa, saaxiibkiis ayaana ku yidhi:- waxaad samaysaa bir geli dab, markay casaatona ku dheji meesha nabarka ah!!!.

Aabihii waa qaatay taladii saaxiibkii, wuxuuna geliyay birtii dabka, markay casaatay ayuuna kasoo bixiyay kadibna ku dhejiyay wiilkiisii, waxaana kasoo booday malaxdii ku jirtay nabarka, wiilkiina waaba seexday wuuna caafimaaday!!!.

Haddaba birta dabka lacasaatay markuu ku dhejinayo wiilkiisa ma naxariis ayay ka tahay aabaha mise naxariis darro?, waxay ka tahay naxariis iyo kalgacay,


Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

haddaba ha dhibsan dhibaatada kusoo wajahda, illeen waa naxariis Eebe ka timide, marka laguu eego adiga dhib ayaad u aragtaa balse dhanka Allah swt waa naxariis, marnabana dhib kamasoo fulo Allah swt.

Qummanaanta ama saxsanaanta arrimuhu ma'aha hal dhinac, balse waa hadba sida xaaladda markaas taagani ay ku farayso, waayo diinteenna suubbaniba xaaladaha qaar runta ayay mamnuucday, sidoo kale xaaladaha qaarna beenta ayay bannaysay fasaxdayna, sidaa daraadeed go'aankaagu haku salaysnaado hadba wejiga xaaladda aad wajahayso!!!.

AABBO MAXAAD KA AKHRIN QUR'AANKA, HADDII AANAD XIFDIYAYNIN!!!



Waxa uu akhrin jiray Qur'aanka laakiin ma xifdin jirin, wiil yar oo uu dhalay ayaana ku yidhi: aabo maxaad ka akhrin Qur'aanka haddii aanad xafidaynin?, odaygii ayaana wuxuu ku yidhi:- aabbo waxaad qaadataa seledda dhuxusha lagusoo qaado oo biyo kusoo dhaami, wiilkiina intuu yaabay ayuu ku yidhi aabihii:- aabbo saladda biyo laguma dhaamin karo oo way wada dalooshaa, odaygiina wuxuu ku yidhi:- orod oo isku day!!!.

Wiilkii isaga oo og haddana raalli-gelinaya aabihiis ayuu qaatay saladdii, wuxuuna la tegay biyihii badda, wuxuuna kusoo noqday aabihiis oo uu ku yidhi:- aabbo biyo laguma qaadi karo saladda oo kolkaad soo dartoba dhinac walba way ka daadanayaan, odaygiina wuxuu ugu jawaabay:- ku cel-celi!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

Kolkiii yarkii daalay oo uu dhawr-jeer ku noqday ayuu odaygii ag-fadhiistay, wuxuuna ku yidhi:- aabbo suurto-gal ma'aha in aynu saladda biyo kusoo dhaamiyo, odaygiina wuxuu ku yidhi:- aabbo intii aad saladda biyaha ku dhaaminaysay wax ma ku aragtay?, wiilkiina wuxuu ku jawaabay:- haa, oo wasakhdii oo dhan ayaa ka daadatay saladdiina nadiif ayay noqotay, odaygiina wuxuu yidhi:- qofka Qur'aanka akhriya wasakhdaas oo kale ayaa ka daadanaysa qalbigiisa illaa qalbiga qofka Qur'aanka akhriyaa uu nadiif ka noqdo yuusanba xifdiyine!!!.

Yaa Allah noo fududee akhrinta iyo ku camal-falka kalaamkaaga kariimka ah!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAAN KA XUMAHAY, WAANA GOOR DAMBE!!!



Nin ayuu wiil u dhashay, markaas ayuu u tegay nin oday ah oo xigmad badnaa, waxaana uu ku yidhi:- wiil ayaa ii dhashay, waxaan kaa rabaa in aad ii sheegto habka ugu wanaagsan ee aan u tarbiyadeeyo?, ninkii odayga ahaa ee xikmad-yahanka ahaa ayaana ugu jawaabay ninkii:- waan ka xumahay, waa goor dambe, hadda maaha inaad ii timaaddo ee waxa loo baahnaa in aad ii timaadid markii aad guursanaysay wiilka hooyadiis, oo wakhtigaasi ayay bilaabantaa tarbiyadda carruurtu!!!.

Xikmadda ayaa ah rag iyo dumarba waa in qofku marka hore xushaa oo iska hubiyaa qofka uu guursanaayo, maxaa yeelay waa arrin mustaqbal noloshaada oo dhan kulasoconaaya ah, markaa waa in loogu kuurgalo khayr iyo wanaag, taasi oo ubadkuna ku dayanayo wanaagga waalidka ka dhaxeeya kana muuqda!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

FURSAD LABAAD AYAAN SIINAAYAY!!!



Nin kalluumayste ah ayaa waxa uu lahaa saddex hablood, mid kastana maalin ayuu u kaxaysan jiray badda si ay ula shaqayso, habeen iyaga oo wada cashaynaaya saddexdii hablood iyo aabahood ayuu odaygii ku yidhi hablihiisii:- kalluunku kumasoo dhaco shabagga illaa hadduu ilaawo digriga Ilaahay swt mooyaane, hablihii way yaabeen oo dhaheen:- aabbe kalluunkuna Allah swt miyuu xusaa, odaygii ayaana yidhi:-haa, ma jiraan wax Alle swt aan xusin ama aan baryini!!!.

Subixii ayuu odaygii u baxay shaqadii saddexdii habloodna midbaa raacday, markii uu odaygii shabaggii ku tuuray badda ayaa waxa uu soo qabtay kalluun, waa soo jiiday, waxaanuu ku riday doontii dusheeda, markii uu sii jeestay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ayay inantiisii kalluunkii badda ku celisay, markasta oo uu soo qabtaba iyana way ku celinaysay!!!.

Odaygii shaqadii waa uu dhammeeyay, waxaanuu usoo baxay dhanka xeebta, inantiisii ayuuna ku yidhi:- aabbo inoo tiri kalluunka, inantii ayaana ugu jawaabtay:- waxba kuma jiraan, odaygii waa uu yaabay, wuxuuna ku yidhi:- oo aabbe mee kalluunkii, inantiina waxay ugu jawaabta:- aabbe waadigii noo sheegay in kalluunku markuu ilaawo xuska Alle swt uu kusoo dhacayo shabagga, aniguna farsad ayaan siinayay si uu Alle swt ugu tawbad keeno una xuso mar labaad, odaygii aabaha ahaana farxad ayuu la ooyay!!!.

Maansha Allah, lama uu ooyin, tacabkii uu maanta oo dhan waday ee aanu waxba kahaynin, balse waxa uu la ooyay derejada Iimaanka ee uu Allah swt ku mannaystay gabadhaas yar, ku dedaal in aad markasta muhiimaddeeda siiso, diiraddana ku hayso barbaarinta ubadka ama dhallaanka ee dhanka ruuxda iyo Alle kacabsiga adiga oo usoo qaadanaaya tusaaleyaal nool-nool, waayo tusaaluhu waxa uu soodhaweeyaa fahamka basharka aadamaha, hayaraado ama hawaynaadee, waa run oo qofka maskaxdiisu sifiican ushaqaynayso una fikirayso waxa lagayaabaa in hal tusaale oo nool oo aad siisay uu noloshiisa oo dhanba beddelo, ama uu usii furo albaabo kale oo badan oo dhanka fahamka nolosha ah!!!.

Yaa Allah noosiyaadi derejada Iimaanka iyo fahamka wanaagsanba.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ALLAH SWT AYAA OG KA WAX-KUTARI-DOONA!!!



Waxa ay ahayd macallimad waxayna lahayd aqoon, qurux iyo akhlaaq aad u sarraysa, nin kastaa wuu ku hammin jiray inuu guursado, laakiin may yeeli jirin, maalin ayay asxaabteedu waydiiyeen sababta ay guurka u diidan tahay, waxayna ku tidhi:- waxaan idiinka sheekaynayaa qissadan ee dhegaysta :- nin ayaa xaaskiisu u dhashay shan hablood oo isku xiga, waxaana uu u sheegay xaaskiisa haddii ay gabadh kale dhasho in uu dili doono gabadhaas, hooyadii markii lixaadna waxay dhashay gabadh, odaygii ayaa u cadhooday, wuxuuna qaaday gabadhii yarayd ee dhalatay, isagoo hor dhigay masaajidka si loo qaato habeenkii!!!.

Nasiib wanaag qofna ma qaadan, dhibna ma gaadhin, subixii ayuu haddana soo celiyay iyadoo hooyaduna Allah swt ka baryaysay inuu usoo celiyo, markii uu sidaas sameeyay dhawr habeen ee ay taasi dhici waydayna wuu iska dhaaafay,

hooyadii markii dambe waxay dhashay wiil, laakiin waxa dhimatay inantii u waynayd, mar kale ayay haddana dhashay wiil kale waxaana dhimatay gabadhii ku xigtay, sidaasi ayay shan wiil ku dhashay iyagoo shantii hablood ee waaweynaana ay wada dhinteen, laakiin waxa nool gabadhii uu doonayay inuu dilo!!!.

Hooyadii ayaa iyana mar dambe dhimatay, odaygiina wuxuu noqday qof wayn oo u baahan gargaar, gabadhaasi badbaaday miyaad garanaysaan?, taasi waa anigan idinla hadlaya, waxaanaan u guursan waayay si aan aabahay u xannaaneeyo, wiilashii uu aabahay jeclaana marmar ayay u yimaadaan, saacad kastana wuu ooyaa marka uu xusuusto sidii hablihiisa uu u necbaa!!!.

Hakala jeclaysanin ubadkaaga, hana ukala burinin ee mid walba waajibkii uu Allah swt kaa saaray ku dedaal in aad kasoo baxdo wiilal iyo gabdhoba intii awooddaada ah, xittaa adigu haka fekerin waxtar dambe marka aad waajibkaaga gudanaysid, hana ku xidhin, kan adiga wax ku tari doonana Allah swt ayaa og!!!.

DUCO AABBE!!!



Waxa uu ahaa oday waayeel ah, waxa la joogay wiilkiisa, labadooda oo wada sheekaysanaya ayaa waxa lasoo garaacay albaabka guriga, waxa soo furay wiilkiii, waaba nin uusan aqoon, ninkii waxa uu u tegay odaygii, warna waxa uu ka bilaabay:- Allaah ka cabso oo dayntayda aan kugu lahaa isii, in badan ayaan dulqaadanayay, waana iga dhammaaday dulqaadkii ee xoolahaygii isii!!!.

Wiilkii waa uu ka naxay waxa canaan aabihii ku socota iyo murugada aabihiis ka muuqata, waxa uuna lahadlay ninkii waxa uuna ku yidhi:- immisa ayaad ku leedahay aabbo?, ninkii waxa uu ku jawaabay:- 90-kun oo Riyaal ayaan ku leeyahay, wiilkii qolka ayuu galay waxaana uusoo baxshay lacag uu u arursaday in uu ku guursado, waxayna noqotay 27-kun oo Riyaal, waxa uu ugeeyay ninkii, waxa

uuna ku yidhi:- waa la khayri insha Allah, intan sii qaado inta dhimana aniga iisoodoono!!!.

Odaygii ayaa ku yidhi ninkii:- uceli wiilka lacagtiisa waa uu ubaahan yahaye, aniga ayaad lacagta igu leedahay, oo lacagtaada kuusoo raadinaya, laakiin wiilkii ayaa diiday oo yidhi:- lacagtaada qaado, inta dhimana aniga iisoo doono, aabahay lacag dambe ha waydiin, ninkiina waayahay ayuu yidhi waana uu baxay!!!.

Markii ay isku soo hadheen wiilkii iyo aabihii, ayaa wiilkii aabihii ku yidhi:- aabbe qiimaha aad agtayda ka joogto ayaa ka qiimo badan lacag iyo guur, odaygii waa ooyay, waxa uuna u duceeyay wiilkiisii doco qalbi ah, markii laba maalin kasoo wareegtay dhacdadii ayaana wiilkii waxa uu la kulmay saaxiibkiis, kaftan iyo salaan kadib ayaana saxiibkii waxa uu wiilkii ku yidhi:- saaxiib ninka aan la shaqeeyo nin saaxiibkiis ah oo ganacsade taajir ah ayaa i dhahay ii soo raadi nin aamin ah, niyad fiican oo hammi iyo karti uu ku shaqeeeyona leh, masuuliyadna qaadi kara, markii aan fakarayna waxa iisoo baxday in cid aan adiga ahayni aanay ka bixi karin ee maqaban shaqadaas?!!!.

Wiilkii waxa uu yidhi:- haa, waan qaban wll, saaxiibkiina waxa uu yidhi:- haddii ay saas tahay galabta soo fasax qaado waxaan la balansanaa ganacsadaha’e, galabtiina waxay la kulmeen taajirkii isbarasho iyo waraysi wiilkii lala yeeshay kadibna waxa loo ogolaaday shaqadii!!!.

Ganacsadihii taajirka ahaana waxa uu yidhi:- immisa ayaad ku shaqaysaa imminka?, wiilkiina waxa uu yidhi:- **4500** oo riyaal, taajirkii baana yidhi:-

mushaharkaaga shaqadan waa **15000** oo riyaal, waxaana dheeri kuu ahaan doona **10%** lagaasiindoono faa'iidada aad soosaarto, lacag lix bilood mushaharkeeda ahnna waa laguu hormarinayaa ee noqo mid shaqadiisa qabsada!!!.

Wiilkii ayaa ilmeeyay, taajirkii baana yidhi:- maxaad la ilmaysay?, waxa uuna yidhi:- ducada aabbe maxaa ka deg-deg badan, waxa uuna uga sheekeeyay wixii dhacay laba maalin ka hor, taajirkiina markii qisada uu maqlay waxa uu ku farxay in uu helo nin dhalinyaro ah, aqoon leh oo haddana ducaysan, waxa uuna yidhi:- daynta inta dhiman aniga ayaa bixinaaya ee haka wal-walin, haddii aad iga yeeshona waxa ii joogta gabadh sidaada oo kale ducaysan, aamina ah, ee aan kuu guuriyo, wiilkiina waa uu aqbalay!!!.

Wax walba oo wanaag iyo samafal ah oo aad waalidkaa usamayso, aawadood ku bixiso, ama cid kaleba, marnaba kuma khasaaraysid!!!.

Hala ogaado samafalka waalidka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

DHUGASHO LA’AAN QOFNA HA XUKMININ!!!



Dhakhtarkii waxa uu soo galay cusbitaalka isaga oo deg-degsan markii loogu yeedhay qalliin deg-deg ah, waxa uu beddelay dharkiisii waxaanuu toos u aaday goobtii qalliinka, waxa uu la kulmay inanka qalliinka loo samaynaayo aabihii oo ku sugaaya meesha qalliinka horteeda si uu ula kulmo dhakhtarka, waa uu uyeedhay dhakhtarkii wuxuuna ku yidhi:- " maxaa xilligan ku wada?, miyaanad ogayn in wiilkayga noloshiisu khatar ku jirto?, miyaanad lahayn wax damiir ah oo masuulnimo ah?"!!!.

Dhakhtarkii waa uu dhoola-caddeeyay waxaana uu yidhi:- " waan ka xumahay, maan joogin dhakhtarka, waan soo deg-degay markii telefoonka laygasoo sheegay, waa inaad isdejisaa, waxaan hadda qabsan doonaa shaqadayda insha Allah,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

is dejiya"!!!, maxaad samayn lahayd hadduu inankaagu ku jiri lahaa qolkan?, se hadduu inankaagu ku dhiman lahaa qolkan maxaad samayn lahayd?, si cadho leh ayuu uyidhi aabihii, dhakhtarkiina waa uu dhoola-caddeeyay mar labaad waxaanuu ku jawaabay:- " Ilaahay swt ayaa kitaabkiisa ku caddeeyay waxaynu ka nimi ciid, waana laynagu celin doonaa ", dhakhaatiirtu awood uma laha in ay naf baxaysa ceshaan, laakiin Allah swt ogolaanshihiisa ayaanu usamayn-doonaa waxii awooda ee aanu karno!!!.

Qalliinkii waxa uu qaatay dhawr saacadood illaa uu soo baxay dhakhtarkii isaga oo iska caadi ah, " u mahadnaq Ilaahay swt, waa uu badbaaday inankaagii", isaga oo aan sugin jawaabta aabaha ayuuna iska dhaqaaaqay waxaanuu ku yidhi:- haddaad wax su'aal ah qabtid kala xidhiidh kalkaalisada, " maxaa uu aad ugu xanaaqsan yahay?, ee uu ii sugi waayay dhawr minit oo aan kaga waraysto xaalada inankayga", aabahii ayaa kalkaalisadii waydiiyay dhawr minit ka bacdi markuu kasii maqnaa dhakhtarku, kalkaalisadiina iyadoo ilmaynaysa ayaa waxa ay tidhi:- " ninkan dhakhtarka ah shalay ayuu ku dhintay inankiisii shil baabuur, waa uu geeryaysnaa markaan la hadlaayay ee aan ugu yeedhaayay qalliinka inankaaga, iminkana waxa uu badbaadiyey inankaaga noloshiisa, waxaana uu udeg-degay aaska inankiisa"!!!.

Qofna haku xukumin si deg-deg ah, waayo waxa lagayaabaa in aanad ogayn sida ay tahay noloshiisu ama xaaladda uu ku jiro!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

FILAN WAA!!!



Nin hal xaas leh ayaa guri kiraystay, labo sanno kadib ayaa lagu qaaliyeeyay kiradii kamana caban, waxaa ku adkaatay kiradii inuu bixiyo, ninkii wakiilka ka ahaa guriga ayaa qabsaday kuna yidhi:- kirada bixi, xaaskiisa ayaa aragtay in ninkeeda lagu dheganyahay markaas ayay lacag meel utiil amaahisay sidaas ayuuna kirada bishaas ku bixiyay!!!.

Aad ayuu ugu farxay in xaaskiisu caawisay, dib ayuuna usiiyay lacagtii ay amaahisay, haddana markale ayaa lagu kordhiyay kirada, aad ayuu uga naxay, wuxuuna kabaryay wakiilka guriga in uu baro milkiilaha si uu uga baryo in laga daayo lacagta lagu siyaadiyay, waase uu kadiiday inuu baro!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Ninkii waxa uu go'aansaday in uu raadiyo milkiilaha guriga, wuxuuse ugu dambayn ogaaday arrin naxdin leh taas oo ah in guriga ay leedahay xaaskiisu!!!.

Cid kasta oo wanaag kuu samaysa ha uqaadanin in ay wanaag ay kuu hayso kuugu samo-falayso, haba ahaadeen kuwa nolol-wadaaga aad isugu dhawdihiine, balse udhug-yeelo mar-kasta, goor-kasta, goob-kasta iyo xaalad walba dhacdooyinka faraha badan ee hareerahaaga kadhacaaya intii awooddaada ah, mid kastana kalasoo bax macnaha ama farriinta ay kuu siddo ee kudhex duugan!!!.

TUULADA QAANSO-ROOBAADDA!!!



Waa tuulo ku taalla waddanka Indonesia, waxaana lagu magacaabaa "Kampung Pelangi", waxa ay ahaan jirtay tuulo lagu tiriyo deegaamada danyarta ah, ma aysan lahayn nadaafad buuxda, xattaa dawladdu ma aysan danayn jirin, dayac iyo darxumo wayn baa ka muuqatay, balse maalin maalmaha ka mid ah ayaa macallin dugsi maamule ka ahi waxa uusoo jeediyay in guryaha la mariyo midabbo (rinji) kala nooc ah, halkii aqalbana ugu yaraan seddex midab oo kala duwan lagu dahaadho!!!.

Dadkii tuulada deganaa waa ay aqbaleen fikraddaas waa ayna bilaabeen, isla maalmo gudahoodbana waxa la rinjiyeeyay 223 aqal, meeshiina waxay isu beddeshay goob indhaha soo jiidata oo aad uqurxoon, waxa bilaabantay in loosoo dalxiis tago oo sawirro la iskaga qaado, waxa kordhay dakhligii soo gelayay tuulada

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

iyo dadkeedaba, waxa aysoo jeedisay indhihii xukuumadda oo iyana bilowday inay tuuladaas ugu deeqdo lacag dhan 300 oo Million oo Rubbi!!!.

Waxa lasii kordhiyay aqalladii la midabaynaayay illaa ay gaadheen 390 guri, waxa kaloo lagu daray waddooyinkii, buundooyinkii, kuraastii fadhiyada goobaha nasashada iwm, waxa siibatay dalxiisayaashii, lacagihii kasoo xeroonayayna hawada ayay isku shareereen, waxay noqotay meel ay sawir-qaadayaashu isugu yimaadaan, waxay isu rogtay tuuladii yarayd ee aan la magac dhabi jirini mid kamid ah goobaha ugu caansan dalkaas, meel nadaafaddeedu ay kasoo raynayso, illaa ay dadku ugu naanayseen "Tuuladii Jeegaanta ama qaanso-roobaadda" midabadeeda kala duwan awgeed!!!.

Dadka degaankaas degan ayaa ku tilmaamay arrintaas inay tahay guul wada jir ah oo ay gaadheen bulshadoodu, Dawladda ayaana u qorshaysay miisaaniyad gaar ah oo dhan 2 Billion oo Rubbi oo noqonaysa mid lagu kordhinayo adeegyada dalxiisayaasha loo qabto, laguna hagaajinayo oo lagu qurxinayo jidadka iyo buundooyinka, waxa kaloo lagu nadiifinayaa oo qashinka lagaga gurayaa biyaha webiga mara tuuladaas si ay meeshu u noqoto goob caafimaad ahaana u wacan dalxiiska, loogana yimaado daafaha caalamka!!!.

Tuuladaasi sida sawirka ka muuqata waxay ahayd mid aan indhaha u roonayn, balse bilo gudahood waxa ay noqotay goob caalami ah oo loosoo daawasho tago, waxaana sidaa u beddelay waa macallin aan xukuumad iyo hay'ado waxba ka sugin maskaxdiisana maalay, kumana uusan calaacalin madaxdeenu waxba nooma qabtaan, xukuumaduhu nama daneeyaan, cambaarayn joogta ahna dusha kamuu saari

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

jirin cid kale, ee isaga ayaa go'aansaday inuu tuuladiisa kasoo saaro hogga faqriga idamka Alle swt!!!.

Haddaba ma dhici doontaa, mana laga yaabaa inaad guntiga dhiisha iskaga dhigto oo aad tuuladaada u bedesho jeegaan qurxoon oo loosoo daawasho tago, meesha ay qab-qablayaashu la doonayaan deegaankaaga inuu noqdo goob dhiig iyo xinjiro lagu daadiyo, kuna caan-baxda hirdanka iyo dagaalada sokeeye.

Waad awooddaa sida macallinkaas oo kale, balse adiga ayaa doorashada leh!!!.

MAQAAL – QODOBBO NOLOSHAADA GUUL UHORSEEDI KARA!!!



Qof kasta waxa ku beeran hammi ah in uu guul gaadho, ruuxa bulshadu ku qiimayso sarraynta iyo karaamaduna waa ka laga arko guul uu ka gaadhay hawl uu ugacan qaaday ama si guud nolosha, cilmibaadhis lagu sameeyay furayaasha guusha loo kaashan karo ayaa qodobadii ugu muhiimsanaa ee ay xustayna waxa kamid ahaa:-

1. **Himilo cad:-** sirta koowaad ee guusha noloshu waa in uu qofku dhigto ujeeddooyin cad-cad iyo hawlo qodobbaysan oo uu doonayo in uu gaadho, waxa iyaduna muhiim ah in qofku ujeeddooyinkiisa uu qoranayo uqaybiyo kuwo himilada dhow ah iyo himilo fog oo uu hiigsanayo mar dambe in uu gaadho, waa in uu qoro jidka uu u marayo himilada dhow oo ukala horraysa

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

sida ay ugu kala muhiimsan yihiin, kadibna uu qoro jidka uu uga wareegayo haddii jidkaas hore xidhmo, waxa iyaduna marar badan muhiim ah in hawsha uu doonayo in uu ku guulaystaa ay lahaato waqti xaddidan oo uu qorshaysto in uu ku gaadho, si haddii waqtigaas uu ku gaadhi waayo uu dib uga fikiro waxa qaldan iyo sida uu ku sixi karo!!!.

2. **Go'aan qaadasho:-** waa in go'aamada aad qaadanaysaa ay noqdaan kuwo fulintoodu kaa go'antahay, haddii bilowga hore aad shaki badan ka qabto fulitaanka go'aankan, ha qaadan go'aankaas ee dib uga fikir!!!.
3. **Awoodda saddexan:-** jaran-jarada guushu waxa ay ka bilaabataa kaabadda koowaad oo go'aan qaadasho ah, laakiin ha illaabin in go'aan aad ku gaadho hawlqabashadeeda uu ka horreeyo saddex arrimood oo ah, in aad marka koowaad garato awooddaada, dhaqaale, jidheed, aqooneed iyo karti kasta oo hawshani u baahan tahay in aad leedahay, haddii aad taa hubto waxa iyaduna muhiim ah in aad garato waxa aad ku wanaagsan tahay, tusaale ahaan haddii aad ogtahay in aad saxafi ku habboon tahay oo hiwaayaddii hawshan iyo aqoonteedii aad buuxin karto ha isku hawlin in aad noqoto taliye milateri si aanad ugu fashilmin gaadhisteeda ama ugu yaraan waqti badani kaaga lumin, arrinta saddexaad waa in aad yeelato hal-adaygii go'aanka aad qaadanayso iyo samirkii aad ku sugi lahayd natiijadiisa, haddii aad saddexdaas hayso waxa aad qaadan kartaa go'aan adag oo guushaada fure u noqda!!!.
4. **Curin:-** arrimaha waayo-aragnimada lagu ogaaday waxa ka mid ah in curintu ay kamid tahay furayaasha ugu muhiimsan ee guusha noloshaada aad ka gaadhayso, curintu waa qofka oo mar kasta maskaxdiisa miira si ay u keento afkaar iyo qorshayaal cusub, waa qofka oo hal-abuur yeesha mar kasta oo uu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

hawl ka faraxashana ka fikira hawsha kale ee iyadana ay tahay in uu guul ka gaadho!!!.

5. **Qaladaadka oo wax laga barto:-** qaladaadku ma'aha dhammaadka nolosha, mana aha dhammaadka rajada guusha, balse keliya khaladku waa dugsi ay qasab tahay in qof kastaa maro oo loo baahan yahay in wax laga barto lagana faa'idaysto, qaladaadka aad gelayso inta aad ku gudo jirto dedaalka aad himiladaada ku gaadhayso waa in aad u qaadataa waayo-aragnimo iyo dersi aad ku cibro qaadanayso, iskana jir in qalad aad mar gashay uu kugu noqdo boog abid ku daba socota, si joogto ahna aad u xasuusato, waayo taasi waxa ay kaa hor istaagaysaa in aad dedaal dambe gasho oo cabsi ayaad ka qabtaa in aad haddana qaldanto, qaladka ka qaado wixii duruus ku jira, sida in aad fahamto sida uu ku yimi iyo sida ay tahay in aad mar labaad isaga ilaaliso, intaas waxa kasoo hadhaana waa qaladka in aad dhabarkaaga dambe ka tuurto si aanad dib ugu xasuusanba!!!.
6. **Ka faa'idaysiga waqtiga iyo nidaamintiisa:-** arrimaha muhiimka u ah guusha nolosha waxa ka mid ah in qofku uu yaqaano sida ugu fiican ee uu waqtigiisa ugaga faa'idayn karo gaadhista yoolkiisa nolosha, waa in aad waqtiga u aqoonsato in uu yahay hanti qaaliya oo Alle swt hibo kuu siiyay, sida saxda ahi waa in aad ka dhigato raasamaal aad ka faa'idaysato, sababna u noqda guul aad gaadho, haddii kale waa seef laba-af-leh oo adiga ayaa uu ku jari!!!.
7. **Rajo-san:-** rajo samaantu waxa ay ka mid tahay tilmaamaha muhiimka ah ee lagu garto ruuxa guusha gaadha, in qofku khayr rajaystaa waxa ay qalbigiisa ku beertaa rajo fiican iyo kalsooni uu naftiisa uqaado, waxa aanay ku dhiiri-

gelisaa firfircoonida iyo shaqada, arrimahaasina dhammaantood lagama maarmaan ayaa ay u yihiin guusha uu ruuxu doonayo in uu noloshiisa ka gaadho.

Dhanka kale, qofku sidiisaba ma xaqiijin karo hadaf aanu rumaysnayn in uu xaqiijin karo, haddii aan si kale u dhigo, qofku wuxuun buu soo hirgelin karaa wixii uu isu arko in uu soo hirgelin karo, waa inaad kolka hore suuraysan karto inaad gaadhi karto hadafkaaga, dabadeedba aad la timaado dedaalkii lagaaga baahnaa inaad ku soo hirgeliso, laakiin si kasta oo aad udedaasho, haddii aanad rumaysnayn in aad hadafkaa soo hirgelin karto, natiijadaadu wuxuunbay noqonaysaa mid liidata!!!.

Waxa jirta qaaciido 4 geesood ah oo odhanaysa:- aragtida aad ka haysato awooddaada, waxay saamayn ku yeelataa ficilkaaga, ficilkaaguna wuxu saamayn ku yeeshaa natiijada ficilkaaga ka dhalanaysa, natiijadaasuna waxay sii xoojisaa aragtidii aad kolkii horaba awooddaada ka haysatay, tusaale:- haddii aad isu aragto in luqada Ingiriisigu ay kugu adag tahay oo aanad baran karin, aragtidaadaasi waxay yaraynaysaa ficilka iyo dedaalka aad ku bixninaysid barashada luqadda ingiriisiga, ficilkaas yarna wuxuu saamayn ku yeelanayaa oo dhalayaa natiijo yar, natiijadaa yarna waxay sii xoojinaysaa aragtidaadii hore ee ahayd in ingiriisugu uu kugu adag yahay, sidaa uun bay marba marka ka dambaysa usii xoogaysanaysaa aragtidaa uu qofku iska haysto illaa ay aakhirka ku kallifto in uu iskaga hadho in uu ingiriisiga barto!!!.

Waxa aad hiigsanayso adoo suuraysanaaya waa inaad aragto si aad ugaadho, haddii kale sinaba uma gaadhi kartid, haddaba, haddii uu jiro hadaf aad

doonayso inaad xaqiijiso, welina aad xaqiijin kari la'dahay iswaydii iyana in dhibtu tahay aragtida aad awooddaada ka haysato inaad yookaa xaqiijin karto iyo in kale!!!.

Sidoo kale waxa jira waxyaabo dib kuu haya sida:- cabsida, dareenada xun-xun, kalsooni-darrada, dhibaatooyin nolosha ah iyo kuwa kale oo badan, xittaa hadday jiraan boqollaal waxyaabood oo dib kuu celinaaya ma ogtahay natiijada aad ka helayso haddaad isku dhiibto boqollaalkaas waxyaabood?, natiijada aad ka helayso waa inaad ahaato sida aad maanta tahay, waligaana aad joogto meesha aad maanta joogtid, wax isbeddelana aanad samaynin, dadka dunida joogaana waa saddex:-

- ❖ Dad faraxsan hadafyadoodiina gaadhay.
- ❖ Qaar weli ku guda jira siday ku gaadhi lahaayeen.
- ❖ Qaar quustay oo raja dhigay.

Haddaba, immisa sano ayaa ku dhaaftay adigoon wax faa’iido leh qabsan, immisa sano ayaa ku dhaafay illaa haddana aanad samaynin ficil dhab ah ood noloshaada ku badasho?, haddaad u jeelantahay ama diyaar utahay inaad badasho noloshaada waa inaad hadda bilowdaa, aadana sugin berri, ka gudub cabashadan iyo ciirsigan aan dhammaadka lahayn, ficil samey haba yaraadee, buurahan waawaynibana waxay ka samaysan yihiin dhagxaan yar-yar iyo qaruurux isu tegay, waa inaad isku dhibtaa saad qaruurux u arursan lahayd si aad udhisato buurtaada, qodobada iyana kusaacidi karana waxa kamid ah:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- Subaxdii oo aad saacad kahor toosto xilliga aad toosi jirtay waxay isbeddel wayn ku samayn doontaa noloshaada!!!.
- Saacad kamid ah toddobaadkii haddaad fikrad cusub baadho waxaad helaysaa boqolaal fikradood oo cusub!!!.
- Labo mawduuc oo aad akhrido maalin walba waxay doonaanba ha ahaadaane waxa hubaaal ah in shan sanno gudohood aad ku noqon doonto khabiir!!!.
- 30 daqiiqadood ood maalin walba jimicsi samayso, waxa hubaaal ah in bil gudeheed uu ku dhismayo jidhkaagu!!!.

Isbeddelku waa wax aad u fudud, ka gudub cabashada adiga oo ficil samaynaaya, marnabana ha raja dhigin hana ogalaan waxa layiraahdo quusashada, adoo Allah-na swt kaalmaysanaaya, waana muhiim in miisaanka aad saarto wax kasta oo noloshaada kusoo biiraaya ama ka baxaaya, si kale haddaynu u dhigno miisaanka saar waxkasta oo aad isticmaalayso ama samaynayso, hana noqdo cabbirkiisu sida:- meeqaamka uu diinta Islaamka ka joogo iyo siday u aragto, marna xadka diintu dhigtayna ha baal marin!!!.

Noloshaada waa in aad noqotaa qof keligii is bixin kara oo aan cidna u daba fadhiisan arrimihiisa, danihiisa, baahidiisa, awooddiisa iyo waxkasta oo noloshiisa ku saabsan, xaalka dadka kale ku noolyahayna waa in aad qiimaysaa mar kasta, markay kuu baahdaana waa in aad halkay taagan yihiin is dhigto, maaliyadda ama dhaqaalaha kusoo galana marna ha ku dhammayn wax aan faa'iido badan soo kordhinayn, noloshana haka dhigin maanta uun in ay tahay ee kafikir berri iyo mustaqbalka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Qofna haku qiimayn muuqaalkiisa, da'diisa, haybtiisa ama waxyaalo kale oo hooseeya, laakiin ku qiimee caqligiisa, cilmigiisa, kartidiisa iyo garashadiisa, haddii aad nolosha ku kufto oo aad aragto kuwaad wada socoteen oo ku dhaafayna ha quusan oo ha iska sii jiifin, laakiin kac oo kuwa tartanka gadaal ka soo galay yayna ku dhaafin, haddii aad adigu naftaada ku kalsoonaan waydo oo aad isjeclaan waydona cid kalena ku jeclaan mayso, mar kastana isu hayso in aad adduunka ugu qurux badan tahay, geesi san tahay, karti badan tahay ama ugu wanaagsan tahay!!!.

Caawi oo taakulee dadka inta aad awoodo, caawintuna maaha oo kaliya dhaqaale, laakiin walaalkaa oo qaldan baad toosin kartaa, hawl baad la qaban kartaa ama si uun baad u taageeri kartaa, in aad dadka cafidona ku dedaal maxaa yeelay raalli ahaanshaha Alle swt ayaad helaysaa, ka fagowna waxyaabaha qalbiga dila ee xasadka, xiqdiga iyo yasitaanka, garawso in bani'aadam kastaa qaldamo, adba immisa jeer baad qalad gashay, maxaad jeclayd markaa?, talo iyo waano kasta oo aad siinayso dadka aad jeceshahayna si ay u noqoto mid qalbiga si dhaba u taabata waa in aad adigu ugu horayn naftaada ku dhaqday, haddii kale waxba masoo kordhinayso haddii naftaaduba ka qatan tahay!!!.

Allah swt ha inagu wada guuleeyo labada daaroodba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

TIXRAAC:-

BOGAG - FACEBOOK:-

- ✓ **Abdulahi nur Colombo.**
- ✓ **Afmaal-akhbaar.plogspot.com.**
- ✓ **Tuur yare.**
- ✓ **Qisooyin cajiib ah oo aad aqoon badan aad ka korорsan doonto.**
- ✓ **Somalidoc.**
- ✓ **Sama wade.**
- ✓ **Saxardiid xaashi ardaale.**
- ✓ **Ali mahad abdi mohamud.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- ✓ **Badmacaan.**
- ✓ **Qisooyin waa qici ah.**
- ✓ **Qisooyin iyo sheekoyin.**
- ✓ **Somali post.**
- ✓ **Ahmed abdikarim waayo-arag.**
- ✓ **Bulsho times.**
- ✓ **Qisooyin jacayl.**
- ✓ **Cabdulaahi cisman xuseen.**
- ✓ **Maxaa cusub tv.**
- ✓ **Qisooyinka diin ah.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

- ✓ **Tv-ga dhacdooyinka dunida.**
- ✓ **Qisooyin diini ah oo cajiib ah.**
- ✓ **Hiigsiga nolosha.**
- ✓ **Lone.**
- ✓ **Qolka quraanka kariimka.**
- ✓ **Qisooyinka diiniga ah.**
- ✓ **Shucayb sh.max'ud jabaaye.**
- ✓ **Ahmed Ibrahim ahmed.**
- ✓ **Qiso iyo murti kaftan iyo sheko.**
- ✓ **Qiso real page.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- ✓ **Nasra bintu Suleiman.**
- ✓ **Qisooyin jacayl.**
- ✓ **Qoso jacayl.**
- ✓ **Qarniyaal iyo qisooyin jacayl.**
- ✓ **Lamaanaha nolosha.**
- ✓ **Adbulkareem ali boltuur.**
- ✓ **Qisooyin cajiib a.**
- ✓ **Qisooyin dhab ah.**
- ✓ **Idaacada asal.**
- ✓ **Abdirizak atosh.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (3)

- ✓ **Aljasiira news somali.**
- ✓ **Dhuubo dhexyar.**
- ✓ **Faafinta diinta islaamka.**
- ✓ **Hormarka qoyska.**

ASXAAB - FACEBOOK:-

- ✓ **Muhumud Osman.**
- ✓ **Mcm yare.**
- ✓ **Ahmed Mohammed artan.**
- ✓ **Nuur ahmed islaam.**
- ✓ **Mohamed mursal dahir.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- ✓ **Mansour ahmedov.**
- ✓ **Abwaan siyaad nirgoole.**
- ✓ **Author jirde.**
- ✓ **Maxamed abdi qaadir shekh.**
- ✓ **Madadal yare.**
- ✓ **Hadhwanaagmedia.com.**
- ✓ **Barocaafimaad.com.**

ALLAA-MAHAD LEH

DHAMMAAD QAYBTII SADDEXAAD

LASOCO QAYBTA AFRAAD INSHA ALLAH

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong